JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# WARBIXINTA GUDDIGA LA-SOCODKA DIB-U-EEGISTA DASTUURKA BFS IYO GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA DASTUURKA EE DIB-U-EEGISTA DASTUURKA KU-MEEL-GAARKA AH

Soo-jeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka

UU SOO GUDBIYEY GUDDIGA MADAXBANNAAN EE DIB-U-EEGISTA DASTUURKA

December 2020
MUQDISHO-SOOMAALIYA

UUNA ANSIXIYEYGUDDIGA LA-SOCODKAEE BFS

| Asalka Dastuurka KMG | Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
|---|---|---|
| CUTUBKA KOOWAAD: BAAQA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA | CUTUBKA KOOWAAD: BAAQA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA | *Waxaa lagu darey ereyga "Federaalka"* |
| Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Soomaaliya | Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | *Waxaa lagu darey ereyga "Federaalka"* |
| (1) Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, leh gobannimo, dimoqraaddi ah, oo ku dhisan matilaadda dadweynaha, loo dhan yahay oo ku salaysan nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad bulshadeed. | 1. Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, madax bannaan, dimuqraadi ah, kuna saleysan caddaalad iyo sareynta sharciga. | *Faqraddan waxaa loo qaybiyay labo Faqradood maadaama ay ka kooban tahay mabaadii guud iyo qiyam. Faqradda kowaad waxay ka hadlaysa madaxbannanida iyo gobannnimada.*<br>*Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka ayaa nuxur ahaan lagu soo darey faqraddan 1aad.* |
| | 2. Soomaaliya waa Jamhuuriyad ku dhisan nidaamka Xisbiyada badan oo leh aragti kala duwan kuna salaysan dastuurka iyo Xeerarka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Faqradddan seddexaad ee laga soo jarey faqradda 1aad ee asalka ayaa ka hadlaysa in Jumhuuriyaddu ku dhisantahay mabaadida dimoqradiyada iyo asxaabta siyaasadda* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Allahu Subxaanahu wa Tacaalaa ka sokow (SWT), awoodda oo dhan waxa leh Shacabka, wuxuuna ugu isticmaalayaa si toos ah iyo isagoo u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda. Waxaa reeban in qof ama qayb ka mid ah bulshada sheegato gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ama u adeegsadaan si u gaar ah. | 3. Allahu Subxaanahu wa Tacaalaa ka sokow (SWT), awood-qarameedka ugu sareysa waxa leh Shacabka; wuxuuna ugu isticmaalayaa si toos ah iyo isagoo u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay oo uu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya tiir-dhexaad u yahay, si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Faqraddaan waxaa loo qoray si qaanuuni ah.*<br><br>*Qaybta labaad ee farqadd 2aad ee asalka dastuurka waxaa laga dhigay farqad cusub oo noqoneysa farqad 5aad.* |
| | 4. Waxaa reebban in qof ama qayb ka mid ah Shacabka sheegato ama la wareegto gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ama u adeegsadaan si u gaar ah. | .<br>*Waxaa laga soo raray Qaybta labaad ee farqadd 2aad ee qodobkaan ee asalka dastuurka waxaa laga dhigay farqad cusub oo noqoneysa farqad 5aad.* |
| (3) Gobannimada iyo midnimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma-xadgudbaan. | 5. Gobonnimada, madaxbanaanida, midnimada qaranka iyo xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma-xadgudbaan. | *Ayadoon la baddedlin nuxurkii faqradda 3aad ee asalka dastuurka, waxaana lagu soo kordhiyey ereyada, 'Madaxbannaanida, Qaranka iyo Xuduudaha'* |
| **Qodobka 2aad: Dawladda iyo Diinta** | **Qodobka 2aad: Diinta Dalka** | ***Cinwaanka waxaa loo bedeley "Diinta Dalka"*** |
| (1) Islaamku waa Diinta Dawladda. | 1. Diinta Dalku waa Islaam. | *Faqradda 1aad, waxaa la badalay erayga "Dawladda" laguna badalay "**Dalka**" maadaama Diintu aysan ahayn Diinta Dawladda oo kaliya.*<br>*Waxaana wax laga bedel siiqada.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo dalka. | 2. Diin aan Islaam ahayn laguma faafin karo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Faqradda 2aad siiqada ayaa wax yer laga bedeley.*<br>*Waxaa ereyga "Dalka" lagu bedely "Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya"* |
| (3) Lama soo saari karo sharci aan waafaqsaneyn Mabaadi'da Guud ee Shareecada Islaamka iyo Maqaasiiddeeda. | 3. Lama soo saari karo xeer aan waafaqsaneyn Shareecada Islaamka iyo maqaasiddeeda. | *Faqradda 3aad, Ereyga "Sharci" waxaa lagu bedalay "xeer". waxaa la tirtiray erayga ah "Mabaadii'ada" maadaama mabaadii'da Shareecaddu ay farabadan tahay oo aysan ahayn mid kooban oo cayiman ayna keeni karto baahsanaaan tafsiireed oo ku saabsan mabaadii'da.* |
| **Qodobka 3aad: Mabaadii'da Asaasiga** | **Qodobka 3aad: Mabaadii'da Aasaasiga ah** | ***FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka*** |
| (1) Dastuurka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka kariimka ah iyo Sunnada Nabigeenna Muxammed (NNKH), wuxuuna ilaalinayaa maqaasidda (ujeeddooyinka) shareecada iyo caddaaladda bulshada. | 1. Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka Kariimka ah iyo Sunnada Nabigeenna Muxammad (NNKH). Wuxuuna ilaalinayaa Shareecada Islaamka iyo Maqaasiddeeda. | *Waxaa la tirtirey ereyga "Cadaalad Bulshada" maadaama lagu arki doono meelo kale.*<br>*Waxaa lagu daray kadib ereyga dastuurka "Jamhuuriyadda Federaalka"* |
| (2) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Islaam ah, kana mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka. | 2. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Islaam ah, kana mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka. | *Asalka ayaa lagu raacey.* |

| | | |
|---|---|---|
| (3) Mabaadi'da asaasiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan yihiin mabaadi'da asaasiga ah ee awood qaybsiga Nidaamka Federaalka. | 3. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan tahay mabaadi'da asaasiga ah ee awood qaybsiga Nidaamka Federaalka. | *Nuxurka faqradan waxba lagama bedelin, laakiin siiqada ayaa la toosiyey.* |
| (4) Dastuurka Soomaaliya wuxuu Dhiiragelinayaa xuquuqda Aadanaha, talinta sharciga, shuruudaha guud ee xeerarka caalamiga ah, caddaaladda, xukuumad loo dhan yahay oo ku dhisan wadatashi, kala-soocidda awoodaha sharci-dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbanaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan iyo hufnaan ka jawaabaya danaha dadweynaha. | 4. Dastuurka Federaalka Soomaaliya wuxuu ilaalinayaa xuquuqda Aadanaha, talinta sharciga, xurmaynaya xeerarka caalamiga ah, xoojinaya Dowlad loo dhan yahay, kala-soocidda awoodaha xeer-dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbannaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan, daahfurnaan iyo hufnaan ka jawaabaya danaha dadweynaha. | *Faqraddan 4aad nuxurkeeda waxba lagama bedalin laakiin waxaa loo qorey siiqa qaanuuni ah ayadoo lagu darey ereyeda, "Ilaalinayaa, xurmeynayaa, xoojinayaa iyo daahfurnaan". Sidoo kale waxaa la tirey "Dhiirigelinayaa iyo Shuruudaha guud".*<br><br>*Sidoo kale Waxaa lagu daray kadib ereyga dastuurka "Jamhuuriyadda Federaalka"* |
| (5) Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan hay'adaha guud ee qaranka, si wax-ku-ool ah, gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo ee saddexda laamood ee Dawladda iyo Guddiyada Madaxbannaan ee qaranka. | 5. Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay'adaha Dawladda iyo Guddiyada Madaxbannaan ee heer Federaal heer Dawlad Goboleed, iyo Dowladaha Hoose si wax-ku-ool ah, gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo. | *Faqraddan 5aad nuxur ahaan waxba lagama bedelin balse waxaa lagu sameeyey toosin siiqo.*<br><br>*Waxaa lagu daray kadib ereyga dastuurka "*ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed *"* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 6. Awoodda dawladda ee heer kasta waa in loo adeegsadaa oo keliya si waafaqsan Dastuurka iyo xeererka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Farqad Cusub: Faqrad cusub*<br>*Sababta Faqrad 4aad loogu kordhiyay ayaa ah in hay'ad kasta oo dawladeed ay awoodoodu ku xadidan tahay inta Dastuurka iyo shuruucda dalku ay siiyeen.* |
| | 7. Dhulka, badda, hawada iyo kheyraadka dabiiciga ah waa hanti Qaran oo ay Shacabka Soomaaliyeed wada leeyihiin. Waxaana masuul ka ah Dowladda federalka. | *Nuxurka Faqraddan 7aad waxaa laga soo raray Cutubka 3aad Qod.43 (1) ee Dastuurka, waxaana lagu daray "badda", hawada" iyo "Khayraadka dabiiciga". iyadoo loo arkay in ay tahay Mabda' Asaasi ah kuna habboon tahay in lagu daro Qod.3aad oo ka hadlaya Mabaadi'da Asaasiga ah ee dastuurka.* |
| **Qodobka 4aad: Sareynta Dastuurka** | **Qodobka 4aad: Sarreynta Dastuurka** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Shareecada ka sokow, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sharciga dalka ugu sareeya, isaga ayayna xukuumaddu u hogaansameysaa wuxuuna hagayaaa hal abuurka iyo go'aanda siyaasadeed ee qaybaha Dawladda oo dhan. | Shareecada Islamka ka sokow, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sharciga dalka ugu sareeya, isagaana loo wada hogaansamayaa. | *Faqradda 1aad waxaa loo qoray hab qaanuuneed.* |
| (2) Sharci kasta ama tallaabo maamul oo ka soo horjeedda Dastuurka, maxkamadda Dastuuriga ah ayaa awood u leh burrinta sharcigaas ama tallaabadaas maamul, si waafaqsan Dastuurkan. | | *Farqaddan waxaa loo rarey Awoodaha Maxkamadda Dastuurka ee Cutubka 9aad* |
| **Qodobka 5aad: Afafka Rasmiga ah** | **Qodobka 5aad: Afka Rasmiga ah** | ***"Afafka" Waxaa laga dhigay "afka"*** |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (1) Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Af-soomaaliga (Maay iyo Maxaatiri), af Carabigana waa luqadda labaad. | 1. Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Af-soomaali (Maay iyo Maxaa tiri), Af-Carabiguna waa luqadda labaad. | *Faqraddaan waxba lagama beddelin* |
| | 2. Dawladda Federalka Soomaaliya waa in ay daryeeshaa, ilaalisaa isla-markaana horumarisaa Afka Soomaaliga iyo suugaantiisa. | *Faqrad Cusub: Sababaha Faqrada cusub loogu soo kordhiyay ayaa ah in Dawladda Federaalka ay la timaado Siyaasad ay ku hormarinayso kuna daryeelayso laguna ilaalinayo Afka-Soomaaliga iyo dhaqanka suuban ee Umadda si loo ilaaliyo jiritaanka Afka –Soomaaliga iyo Dhaqankaba.* |
| **Qodobka 6aad: Calanka iyo Astaanta Qaranka** | **Qodobka 6aad: Calanka iyo Astaanta Qaranka** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta A ee Jadwalka koowaad, waa laydi buluug furan ah oo ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shangees ah, madaxyo simanna leh. | 1. Calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta A ee Jadwalka koowaad, waa laydi buluug furan ah (bey) oo ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shangees ah, madaxyo simanna leh. | *Nuxurka faqraddan waxba lagama beddelin. Lamana xusin "Qaybta A jadwalka kowaad" sababtoo ah ma cadda tirade jadwalada iyo lifaaqyada.* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Astaanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta B ee Jadwalka koowaad, waxay ka kooban tahay gaashaan buluug ah oo leh xiddaayad dahabi ah, dhexdana ku leh xiddig shangees ah oo dheeh qalin ah leh. Gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo Carbeed oo xardhan, lehna shan madax oo dahabi ah oo labada geesba ku yaalliin ay kala qaaran yihiin. Hareeraha waxaa ka haya laba shabeel oo isu tusmaysan, kuna kala taagan labo waran oo isku weydaarsan caaradda hoose ee gashaanka, ayna weheliyaan laba caleen-cawbaar, diillin cadna ay ku qoofalan tahay. | 2. Astaanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta B ee jadwalka koowaad waxay ka kooban tahay gaashaan buluug ah oo leh xiddaayad dahabi ah, dhexdana ku leh xiddig shan-gees ah oo dheeh qalin ah leh. Gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo Carbeed oo xardhan, lehna shan madax oo dahabi ah oo labada geesba ku yaalliin ay kala qaaran yihiin. Hareeraha waxaa ka haya laba shabeel oo isu tusmaysan, kuna kala taagan labo waran oo labo caleen cawbaar, mayrax cadna ay ku qoofalan tahay. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (3) Soomaaliya Hees astaan u ah qaranka wey leedahay waana "Qolobaa Calankeed" | 3. Hees-astaameedka qaranka Soomaaliya waa "Qolaba calakeedu waa cayn" Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawlad-goboleedyada iyada ayay u adeegsanayaan munaasabadaha rasmiga ah. | *Nuxurka Faqradda 3aad ee heesta atsaanta Qaranka "**Qolobaa Calankeed**" waxba lagama beddelin aan ka ahayn in lagu kordhiyay inay tahay astaanta Dawladda Federaalka, isla markaasna ay u adeegsanayaan dawlad goboleedyada munsaabadaha rasmiga ah si loo adkeeyo midnimada qaranka.* |
| (4) Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya waxey yeelan doonaan calankooda iyo astaantooda u gaarka ah si waafaqsan nidaamka Federaalka. | *4. Dawlad goboleedyada xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay yeelan karaan calan iyo astaan u gaar ah, balse ma yeelan* karaan Hees astaameed iyaga u gaar ah. | *Faqradda 4aad waxaa la badalay "**Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka"** laguna badalay **"Dawlad Gobolleed"** oo loo arkay mid ku haboon. Waxaa kaloo faqaradda lagu daray in aysan yeelan Karin hees astaameed iyaga u gaar ah si loo adkeeyo midnimada Qaranka.* |

| Qodobka 7aad: Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | Qodobka 7aad: Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | *Ereyga "Dhulka" waxaa lagu beddelay "Geyiga".* |
|---|---|---|
| (1) Gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay koobeysaa dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil, oo ay ku jiraan berriga, badaha, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda Sare iyo geyi-qaaradeedka iyo dhul iyo biyo-goboleed kasta oo ku soo biira Jamhuuriyadda Soomaaliya, si waafaqsan sharci uu Baarlamaanka Qaranku ansixiyo. | 1. Gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay gaarsiisan tahay geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil, oo ay ku jiraan berriga, badaha, webiyada, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda Sare iyo geyi-qaaradeedka iyo dhul iyo biyo-goboleed kasta oo ku soo biira Jamhuuriyadda Soomaaliya. | *Faqradda 1aad waxaa laga badalay "Dhulka" laguna badalay "Geyiga" maadaama erayga "geyiga " uu ka micno ballaaran yahay erayga "Dhulka" uuna koobayo Dhulka, Badda iyo Cirkaba.*<br>*Sidoo kale Ereyga "koobeysaa" waxa lagu beddelay "gaarsiisan tahay" maadama ay ka macna weyn tahay, waxaa ereyga "Sharci" lagu bedeley "Xeer"*<br>*Waxaa kale oo la soo kordhiyey webiyada.* |
| (2) Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma xad-gudbaan lamana qaybin karo. | 2. Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma xad-gudbaan lamana qaybin karo. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (3) Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee khilaafaadka soohdimaha caalamiga ka dhasha in xalilintooda loo maro tub nabadeed iyo iskaashi waafaqsan qawaaniinta Dalka u degsan iyo kuwa Caalamiga ah. | | *Waxaa la isku raacay in faqraddan gabi ahaan la tiro maadaama ay shaki gelneyso soohdimaha geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayna u horsedeyso inay khilaafaad ka abuurmi karaan xuduudeheeda.* |
| (4) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa xuduudihii ku astaansanaa Dastuurka 1960 ee Soomaaliya. | | *Sababta loo tiray Faqradda 4aad ee Qodobkan waxay tahay in Dastuurka 1960kii aysanku caddayn Xuduudoastaansan oo ay laheedJamhuuriyadda Soomaaliya.* |

| | | |
|---|---|---|
| (5) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:<br>a. Waqooyi: Gacanka Cadmeed;<br>b. Waqooyi Galbeed: Jabuuti;<br>c. Galbeed: Itoobiyia;<br>d. Koonfur Galbeed: Kenya;<br>e. Bari: Badweynta Hindiya. | 3. Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:<br>a. Waqooyi: Gacanka Cadmeed;<br>b. Waqooyi Galbeed: Jabuuti;<br>c. Galbeed: Itoobiyia;<br>d. Koonfur Galbeed: Kenya;<br>e. Bari: Badweynta Hindiya. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| Qodobka 8aad: Shacabka iyo Jinsiyadda | Qodobka 8aad: Shacabka iyo Jinsiyadda | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waa mid, lamanakala qaybin karo, wuxuuna ka kooban yahay dhammaan muwaadininta. | 1. Muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waa mid, lamana kala qaybin karo. | *Faqraddaan waxaa loo qoray hab qaanuuneed, ayadoo lasoo koobay.*<br>*Waxaa kaloo lagu kordhiyey "Federaalka"* |
| | 2. Jinsiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa lagu yeelan karaa isir ahaan ama siismo. | *Faqrad Cusub:*<br>*Faqradda waxay tilmaamaysa in jinsiyadda lagu heli karo oo kaliya laba hab oo kala ah "Isir" ama "dawladda oo siisa qofka. Maadaama ay muhiim tahay in dastuurku uu tilmaamo habka lagu helo karo jinsiyadda Soomaaliya.* |
| (2) Jinsiyadda Soomaaliyeed waa mid qurah, sharci gaar ah oo ay soo saaraan Golaha Shacabka ee Dawlada Federaalka Soomaaliyeed ayaana xaddidaya sida lagu helayo, lagu laalayo ama lagu waayayo. | | *Faqradda waxaa loo raray faqradda 5aad ee qodobkaan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (3) Qof leh jinsiyadda Soomaaliyeed lagama qaadi karo jinsiyadda Soomaaliyeed, xataa hadduu qaato jinsiyad dal kale. | 3. Muwaaddinka Jamhuuriyadda Soomaaliya ee qaata jinsiyad dal kale ma luminayo jinsiyadiisa. | *Faqraddaan waxaa loo qoray hab qaanuuneed oo tilmaamaysa* |
| (4) Diidmada, laalista iyo ka-qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed. | 4. Diidmada, hakinta iyo ka-qaadista jinsiyadda. Laguma salayn karo siyaasad, xaalad dhaqaale, jinsi iyo isir midna | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| | 5. Jinsiyadda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed waa mid qura, xeer gaar ah oo uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo kaliya ayaa xaddidaya sida lagu helayo, lagu hakinayo ama lagu waayayo. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. Waxaana laga soo raray Faqradda 2aad ee qodobkan ee asalka dastuurka.*<br><br>*Waxaan ku darney "Jumhuuriyadda" ayadoo ereyga "Sharci" lagu bedely "xeer" waxaana lagu sameeyey siiqeyn.* |
| **Qodobka 9aad: Magaalo-madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Qodobka 9aad: Magaalo-madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | ***Waxba lagama beddelin*** |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Magaalo-madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Muqdisho. Maqaamka magaalo-madaxda waxaa go'aan looga gaari doonaa dib u eegista dastuurka, waxaana sharci gaar ah ka soo saari doona labada aqal baarlammaanka. | **XULASHADA 1aad (Degmo Caasimad ah oo hoostimaada Dawladda Federaalka)**<br>1. Magaalo-madaxda waxay noqoneysaa degmo magaalo madax u ah Dowladda Federaalka.<br>2. Degmada magaala-madaxda federaalku kama mid noqon karto qayb ka mid ah dowlad goboleed.<br>3. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in uu soo saaro xeer gaar ah oo nidaamiya is-xukun dimuqaraadi ah oo lagu maamulo degmada magaala-madaxda federaalka.<br>4. Xeerka doorashooyinka federaalku waa in uu siiyaa muwaadiniinta degan degmada magaala madaxda, xaq ay ku dooran karaan wakiilo u matala Golaha Shacabka, waana in aysan matalaadaas ku waayin deganaanshada ay degan yihiin degmada magaala-madaxda Dowlada Federaalka awgeed. | *Waxaa laga diyaariyey seddex xulasho si wadatashi looga yeesho, kadibna loo doorto hal xulasho.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | XULASHADA 2aad (Caasimad ah Dawlad Goboleed ah)<br>1. Magaala-madaxda federaalku waxay noqonaysaa dowlad-goboleed; leh maqaam iyo xuquuq la mid ah kuwa Dowlad Goboleedyada<br>2. Magaala-madaxda federaalku kuma biiri karto gobol kale ma noqon karto qayb dowlad goboleed kale ku dhul ballaarsato.<br>3. Xukuumadda Dawlad Goboleedka ee magaala-madaxda federaalka iyo Xukuumada Federaalku waa in ay dhowraan mabaadi'da xiriirka iskaashiga ee ku xusan dastuurkan. Waa in ay si gaar ah ugu heshiiyaan arimaha canshuuraha iyo xeerarka kale ee nidaaminaya dhulalka iyo dhismooyinka ay leedahay ama ay deggan tahay xukuumada federaalku ee ku dhexyaal magaala-madaxda. | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | **XULASHADA 3aad (Caasimad Ku-dhextaal Dawlad-Goboleed)**<br>1. Caasimada magaala madaxda federaalku waxay ahaanaysaa magaalo ku dhextaal dowlad goboleed.<br>2. Xukuumadda dawlad-goboleedka ay magaala madaxdu ku dhextaal, iyadoo la tashanaysa Dowladda Fedelaaka waa in ay soo saartaa xeer gaar ah oo qeexaya maqaamka Caasimada Federaalka.<br>3. Golaha maamul ee Caasimada Federaalka, Dowlad Goboleedka ay ku taallo Magaalo Madaxda iyo xukuumada federaalku waa in ay ilaaliyaan mabaadi'da xiriir iskaashiyeedka ee uu dhigayo dastuurku, waana in ay si gaar ah uga heshiiyaan arimaha canshuuraha, xeerarka kale ee nidaaminaya dhulalka iyo dhismooyinka ay leedahay ama ay degentahay xukuumada federaalku ee ku dhexyaal magaala madaxda. | |

DRAFT

| CUTUBKA LABAAD<br>XUQUUQDA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADDINKA | | |
|---|---|---|
| Asali Dastuurka KMG | Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
| CUTUBKA LABAAD: XUQUUQDA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADDINKA | CUTUBKA LABAAD: XUQUUQDA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADDINKA | *Waxba lagama beddelin* |
| Madaxa Koowaad: Mabaadii'da Guud Ee Xuquuqda Aadanaha | Madaxa Koowaad: Mabaadii'da Guud Ee Xuquuqda Aadanaha | *Waxba lagama beddelin* |
| Qodobka 10aad: Karaamada Aadanaha | Qodobka 10aad: Karaamada Aadanaha | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Karaamada aadanuhu waa deeq | 1. Karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |

| | | |
|---|---|---|
| Ilaahey Subxaanahu wa tacaalaa ku mannaystay qof kasta oo Banii'aadan ah, xuquuqda aadanahuna deeqdaas ayey ka dhalataa. | ku mannaystay qof kasta oo bani'aadan ah, xuquuqda aadanahuna deeqdaas ayey ka dhalataa. | |
| (2) Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan. | 2. Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (3) Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin meel-uga-dhicid karaamada Aadanaha. | 3. Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin ku xadgudbidda karaamada Aadanaha. | *Faqaradan waxaa la tiray ereryada "meel-uga-dhicid" iyadoo lagu bedelay "xadgudub" oo ah mid ku habboon.* |
| | 4. Qofna lama addoonsan karo, xoogna looguma shaqeysan karo, lagamana ganacsan karo, shaqana laguma qasbi karo ujeeddo kasta ha laga lahaade. | *Nuxurka Faqaraddan waxaa laga soo raray Qod. 14aad ee Dastuurka, waxaa lagu daray qodobka 10aad ee soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka, iyadoo loo arkay inay la xiriirto karaamada aadanaha.* |
| Qodobka 11aad: Sinnaanta | Qodobka 11aad: Sinnaanta | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Muwaaddiniinta oo dhan, iyagoo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, xirfad, dhalasho iyo afguri toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba waa u siman yihiin sharciga hortiisa. | 1. Muwaaddiniinta oo dhan, iyagoo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, xirfad, dhalasho, isir, da' iyo afguri toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba way u siman yihiin sharciga | *Farqadda 1aad waxaa lagu soo kordhiyay "midab, isir iyo da'" si aysan u noqon halbeegyo lagu faquuqo, loona adkeeyo sinnaanshaha muwaadiniinta.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | hortiisa. | |
| (2) Wax fal takoorid ah haddii natiijadiisu noqoto is-hortaag ama ciriirigelin xaqa qofka, xataa haddii falka si ulakac ah aan loo samayn. | | *Waa la tiray Faqraddan:*<br>*Sababta loo tiray ayaa ah inay ku celcelin tahay maadama lagu sheegay Faqrada 3aad ee isla qodobkan.* |
| (3) Xukuumadda ma takoori karto Qofnaba iyadoo sababeysaneysa da'da, sinjiga, midabka, qabiil, isir, dhaqan ama lahjad, jinsi, dhalasho, Curyaannimo, diin, siyaasad ama fikir, xirfad, mulkiyad | 2. Waxaa reebban in qofna lagu sameeyo takoor ku salaysan da'da, midabka, qabiil, isir, dhaqan, afguri, lab iyo dhedig, dhalasho, naafannimo, diin, afkaar siyaasadeed, xirfad, hanti ama sababo kale. | *Faqradda 3aad waxa la tiray erayga "Xukuumadda" si falalka takooridda ku salaysan aysan keligeed ku koobnayn balse ay u hogaansamaan cidkasta.* |
| (4) Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada Xukuumadda sida Shuruuc, hab siyaasadeed iyo hab maamul ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu geystey takoorid ama ku sugan xaalad dib-u-dhacsan. | 3. Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada Dowladda sida Shuruucda, hab siyaasadeed iyo hab maamuleed ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu geystey takoorid ama ku sugan xaalad dib-u-dhacsan. | *Nuxurka Faqraddan waxba lagama beddelin balse waxaa eryega "xukuumadda" lagu beddelay eryaga "dawladda" si loo ballaariyo macanahay oo aysoo gasho dhammaan qaybaha kala duwan ee dawladda.* |
| Qodobka 12aad: Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah | Qodobka 12aad: Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Xuquuqda asaasiga ah iyo xorriyadda lagu aqoonsaday qaybtan waa in la dhowraa marka kasta oo sharci la dejinayo lana fulinayo. Sidoo kale, qof | 1. Hay'addaha Dawladda Heer Federaal iyo heer Dawlad-gobleedba, urur kasta oo gaar loo leeyahay iyo qof kastaba | *Faqradda 1aad waxaa looqoray hab qaanuuneed iyadoo nuxurka waxba laga bedelin.* |

| | | |
|---|---|---|
| kasta, hay'adaha Dawladda ee heer kasta iyo hay'adaha gaarka ah iyo saraakiisha Dawladdu marka ay gudanayaan xilkooda waa in ay ilaaliyaan xuquuqda aasaasiga ah. | waa in ay u hoggaansamaan markasta xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyaadka lagu aqoonsaday Cutubkaan. | |
| (2) Waajibaadka Dawladdu kuma koobna in ay dhawrto xuquuqda dadka, balse waa in ay qaaddo tallaabooyin maangal ah oo lagu ilaalinayo in xadgudub uga yimaado cid kale. | 2. Waa in mar kasta dowladdu ilaalisaa, damaanad qaadana fulinta iyo ku dhaqanka xuquuqda aasaasiga. | *Faqradda 2aad waxaa lagu qoray hab qaanuuneed iydoo nuxurka waxba laga bedelin. Ereyga "dhowrto" waxaa lagu beddelay "ilaalisaa, damaanad qaadana".* |
| (3) Xuquuqda lagu aqoonsaday cutubkan sharci uun baa lagu xaddidi karaa sida ku xusan Qodobka 38. | | *Sababaha loo tirtiray Farqadda 3aad ayaa ah in Faqraddan ay tahay mid ku celcelis. Qof kasta wuxuu ogaan karaa nidaamka xadidaada xuquuqaha marka uu si guud u aqriyo.* |
| Madaxa Labaad: Xuquuqda, Xorriyaadka Aasaasiga Ah Ee Qofka Iyo Xaddidaadooda | Madaxa Labaad: Xuquuqda, Xorriyaadka Aasaasiga Ah Ee Qofka Iyo Xaddidaadooda | *Madaxan waxaa la soojeediyay in laga tiro halkan waxaana loo raray hadlaya xuquuqda xorriyaadka Aasaasiga oo ku xusan Qodobka 38aad, oo ka hadlaya Dhaqangelinta, Fasiraadda iyo Xaddidaadda Xuquuqda Aasaasiga ah.* |
| Qodobka 13aad: Xaqa Nolosha | Qodobka 13aad: Xaqa Nolosha | *Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka F.G: Cinwaanka waxba lagama baddelin* |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay nolol. | 1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nolol | *Faqaraddan 1aad waxba lagama baddelin* |

| | | |
|---|---|---|
| | 2. Nolosha waa deeq Ilaahay, waana xaq dabiici ah oo bini'aadamku leeyahay. Qofna lagama qaadi karo xaqaas haddii aysan jirin asbaabo sharcigu tilmaamayo in xaqaasi lagu waayi karo. | *Faqrad cusub:*<br>*Sababta Faqradda 2aad loogu soo kordhiyay Qodobkaan ayaa ah in Xaqa Nolosha ee lagu soo sheegay Faqrada 1aad, lana xaddeeyo si waafaqsan Sharciga, marka uu la yimaado ama galo fal dambi oo uu ku waayi karo xaqaasi* |
| | 3. Soo rididda ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii aan ka ahayn xaalad caafimaad aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada. | *Waxaa laga soo raray Qod. 15(5) sababta loo soo raray ayaa ah inay xiriir la leedahay xaqa nolosha, maadama ay nolosha ka bilaabato marka ilmaha calool galo.* |
| Qodobka 14aad: Addoonsi, Midiidin iyo Ku-shaqaysi Qasab ah | | *Qodobkan waa la rarey* |
| Sinaba qof looma addoonsan karo, midiidin lagama dhigan karo, lagama ganacsan karo, qasabna looguma shaqaysan karo. | | *Qodobkan waxaa loo raray Qodobka 10 (4) ee Isla Cutubkan.* |
| Qodobka 15aad: Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada | Qodobka 14aad: Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabagelyada qofnimadiisa. | 1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabagelyada qofnimadiisa. | *Faqraddaan sideedii baa loo qaatay.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay amaan shaqsiyadeed waxaa ka mid ah: ka-reebanaan xarig aan sharciga waafaqsaneyn, waxaa kaloo xorriyadda qofnimo ka mid ah ka-reebanaan wax kasta oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay wax kasta oo cunfi ah oo lagula kaco haweenka. Qofna looma geysan karo jirdil, fal bini'aadantinamada ka baxsan. | 2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay ammaan qof ahaantiisa iyo hantidiisa; Qofna looma geysan karo jirdil, fal bini'aadantinamada ka baxsan; waxaana reeban xarig aan sharciga waafaqsaneyn iyo wax kasta oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay kan lagula kaco haweenka. | *Nuxurkii faqraddan waxba lagama baddelin, waxaa loo qoray hab qaanuuni ah.* |
| (3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay badqabka jirkiisa waana laguma xad gudbaan. Qofna laguma qasbi karo in lagu sameeyo tijaabo takhtareed ama mid cilmibaariseed, haddii qofka ama xigtadiisa dhowi aynan oggolaanin islamarkaasina aysan jirin talo uu bixiyey xeeldheere caafimaad marka uusan qofku sharciyan awood u lahayn inuu wax oggolaado. | 3. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay badqabka jirkiisa waana laguma xad gudbaan. Qofna laguma qasbi karo in lagu sameeyo tijaabo takhtareed ama mid cilmibaariseed, haddii qofka ama xigtadiisa dhowi aynan oggolaanin islamarkaasina aysan jirin talo uu bixiyey xeeldheere caafimaad marka uusan qofku sharciyan awood u lahayn inuu wax oggolaado. | *Faqraddaan sideedii baa loo qaatay* |
| (4) Gudniinka gabdhaha waa caado naxariis-darro iyo xaqiraad u dhiganta jirdil. Gudniinka gabdhaha waa reeban yahay. | 4. Gudniinka Fircooniga ah ee gabdhaha waa caado naxariis-darro iyo xaqiraad u dhiganta jirdil waana reeban yahay. | *Faqraddaan waxaa lagu qoray hab kooban oo qaanuuni ah.* |
| (5) Soo rididda ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii aan ka ahayn xaalad caafimaad aan looga maarmin badbaadinta nolosha | | *Waxaa loo raray Qod. 13(3) sababta loo raray ayaa ah inay xiriir la leedahay xaqa nolosha, maadama ay nolosha ka bilaabato marka ilmaha calool galo* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| hooyada. | | |
| **Qodobka 16aad: Xorriyadda ka-mid-noqoshada** | **Qodobka 15aad: Xorriyadda ka-mid-noqoshada** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro qof kale ama koox. Xaqaas waxaa ka mid ah inuu abaabulo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed. Wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi karo inuu cid kale ku biiro. | Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro dad kale. Xaqaas waxaa ka mid ah inuu abaabulo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed. Wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi inuu cid kale ku biiro. | *Nuxurka qodobkaan waxba lagama baddelin. Ereyada "qof kale ama koox" waxaa lagu beddelay "dad kale".* |
| **Qodobka 17aad: Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada** | **Qodobka 16aad: Xorriyadda Diinta iyo Caqiidada** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Qof kastaa wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa. | Qof kasta wuxuu xor u yahay heysashada iyo ku dhaqanka diintiisa. | *Faqradda 1aad waxaa loo qoray hab qaanuuneed iydoo nuxurka waxba laga bedelin. Soojeedinta habka qoraalka ayaa waxay tahay in si guud ahaan loo tilmaamo in qofkasta loo ogol yahay inuu haysto diintiisa iyo ku dhaqanka diintiisa.* |
| (2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | | *Faqraddan waa la tirtiray, waana ku celis maadaama lagu soo marey Cutubka 1aad qodobkiisa.* |
| **Qodobka 18aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta** | **Qodobka 17aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in | 1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay | *Faqraddan waxaa loo qoray hab* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| uu yeesho, soo bandhigo ra'yigiisa iyo in uu doono, inuu helo oo gudbiyo ra'yigiisa, xog ama afkaar si kastaba. | in uu yeesho ra'yigiisa kuna soo bandhigo hadal, qoraal, saxaafad, farshaxan ama sidii kale oo uu doono si waafaqsan shuruucda Dalka. | *qaanuuneed oo la fahmi karo iyadoo nuxurka waxba laga bedelin. Waxaana lagu soo kordhiyey nuxurka faqraddda 2aad iyo ereyga "si waafaqsan shuruucda Dalka".* |
| (2)Xorriyatu qoolka waxaa ka mid, xorriyadda hadalka, saxaafadda iyo wax walba oo soo gelaya warbaahinta elektaroonikada iyo internet-ka. | | *Nuxurka faqraddan waxaa lagu daray faqradda 1aad ee qodobka.* |
| (3) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu muujiyo hal'abuurkiisa faneed, xorriyaddiisa aqooneed iyo xorriyadda cilmi-baarista. | 2. Qofkasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u soo bandhigo aqoontiisa ama hal'abuurkiisa faafreeb-la'aan. | *Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah ayadoo lagu kordhiyey "faafreeb la'aan".* |
| **Qodobka 19aad: Xurmada Hoyga** | **Qodobka 18aad: Xurmada Hoyga** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Qofna gurigiisa ama meeshii kale ee isaga u gaar ah lama geli karo, lama baari karo, lamana basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la'aantiis. | Amar garsoore oo sababaysan la'aantiis:<br>a. Qofna lama baari karo, lama basaasi karo hoygiisa iyo waxyaabaha u gaarka ah;<br>b. Qofna laguma xadgudbi karo xiriirkiisa isgaarsiineed, lamana shaacin karo xogihiisa gaarka ah<br>c. Qofna hantidiisa lalama wareegi karo sharci la'aan. | *Faqraddan waxaa loo qorey hab qaanuuneed"*<br>*Ereyga "Gurigiisa" waxaa lagu bedeley "hoygiisa". Sidoo kale ereyada "meeshii kale ee isaga u gaar ah" waxaa lagu bedely "waxyaabaha u gaarka ah".* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Waxaa waajib ah in amarka garsooraha si toos ah loogu akhriyo degganaha hoyga, baarahana waxaa ka reeban ku xadgudubka sharciga. | | *Faqradda waxaa la soo jeediyey in la tiro maadaama nuxur ahaan ay ku jirto faqradda kore iyo qodobka 35aad (2).* |
| **Qodobka 20aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka** | **Qodobka 19aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qaybgalo kulammo ama bannaabax oo si xasilooni ah cabasho loogu muujinayo, iyada oo aan oggolaansho loo baahnayn. | 1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qaybgalo kulamo ama bannaanbax, cabasho, taageero oo lagu muujinayo si xasilooni ah, iyada oo aan oggolaansho loo baahnayn. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatey marka laga reebo soo kordhinta ereyga "Taageero".* |
| (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho qoraal ah u gudbiyo ha'adaha Dawladda. | 2. Qofkasta wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho qoraal ah u gudbin karo hay'adaha dawladda. | *Faqrada 2aad ee Qodobkan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| **Qodobka 21aad: Xorriyadda Isu-socodka iyo Degitaanka** | **Qodobka 20aad: Xorriyadda Isu-socodka iyo Degitaanka** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Qof kasta oo si sharci ah ku deggan dhulka Jamhuuriyaddu wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u degi karo, ugu dhex-socon karo meel kasta oo dalka ka mid ah, kana bixi karo. | 1. Qof kasta oo dalka sharci ku jooga wuxuu xaq u leeyahay in uu dego meesha uu rabo, kuna dhex socdo kana baxi karo dalka gudihiisa si xor ah. | *Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama bedelin marka laga reebo siiqada.* |
| (2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay soo-gelidda iyo joogitaanka | 2. Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay soo-gelidda iyo | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatey.* |

| | | |
|---|---|---|
| waddanka iyo inuu helo Baasabboor. | joogitaanka waddanka iyo inuu helo Baasabboor. | |
| **Qodobka 22aad: Xaqa Ka-qaybgalka Siyaasadda** | **Qodobka 21aad: Xaqa Ka-qaybgalka Siyaasadda** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Muwaaddin kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qayb-qaato arrimaha guud ee dadweynaha. Xaqa kan waxaa ka mid ah:<br><br>(a) Inuu samaysan karo ama ka mid noqon karo xisbi siyaasadeed, kana qayb-qaadan karo hawlihiisa;<br><br>(b) In xisbi siyaasadeed gudihiisa looga dooran karo jago kasta. | 1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qeyb qaato siyaasadda dalka, uuna sameysan karo, kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed, loona dooran karo jago kasta oo xisbiga gudihiisa ah, si waafaqsan shuruucda dalka. | *Faqradda 1aad waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn qaabka iyadoo laga dhigay hal faqro lagana saaro xarfaha (a) iyo (b).* |
| (2) Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha sharciga tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto, lana doorto. | 2. Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha sharciga tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto, lana doorto. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| | 3. Waaxaa reeban Ururo siyaasadeed ama koox qarsoodi ah, lehna qaab ciidan iyo magac qabiil. | *FG: Waxaan soo kordhinay farqaddan anagoo tixraaceyna Dastuurkii 1960kii si looga hortago ururada qarssodiga ah.* |
| (3) Xuquuqda ku xusan faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan waa in loogu dhaqmaa si waafaqsan Dastuurkan iyo sharci | *4.* Xuquuqda ku xusan Farqadaha (1) iyo (2) ee Qodobkaan waa in loogu dhaqmaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeer uu ansixiyo | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka Federaalka. | Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | |
| **Qodobka 23aad: Xorriyadda xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda** | **Qodobka 22aad: Xorriyadda xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda** | *Waxba lagama beddelin* |
| Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u doorto xirfadda, shaqada ama mihnadda uu rabo. | Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u doorto xirfadda, shaqada ama mihnadda uu rabo. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| **Qodobka 24aad: Xiriirka Shaqada** | **Qodobka 23aad: Xiriir Shaqo oo Caddaalad ku Dhisan** | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xiriir shaqo caadil ah. | 1. Qofkasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan caddaalad. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (2) Qof kasta oo shaqaale ahi wuxuu xaq u leeyahay inuu abuuro, kuna biiro urur shaqaale, kana qayb-galo hawlaha ururkaas. | 2. Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay inuu abuuro, kuna biiro urur shaqaale, kana qayb-galo hawlaha ururkaas. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (3) Shaqaale kastaa wuxuu xaq u leeyahay shaqo-joojin. | 3. Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay shaqo joojin, hadii aysan wax yeeleyneynin nabadgelyada iyo danta guud. | *Faqraddan waxaa loogu kordhiyay in xaqa shaqo joojinta uusan waxyeeleynin danta guud, habsami u socodka hawlaha aasaasiga ah iyo dhawrista nabad gelyada guud.* |
| (4) Urur shaqaale, ama loo-shaqeeyayaasha amase loo-shaqeeyaha | 4. Urur Shaqaale kasta ama loo shaqeeye kasta waxay xaq u | *Farqaddaani sida ay tahay ayaa loo qaatay.* |

| | | |
|---|---|---|
| waxay xaq u leeyihiin inay galaan gorgortan-wadareed ku saabsan arrimaha shaqada | leeyihiin in ay wada geli karaan gorgortan wadareed oo ku saabsan arrimaha shaqada. | |
| (5) Qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan dumarka waxa ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faraxumeyn, faquuqid iyo takoorid goobaha shaqada. Sharci kasta shaqaale iyo hab dhaqan kasta waa inuu waafaqsanaadaa sinaanshaha jinsiga ee goobaha shaqada. | 5. Qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan dumarka waxa ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faraxumeyn, faquuqid iyo takoorid goobaha shaqada. Sharci kasta oo shaqaale iyo hab dhaqan kasta waa inuu waafaqsanaadaa sinaanshaha jinsiga ee goobaha shaqada. | *Farqaddaani sida ay tahay ayaa loo qaatay.* |
| | 6. Dadka naafada ah waa in la siiyo sinnaan buuxda goobaha shaqada, loona suurtageliyaa qaab kasta oo u fududeynaya shaqadooda. | *Waa Farqad cusub:*<br>*Farqaddaani Waxaa loogu soo daray si loo ilaaliyo xuquuqda shaqo ee dadka naafada iyo in ay helaan dhammaan waxyaabaha u fududayn kara gudashada shaqadooda.* |
| **Qodobka 25aad: Deegaanka** | **Qodobka 24aad: Deegaan iyo Bii'ad Nadiif ah** | ***Waxaa lagu daray Bii'ad Nadiif ah*** |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo Deegaan aan waxyeello u lahayn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyaalaha halista ah. | 1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo deegaan iyo bii'ad nadiif ah, lagana ilaaliyo wasakhda iyo waxyaalaha halista ku ah noolaha. | *Faqradaan waxaa loo habeeyay loona qoray hab qoris sharci iyadoo aysan waxba ka baddelin nuxurka, waxaana lagu daray erayga "noolaha".* |
| (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo laga ilaalinaayo ka | 2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo | *Faqradan sideeda ayaa loo qaatey.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| faa'ideysi xad-dhaaf ah oo Deegaanka waxyeello u geysan kara. | laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad dhaaf ah oo deegaanka waxyeello u geysan kara. | |
| Qodobka 26aad: Hantida | Qodobka 25aad: Hantida Gaarka Loo Leeyahay | *Waxaa lagu daray* Gaarka Loo Leeyahay |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu hanti yeesho, ku dhaqmo, ku naalloodo, iskana gado ama iska wareejiyo markuu doono. | 1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu hanti gaar ah yeesho, ku dhaqmo, ka faa'ideysto, kuna naalloodo iskana gado ama hibeeyo markuu doono. | *Faqradaan waxaa loo habeeyay loona qoray hab qoris sharci iyadoo aysan waxba ka baddelin nuxurka, waxaa la bedeley erayga "ku naalaado" waxaa lagu bedeley "ka faaideysto", sidoo kale erayga "iska wareejiyo" lagu bedeley "hibeeyo"* |
| (2) Dawladdu waxay si qasab ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loola wareegey wuxuu Dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddil ah oo lagu heshiiyey ama ay maxkamadi go'amisay | 2. Dawladdu waxay si qasab ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loola wareegey wuxuu Dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddil ah oo lagu heshiiyey ama ay maxkamadi go'amisay. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatey.* |
| Qodobka 27aad: Dhaqaalaha iyo Xuquuqda Bulshada | Qodobka 26aad: Xuquuqda Bulshada | *Wax baa laga beddelay*<br><br>Cinwaanka waxaa laga tirey "Dhaqaalaha". |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay biyo nadiif ah uu cabo. | 1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo biyo nadiif ah uu cabo. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay* |
| (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo dareyeel caafimaad, cidna lagama | 2. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo daryeel | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay ayadoo loo qorey hab qaanuuni ah.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| hor istaagi karo daryeel caafimaad oo deg deg ah sabab kasta, oo ay kamid tahay awood la'aan dhaqaale. | caafimaad, aydoo qofna laga reebi karin helitaanka adeegyada caafimaadka deg-deg ah sabab kasta ha jirtee. | |
| (3) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay daryeel bulsho oo dhammaystiran. | 3. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay daryeel bulsho oo dhammaystiran. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (4) Xuquuqada lagu aqoonsaday qodobkan waxaa ka mid ah xaqa qof kastaa uu u leeyahay inuu si sharciga waafaqsan u ilaashado, raadsado, si buuxdana xuquuqdaas u gaaro, iyadoo aanay Dawladdu ama cid kale ku soo faraggelin | 4. Hay'adaha dowladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in si dhab ugu sugaan Dadweynaha dhamaantood taabbo galinta xuquuqdaas, ayagoo si gaar ah mudnaan u siinaya haweenka, Caruurta, waayeelka iyo naafada. | *Farqaddaani waxaa loo bedeley si loo cadeeyo masuuliyadda ka saran dawladda taaba gelinta xuquuqdan iyadoo si gaar ah u tixgelineysa haweenka, dadka da'ada ah iyo naafada iyo dadka laga tiro badan yahay. Sidoo kale faqradan waxaa lagu soo kordhiyey Faqradda 5aad ee isla qodobkan.* |
| (5) Waa in la hubiyaa in dumarka, dadka da'da, naafada iyo dadka laga tiro badan yahay oo taariikhiyan latakoori jiray inay helaan kaalmo gaar ah si ay ugaaraan xuquuqdooda dhaqan –dhaqaale. | | *Faqradaan waxaa nuxureekda lagu daray faqradda 4aad ee isla qodobkan ee soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka.* |
| **Qodobka 28aad: Daryeelka Qoyska** | **Qodobka 27aad: Daryeelka Qoyska** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Guurku waa aasaaska qoyska oo ah saldhigga bulshada, ilaalintiisuna waa waajib sharci ah oo saaran Dawladda. | 1. Guurku waa aasaaska qoyska oo ah saldhigga bulshada, ilaalintiisuna waa waajib sharci | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatey.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | ah oo saaran Dawladda. | |
| | 2. Qof kasta oo qaangaara wuxuu xaq u leeyahay in uu guursado uuna helo qoys ku yimid rabitaankiisa, si waafaqsan shareecada Islaamka. | *Waa Faqrad cusub.* |
| (2) Daryeelka Hooyada iyo Dhallaanka waa waajib saaran Dawladda. | 3. Daryeelka Hooyada, dhallaanka iyo caruurta waa waajib qaran oo saaran Dawladda. | *Faqraddan waxaa lagu kordhiyeye ereyada "Caruurta" iyo "Qaran".* |
| (3) Ubadku wuxuu waalidkiis xaq ugu leeyahay xannaano ay ka mid tahay waxbarasho iyo barbaarin. Haddiise xannaanadaas uu ka waayo deegaanka qoyskiisa waa in loo yeelo cid kale oo daryeesha. Isla xuquuqdan oo kale ayay leeyihiin carruurta dariiq-joogga ah iyo kuwa aan waalidkood la aqoonnin, Dawladda ayaana si gaar ah ugu xilsaaran inayxuquuqdooda ilaaliso, si buuxdana ay u helaan. | *4.* Ubadku wuxuu waalidkiis xaq ugu leeyahay xannaano ay ka mid tahay waxbarasho iyo barbaarin toosan. Haddiise xannaanadaas uu ka waayo qoyskiisa ama xigtadiisa, ama uu yahay ubad dayacan, Dawladda ayaa kafaala qaadaysa xuquuqdaas. | *Farqaddaan waxaa lagu kordhiyey erayga "toosan", waxaana la bedalay erayada "cid kale " oo lagu bedalay "Xigtadiisa". Hadii xigtadiisa ay xanaaneyn weyso Dawlada ayaa kafaala qaadeyso xanaanadiisa.*<br>*Sidoo kale, waxaa la bedalay erayada "caruurta dariiq-jooga ah" laguna bedalay "caruurta dayacan".* |
| (4) Waalidka aan iskii isugu filnayn wuxuu ubadkiisa qaangaarka ah xaq ugu leeyihiin daryeel sharci ah. | 5. Waalidka aan iskiis isugu filnayn wuxuu ubadkiisa qaangaarka ah xaq ugu leeyahay in uu ka helo daryeel. | *Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (5) Guur ansaxayaa ma jiro haddaanay si xor ah iyo oggolaansho ninka iyo naagta ka timid jirin. Labaduba waa inay gaareen | | *Faqraddan 5aad waxaa nuxurkeeda loo rarey faqradda 2aad ee qodobkan.* |

| | | |
|---|---|---|
| da'da guurka. | | |
| | 6. Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidmaaniya arrimaha qoyska. | *Farqad cusub* |
| Qodobka 29aad: Caruurta | Qodobka 28aad: Xuquuqda Carruurta | *Waxa lagu daray Xuquuqda* |
| (1) Ubad kastaa markuu dhasho wuxuu xaq u leeyahay inuu helo magac suubban iyo jinsiyad. | 1. Ubadku markuu dhasho wuxuu xaq u leeyahay in loo bixiyo magac suuban, helana diiwaangelin rasmi ah. | *Faqradaani waxaa lagu daray erayada "diiwaangelin rasmi ah", si mustaqbalka loo diiwaan geliyo dhamaan Umadda Soomaaliyeed, waxaa laga tiray erayga "jinsiyad" maadaama caruurta ku dhalata Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay isugu jiri karaan kuwa ay muwaadiniin Jamhuuriyadda Soomaaliya ay dhaleen iyo kuwa shisheeye ay dhaleen, sidaa awgeed ayaa looga tiray jinsiyad si ubad shisheeyaha dhaleen ee ku dhasha Soomaaliya looga reebo xaqa helidda jinsiyadda iyadoo loo sababaynayo ku dhalashada geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.* |
| | 2. Caruur waxaa loola jeeda qof kasta 18 sano ka yar. | *Faqraddan waxaa laga soo rarey faqradda 8aad ee qodobkan.* |
| (2) Ubad kastaa wuxuu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo dhaqanxumo, dayacaad, xadgudub ama liiditaan. | 3. Ubad kastaa wuxuu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo dhaqanxumo, dayacaad, xadgudub ama liiditaan. | *Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay.* |

| | | |
|---|---|---|
| (3) Carruurta looma diri karo inay qabtaan hawl, ama adeegyo aan ku habboonayn da'dooda, ama halis gelin kara caafimaadkooda ama koritaankooda. | 4. Carruurta looma diri karo inay qabtaan hawl, ama adeegyo aan ku habboonayn da'dooda, ama halis gelin kara caafimaadkooda ama koritaankooda. | *Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (4) Carruurta waxaa la xiri karaa oo keliya muddo gaaban markii la waayo xal kale, lagumana hayn karo dadka waaweyn dhexdooda marka laga reebo xigtada ugu dhow, waana in lagu hayaa xaalado ku habboon. Xigtada ugu dhow carruurta waa in sida ugu dhaqsaha badan oo suurtogal ah loo war-geliyaa xiritaankooda. | *5.* Carruurta waxaa la xiri karaa oo keliya muddo gaaban markii la waayo xal kale, lagumana hayn karo dadka waaweyn dhexdooda marka laga reebo xigtada ugu dhow, waana in lagu hayaa xaalado ku habboon. Xigtada ugu dhow carruurta waa in sida ugu dhaqsaha badan oo suurtogal ah loo war-geliyaa xiritaankooda. | *Faqraddan waxaa loo qorey hab qaanuuneed.* |
| (5) Ubadku waxay xaq u leeyihiin inay helaan kaalmo qareennimo oo kharajkeeda ay Dawladdu bixiso, si ay uga badbaadaan dacwad kasta oo caddaalad-darro u keeni karta. | | *Sababta loo tirey waxay tahay waa in aan lagu soo koobin oo keliya Caruurta qof kasta oo eedaysane ah oo aanan awoodin inuu bixiyo qarashka Qareenka marka dacwad faldambiyeed lagu soo oogo.* |
| (6) Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo, loona adeegsan dagaallada hubaysan. | 6. Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo, loona adeegsan dagaallada hubaysan. | *Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay.* |
| (7) Danta carruurta ayaa mar walba mudnaan leh markay joogto arrin kasta oo maslaxaddooda khusaysa. | 7. Danta carruurta ayaa mar walba mudnaan leh markay joogto arrin kasta oo maslaxaddooda | *Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | khusaysa | |
| (8) Ereyga "carruur/ubad" ee qodobkan ku xusan waxaa looga jeedaa qof da'diisu ka yar tahay 18-jir. | | *Faqraddan waxaa loo rarey faqradda 2aad ee qodobkan.* |
| Qodobka 30aad: Waxabarashada | Qodobka 29aad: Waxbarashada | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Waxbarashadu waa xuquuq aasaasiga ah ee ay leeyihiin dhammaan muwaaddiniinta Soomaaliyeed. | 1. Waxbarashadu waa xuquuq Aasaasi ah ee ay leeyihiin dhammaan Muwaaddiniinta Soomaaliyeed. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatey.* |
| (2) Dhammaan muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarasho lacag la'aan ah ilaa iyo dugsi sare. | 2. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho lacag la'aan ah oo gaarsiisan ilaa heer Dugsi Sare. | *Farqaddan sideeda ayaa loo qaatay, haseyeeshee ereyga "Dhamaan Muwaadiniinta" ayaa lagu bedeley "Muwaadin kasta".* |
| | 3. Waxbarashada dugsiyada hoose-dhexe waa khasab. | *Faqrad cusub:*<br>*Sababta loogu soo kordhiyay Faqradaan waxay tahay in sare loo qaado aqoonta Shacabka Jamhuuriyadda Soomaaliya waajibna looga dhigo qof kasta waxbarashada Dugsiga hoose dhexe.* |
| (3) Xukuumaddu waxay mudnaan siinaysaa horumarinta, baahinta iyo fidinta waxbarashada dadweynaha. | 4. Heerarka kala duwan ee Hay'adaha Dawladda ee u xilsaaran waxbarashada, waxaa waajib ku ah horumarinta, fidinta iyo baahinta waxbarashada guud ee dadweynaha. | *Maadaama nidaam federal ah uu dalka ka jiro, Dawladda Federaalka iyo Dawlad Gobaleedkaba waxaa saaran waajibka horumarinta, fidinta iyo baahinta waxbarashada guud.* |
| (4) Waa in lagu dhisaa dugsiyada gaarka ah, machadyada iyo jaamacadaha si sharciga waafaqsan isla markaana la | 5. Heerarka kala duwan ee hay'adaha Dawladda ee u xilsaaran waa in ay | *Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyey ereyada, "heerearka dawladda, tacliinta sare, machadyada farsamo, tiknoolijiyada,* |

| | | |
|---|---|---|
| socdaan barnaamijyada iyo manaahijta waxbarashada dalka. | horumariyaan tacliinta sare, machadyada farsamo, tiknoolijiyada, cilmi barista, hal-abuurka, isboortiga iyo hiddaha iyo dhaqanka. | *cilmi barista, hal-abuurka, isboortiga iyo hiddaha iyo dhaqanka."* |
| (5) Xukuumaddu waxay dhiirigelineysaa sare-u-qaadidda cilmi-baarista, hal-abuurka iyo farshaxanka, horumarinta ciyaaraha hiddaha & dhaqanka, isboortiga iyo dhaqanka suuban ee dadka Soomaaliyeed. | | *Nuxurka Faqraddan waxaa lagu kobciyey farqadda kore ee 5aad.* |
| (6) Xukuumaddu waxay dugsiyada dalka oo dhan ka hirgelinaysaa manhaj midaysan, waxayna hubinaysaa dhaqangalkiisa. | 6. Heerarka kala duwan ee Dawladda ee u xilsaaran waxbarshada waa inay dejiyaan manhaj mideysan oo ay u dhan yihiin dugsiyada dalka, ayna xaqiijiyaan hirgelintiisa. | *Faqradaan waxaa la bedalay erayga "Xukuumadda" laguna bedalay ereyada "Heerarka kala duwan ee Hay'adaha Dawladda" si aysan ugu ekaanin ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda kaliya ay saarantahay horumarinta arrimaha lagu sheegay Qodobkan* |
| (7) Xukuumaddu waxay kobcinaysaa waxbarashada sare, machadyada farsamada, tiknoolojiyadda iyo xarumaha cilmi-baarista. | | *Nuxurka Faqraddan wuxuu ku jiraa farqadda 5aad ee qodobkan.* |
| (8) Waxaa qasab ah in la baro diinta Islaamka carruurta dugsiyada Dawladda iyo kuwa gaarka ah. Arrimmahan laguma dabaqi karo dugsiyada ay leeyihiin dadka | 7. Barashada tacliinta Diinta Islaamka waa ku khasab ardeyda dhigata dugsiyada dawladda iyo dugsiyada gaarka ay leeyihiin dad Muslim ah. | *Faqradaan waxaa loo habeeyay loona qoray hab sharci ah iyadoo aysan waxba ka baddelin nuxurka.* |

| | | |
|---|---|---|
| aan Muslimka ahayn | | |
| Qodobka 31aad: Dhaqanka iyo Afka | Qodobka 30aad: Afka iyo Dhaqanka | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Dawladdu waa in ay horumarisaa hiddaha iyo dhaqanka suubban ee Shacabka Soomaaliyeed, iyadoo ku dedaaleysa in ay bulshada ka suuliso caadooyinka haraaga ah iyo kuwa dhowaan-soo-baxa ah ee wax u dhimaya midnimada, ilbaxnimada iyo caafimaadka bulshada. | 1. Heerarka kala duwan ee hay'adaha Dawladda waa in ay horumariyaan afka, hiddaha iyo dhaqanka suubban ee Shacabka Soomaaliyeed iyagoo ku dadaalaya in ay bulshada ka ciribtiraan caadooyinka xun ee haraaga ah iyo kuwa dhawaan-soo-baxa ah ee wax u dhimaya Diinta, midnimada iyo samaanta bulshada. | *Faqradaan waxaa lagu badalay "Dawladda" laguna badalay "Heerarka kala duwan ee Hay'adaha Dawladda" si aysan ugu e kaanin ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda kaliya ay saaran tahay qabashada arrimaha lagu sheegay Faqradda.*<br>*Sidoo kale, waxaa loo dhigay hab sharci oo aan nuxurka waxba ka badalin, iyadoo lagu daray erayga "xun iyo diinta".* |
| (2) Dawladdu waa in ay ururisaa, ilaalisaa, kaydisaa waxyaabaha iyo xarumaha taariikhiga ah ee dalka, iyadoo horumarinaysa aqoonta iyo farsamada xilkaas lagu gudan karo. | 2. Hay'adaha Dowladda ee ku shaqada leh waa in ay ururiyaan, ilaaliyaan, kaydiyaan dhaxalkii sooyaalka ahaa ee ummadda sida xarumaha taariikhiga ah ee dalka, ayadoo horumarinaysa aqoonta iyo farsamada xilkaas lagu gudan karo. | *Faqradaan waxaa la bedalay erayga "Dawladda" laguna bedalay ereyada "Hay'adaha Dawladda eek u shaqada leh" si aysan ugu e kaanin ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda kaliya ay saaran tahay horumarinta arrimaha lagu sheegay Qodobkan* |
| (3) Dawladdu waa in ay horumarisaa dhaqammada iyo afguriga dadka laga tira badan yahay. | 3. Hay'adaha Dowladda ee ku shaqada leh waa in ay horumariyaan, ilaaliyaana dhaqan hoosaadyada iyo afguriyada dhammaan dadka | *Faqradaan waxaa la bedalay erayga "Dawladda" laguna bedalay ereyada "Hay'adaha Dawladda ee ku shaqada leh" si aysan ugu kaanin ama aysan u noqon Xukuumadda Federaalka midda kaliya ay* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | Soomaaliyeed. | *saarantahay horumarinta arrimaha lagu sheegay Faqradan.* |
| (4) Xuquuqda qodobkan ku xusan waa in loogu dhaqmaa si waafaqsan xuquuqda asaasiga ah ee Dastuurkan lagu aqoonsaday. | | *Faqradan waa la tiray sababtoo waxay si cad ugu xusan tahay mabaadiida guud ee xuquuqda ee ku xusan Cutubkan.* |
| | 4. Xukuumadda Federaalka waa inay abuurto hay'ad si gaar ah u hormarisa Hiddaha, dhaqanka, afka iyo Sooyaalka Soomaaliyeed. | *Waa faqrad cusub.* |
| **Qodobka 32aad: Xaqa Helidda Macluumaadka** | **Qodobka 31aad: Xaqa helidda Xogta** | ***F.G: waxaa erayga "Macluumaadka" lagu bedelay erayga "Xogta"*** |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo macluumaadka ay Dawladdu hayso. | 1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo Xogta ay hayaan hay'adaha Dawladda heer kasta ay ka joogaan Xukuumada, marka laga reebo xogta taabanaysa amniga qaranka. | *Faqradaani waxaa lagu soo kordhiyay in heerkasta oo dawladeed uu bixiyo xogta ay hayaan "marka laga reebo xogta taabanaysa amniga qaranka."* |
| (2) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay helitaanka macluumaadka ay cid kale hayso oo loogu baahan yahay in lagu fuliyo ama lagu ilaaliyo xuquuq kastoo kale oo daw loo leeyahay. | | *Faqraddan waxaa loo tiray iyadoo ay ku xadgudbayso xuquuqda qof kale leeyahay.* |
| | 2. Qof iyo hay'ad midna laguma khasbi karo inuu bixiyo xog haddii aysan maxkamad amrin | *Faqradda cusub:* *Sababta waxay tahay in laga hortago ku khasbid in qofku uu bixiyo xog uu hayo iyadoo awood loo isticmaalayo ilaa iyo* |

| | | |
|---|---|---|
| | | *maxkamadi ka amarto.* |
| (3) Baarlamaanka Federaalku waa in uu soo saaraa sharci lagu hirgelinayo xaqa macluumaad helidda. | *3.* Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa lagu hirgelinayaa xaqa helidda xogta. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatey balse waxaa loo qoray hab qaanuuneed ah.* *Ereyga "Sharci" ayaa lagu bedeley "Xeer" sida ay soo jeediyeen Madasha Gudiyada.* |
| **Qodobka 33aad: Go'aano Maamul oo Caddaalad ah** | **Qodobka 32aad: Go'aano Maamul oo Caddaalad ah** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| 1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aamada ka soo fula maamullada ay ahaadaan kuwo ku dhisan sharci, maangal ah, go'aan-ka-gaaristoodana loo maray hannaan caaddil ah. | 1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aamada ka soo baxa maamullada heerarka kala duwan ee hay'adaha Dowladda ay ahaadaan kuwo ku dhisan sharci, sababaysan, go'aan-ka-gaaristoodana loo maray hannaan caaddil ah. | *Faqradaan waxaa loo habeeyay loona qoray hab qoris sharci iyadoo aysan waxba ka baddelin nuxurka.* |
| | 2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato go'aamada ka soo baxa maamullada heerarka kala duwan ee hay'adaha Dowladda isaga oo horgeynaya Maxakamada awoodda u leh. | *Faqradda cusub:* *Waxaa loogu soo kordhiyay faqrad 2aad oo tilmaamaysa qofka ku qanci waaya go'aan maamul inuu dacwad u gudbin karo maxakamadda awooda u leh.* |
| **Qodobka 34aad: Xaqa Dacwadda iyo Isdifaaca** | **Qodobka 33aad: Xaqa Dacwadda iyo Isdifaaca** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh. | 1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto | *Faqraddaan sideedii baa loo qaatay* |

| | | |
|---|---|---|
| | Maxkamadaha awoodda u leh. | |
| (2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo garsoor madax-bannaan, caaddil ah, aan eex lahayn, laguna qaadayo maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo waqti macquul ah, ama golihii kale ee awood go'aan-gaaris ah u leh:<br><br>(a) Arrin kastoo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka madaniga; ama<br><br>(b) Fal-dembiyeed kasta oo kale lagu soo oogey, ciqaabna lagu mutaysanayo | 2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garsoor madax-bannaan, caddaalad ku dhisan, aan eex lahayn; laguna qaado maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo muddada xeerku jideeyey. | *Faqradaan waxaa qoray hab qoris sharci iyadoo aysan waxba ka baddelin nuxurka, waxaana la soojeediyay in la tiro xarfaha (a) iyo (b). Waxaa kaloo la bedelay erayga "waqti macquul ah" laguna bedeley "muddada ku xadidan shuruucda".* |
| (3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahey inuu iska difaaco dacwadda uu danaynayo, heer iyo darajo kasta oo ay taagan tahay. | 3. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahey inuu iska difaaco dacwad kasta oo lagu soo oogo heer iyo darajo kasta oo ay taagan tahay. | *Faqraddaan sideedii baa loo qaatay.* |
| (4) Dawladdu waxay u kafaalo-qaadaysaa dadka aan awood dhaqaale lahayn inay difaac lacag la'aan ah helaan. | 4. Gar-gaar sharci oo lacag la'aan ah ayaa Dowladdu siineysaa kuwa aan awood u lahayn bixinta qarashka dacwada maxkamadda, waxayna bixinaysaa xushamadda qareenka marka ay dacwadda ku raadinayaan danta guud. | *Waxaa la isku biiriyay Farqaddaha 4aad iyo 5aad ee Qodobokan maadaama ay isku nuxur yihiin.*<br>*Kelimadda "Kaalmo Qaanuuneed" waxaa l;ag bedely "Gar-gaar sharci"* |
| (5) Dawladdu waxay u damaanad qaadaysaa difaac lacag la'aan ah shaqsiyaadka, bulshooyinka marka ay si | | *Waxaa lagu daray Farqaddaha 4aad* |

| | | |
|---|---|---|
| sharci ah ay ugu raadinayaan danta guud. | | |
| Qodobka 35aad: Xuquuqda Eedaysanaha | Qodobka 34aad: Xuquuqda Eedaysanaha | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Eedaysanuhu wuxuu la mid yahay qof barii' ahoo aan dembi gelin ilaa maxkamadi si kama-dambays ah ugu caddayso dembiga loo haysto. | 1. Edaysanuhu wuxuu la mid yahay qof aan dembi gelin illaa Maxkamadda awoodda u leh ay si kama-dambays ah ugu caddayso dembiga loo haysto. | *Ereyga "barii' ahoo" waxaa lagu beddelay kalmadda "qof aan dembi gelin".* |
| (2) Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in isla markiiba la ogeysiiyaa dembiga lagu tuhunsan yahay, looguna sheegaa af uu garanayo. | 2. Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in isla markiiba la ogeysiiyaa dembiga lagu tuhunsan yahay, looguna sheegaa af uu garanayo. | *Faqraddaan sideedii baa loo qaatay* |
| (3) Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in xaaladdiisa la gaarsiiyo qoyskiisa ama eheladiisa. | 3. Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in xaaladdiisa la gaarsiiyo qoyskiisa ama eheladiisa. | *Faqradaan sideedii baa loo qaatay* |
| (4) Qofna laguma qasbi karo dembi-qirasho, xukunkiisana saldhig loogama dhigi karo qiraal lagu qasbay. | 4. Qofna laguma qasbi karo dembi-qirasho, xukunkiisana saldhig loogama dhigi karo qiraal lagu qasbay. | *Faqradaan sideedii baa loo qaatay* |
| | 5. Edaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco | *Faqraddan waxa laga soo raray faqradda 9aad ee isla Qodobkan, siiqadana wax baa laga bedalay, waxayna noqotay faqradda* |

| | | |
|---|---|---|
| | Maxkamadda awoodda u leh horteeda, lana yimaado caddeynta iska rogidda dambiga lagu soo oogay. | *5aad ee soojeedinta wax-ka-bedelka Dastuurka* |
| (5) Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in 48 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamad awood u leh. | 6. Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in 48 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamadda awoodda u leh. | *Faqradaan sideedii baa loo qaatay* |
| | 7. Eedeysannuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu goobjoog ka ahaado dacwaddiisa. | *Faqraddan waxaa laga soo raray faqradda siddeedaad ee dastuurka.* |
| (6) Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen difaaca, haddii uusan awood u lahaynna ay Xukuumaddu u qabato. | 8. Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen difaaca, haddii uusan awood u lahaynna ay Xukuumaddu u qabato. | *Faqradaan sideedii baa loo qaatay* |
| | 9. Eedeysannuhu waxuu xaq u leeyahay tarjumaan haddii uusan fahmayn luqadda maxkamaddu adeegsanayso. | *Faqraddan waxaa laga soo raray faqradda 10aad ee dastuurka.* |
| (7) Qof kasta oo maxkamad lagu soo taagey tuhun fal dembi-ciqaabeed waxa uu xaq u leeyahay garsoor caaddil ah. | 10. Qof kasta oo maxkamad lagu soo taagey tuhun fal dembi-ciqaabeed waxa uu xaq u leeyahay garsoor caaddil ah. | *Faqraddaan sideeedii baa loo qaatay* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 11. Qofna laguma soo oogi karo mar labaad dambi si kama dambeys ah loogu xukumay ama looga sii daayay si sharciga waafaqsan. | *Faqrad cusub: Sababta faqradan loogu soo kordhiyay ayaa ah dhaqangelinta Mab'da guud ee Qanuunka Ciqaabta kaasi ah "in aan Qofna lagu ciqaabi karin laba jeer hal dambi* |
| (8) Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu goobjoog ka ahaado dacwaddiisa. | | *Faqraddan waxaa loo raray faqradda todobaad ee soojeedinta wax-ka-beddelka dastuurka* |
| | 12. Masuuliyadda Ciqaabtu waa shakhsi, qofna looma ciqaabi karo fal-dembiyeed uu galay qof kale. | *Faqraddan waxaa laga soo raray faqradda 12 ee asalka dastuurka, ayadoo loo habeyey hab-qanuuni ah.* |
| (9) Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco caddaymaha la soo hordhigay ee lidka ku ah. | | *Faqraddan waxa loo raray faqradda 5aad ee isla Qodobkan ee soojeedinta dastuurka, waxayna noqotay faqradda 5aad ee soojeedinta wax-ka-bedelka Dastuurka* |
| | 13. Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacaayay uusan sharcigu dembi u aqoonsaneyn, haddii uusan ahayn dembi ka soo horjeeda bani'aadannimada. | *Faqraddan waxa laga soo raray faqradda 13aad ee Asalka Dastuurka ee isla Qodobkan,* |
| (10) Eedaysanaha wuxuu xaq u leeyahay in loo qabto turjumaan hadii uusan garanayn afka maxkamadda laga | | *Faqraddan waxa loo raray faqradda 9aad ee isla Qodobkan ee soojeedinta waxkabeddelka dastuurka,* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| isticmaalayo. | | |
| | 14. Edeysanuhu waxuu xaq u leeyahay in uu racfaan u qaato Maxkamad ka sarreysa tan xukunka gaartay hadduusan ku qancin xukunka Maxkamadda. | *Faqarad cusub: Sababta Faqradda Cusub loogu soo kordhiyay ayaa ah in Dastuurka lagu adkeeyo xaqa racfaan qaadashada ee heerarka kala duwan ee Maxkamadaha.* |
| (11) Eedeysanaha laguma hayn karo goob aan sharcigu bannayn, waana in loo oggolaado booqashada eheladiisa, takhtarkiisa iyo qareenkiisa. | 15. Eedeysanaha laguma hayn karo goob aan sharcigu bannayn, waana in loo oggolaado booqashada eheladiisa, takhtarkiisa iyo qareenkiisa. | *Faqraddaan sideedii baa u qaadanay.* |
| (12) Mas'uuliyada ciqaabtu waa shakhsi, qofna looma ciqaabi karo fal-dembiyeed uu galay qof kale. | | *Faqraddan waxaa loo raray faqradda 12 ee soo-jeedinta waxka-beddelka dastuurka. ayadoo loo habeyey hab-qanuuni ah, lana tirtiray kalmadda "Mas'uuliyada ciqaabtu waa shakhsi,"* |
| (13) Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacay uusan sharcigu dembi u aqoonsaneyn, haddii uusan ahayn dembi ka soo horjeeda bani'aadannimada, laguna caddeeyey qawaaniinta dawliga ah. | | *Faqraddan waxaa loo raray faqradda 13 ee soo-jeedinta waxka-beddelka dastuurka.* |
| Qodobka 36aad: Isucelinta | Qodobka 35aad: Isucelinta | *Waxba lagama beddelin* |

DRAFT

| Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha | Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha | |
|---|---|---|
| (1) Isucelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaa lagu oggolaan karaa oo keliya si waafaqsan sharciga, iyo in uu jiro heshiis isu-celin ah oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhinac ka tahay iyo heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliyeed celinta eedaysanaha ama dembiilaha. | 1. Isucelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaa lagu oggolaan karaa oo keliya si waafaqsan sharciga, iyo in uu jiro heshiis isu-celin ah oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhinac ka tahay iyo heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliyeed celinta eedaysanaha ama dembiilaha. | *Faqraddan sideedii baa loo qaatay* |
| (2) Isucelinta eedaysanaha iyo dembiilaha waa in ay ahaataa mid waafaqasan dhaqanka iyo qaanuunka caalamiga ah, waana in Baarlamaanka Federaalka ah soo saaraa sharciga lagu maamulayo isucelinta dembiilayaasha. | 2. Isucelinta eedaysanaha iyo dembiilaha waa in ay ku dhisnaataa heshiis ay kala galeen labo dowladdood taas oo waafaqan dhaqanka iyo Qaanuunka Dawliga ah, iyo inay ku saleysnaato xeer uu soo saaray Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | *Faqradan waxaa loo qoray hab qaanuuneed.* |
| **Qodobka 37: Qaxootiga iyo Magangelyada** | **Qodobka 36: Qaxootiga iyo Magangelyada** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Qof kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo gala qaxootinnimo wuxuu xaq u leeyahay in | Qof kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo gala magangalyo-doon ama loo | *Faqraddan waxaa loo habeyey hab sharci ayadoo lakala saaray magangalyo-doon iyo qaxootinimada.* |

| | | |
|---|---|---|
| aan dib loo celin ama aan loo qaadin dal kale, haddii ay jirto cabsi muuqata oo ah in uu la kulmayo ciqaab. | aqoonsado qaxooti wuxuu xaq u leeyahay in aan dib loo celin ama aan loo qaadin dal kale, haddii ay jirto cabsi muuqata oo ah in uu la kulmaayo ciqaab ama qatar lid ku ah. | |
| (2) Baarlamaanka Federaalka ihi waa in uu soo saaraa sharci waafaqsan qaanuunka caalamiga ah; kaas oo nidaaminaya qaxootiga ama magangelyo-doonka. | | *Waxaa lagu daray qodobka 53aad* |
| **Qodobka 38aad: Xaddidaadda Xuquuqda** | **Qodobka 37aad: Xaddidaadda Xuquuqda** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Xuquuqda lagu sheegay Cutubkan waxaa xaddidi kara sharciga, haddii sharcigaasi uusan si gaar ah u bar-tilmaameedsanayn shakhsiyaad ama kooxo. | 1. Xuquuqda lagu sheegay Cutubkan waxaa xaddidi kara sharciga, haddii sharcigaasi uusan si gaar ah u bar-tilmaameedsanayn shakhsiyaad ama kooxo. | *Faqraddan sideedii baa loo qaatay* |
| (2) Xuquuqdan waxaa xaddidaya sharciga, ama waxaaba si gaar ah loogu asteeyay cutubkan, waase haddii xaddidaaddaasi ay tahay mid si cad u maangal ah ama kuwo la aqbali karo oo waafaqsan qiyamka lagu qeexay Dastuurka. | 2. Xuquuqdan waxaa xaddidaya sharciga, ama waxaaba si gaar ah loogu asteeyay cutubkan, waase haddii xaddidaaddaasi ay tahay mid si cad u maangal ah ama kuwo la aqbali karo oo waafaqsan qiyamka lagu qeexay Dastuurka. | *Faqraddaan sideedii baa loo qaatay.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (3) Marka go'aan laga gaarayo in xaddididda xuquuqdu ay noqoto mid la aqbali karo oo maangal ah, waa in dhammaan arrimaha xaddeyntan khuseeya xisaabta lagu darsadaa. | 3. Xadidaadu waxay imaan kartaa oo keliya marka ay jirto baahi culus oo lagu xaqiijinayo dhawritaanka xuquuqda cid kale, amniga guud, difaaca dalka, caafimaadka guud iyo anshaxa wanaagsan iyadoo la tixgelinayo isu dheelitirnaanta xadidaada iyo asbaabta keentay. | *Faqrada 3aad iyo 4aad ee Qodobkaan waa la isku biiriyay Maadaama aya labada Faqradood ay ka wadahadlayaan arrimaha la siinayo tixgelinta marka ay go'aan laga gaarayo Xadaynta Xuquuqdda iyo Xoriyaatka ku xusan Cutubkaan.* |
| (4) Arrimaha la xiriira waxaa ka mid ah dabeecadda iyo ahmiyadda xuquuqda la xaddidey iyo muhimmadda ujeeddo la rabo in lagu gaaro xaddidaadda; haddii xaddididdaasi u habboon tahay in lagu gaaro ujeeddada ama haddii isla ujeeddadaas lagu gaari karaayey iyadoo aan la xaddidin xuquuqdaas. | | *Waxaa la soojeediyaay in la isku daro Faqraddda 3 iyo 4 ee asalka ah oo tilmaamayaan xaaladaha loo baahan yahay in la tix geliyo marka la go'aaminayo xadidaada xuquuqaha ku xusan qodobkan.* |
| | 4. Hay'adaha garsoorka ayaa damaanad qaadaya inaan lagu xadgudbin xuquuqda iyo xorriyaadka, lana dhawro qiyamka saldhiga u ah Dastuurka. | *Faqraddan cusub waxaa loogu soo jeediyay in hay'adaha Garsoorka la saaro mas'uuliyada in ay damaanad qaadaan ilaalinta xuquuuqda, xoriyaadka iyo qiyamka uu xambaarsan yahay Dastuurka.* |
| (5) Xaddididda suurtogalka ah ee xuquuqda asaasiga ah ee muwaaddinka xilliga xaaladda deg degga waxaa lagu sheegay Cutubka 14aad, Qodobka | | *Faqradan waxaa la soojeediyay in latiro maadaama ay dhici karto in la xadido xuquuqda aasaasiga ah marka ay timaado xaalad degdeg ah taasoo ku xusan cutubka* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| 131aad. | | *Amniga ka hadlaya.* |
| **Qodobka 39aad: Sixidda Ku-xadgudubka Xuquuqda Aadanaha** | **Qodobka 38aad: Xaqsoorka La Xiriira Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha** | ***Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha*** <br> ***F.G: waxaa la tiray erayga "sixidda" laguna bedelay erayada "xaqsoorka la xiriira".*** |
| (1) Sharcigu waa in uu qeexaa habraac habboon oo lagu saxayo xadgudubyada xaquuqda Aadanaha. | 1. Qof kasta waxuu xaq u leeyahay magdhow haddii lagu xadgudbo xuquuqdiisa aasaasiga ah, waxaana go'aan ka gaaraya dacwadiisa Maxkamadda awoodda u leh. | *Faqraddan waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn dhinaca siiqadda Sharciga iyadoo nuxurkeeda aanan wax laga badalin kaliya la adkeeyay in xadgudubyada xuquuqda Aadanaha loo gaysto ha ahaadaan kuwa dhacay, dhacaya ama mustaqbalka dhici kara in Maxkamad la horgeeyo si loogu sameeyo Xaqsoor dhibbanayaasha.* |
| (2) Sixidda xadgudubyadaas waa in lagu helaa maxkamad ay dadku si fudud dacwad uga furan karaan. | | *Faqraddaan waa la tiray nuxurkeedana waxaa lagu daray Faqradda (1) – eeg kor.* |
| (3) Qof ama urrur way u dacwoon karaan maxkamad, si ay u difaacaan xuquuqda asaasiga ee dadka kale leeyahiin oo aan awoodin in ay iskood isu difaacaan. | *2.* Qof ama urrur way u dacwoon karaan maxkamadda awoodda u leh, si ay u difaacaan xuquuqda asaasiga ee dadka kale leeyihiin oo aan awoodin in ay iskood isu difaacaan. | *Faqradaan Sideeda ayaa loo qaatay* |
| | 3. Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya Xaqsoorka xadgudubyada Xuquuqda Aasaasiga ah. | *Faqrad Cusub: Waxaa muhiim ah in lahelo xeerar qeexaya magdhowga iyo xaqsoorka xadgudubyada.* |
| **Qodobka 40aad: Fasiraadda Xuquuqda** | **Qodobka 39aad: Fasiraadda** | ***Waxba lagama beddelin*** |

| Asaasiga ah | Xuquuqda Asaasiga ah | |
|---|---|---|
| (1) Marka la fasiraayo xuquuqda ku xusan qaybtan waa in maxkamaddu ay raadiso qeexidda ujeeddooyinka laga leeyahay xuquuqdaas iyo qiyamka ay xambaarsan yihiin. | 1. Marka la fasirayo xuquuqda ku xusan Cutubkaan waa in Maxkamadda awoodda u leh ay raadiso qeexidda ujeeddooyinka laga leeyahay xuquuqda asaasiga ah iyo qiyamka saldhigga u ah Dastuurkaan. | *Faqradaani sideeda ayaa loo qaatay, waxaa lagu daray oo keliya "awooda" iyo "aasaasiga"* |
| (2) Fasiraadda xuquuqdan waxay maxkamaddu tixgelineysaa Shareecada, qaanuunka caalamiga ah iyo go'aannada maxkamadaha dalal kale, inkasta oo ayan qasab ku ahayn inay raacdo go'aannadooda | 2. Marka ay fasirayso xuquuqahaani waxay maxkamadda tixgelineysaa Shareecada Islaamka, Qaanuunka Dowliga ah, dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed iyo mabaadiida iyo halbeega fasiraadda shuruucda ee caalamiga ah, illaa iyo inta fasiraaddaas aysan ka horimaaneyn Dastuurka iyo qiyamka saldhigga u ah. | *Faqradaani waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn si loo cadeeyo in hadii ay iska hor yimaadaan Dastuurka Soomaaliga uu mudnaanta ka yeelanayo qaanuunka dawliga ah.* |
| (3) Marka guud ahaan sharci la fasiraayo ama la dhaqan-gelinaayo, maxkamad kasta ama xeer-beegti waa in ay tixgelisaa muhiimmada qodobbada Cutubkan, intii suurtagal ahna go'aannadooda ka dhigaan kuwo la socon kara qodobbadaasi. | | *Faqradan 3aad nuxurkeeda waxaa lagu daray Faqradda 1aad ee Qodobkan.* |
| (4) Xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Cutubkan kama hor-imaaan karaan | 3. Aqoonsiga xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Cutubkan kama | *Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah iyadoo la tirtiray "xeer-dhaqameedka la* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| xuquuqda kale ee Shareecada Islaamku jideysey iyo xeer-dhaqameedka la jaanqaadi kara Shareecada iyo Dastuurka. | hor-imaaan karaan xuquuqda kale ee Shareecada Islaamku aqoonsatay. | *jaanqaadi kara Shareecada iyo Dastuurka" maadaama xuquuqdaan dastuurka ku xusan ay ka hormarayso xeer-dhaqameedka.* |
| Qodobka 41aad: Guddiga Xuquuqda Aadanaha | | *Waxaa loo rarayaa qeybta Guddiyada Madaxabannaan* |
| (1) Baarlamaanka Federaalka ihi waa inuu dhisaa Guddi Xuquuqda Aadanaha u qaybsan oo ka madax bannaan maamulka Dawladda, lehna ilo dhaqaale oo uu si habsami leh ugu fuliyo hawlihiisa. | | *Sababaha loo tiray qodobkaan ayaa ah in Guddiga Xuquuqda Aadanaha lagu nidaaminayo Cutubka 10aad Guddiyada Madaxbanaan ee Dastuurka, halkaas ayaana loo faahfaahiyay awoodihiisa iyo Xilalkiisaba.* |
| (2) Hawlaha Guddiga Xuquuqda Aadanaha waa in ay ku jiraan horumarinta aqoonta xuquuqda Aadanaha iyo, gaar ahaan, Shareecada, asaga oo u dejinaaya halbeegyada dhaqangelinta lagu hirgelinaayo waajibaadka xuquuqda Aadanaha; dabagelidda xuquuqda Aadanaha ee dalka gudihiisa iyo baarista eedaha la xiriira xuquuqda aadanaha. | | *Sababaha loo tiray qodobkaan ayaa ah in Guddiga Xuquuqda Aadanaha lagu nidaaminayo Cutubka 10aad Guddiyada Madaxbanaan ee Dastuurka, halkaas ayaana loo faahfaahiyay awoodihiisa iyo Xilalkiisaba.* |
| Madaxa Saddexaad: Waajibaadka Muwaadinka | Madaxa Saddexaad: Waajibaadka Muwaadinka | *Waxba lagama beddelin* |
| Qodobka 42aad: Waajibaadka Muwaaddinka | Qodobka 40aad: Waajibaadka Muwaaddinka | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Sida Diinta Islaamku qabto, caddaaladda waxay ku jirtaa isu- | | *Faqradan waxaa loo tirey iyadoo loo arkey dheeraad mana soo kordhinayso qiimo sharciyeed.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| dheellitirnaanta xuquuqda iyo waajibaadka. | | |
| (2) Ku-dhaqanka sinnaanta, xorriyaadka iyo xuquuqda lagama sooci karo waajibaadka. Sidaas darteed, muwaaddin kasta waxaa waajib ku ah in uu: Noqdo waddani daacad u ah horumarinta iyo wanaagga dalkiisa;<br>(a) Ka qayb-qaato hawlaha waxtarka u leh muwaaddinka, qoyska, wanaagga guud iyo in uu kaqayb-qaato horumarinta qaranka iyo bulshada uu la nool yahay;<br>(b) Horumariyo mas'uuliyadda waalidnimo;<br>(c) Dhiiriggeliyo midnimada qaranka, isaga oo kaashanaya muwaaddiniinta kale;<br>(d) Horumariyo mabda'a isla-xisaabtanka iyo talinta sharciga;<br>(e) Noqdo qof aqoon u leh qodobbada Dastuurka, si daacad ahna uu u taageero, una difaacoDastuurka iyo shuruucda dalka;<br>(f) Ku dedaalo/ku dedaasho codbixinta xilliyada doorashada;<br>(g) Noqdo canshuur-bixiye wanaagsan, si uu uga qayb-qaato kharajka Dawladda si waafaqsanawooddiisa waxbixineed iyo sharciga;<br>(h) Difaaco dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | 1. Muwaddin kasta ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah inuu u hogaansamo arrimaha soo socda:<br>a. Noqdo waddani daacad u ah horumarinta iyo wanaagga dalkiisa;<br>b. Difaaco ilaaliyana diinta, dalka, dadka iyo karaamada aadanaha.<br>c. Dhiiriggeliyo midnimada qaranka, isaga oo kaashanaya muwaaddiniinta kale;<br>d. Si buuxda u barto, u xurmeeyo, ku dhaqmo, una hogaansamo, difaacaana Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.<br>e. Horumariyo mabda'a isla-xisaabtanka iyo sarreynta sharciga;<br>f. Noqdo canshuur bixiye si waafaqsan shuruucda Dalka.<br>g. Ka qayb-qaato horumarinta qaranka iyo wanaajintiisa;<br>h. Ka ilaaliyo degaanka wasakhda iyo waxyeellada aan loo baahneyn;<br>i. Dhowro xuquuqda | *Waxaa la soojeediyay in loo qoro hab qaanuuni ah taxanaha ay u qoran tahayna la habeeyay.*<br><br>*Faqrada 2(c) ee qodobka asalka ayaa la soojeediyay eeka hadlaya Daryeelka qoyska in loo wareejiyo Qodobka Daryeelka qoyska. xarafka (c) ee Faqradda 1aad ee soojeedinta, waxaa kale oo lagu soo kordhiyey "ilaaliyana diinta, dalka, dadka iyo karaamada aadanaha"* |

| | | |
|---|---|---|
| | xayawanaadka dalka.<br>j. Inuu codeeyo doorashooyinka. | |
| | 2. Marka la fasirayo waajibaadka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan laguma xaddidi karo xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Cutubkaan. | *Sababaha loogu soo kordhiyay Faqradaan ayaa ah in marka la fasirayo Waajibaadyada Faqrada 1aad ee Qodobkaan in aanan loo fasirin hab xadidaysa Xuquuqda iyo Xoriyaatka asaasiga ah ee ku xusan Cutubkan.* |

DRAFT

| DHULKA, HANTIDA IYO DEEGANKA | | |
|---|---|---|
| Asali Dastuurka KMG | Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS | FAALO: *Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
| CUTUBKA SADDEXAAD: DHULKA, HANTIDA IYO DEEGANKA | CUTUBKA SADDEXAAD: DHULKA, HANTIDA IYO DEEGANKA | *Waxba lagama beddelin* |
| Qodobka 43aad: Dhulka | Qodobka 41aad: Dhulka | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Dhulku waa kheyraadka koowaad ee Soomaaliya iyo saldhigga nolosha dadka. | | *Faqrada 1aad ee Qodobkaan waxaa loo raray Cutubka 1aad Qodobka 3 (7) ee Mabaadi'da Asaasiga ah*<br>*Eeg Cutubka 1 Qod. 3 (7).* |
| (2) Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh, waxsoosaar waarana leh. | 1. Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, hufan, waxtar leh, waxsoosaar waarana leh iyo si aan ka soo horjeedin sharciga iyo danta guud. | *Nuxurka Faqrada 2aad ee Qodobkaan waxba lagama beddelin waxaa lagu kordhiyey* "si aan ka soo horjeedin sharciga iyo danta guud". |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (3) Xukuumaddu Federaalku waa inay dejiso siyaasad dhuleed oo heer qaran ah oo si joogto ah dib-u-eegis loogu sameeyo. Siyaasaddaasi waa in ay xaqiijiso:<br>a. U sinnaanshaha fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'ideysiga kheyraadkiisa;<br>b. Damaanad-qaadista xuquuqda lahaanshaha dhulka iyo diiwaangelinta;<br>c. Xaqiijinta ka faa'ideysiga dhulka si waafaqsan Mabaadi'da ka dheefsashada dhulka iyadoon dhibaato loo geysan;<br>d. In si deg deg ah oo lagu wada qanci karo loo xalliyo khilaafaadka ka dhasha dhulka iyo hantida;<br>e. In la xaddido dhulka uu qof ama shirkadi yeelan karaan;<br>f. In la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ka-ganacsiga dhulka, si looga hortago ku-takrifalidda xuquuqda milkiilayaasha dhulka ee yaryar;<br>g. Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay dejinayaan siyaasad-dhuleed oo heerkooda ah. | 2. Xukuumadda Federaalku waa inay dejiso siyaasad dhuleed oo heer qaran ah oo si joogto ah dib-u-eegis loogu sameeyo. Siyaasaddaasi waa in ay xaqiijiso:<br>a. U sinnaanshaha fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'ideysiga kheyraadkiisa;<br>b. Damaanad-qaadista xuquuqda lahaanshaha dhulka iyo diiwaangelinta;<br>c. Xaqiijinta ka faa'ideysiga dhulka si waafaqsan Mabaadi'da ka dheefsashada dhulka iyadoon dhibaato loo geysan;<br>d. In si deg deg ah oo lagu wada qanci karo loo xalliyo khilaafaadka ka dhasha dhulka iyo hantida;<br>e. In la xaddido dhulka uu qof ama shirkadi yeelan karto;<br>f. In la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ka-ganacsiga ee dhulka, si loo ilaaliyo xuquuqda milkiilayaasha dhulka yar leh. | *Nuxurka faqraddan waxba lagama baddelin, hase ahaate xarafka (g) ee faqraddaan waxaa laga dhigay faqrad gooni ah maadaama ay ka hadlayso awoodda dawlad-goboleeyada ay u leeyihiin dejinta siyaasadda dulka ee heerkooda ah.*<br>*Sidoo kale waxaa la soojeediyay in la isku daro qaar ka mid ah Farqaddaha si loo helo qaab urursan oo isku xiran oo maangal ah.*<br>*Sidoo kale, waxaa kalmadda "* si looga hortago ku-takrifalidda" waxaa lagu beddelay " si loo ilaaliyo". |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 3. Dawlad Goboleedyada waxay dejinayaan siyaasad-dhuleed oo heerkooda ah. | Faqraddan waxaa laga soo raray xarafka "g" ee faqradda kore. |
| (4) Lama bixin karo ruqsad la xiriirta isticmaalka abadiga ah ee berriga, badda iyo hawada sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sharci Baarlamaanka Federaalku soosaaro ayaa xaddidaya baaxadda, muddada iyo shuruudaha rukhsadaha istcimaalkooda. | *4.* Lama bixin karo ruqsad la xiriirta isticmaalka abadiga ah ee berriga, badda iyo hawada sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Xeer Baarlamaanka Federaalku soosaaro ayaa xaddidaya baaxadda, muddada iyo shuruudaha rukhsadaha istcimaalkooda. | Faqraddaan sida asalka Dastuurka aha ayaa loo qaatay |
| (5) Dawladda Federaalku iyadoo la tashaneysa Dawladaha xubinta ka ah Federaalka iyo ciddii kale oo ay quseyso, waxay dejineysaa siyaasadda dhulka iyo qaab lagu koontaroolo, laguna isticmaalo dhulka. | | *Faqraddan waxaa loo arkay in ay tahay mid ku celcelis ah.* |
| **Qodobka 44aad: Kheyraadka Dabiiciga ah** | **Qodobka 42aad: Kheyraadka Dabiiciga ah** | ***Waxba lagama beddelin*** |
| Qaybsiga kheyraadka dabiiciga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa ka wada xaajoon doona Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawladaha Xubinta ka noqon doona Dawladda Federaalka Soomaaliya iyadoo loo marayo qaab Dastuuri ah. | 1. Kheyraadka Dabiiciga ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya waa hanti qaran oo loo eedegsanayo qaab waara iyo si waxtar u leh dhammaan dadweynaha. | *Faqraddan waxaa lagu sameeyey dib-u-habayn iyadoo si cad loo muujiyey in kheyraadka dabiiciga uu yahay hanti qaran loona isticmaalayo qaab waara una dhexeeya kana faa'idaysta dhamaan shacabka.* |
| | 2. Xukuumadda Federaalka ee Soomaaliya waa inay xaqiijisaa in kheyraadka dabiiciga ah si ku dhisan caaddaalad u wadaagaan Dowladda | *Faqrad Cusub waxaa loogu soo kordhiyay In la cadeeyo in si cadaalad ah* |

| | | |
|---|---|---|
| | Federaaalka, Dowlad Goboleedyada iyo Dowladaha Hoose ee jamhuuriyaddda. | *ay u wadaagaan kheyraadka dabiiciga heerarka kala duwan ee Dawlada Federaalka Soomaaliya.* |
| Qodobka 45aad: Deegaanka | Qodobka 43aad: Deegaanka | ***FG: Cinwaanka waxba lagama baddelin*** |
| (1) Xukuumadda Federaalku waxay mudnaan siinaysaa ilaalinta, keydinta iyo dhawrista Deegaanka, iyadoo laga ilaalinayo wax kasta oo wax u dhimaya kala-duwanaanshaha noole ee dabiiciga ah iyo hannaanka deegaameed ee dabiiciga ah. | 1. Dhammaan heerarka kala duwan ee hay'adaha Dowladda waxaa waajib ku ah ilaalinta, keydinta iyo dhowrista deegaanka iyadoo laga hortagayo xaalufinta, wasaqeynta, iyo waxyeello kasta oo kale. | *Faqradan, erayada "xukuumadda Federaalka" waxaa lagu bedeley erayada "Hayadaha awoodda u leh ee heerarka kala duwan ee Dowladda" taasoo lagu muujinayo in ay masuuliyad ka saran tahay dhamaan hay'adaha kala duwan dhowrista iyo ilaalinta bii'adda.* |
| (2) Dhammaan dadka kunool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo kobcinta Deegaanka iyo ka-qaybgalka horumarinta, fulinta, maareynta, xannaanaynta iyo dhawrista kheyraadka dabiiciga ah iyo Deegaankaba. | 2. Dhammaan dadka kunool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo kobcinta Deegaanka iyo ka-qaybgalka horumarinta, fulinta, maareynta, xannaanaynta iyo dhawrista kheyraadka dabiiciga ah iyo Deegaankaba. | Faqraddaan sideedii ayaa loo qaatay. |
| (3) Xukuumadda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ee waxyeellada Deegaanku ay saameeyeen waa in ay: | 3. Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleeedyada ee waxyeellada Deegaanku ay saameeyeen waa in ay:<br>a. Qaadaan tallaabooyin deg deg ah oo lagu | *Waxaa la soojeediyay in lagu bedelo "Dawladaha ka tirsan Federaalka", "Dawlad Goboleed". Waxaa isweydiin* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| a. Qaadaan tallaabooyin deg deg ah oo lagu dhaqangelinaayo nadiifinta wasakhda iyo haraaga sunta halista ah ee lagu shubay dhulka iyo biyaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>b. Dejiyaan sharci, qaaddaana tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah ee looga hortegayo ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; taasoo xeer-jebin ku ah qaanuunka dawliga ah iyo ku-xadgudub gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>c. Qaaddaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in laga qaado magdhaw kuwa masuulka ka ah ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; ha joogeen Jamhuuriydda Federaalka Soomaaliya gudaheeda ama meel kale;<br>d. Qaaddaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah dib-u-noolaynta, dib-u- dhiraynta, kor-u-qaadidda iyo ilaalinta Deegaanka, iyo ka hortagga wixii waxyeellayn kara khayraadka dabiiciga ah iyo Deegaanka dalka | dhaqangelinaayo nadiifinta wasakhda iyo haraaga sunta halista ah ee lagu shubay dhulka iyo biyaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>b. Dejiyaan sharci, qaaddaana tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah ee looga hortegayo ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; taasoo xeer-jebin ku ah qaanuunka dawliga ah iyo ku-xadgudub gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>c. Qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in laga qaado magdhaw kuwa masuulka ka ah ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; ha joogeen Jamhuuriydda Federaalka Soomaaliya gudaheeda ama meel kale;<br>d. Qaadaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah dib-u-noolaynta, dib-u- dhiraynta, kor-u-qaadidda iyo ilaalinta Deegaanka, iyo ka hortagga wixii waxyeellayn kara khayraadka dabiiciga ah iyo Deegaanka dalka. | *la hayn hab dhaqanka xubnaha ka tirsan federaalka in eray bixintaan loo arkay mid ku haboon taasoo adkaynaysa dabeecadda ay leedahay gobol ka tirsan Jamhuuriyadda Federal Soomaaliya halkii loo arki lahaa dawlad gaar u taagan oo madaxbannaan.* |
| (4) Xukuumadda Federaalka iyadoo la tashaneysa Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxay dejinaysaa siyaasad guud ee Deegaan ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya. | *4.* Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa soo saaraya xeer qeexaya mabaad'ii guud ee daryeelka Deegaanka ee ku salaysan halbeegyo caalamiga ah ee lagu ilaalinayo, lagu keydinayo, laguna dhowrayo deegaanka | *Waxaa la soojeediyay in la soo saaro sharci ku saabsan bii'adda kaasoo laguna ilaalinaayo. Barlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa soo saaraya sharci qeexaaya* |

| | | |
|---|---|---|
| | | *mabaa'dii guud iyo halbeegyo lagu ilaalinaayo bii'adda si loo damaand qaado in dhammaan Jamhuuriyadda loo ilaaliyo si isku mid ah.* |

DRAFT

CUTUBKA AFARAAD
MATALAADDA SHACABKA

| Asalka Dastuurka KMG | Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS | FAALO: *Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
|---|---|---|
| CUTUBKA AFARAAD: MATILAADDA SHACABKA | CUTUBKA AFARAAD: MATALAADDA SHACABKA | *Waxba lagama beddelin* |
| Madaxa koowaad: Mabaadii'da Gudd ee Matalaadda Shacabka | Madaxa koowaad: Mabaadii'da Guud ee Matalaadda Shacabka | *Waxba lagama beddelin* |
| Qodobka 46aad: Awooda Shacabka | Qodobka 44aad: Awooda Shacabka | *Waxba lagama beddelin* |
| (1) Awoodda isxukunku waxey ka bilaabataa, kuna dhamaataa shacabka, asaga oo adeegsanaya awooda ah in mar kasta oo loo baahdo uu hey'adaha iyo wakiilada shacabka ku oogikaro la xisaabtan. | 1. Awoodda is-xukunka waxay ka bilaabataa kuna dhamaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha iyo wakiillada Shacabka ee heer kasta oo xukuumadeed. | *Faqradan dib-u-habayn yar ayaa lagu sameeyay si hayadaha dawladda ee heer kasta ee xukuumadeed ay la xisaabtami karaan shacabka Soomaaliyeed.* |
| (2) Nidaamkamatilaaddashacabkawaa in uuahaado mid furan ooqofkastafursad u siinaya in uukaqaybqaatohabraacyadiisaiyoxeerar kiisanasifudud loo fahmikaro. | 2. Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo xukuumadeed waa inay ahaataa mid madaxbannaan oo loo dhan yahay uuna helo muwaadin kasta fursad uu uga qaybgalo xukunka si toos ah ama si dadban. | *Faqradan waxaa lagu sameeyey dib-u-eegis iyadoo matilaada heerarka kala duwan ee xukuumadeed ay noqoto mid furan oo loo dhan yahay muwaadinkana uu ka qeyb geli karo si toos ah iyo si dadban.* |
| (3) Nidaamkka Matalaaddu waainuuahaadaa mid sikufilanoomacquul ah ugahortagikaraqalalaasekadhashatarta nkasiyaasaddaiyonatijooyinkadoorasha da. | | *Faqradda waxaa la soojeediyey in la tiro nuxurkeedana lagu daro Qodobka nidaaminayo doorashooyinka.* |
| | 3. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay masuul ka tahay xaqiijinta in Dowlad Goboleed kasta ay dhaqan galiso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. | *Faqrad Cusub: Sababaha Faqradda Cusub loogu soo kordhiyay Qodobkaan ayaa ah in la xaqiijiyo u hoggaansanaanta mabaadi'da asaasiga ah ee* |

| | | |
|---|---|---|
| | | *ku saabsan Matalaadda Shacabka ee heerarka dawladeed ee kala duwan ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.*<br>*Waxaana lasoo jeediyey in loo raro qodobka awoodaha* |
| Madaxa Labaad: Doorashiiyinka | Madaxa Labaad: Doorashiiyinka | ***Waxba lagama beddelin*** |
| Qodobka 47aad: Nidaamka Doorashooyinka iyo Xisbiyada | Qodobka 45aad: Nidaamka Doorashooyinka iyo Xisbiyada | ***Waxba lagama beddelin*** |
| (1) Shuruucda kusaabsan Xisbiyada, Diiwaangelintooda, Doorashooyinka heerka dowladda federaalka ah iyo Guddiga Qaranka ee Madaxbannaan ee Doorashada, waxaa lagu qeexidoonaa shuruuc gaar ah oo uu soosaaro Golaha Shacabka ee Federaalka Soomaaliya | 1. Nidaamka doorashadu waa inuu ahaadaa mid xor ah, ku dhisan caddaalad, sinnaan, cod qarsoodi, kana maran musuqmaasuq iyo caqabado, hanjabaad iyo cabsi gelin. | *Faqradan waxaa lagu sameeyey dib-u-eegis iyadoo lagu daray mabaadii saldhig u ah sharciga doorashooyinka oo waafaqsan halbeegyada caalamiga ah.*<br>*Sidoo kale qaybtii ku saabsaneed Guddiga Qaranka ee Madaxabannaan ee doorashooyinka waxaa loo raray Cutubka Guddiyada Madaxbannaan. Qaybta xisbiyadana waxaa laga dhigay Q47aad oo gooni ah.* |
| | 2. Nidaamka Doorashadu waa inuu sugaa wadjirka Bulshada iyo Midnimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Faqrad Cusub: Waxaa muhiim ah in lagu xuso Dastuurka nidaamka Doorashadu inuu noqdo mid xaqiijinaya midnimada Jasoomaaliya.* |
| | 3. Nidaamka doorashada waa inuu xaqiijiyaa | *Faqrad Cusub: Waxaa lagu* |

| | | |
|---|---|---|
| | matalaadda dadka laga tirada badan yahay iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh iyo dumarka. | *soor kordhiyey faqraddaan si loo helo mataalada haweenka iyo dadka baahiya gaar ah leh.* |
| | 4. Hannaanka doorashada ee heer federaal iyo heer Dawlad-goboleed waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan xisbiyada siyaasadeed u soo sharraxaan tiro wax-ku-ool ah oo haween ah xubnaha xeer-deejinta ee matalaya xisbiga. | *Faqrad cusub: Wuxuu qeexayaa hannaanka doorasho inuu noqdo mid dhiiri gelinaya ka-qaybgalka haweenka iyo xisbiya.* |
| | **Qodob 46aad: Midaynta Doorashooyinka** | **Waa qodob cusub** |
| | Dhammaan doorashooyinka goleyaasha heerarka kala duwan ee dawladda waa in la qabta 5tii sanaba mar oo hal xilli doorasho ah. | |
| | **Qodob 47aad: Axsaabta** | ***Qodob Cusub*** |
| | 1. Muwaadiniinta Soomaaliyeed waxay sameysan karaan axsaab siyaasadeed si ay uga qaybqaataan loollanka doorashooyinka iyo magacaabista musharaxiiintooda. | *Waxaa la soojeediyay in Qodobkaan lagu daro iyadoo ujeeddada loogu soo kordhiyay ayaa tahay in la dejiyo nidaam guud dastuureed oo lagu nidaaminayo arrimaha axsaabta siyaasadeed. Tani waxay lagama maarmaan u tahay axsaab siyaasadeed oo mustaqbalka la filaayo in ay ka hirgalaan dalka. Hadaba si looga fogaado in doorashooyinka lagu maamulo shuruuc caadi ah ayaa waxaa la soojeediyay in lagu dhaqo halbeegyo dastuuri ah.* |

| | | |
|---|---|---|
| | 2. Axsaabta siyaasadeed waa inay u hogaansamaan shareecada islaamka, dastuurka iyo xeerarka kale ee Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Egg faalada ku qoran Faqradda 1aad* |
| | 3. Nidaamka Axsaabta siyaasadeed waa inuu noqdaa mid ka tarjumaya dhaqanka, dhaqaalaha iyo arrimaha Bulshada. | Madaama axsaabta siyaasdeed dastuurku hirgalinayo, nimaadmka la qaadanayo waa inuu yahay mid waafaqsan dhaqanka, dhaqaalaha dalka iyo arrimaha bulshada. |
| | 4. Xeer-hoosaadyada xisbi kasta oo siyaasadeed waa inuu u hogaansamaa mabaadiida guud ee dimuqraadiyadda. | *Egg faalada ku qoran Faqradda 1aad* |
| | 5. Axsaabta siyaasadeed waa inay xaqiijiyaan isku-dheelitirka ragga iyo dumarka, dadka laga tirada badan yahay iyo dadka naafada ah ee xubinnimada iyo hogaamintaba. | *Egg faalada ku qoran Faqradda 1aad* |
| | 6. Xeer gaar ah ayaa faafaahinaya nidaamka Axsaabta siyaasadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Egg faalada ku qoran Faqradda 1aad* |

DRAFT

## CUTUBKA SHANAAD

| BAAHSANAANTA AWOODDA XUKUUMADAHA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA | | |
|---|---|---|
| Asalka Dastuurka KMG | Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS | *Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
| CUTUBKA SHANAAD: BAAHSANAANTA AWOODDA XUKUUMADAHA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA | CUTUBKA SHANAAD: BAAHSANAANTA AWOODDA XUKUUMADAHA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA | *Waxba lagama bedelin* |
| Madaxa koowaad: Qaab dhismeedka iyo mabaadiida wadashaqeynta heerarka xukuumadaha. | Madaxa koowaad: Qaab dhismeedka iyo mabaadiida wadashaqeynta heerarka xukuumadaha | *Waxba lagama bedelin* |
| Qodobka 48aad: Qaab-dhismeedka Dawladda | Qodobka 48aad: Qaab-dhismeedka Dawladda | *Waxba lagama bedelin* |
| (1) Qaab-dhismeedka Dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu ka kooban yahay 2 heer Dawladeed:<br><br>(a) Heerka Xukuumaddu Federaalka<br><br>(b) Heerka Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxaa ka kooban tahay Xukuumaddu ka tirsan Dawladaha Federaalka iyo Dawladaha Hoose. | 1. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ka kooban tahay seddex (3) heer dawladeed:<br>a. Heerka Dawladda Federaalka;<br>b. Heerka Dawlad Goboleedyada; iyo<br>c. Dawladaha Hoose. | *Guud ahaan waxaa la soojeediyay Erayada "Dawladdaha xubinta ka ah Federaalka" waxaa lagu bedeley erayada "Dawlad Goboleedyada" sidoo kale qaab dhismeedka waxaa lagu daray "Dawladaha Hoose", Maadama ay leeyihiin muhumad gaar ah oo ay tahay in si cad lagu xuso Dastuurka.*<br><br>*Sidoo kale, waxaa la tirtiray* |

| | | |
|---|---|---|
| | | *"Qaab-dhismeedka"* |
| (2) Gobol goonni isu taagi karaa ma jiri karo, inta uu Gobol kale uu kuu biirayo, Xukuumaddu Federaalka Soomaaliya ayaana maamulaysa waxaana waajib ku ah gobolkaas inuu ku biiro gobol kale ama Dawlad xubin ka ah Dawladda Federaalka muddo labo sano gudahood ah | *2.* Gobol goonni isu taagi karaa ma jiri karo inta uu Gobol kale ugu biirayo, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaana maamulaysa waxaana waajib ku ah gobolkaas inuu ku biiro gobol kale ama Dawlad xubin ka ah Dawladda Federaalka muddo labo sano gudahood ah | *Faqradaan sideedii baa loo qaatay* |
| | 3. Xukuumadda Federaalka waxay qaab ahaan ku dhisan tahay kuna fulinaysaa hawlaheeda si waafaqsan Dastuurka. | *Waxaa la soojeediyay in la ku daro Faqraddan cusub si uu u go'aamiyo Dastuurka ah ee Dawladda Federalka iyo Dastuurada Dawlad Goboleedyada iyo Dawladaha Hoose, eeg Faqradaha hoos ku qoran.* |
| | 4. Dawlad Goboleedyada waxay hawlahooda ku fulinaayaan si waafaqsan Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo Dastuuradooda u gaarka ah. | *Waxaa la soojeediyay in la ku daro Faqraddan cusub si loo caddeeyo in Dawlad Goboleedyada ay ansixinayaan Dastuuro iyaga u gaar ah iyagoo welina ku dhaqmayaan Dastuurka Federal.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 5. Dawladaha Hoose waxaa lagu dhisayaa, ayna ku shaqaynayaan si waafaqsan Dastuurka Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dastuurada Dawlad Goboleedyada ay ka tirsan yihiin. | *Faqrad Cusub*<br>*Sababaha Faqrad cusub loogu soo kordhiyay ayaa ah dejinta Mabaadi'da Dastuuriga ah ee Nidaamka Federaalka Soomaaliya. Iyadoo Dawladaha hoose u hoggaansamayaan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka, Dastuurka iyo Shuruucda Dawlad Goboleedka ay ka tirsan yihiin.* |
| Qodobka 49aad: Tirada iyo Xudduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyo Degmooyinka | Qodobka 49aad: Tirada iyo Xudduudaha Dawlad Goboleedyada | *Cinwaanka waxaa la bedelay erayada "Dawladdaha xubinta ka ah Federaalka" waxaana lagu bedelay "dawlad goboleedyada iyo degmooyinka".*<br>*Waxaa la tirtiray "Degmooyinka"* |
| (1) Tirada iyo xuduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka cusub waxaa go'aaminayaGolaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. | 1. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa go'aaminaya tirada iyo xuduudaha Dawlad goboleedyada kadib markuu helo warbixinta Guddiga Maxabannaan ee Xuduudaha iyo Federaalaynta. | *Ereyga "Golaha Shacabka" waxaa laaggu baddelay" Barlamaanka Federaalka Soomaaliya". Sidoo kale wxaa lagu soo kordhiyey "markuu helo warbixinta Guddiga Maxabannaan ee Xuduudaha iyo Federaalaynt"* |
| (2) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka, inta | | *Faqraddan waxaa loo raray Cutubka Guddiyada* |

| | | |
|---|---|---|
| aanu goyn tirada iyo xudduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, wuxuu magacaabayaa guddi heer qaran ah oo daraasad ka sameeya, warbixin ay la socdaan talooyinna u bandhiga Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. | | *madaxabannaan madaama faqraddaan ay ka hadlayso asaasidda guddiga madaxabanaan ee xuduudaha, ayna faah-faahintiisu ku qorantahay cutubkaas.* |
| (3) Magacaabidda guddigu lagu xusay faqradda 2 ee kore waa inuu ka horreeyo sharci Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka uu ansixyo oo qeexaya:<br><br>a. Xilalka iyo awoodaha Guddiga;<br>b. Hal-beegyada uu u cuskanayo samaynta Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyo shuruudaha qayb dalka ka mid ihi ku mutaysan karto inay ka mid noqoto Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka;<br>b. (c) Tirada xubnaha guddiga, shuruudaha xubinnimada iyo siyaabaha lagu magacaabayo | | *Eeg faalada faqradda 2aad ee qodobkan* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| xubnaha guddiga, muddada xilhayntood, xuquuqdooda; | | |
| (4) Tirada iyo xuduudaha degmooyinka Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxaa goynaya sharci uu soo saaro Baarlamaanka Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, Golaha Shacabka ee Federaalkuna oggolaado. | 2. Marka ay dhismaan Dawlad Goboleedyada, waxaa wax ka bedel lagu samayn karaa oo keliya marka ay heshiis ku wada gaaraan dhinacyda dawlad goboleeyada ay khuseyso. Haddii ay heshiin waayaan waxaa khilaafkooda lagu xalinayaa habraac Maxkamadeed waxaana go'aan ka gaaraya Maxkamadda Dastuurka. | *Faqrad cusub: Sababaha loogu soo kordhiyay Faqradaan ayaa ah in wax-ka-beddelka kasta oo lagu samaynayo Xuduudaha Dawlad Goboleedyada in ay heshiis kuwada gaaraan dhinacyada ay khuseyso iyo in bulshada ay ku ogolaato afti iyo si loogu hortago xasilooni darro.* |
| (5) Xuduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalku waxay ku salaysnaan doonaan xuduudihii gobollada ee jirey 1991-kii. | 3. Xuduudaha Dawlad Goboleedyada waxay ku salaysnaan doonaan xuduudihii gobollada ee jirey 1991-kii. | *Faqraddaan sideedii baa loo qaatay* |
| (6) Ugu yaraan laba gobol iyo ka badan ayaa ku midoobi kara Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyaga xor u ah go'aankooda. | 4. Ugu yaraan laba gobol iyo ka badan ayaa ku midoobi kara Dawlad goboleedyada iyaga xor u ah go'aankooda. | *Nuxurkii Faqraddaan waxba lagama baddelin.* |
| | Madaxa 2aad: Mabaadii'da Federaalka, Iskaashiga iyo Awoodaha Heerarka Kala duwan ee Dawladda | *Madax Cusub: Waxaa lasoo kordhiyey madaxaan 3aad si loo nidaamiyo qodobada la xiriira Mabaadii'da federaalka iyo awoodaha heerarka kala duwan.* |

| Qodobka 50aad: Mabaadii'da Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | Qodobka 50aad: Mabaadii'da Federaalka | *Waxba lagama bedelin*<br><br>Waa la tirtiray "ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya" |
|---|---|---|
| (1) Heerarka kale duwan ee Xukuumaduhu marka ay dhexdooda ka macaamilayaan iyo marka ay ku gudo-jiraan adeegsiga awoodda sharci-dejinta iyo awoodaha kaleba, waa in ay ilaaliyaan mabaadi'da Federaalnimada; kuwaas oo ah:<br><br>a. Heer kasta oo xukuumadeed waa in ay haysato kalsoonida iyo taageerada dadweynaha;<br>b. Awood walba waa in la siiyo hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta;<br>c. Jiritaanka iyo joogtaynta xiriirro iskaashi iyo istaageerid labo-dhinacle ah oo ka dhexeeya Dawladaha xubnaha ka ah federaalka dhexdooda iyo dawladaha xubnaha ah iyo Xukuumadda Federaalka ah;<br>d. Si uu u jiro dareen midnimo qaran, degaan kasta oo ka mid ah Jamhuuriyaddu Federaalka | Dhammaan heerarka iyo hay'adaha kala duwan ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay u hogaansamaan mabaadii'da Federaalka ee soo socda:<br><br>a. Awoodda dawladnimo waa inay ku baahsantahay dhammaan heerarka kala duwan ee Dawladda si waafaqsan dastuurka Federaalka Soomaaliya;<br>b. Heer kasta oo xukuumadeed waa in ay haysato kalsoonida iyo taageerada dadweynaha;<br>c. Waa inuu jiraa xiriir iskaashi iyo wadashaqayn joogta ah oo u dhexeeya Xukumadda Federaalka iyo Xukuumadaha Dawlad Goboleedyada; sidoo kale xiriirkaasi mid la mid ah waa inuu ka jiraa Dawlad Goboleedyada dhexdooda;<br>d. Qayb kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya waxay helaysaa heer adeeg iyo taageero ku dhisan xaqsoor oo ay ka hesho Xukuumadda Federaalka.<br>e. In khayraadka iyo dakhliga dalka si caddaalad ah loo wadaago; iyo<br>f. In khilaafaadka ka dhex dhasha Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada iyo sidoo kale Dawlad Goboleedyada dhexdooda waa in lagu xalliyo wada hadal; hadii lagu guulaysan waayana waxaa loo gudbinayaa Maxkamdda Dastuurka. | *Waxaa la soojeediyay in taxanaha Qodobkaan dib-u-habayn lagu sameeyo lana toosiyo la iskuna daro.*<br>*Waa la tirtiray*<br>*"Heerarka kale duwan ee Xukuumaduhu marka ay dhexdooda ka macaamilayaan iyo marka ay ku gudo-jiraan adeegsiga awoodda sharci-dejinta iyo awoodaha kaleba".*<br>*Waxaana lagu baddelay "Dhammaan heerarka iyo hay'adaha kala duwan ee dawladda"*<br><br>*Waxaa kaloo la soojeediyay in lagu daro in la siiyo muwaadiniinta xaq ka qaybgal siman uuna dammanad qaadayo Dawlad Goboleed kasta.*<br>*Sidoo kale, waxaa lagu soo kordhiyay in loo gudbiyo Maxkammad dastuuriga in ay xaliso khilaafaadka u dhaxeeya heerarka Dawladeed ee kala* |

| | | |
|---|---|---|
| ah ee Soomaaliya waa inuu helaa adeegyo iyo waxqabad xukuumadeed oo isku mid ah;<br>e. Khayraadka dalka oo si caddaalad ah loo qaybsado;<br>f. Dakhli-ururinta oo loo xilsaaro hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta; iyo<br>g. Khilaafaadka oo wadahadal iyo dib-u-heshiin lagu xalliyo. | | *duwan haddii lagu xalin kari waayo khilaafaadka hab dhexdhexaadin iyo heshiisiin. Waxaa kaloo la soojeediyay in la tiro xarafka (b) iyo (f) ee Faqradan ee dastuurka asalka sababtoo ah waxaa jira awoodo loo kala qoondeeyay heerarka kala duwan ee xukuumadaha ee ka tirsan Dawladda Federal in ay awood u leeyihiin uruurinta dakhli oo ku xusan Dastuurka. Marka xarafkaan wuxuu siinayaa awood heer ay ku fulin karaan kaasoo markii hore wiiqaayay u qoondeeynta awoodaha.* |
| **Qodobka 51aad: Xiriirka Iskaashiga Heerarka Dawladaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Qodobka 51aad: Xiriirka Wadashaqaynta Heerarka iyo Hay'adaha Kala Duwan ee Dawladda** | *waxaa la tiray erayada "Iskaashiga Heerarka Dawladaha", laguna bedelay "Wadashaqaynta Heerarka kala duwan"* |
| | 1. Dhammaan heerarka kala duwan ee dawladda waxaa waajib ku ah inay dhawraan Dastuurka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayada oo aan heerna isa siinayn awood ka baxsan kuwa Dastuurku siiyey. | *Faqarddan waxaa laga soo raray Faqradda 4aad ee isla Qodobkan, waxaa la faahfaahiyey heerarka kala duwan oo ah heer Federaal iyo heer dawlad Goboleed. F.G: Waa lasoo kordhiyey "Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya "* |

| | | |
|---|---|---|
| (1) Heer kasta oo Xukuumadeed ha ahaadeen heerar siman ama kuwo kala sarreeya waa in ay yeeshaan xiriir iskaashi oo wanaagsan. | 2. Heer kasta oo Xukuumadeed ha ahaadeen heerar siman ama kuwo kala sarreeya waa in ay yeeshaan xiriir iskaashi oo wanaagsan. | *Faqraddaan sideedii baa loo qaatay.* |
| (2) Xukuumad kasta waa in ay ixtiraamtaa, ilaalisaana xadka awoodaha ay leedahay iyo awoodaha ay leeyihiin Dawladaha kale, waana in ay:<br>a. La yeelataa xiriir walaaltinnimo oo wax-ku-ool ah heerarka kale ee Xukuumadaha, una horseedaa midnimada muwaaddiniinta;<br>b. Heer kasta oo Xukuumadaha waa in ay ku wargelisaa heerarka kale siyaasadaha iyo hawlgallada ay ka fulineyso degaannadeeda oo saamayn ku yeelan kara degaannada heerarka kale;<br>c. Yeeshaan siyaasado u adeegaya qorshaynta iyo hirgelinta mashaariic hormarineed oo wadajir ah. | 3. Heer kastoo Xukuumadeed waa in ay ixtiraamtaa, ilaalisaana xadka awoodaha ay leedahay, aqbashaana awoodaha xukuumadaha kale, waana inay:<br>d. La yeelataa xiriir is-xurmeyn leh oo wax-ku-ool ah heerarka kale ee Dawladeed, una horseedaa midnimada muwaaddiniinta;<br>e. Ku wargelisaa heerarka kale siyaasadaha iyo hawlgallada ay ka fulineyso degaannadeeda oo saamayn ku yeelan kara degaannada heerarka kale.<br>f. La yeelato siyaasado u adeegaya qorshaynta iyo hirgelinta mashaariic horumarineed oo wadajir ah. | *Nuxurka Faqradaani sideeda ayaa loo qaatay, ayadoo la habeeyey siiqadii.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (3) Si loo xaqiijiyo jiritaanka iyo horumarinta xiriirada iskaashiga Federaaliga ah waa in la joogteeyo kulan sanadeed ay wada yeeshaan madaxda fulinta Xukuumadda Federaalka iyo Madaxda Fulinta Dawladaha xubinta ka ah Xukuumadda Federaalka si ay isula meeldhigaan:<br>a. Adkaynta Midnimada Qaranka;<br>b. Sugidda ammaanka iyo Nabadgelyada Dalka;<br>c. Horumarinta dhaqan-dhaqaalaha qaranka iyo suuqa mideysan ee dalka;<br>d. Horuumarinta baraaraha shacabka;<br>e. Isdhaafsiga macluumaadka. | | *Waxaa la soojeedinta nuxurka Faqraddan laga dhigo Qodob gaar ah, Eeg Qodobka 52(1) ee hoos ku qoran, oo cinwaaankiisu yahay" Golaha Iskaashiga U dhexeeya…"* |
| (4) Dhammaan heerarka Xukuumadda waxaa waajib ku ah inay u hoggaansanaadaan Dastuurka dalka, ayada oo aan heerna isa siinayn awood ka baxsan kuwa Dastuurku siiyey. | | *Waxaa la soo jeediyay in la tiro Faqraddan nuxurkana lagu daro Eeg Faqradda 1aad ee isla Qodobka.* |
| (5) Sharci Baarlamaank Federaalku ansxiyay waa inuu | | *Waxaa loo raray qodobka* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| xeeriyo:<br><br>a. Samaynta hay'ado iyo habraacyo fududaynaya wada falgelidda heerarka Xukuumadda;<br>b. Samaynta hay'ado habaraacyo fududaynaya xallinta khilaafaadka ka dhex dhasha heerarka Xukuumadda inta aanay u gudbin maxkamad. | | *53aad* |
| Qodobka 52aad: Iskaashiga Xukuumadaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka | | *Nuxurkaa Qodobkaan 52 ee dastuurka asalka ahaa waxaa loo raray Qodobka 54aaad oo ah awood qaybsiga.* |
| (1) Xukuumadda Federaalka ah iyo Xukuumadah xubnaha ka ah waxaa waajib ku ah in madaxweyneyaasha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Mas'uuliyiintooda sare yeeshaan kulammo joogto ama kaltan ay kaga wada xaajoodaan arrimaha degaammadooda wada saameeya oo ay ka mid yihiin:<br>a. Ilaha biyaha;<br>b. Beeraha;<br>c. Xannaanada xoolaha;<br>d. Daaqa iyo seeraynta; | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| e. La dagaallanka nabaadguurka iyo ilaalinta deegaanka;<br>f. Caafimaadka;<br>g. Tacliinta;<br>h. Xiriirinta iyo wada-xaajoodka hoggamiyeyaal-dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer-dhaqameedka;<br>i. Xiriirinta culimada diinta; iyo<br>j. Dhallinyarada. | | |
| (2) Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayadu dhexdooda ama Xukuumadda Federaalka waxay isla geli karaan heshiisyo iskaashi oo ay ku wada hawlgalaan, aanse lahayn awood sharci, kana horimanayn Dastuurka Federaalka iyo kan Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | | *Waa la tirtiray, maadama nuxurkiisa lagu sheegay qodobka 52aad.* |
| | Qodobka 52aad: Golaha Iskaashiga U Dhexeeysa Xukuumadda Federaalka iyo Xukuumadaha Dawlad Goboleedyada | *Qodob Cusub.* |
| | 1. Si loo xaqiijiyo jiritaanka iyo horumarinta xiriir wadashaqayn ee u dhexeeya xukuumadda Federaalka ah iyo Xukuumadaha Dawlad Goboleedyada ayaa waxa la dhisayaa golaha Iskaashiga, oo looga wadaxaajoonayo, layslana | *Qodobkaan waa qodob lasoo kordhiyey balse nuxurkiisa qayb kamid ah laga soo rarey Qodobka 51 ee Dastuurka iyo 111 F ee Dastuurka asalka ah.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | meeldhigaayo siyaasado midaysan oo ay ka mid yihiin balse ku koobnayn:<br>a. Xoojinta midnimada Qaranka;<br>b. Sugidda nabadda iyo amniga dalka;<br>c. Horumarinta arrimaha dhaqan dhaqaalaha Qaranka iyo iskaashiga ganacsiga dalka;<br>d. Kor-u-qadidda nolosha iyo kobcinta dhaqaalaha shacabka Soomaaliyeed; iyo<br>e. Wadaagga xogta ee heerarka kala duwan ee Xukuumadeed. | |
| | 2. Kulan wadashaqayn oo u dhexeeya Xukuumadda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada ayaa waxay si joogta ah isugu imaanayaan lixdii biloodba mar iyo markii loo arko inay tahay lagama maarmaan. | *Eeg Faallada Faqradda 1aad ee kor ku xusan.* |
| | 3. Dawladda Federaalka iyo dawlad gobleedyada waxay codsan karaan kulan aan caadi ahayn marka loo baahdo. | *Eeg Faallada Faqradda 1aad ee kor ku xusan.* |
| | 4. Kulamada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn waxaa isugu yeeri kara oo keliya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | *Eeg Faallada Faqradda 1aad ee kor ku xusan.* |
| | 5. Golaha Iskaashiga ama Dawlad-goboleedyada xubinta ka ah Dawladda Federaalka dhexdooda waxay isla gaari karaan go'aanno iyo heshiisyo aanse lahayn awood sharci. | *Eeg Faallada Faqradda 1aad ee kor ku xusan.* |
| | 6. Go'aanada iyo heshiiyada Golaha iskaashiga wuxuu sharci noqonaya oo kaliya marka ay ansixiyaan | *Eeg Faallada Faqradda 1aad* |

| | | |
|---|---|---|
| | Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, halka go'aanada iyo heshiisyada dawladaha Xubinta ka ah dhexdooda ay ansixiyaan barlmaanadooda. | *ee kor ku xusan.* |
| Qodobka 53aad: Wada-xaajoodyada Caalamiga | | *Nuxurka Qodobkaan waxaa loo raray Qodobka 53 iyo 54 ee ka hadlay awooda* |
| (1) Iyada oo la qaddarinayo nuxurka iskaashi ee lagu shaqaynayo, xukuumadda Federaalku waa in ay Dawlad-goboleedyada kala tashataa wada-xaajoodyada la xiriira kaalmada dibedda, ganacsiga, cahdiyada ama arrimaha muhiimka ah ee la xiriira heshiisyada caalamiga ah. | | |
| (2) Marka ay wada-xaajoodyadu si gaar ahaan u saamaynayaan danaha khuseeya dawladda xubinta ka ah dawladda federaalka, xukuumadda Federaalku ergada wada-xaajoodka geleysa waxaa kaabaya wakiillo ka socda Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | | |
| (3) Xukuumadda Federaalka marka ay ka hawlgelayso wada-xaajoodyada, waa in ay isu | | |

| | | |
|---|---|---|
| aragtaa xilgudashadeeduna ka muuqdaa in ay tahay ilaaliyaha danaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | | |
| **Qodobka 54aad: Kala Qaybinta Awoodaha** | **Qodobka 53aad: Awoodaha U Gaarka ah Dawladda Federaalka** | ***Soojeedinta cusub Wax-ka-beddelka Dastuurka*** |
| Awood-qaybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale waxaa ka wada xaajoon doona Xukuumadda Federaalka iyo Dawladaha ka mid noqonaya Dawladda Federaalka Soomaaliya marka laga reebo: A) Arrimaha Dibadda; B) Difaaca Qaranka; C) Jinsiyadda iyo Socdaalka iyo D) Siyaasadda Lacagta, oo ay awooddeeda iyo mas'uuliyadda yeelaneyso Xukuumadda Federaalka. | 1. Baarlamaanka Federaalk Soomaaliya wuxuu leeyahay awoodaha u gaarka ah oo kala ah:<br>a) Wax-ka-baddelka Dastuurka Federaalka Soomaaliya;<br>b) Xeer-dejinta arrimaha ku xusan Qaybta "A" ee Jadwalka 2aad;<br>c) Soosaaridda xeerar nidaamiya siyaasadda Qaranka iyo halbeegyada midaysan ee la xiriira arrimaha ku xusan Qaybta "B" ee Jadwalaka 2aad;<br>d) U igmidda awoodaha xeer-dejineed ama fulineed mid kamid ah golaha wakiilada ee heerarka kala duwan ee Dawladda. | *QODOBADA 53 IYO 54AAD WAXAA LOO BAAHANYAHAY IN HESHIIS KA GAARAAN DAWLADDA FS IYO DAWLAD GOBOLEEDYADA.*<br><br>*Labada Guddi qabyo-qoraalkii 1aad, kamaysa diyaarin aragti iyo soojeedin ku aadan arrimaha Kala-qaybinta awoodaha.*<br><br>*F.G: SI LO SAHLO WADA-XAAJOODKA KALA-QAYBINTA AWOODAHA, GUDDIGA LA SOCODKA WUXUU U DIRAY GUDDIGA MADAXA-BANNAAN INUU KASOO DIYAARSHO ARAGTI SAHLAYSA LAGUNADUL SHAQAYN KARO. GUDDDIGA MADAXABANNAAN WUXUU SOO DIYAARIYEY SOOJEEDIIN(Proposal) ASAGOO LA KAASHANAYA KHUBURO IYO LA TALIYAAL* |

| | | |
|---|---|---|
| | | *SOOMAALIYEED IYO CAALAMI AH SI MADAXDA FEDERAALKA IYO MADAXDA-DAWLAD GOBOLEEDYADU UGA SAMEEYAAN WADAXAAJOOD SIYAASADEED.*<br><br>*Qodobka 53aad wuxuu ka hadlayaa* **Awoodaha U Gaarka ah Dawladda Federaalka,** wuxuuna ka koobanyahay laba faqradood.<br>Waxaana la diyaariyey awoodd noqon kara kuwa ugaar ah Dawladda Federaalka. Waxaa laga digay lifaaq.<br>**Fadlan eeg lifaaqa " Qaybta "A" ee Jadwalka 2aad.** |
| | 2. Ayadoo la tixgalinayo faqradda (1) (d) ee qodbkaan, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay leedahay awood u gaar ah maamulidda iyo fulinta dhammaan arrimaha ku xusan Qaybta "A" ee Jadwalka 2aad iyo asaasidda hay'adaha iyo xafiisyada dawliga ah ee lagama maarmaanka u ah. | *Fadlan eeg faalada faqrada 1aad ee qodobkaan.* |
| | Qodobka 54aad: Awoodaha Wadaagga | |
| | 1. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo Goleyaasha wakiilada Dawlad goboleedyada waxaa ay adeegsan karaan awoodda sharci dejinta ee arrimaha ku xusan Jadwalka 2aad (B) | |

| | | |
|---|---|---|
| | 2. Golaha Wakiilada ee Dawlad-goboleed kasta wuxuu ku adeegsanayaa awood sharci-dejin arrimaha ku xusan Jadwalka 2aad (B), haddii aysan ka hor imaanaynin sharciyada federaalka ee isla mowduuca la xiriira. | |
| | 3. Xukuumadda Federaalku waxay maamuleysaa oo fulinaysaa dhammaan shuruucda ku xusan Jadwalka 2aad (B) illaa xadka lagama maarmaanka u ah joogtaynta heerarka iyo qaab-dhismeedka guud iyo aasaasidda iyo joogtaynta hay'adaha iyo xafiisyada dawladda ee lagama maarmaanka ah. | |
| | 4. Dawlad Dawlad-goboleedyadu waxay maamulayaan oo fulinayaan dhammaan shuruucda lagu dabaqay Jadwalka 2aad (B) illaa iyo inta Dowladda Federaalka aysan si toos ah u maareynayn una fulinayn sida ku xusan Farqadda (3). | |
| | Qodobka 55aad: Awoodaha U Gaarka ah ee Dawlad Goboleedka | *Qodob Cusub* |
| | 1. Golaha wakiilada Dawlad-goboleedyada ayaa awood gaar ah u leh xeerdajinta dhammaan arrimaha aan ku xusnayn qaybaha A iyo B ee Jadwalka 2aad. | *QODOBADA 53 IYO 54AAD WAXAA LOO BAAHANYAHAY IN HESHIIS KA GAARAAN DAWLADDA FS IYO DAWLAD GOBOLEEDYADA.*<br><br>*Labada Guddi qabyo-qoraalkii 1aad, kamaysa diyaarin aragti iyo soojeedin ku aadan arrimaha Kala-qaybinta awoodaha.*<br><br>*F.G: SI LO SAHLO WADA-XAAJOODKA KALA-QAYBINTA* |

| | | |
|---|---|---|
| | | *AWOODAHA, GUDDIGA LA SOCODKA WUXUU U DIRAY GUDDIGA MADAXA-BANNAAN INUU KASOO DIYAARSHO ARAGTI SAHLO LAGA DUL SHAQAYN KARO. GUDDDIGA MADAXABANNAAN WUXUU SOO DIYAARIYEY SOOJEEDIIN(Proposal) ASAGOO LA KAASHANAYA KHUBURO IYO LA TALIYAAL CAALAMI AH SI MADAXDA FEDERAALKA IYO MADAXDA-DAWLAD GOBOLEEDYADU UGA SAMEEYAAN WADAXAAJOOD SIYAASADEED.*<br><br>*Qodobka 54aad wuxuu ka hadlayaa* **Awoodaha U Gaarka ah Dawladda Federaalka,** wuxuuna ka koobanyahay seddex faqradood.<br>Waxaana la diyaariyey awoodd noqon kara kuwa ugaar ah Dawladda Goboleedyada. Waxaa laga digay lifaaq.<br>Fadlan eeg lifaaqa "Qaybta "B" ee Jadwalka 2aad. |
| | 2. Golaha Wakiilada wuxuu u leeyahay in ku eg dawlad-goboleedkiisa, awood gaar ah arrimaha soo socda: | *EEG FAALADA FAQRADA 1AAD EE QODOBKAAN* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | a. Xeer-dejinta awoodaha ku xusan Qaybta "B" ee Jadwalka 2aad, waxayna adeegsanayaan awoodda illaa iyo inta xeerarka dowlad-goboleedyada ee noocaas ahi aysan ka hor imaanaynin Xeerarka Dawladda federaalka ee isla mowduuca la xiriira.<br><br>b. U igmidda awoodaha xeer-dejineed ama fulineed mid kamid ah dawladaha hoose ee Dawladda-goboleedkaas. | |
| | 3. Ayadoo la tixgalinayo faqradda (2) ee qodbkaan, Xukuumadda Dawlow-goboleedku waxay awood gaar ah u leedahay maamulidda iyo fulinta dhammaan awoodaha ku xusan Qaybta "B" ee Jadwalka 2aad iyo asaasidda hay'adaha iyo xafiisyada dawliga ah ee lagama maarmaanka u ah. | *EEG FAALADA FAQRADA 1AAD EE QODOBKAAN* |

CUTUBKA 6AAD
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

| ASALKA DASTUURKA KMG | Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS | *FAALO: SABABAHA SOOJEEDINTA WAX-KA-BEDDELKA* |
|---|---|---|
| *CUTUBKA 6AAD: BAARLAMAANKA FEDERAALKA* | *CUTUBKA 6AAD: BAARLAMAANKA FEDERAALKA* | *CINWAANKA CUTUBKA WAXBA LAGAMA BEDELIN* |
| | *MADAXA KOOWAAD: QODOBO GUUD EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA* | |
| Qodobka 55aad: Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka | Qodobka 56aad: Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | *Waxba lagama bedelin* |
| (1) Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay:<br>(a) Golaha Shacabka, iyo;<br>(b) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | 1. Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay labo Gole:<br>b. Golaha Shacabka; iyo<br>c. Golaha Aqalka Sare. | *Faqraddan waxaa lagusoo kordhiyey ereyga "Labo Gole"* |
| (2) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah iyo Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxay masuuliyadaha sharci-dejinta u gutaan si waafaqsan Madaxa Afraad ee Dastuurkan oo ku saabsan habraaca sharci-dejinta Heerka Qaran. | 2. Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya wuxuu matalaa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka waxaana marwalba hagaya kuna shaqeeyaa danaha shacabka oo ay ka mid yihiim balse aysan ku koobanneyn howlaha soo socda:<br>a. Soo saarayaan Xeerarka Federaalka; | Farqadda 2aad gaba ahaan waa la baddelay ayadoo lagusoo kordhiyey xarfaha "a ilaa J", sii laa faahfaahiyo hawlaha uu gudanayo Barlmaanku. |

| | | |
|---|---|---|
| | b. Wax-ka-beddelka Dastuurka Federaalka;<br>c. Doorashada Madaxweynaha Jahmuuriyadda Federaalka;<br>d. Matalaadda deegaan doorashada xildhibaanada labada aqal;<br>e. Eedeynta iyo xilka qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>f. Korjoogteynta Xukuumadda iyo hay'adaha kale;<br>g. Ansixinta Miisaaniyadda Federaalka;<br>h. Ansixinta Heshiisyada Caalamiga ah;<br>i. Ansixinta xaaladaha deg-degga ah;<br>j. Ansixinta xaaladaha dagaalka;<br>k. Ansixinta magacaabidda saraakiisha sare sida xubnaha Guddiyada Madaxbannaan iyo garsoorayaasha Federaalka si waafaqsan dastuurka Federaal Soomaaliya; | |
| | 3. Marka ay gudanayaan howlahooda, labada Aqal waxaa ay go'aamadooda ku gaarayaan fadhiyo gooni-gooni ah ama fadhiyada wadajirka ah sida ku xusan qodobka 57(2) ee Dastuurka Federaalka. | Farqadda 3aad waa ay cusub tahay waxayna tibaaxaysa habka go'aamida Barlamaanku ku gaaro oo ah fadhiyo gooni-gooni ah iyo kuwa wadajir ah |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 56aad: Xilgudashada Baarlamaanka Federaalka** | | *Waa la tirey qodobkan* |
| Golayaasha Baarlamaanka Federaalku:<br>a. Xilalka ay wadaagaan waa inay u gutaan si wadajir ah;<br>b. Xilalka uu gole waliba gaarka u leeyahay wuxuu u gutaa gaar ahaantiisa. | | *Waxaa la soojeediyay in la tiro qodobkaan maadaama uu sheegayo wax iska cad oo nuxur soo kordhinaynin* |
| **Qodobka 57aad: Xilka Xeerdejinta ay Wadaagaan Labada Gole** | **Qodobka 57aad: Fadhiyada Wadajirka ah** | *Asalka Dastuurka cinwaanka qodobkan iyo waxa uu ka hadlayo waa ay kala duwan yihiin sidaa darteed waxaa loo bedeley "Fadhiyada Wadajirka ah" si la isu waafajiyo* |
| Xilka sharci-dejinta ee ay wadaagaan labada gole waxaa ka mid ah:<br>a. Markii loo baahdo Aqalka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka iyo Aqalka Dawladaha Federaalka ka mid ah waxay qabsanayaan fadhiyo wadajir ah, waxaana fadhiyadaa hoggaaminaya Guddoomiyaha Aqalka Sare ama xubin kale oo ka tirsan Baarlamaanka Federaalka ah hadba sida ay xeerka iyo nidaamka aqalladu dhigayaan. | 1. Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay yeelanayaan fadhiyo wadajir ah marka loo arko inay tahay lagama maarmaan ama uu faro Dastuurka ama xeerarka Federaalka. | *Faqradda 1aad siiqada ayaa la hagaajiyey* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| b. Inta uu guddoominayo fadhiyada wadajirka ah, Guddoomiyaha Aqalka Sare Federaalka ah, ama Guddoomiyaha Golaha shacabka ama xubintii kale ee la isla garto in ay guddoonka qabataa, kuma laha wax cod ah arrimaha loo codeynayo, marka laga reebo xaaladda ay cododkii tiro ahaan sinnaadaan.<br><br>c. Iyadoo aan wax loo dhimeyn awoodda uu Baarlamaanku ku habeynayo hawlihiisa iyo shaqo-fulintiisa, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waxaa laga yaabaa, marka uu u arko in ay ku haboon tahay, in uu ku codsado/ay ku codsato farriin loo diro labada guddoomiye ee aqallada in la qabto fadhi wadajir ah oo ku saabsan:<br><br>i. Dejinta habraacyada haga hawlaha guddiyada isku dhafan ee labada Gole;<br>ii. Dhaqangalinta habraacyada meel-marinta go'aan<br>iii. Wax kabaddalidda iyo dib-u-eegidda Dastuurka si waafaqsan Cutubka 15aad. | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 2. Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa ay qabanayaan fadhiyo wadajir ah marka ay gudanayaan howlaha soo socda:<br>a. Ansixinta wax-ka-beddel kasta ee Dastuurka Federaalka<br>b. Doorashada Madaxweynaha Jahmuuriyadda Federaalka;<br>c. Eedeynta iyo xilka qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>d. Ansixinta Miisaaniyadda Federaalka;<br>e. Ansixinta xaaladaha deg-degga ah;<br>f. Ansixinta xaaladaha dagaalka. | *Faqradda 2aai waxaay qeexaysa Fadhiyo wadajirka iyo hawlaha lagu qabanayo halka Faqrada 3aad waa xarafkii "C" ee asalka Dastuurka balse waxaa lagu daray faah-faahin xaalada uu codsan karo fadhiyada wadajir ka ah.*<br>*Waxaa meesha laga saarey xarafka (b) ee asalka dastuurka maadaama ay iska cadahay in guddoomiyaha shirka uuna lahayn cod marka ay lagama maarmaan noqoto mooyee.* |
| | 3. Iyadoo aan wax loo dhimeyn awoodda uu Baarlamaanku ku gudanayo waaajibaadkiisa shaqo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka wuxuu ka codsan karaa labada Guddoomiye ee labada Gole in la qabto fadhi wadajir ah marka ay jiraan xaaladaha soo socda:<br>a. Inuu si rasmi ah u furo kalfadhiyada cusub ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;<br>b. Inuu khudbad u jeediyo xubnaha labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka marka uu dalku wajaho xaalado adag. | *Faqradda 3aad ee cusub waxa loo dhigay in kulan wada jir ah ay soo jeedin karaan labada guddoomiye ee labada Aqal iyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda balse go'aanka shirka wadajirka ah ay leeyihiin labada Guddoomiye.* |

| | | |
|---|---|---|
| | 4. Kulamada wadajirka ah ee labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka waxaa shir-guddoominaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka; marka uu maqan yahayna waxaa shir guddoominaya Guddommiyaha Golaha Aqalka Sare, haddii ay labadooda maqan yihiin waxaa shir-guddoominaya Guddoomiye ku-xigeenka koowaad ee Golaha Shacabka. | *Faqradda 4aad waa xarafkii "a" ee asalka dastuurka ayadoo dib loo siiqeeyey, waxaana la soo jeediyay in fadhiyada wadajirka uu shir guddoomiyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka maadaama uu yahay guddoomiye Gole ka badan (276) Aqalka Sare (54). Haddii uu maqan yahay Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxaa shir guddoominaya Guddoomiyaha Aqalka Sare. Haddii ay maqan yihiin labada Guddoomiye waxaa shir guddoominaya Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka.* |
| | 5. Xeer-hoosaadka wadajirka ah ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa lagu sheegi doonaa habraacyada kulamada wadajirka ah ee labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | *Faqrda 5aad waa cusubtahay, waxayna qeexaysa xeer-hoosaadka wadajirka ah ee Barlamaanka Federaalka* |
| | **Qodobka 58aad: Guddiyada Wadaagga ee Baarlamaanka Federaalka** | **waxaa laga soo raray qodobka 62aad ee Asalka Dastuurka** |
| | 1. Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka waxa ay dhisan karaan guddiyo wadaag ah oo hawlahooda u fududeeya.<br>2. Xeer-nidaamiye labada Gole ay wadajir u | *Asalkii Dastuurka waxab lagama bedelin.* |

| | | |
|---|---|---|
| | meelmariyaan ayaa lagu go'aanminayaa tirada guddiyada iyo habraacyada xil-fulintooda. | |
| **Qodobka 58aad: Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 59aad: Shuruudaha Xubinnimada Barlamaanka Federaalka Soomaaliya** | ***Waxba lagama bedelin*** |
| 1. Qofka loo dooranayo xubinnimadda Baarlamaanka Federaalka waa in:<br>a. Uu yahay Muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhimirkiisu dhan yahay da'diisunaaanay ka yarayn shan iyo labaatan (25) sano, codbixiye ahaanna u diiwaangashan;<br>b. Aan xuquuqdiisa muwaaddinnimo go'anmaxkmadeed lagu hakin shantii (5) sano ee ugu dambaysey;<br>c. Uu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo'aragnimou dhiganta. | 1. Qofka loo dooranayo xubinnimadda Baarlamaanka Federaalka waa in:<br>a. Uu yahay Muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>b. Dhimirkiisu dhan yahay;<br>c. Da'da musharaxa Golaha Shacabka aanay ka yarayn soddon Sano (30), Halka da'da musharaxa Aqalka Sare aysan ka yarayn Soddon iyo shan sano (35);<br>d. Leeyahay aqoon heer Jaamacadeed;<br>e. Musharaxa Golaha Shacabka leeyahay waayo aragnimo shaqo ugu yaraan 5 sano, halka Musharaxa Aqalka sare uu leeyahay ugu yaraan 10 sano waayo aragnimo shaqo;<br>f. Ku sifoobay daacadnimo iyo amaano;<br>g. Aan xuquuqdiisa Codeynta lagu laalin go'aan maxkmadeed shantii (5) sano ee ugu dambaysey;<br>h. Aan lagu xukumin dambi ciqaabtiisu | *Waxaa lagu sameeyay dib-u-eegis farsamo oo keliya balse waxaan ku soo kordhinay da'ada Aqalka Sare in la gaarsiiyo 35 sano, waayo aragnimada Aqalka Sare 10 sano, Golaha shacabkana 5 sano.*<br>*Sidoo kale aqoonta xubinta BFS waxaa lagu xirey Shahaado jaamacadeed.*<br>*Waxaa sidoo kale la soo kordhiyey xarfaha **f, h iyo i** oo ka hadlaya in aan dembi ciqaabeed horey loogu xukumi, loona baahan yahay inuu ku sifoobay daacadnimo iyo amaano" iyo ugu yaraan in uu dagan yahay wadanka 2 sano ka hor doorashada.*<br>Sidoo kale waa lasoo kordhiyey xarafka "j" ee ah inuu xisbi kamid yahay. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | gaarsiisan tahay Shan sano (5) oo xabsi ah.<br>i. Ugu yaraan in uu dagan yahay wadanka 2 sano ka hor doorashada.<br>j. Uu xubin ka yahay xisbi siyaasadeed oo ka diiwaangashan Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Federaalka. | |
| 2. Ka hor inta aan qofka la oggolaan murashaxnimadiisa, Guddiga Qaranka ee Madax Bannaan ee Doorashooyinka waa inuu hubiyo in murashaxu buuxiyey shuruudaha ku cad qodobkan. | 3. Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka waa inuu hubiyaa in murashaxu buuxiyey shuruudaha ku cad Qodobkan ka hor inta aan la oggolaan murashaxnimadiisa. | *Faqradda 2aa waxaa la baddedalay siiqadii faqraddi 2aad ee asalka Dastuurka ayadoo nuxurkii waxba aan laga baddelin.* |
| **Qodobka 59aad: Sababaha Lagu Lumiyo Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 60aad: Sababaha Lagu Lumiyo Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka** | ***Cinwaanka waxba lagama bedelin*** |
| (1) Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka waxaa lagu lumin karaa:<br>a. Xubinta oo Geeriyoota<br>b. Xubinta oo ay la soo gudbonaato xaalad xilgudasho la'aaneed oo joogto ah.<br>c. Xubinta oo istiqaalad u gudbisa aqalka ay xubinta ka tahay, lagana | 1. Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka waxaa lagu lumin karaa:<br>a. Geeri;<br>b. Xilgudasho la'aan joogto ah ee dhanka jirka ama maskaxda;<br>c. Istiqaalad qoraal ah oo loo gudbiyey Golaha xubinta ka tirsan tahay si waafaqsan xeer hoosaadka khuseeya. | *Faqraadaa 1aad waxaa lagu sameeyay dib-u-eegis farsam, balse waxaa jira isbedelo lagu sameeyey:*<br>▪ *Xarafka b waxaa lagu darey "dhanka jirka ama maskaxd"*<br>▪ *Xarafka d "laba kal fadhi" waxaa lagu bedeley "Hal kalfadhi"*<br>▪ *Xarafka e, waxaa meesha laga saarey in xildhibaanka uu qaban* |

| | | |
|---|---|---|
| oggolaado.<br>d. Ka-maqnaansho labo kalfadhi oo caadi ah, iskuna xiga ayada oo aanay jirin sabab maangal ah.<br>e. Haddii ay xubintu aqbasho xil Dawladeed aan wasiir ka ahayn<br>f. Haddii la hakiyo xuquuqdiisa muwaaddinnimo, sida ku cad Sharciga. | d. Ka-maqnaansho hal kalfaldhi ee Golaha uu ka tirsan yahay sabab aan maangal ahayn;<br>e. Aqbalaad xil kale oo dawladeed heer federaal iyo heer Dowlad Goboleed;<br>f. Xukun Maxkameed oo lagu laalay xuquuqdiisa siyaasadeed.<br>g. Xubinta lagu Xukumo dambi ciqaabeed oo kama dambays ah oo gaaraya xabsi ugu yaraan shan (5) sano; | *karo xil wasiir*<br>▪ *Xarafka f waa cusub yahay wuxuuna sheegayaa in xubinta aaney ku dhicin Xukun dembi ciqaabeed oo 5 sano gaaraya.* |
| (2) Haddii xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka lumiso xubinnimadeeda waxaa baddelaya qofka doorashadii hore ku xigey. | 2. Haddii xubin ka tirsan Baarlamaanka Federaalka lumiso xubinnimadeeda, waxaa soddon (30) maalmood guddohood kursiga buuxinaya qof lagu soo doorto doorasho ku celis ah. | *Faqradda 2aad waxaa la soo jeediyey in qofkii booska baneeyo lagu bedelo qof kale oo lagu soo doortey isla habraacii uu qof ka hore ku yimi, faqradda 3aadna waxaa nuxurkeeda lagu darey faqradda 2aad.* |
| (3) Sharciga doorashada ayaa caddaynaya habraaca loo marayo xulashada xubin-sugaha, waana in lagu dhaariyo 30 beri gudohood laga bilaabo maalinta xildhibaanka uu beddelayaa lumiyey xubinnimada Baarlamaanka. | | *Faqradda 3aad ee asalka dastuurka waa la tirtiray, waxaana nuxurkiisa lagu sheegay faqradda 2aad iyo qodobada doorashada.* |
| | Qodobka 61aad: Doorashada Xubnaha Labada Gole | *Qodob cusub* |
| | | *Qodobkaan waa qod cusub balse nuxurkiisa meelo kala duwan lagu* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 1. Xubnaha Golaha Shacabka waxaa si toos ah, qarsoodi ah, madaxbanaan, xor ah oo hufan ku dooranaya shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gaar ahaan shacabka deegaan doorashada xubinta. | *kala sheegay asalkii dastuurka. Wuxuuna nidaaminaya habaka lagu dooranayo labada aqal.* |
| | 2. Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxaa si toos ah, qarsoodi ah oo madaxbannaan u dooranaya shacabka Dowlad-goboleedka. | |
| Qodobka 60aad: Muddada xil-haynta | Qodobka 62aad: Muddada xil-haynta | *Waxba lagama bedelin* |
| (1) Muddada xil-haynta Baarlamaanka Federaalku waa (4) afar sano oo ka bilaabata maalinta natiijada doorshada lagu dhawaaqo. | 1. Muddada xil-haynta xubnaha Golayaasha Baarlamaanka Federaalka waa shan (5) sano oo ka bilaabata maalinta loo dhaariyo. | *Faqradda 1aad waxaa mudada xil haynta xubnaha labada gole la soo jeediyey in laga dhigo 5 sano si waqti fiican oo wax lagu qabto loo helo.* |
| (2) Xildhibaan kasta oo Baarlamaanka Federaalka ka mid ah dib ayaa loo dooran karaa. | 2. Marka ay dhammaato muddada xilhaynta labada Gole waxay xilka sii haynayaan illaa iyo inta laga dhaarinayo xubnaha cusub ee lagu doortey hab waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Dalka. | *Faqradda 2aad waa mid cusub waxayna tilmaameysaa in mudada xilhaynta labada gole ay ku eg tahay maalinta la dhaariyo xubnaha cusub ee xilliga xiga.* |
| | 3. Xubnaha Cusub waxaa lagu dhaarinaya Fadhiga Kowaad ee wadajirka ah ee labada Gole. | *Faqradda 3aad sidoo kale waa ay cusub tahay waxayna ka hadkeysaa in xildhibaanada cusub lagu* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | | *hdaarinayo fadhiga 1aad ee wadajirka ah.* |
| | 4. Xildhibaan kasta oo Baarlamaanka Federaalka ka mid ah dib ayaa loo dooran karaa. | *Faqrad 4aad waxba lagama baddelin oo waa faqraddii 2aad ee asalka dastuurka.* |
| | **Qodobka 63aad: Kal-fadhiyada Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka** | *Qodobkaan nuxurkiisa waxa laga soo raray qodobada 66 iyo 72aad* |
| | 1. Barlamaanka Federaalka ee la doortay, fadhigiisa koowaad waa inuu ku qabsoomaa soddon (30) maalmood gudahood kaddib marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada guud. Taariikhda fadhiga la qabanayo waxaa goynaya Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka. | *Qodobkan cusub nuxurkiisa waxaa laga soo raray 66 iyo 74 ayagoo lagu mideeyey halkaan.* |
| | *2.* Barlmaanka Federaalka wuxuu yeelanayaa sanadkiiba labo kalfadhi oo caadi ah oo ugu yaraan midkiiba soconayo afar (4) bilood. | *Faqrad cusub* |
| | *3.* Xeer-hoosaadka wadajirka ah ee Barlamaanka Federaalka ayaa lagu xaddidayaa waqtiyada iyo taariikhda kalfadhiyada caadiga ah ee labada gole iyo xilliyada nasashada; | *Faqrad cusub* |
| | *4.* Mid ka mid ah labada Gole ee Barlamaanka Federaalka wuxuu yeelan karaa fadhiyo aan | *Faqrad cusub* |

| | | |
|---|---|---|
| | caadi ahayn haddii:<br>a. Madaxweynaha Federaalku isugu yeero;<br>b. Guddoomiyaha Goluhu isugu yeero;<br>c. Ay codsi qoraal ah ku weydiistaan ugu yaraan boqolkiiba labaatan (20%) xubnaha golaha la iskugu yeerayo ama xubnaha hal Dawlad-goboleed.<br>d. Ansixinta ku dhawaaqista xaalad degdeg ah; ama<br>e. Ansixinta ku dhawaaqista xaalad dagaal. | |
| | **Qodobka 64aad: Kaladirista Barlamaanka Federaalka** | **waxaa laga soo rarey qodobka 67aad** |
| | 1. Lama kala diri karo Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ka hor dhammaadka muddo xilleedka oo ah shan (5) sano marka laga reebo xaaladaha uu Barlamaanku gudan waayo waajibaadkiisa dastuuriga ah, ayna soo jeediyaan labada guddoomiye ee labada Gole ayagoo la tashanaya ku-xigeenadooda, waydiistaana Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya doorasho xiligeeda laga soo hormariyay, wuxuuna ku dhawaaqayaa Madaxweynuhu doorasho Baarlamaan iyo mid Madaweyne si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka. | *Qodobkaan waxaa loo baddelay in haddi la kala diro Golayaasha, ay khasab noqonayso in doorasho lasoo hormariyey ee Barlamaanka iyo Madaxweynaha la qabto, si looga hortago kala dirid aan macno ku fadhin in Madaxweynuhu ku dhawaaqo doorasho deg deg ah. Waxaana shardi looga dhigay inuuna madaxweynaha kala diri karin sanadka kowaad iyo kan u danbeeya ee Golayaasha.* |

| | | |
|---|---|---|
| | 2. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka kuma dhawaaqi karo doorasho Barlamaan iyo Madaxweyne sanadka kowaad ama sanadka u dambeeya ee muddo xilliyeedka ee Barlamaanka Federaalka marka laga reebo shuruudaha ku xusan Qod 103(6) Guddiga Madaxabannaan ee Dooraashooyinka Qaranka wuxuu sagaashan (90) maalmood gudahood ku qabanayaa doorashada Barlamaanka Federaalka oo ka billaabata taariikhda la kala diray iyo (30) maamlmood gudahood doorashada Madaxweynaha oo ka bilaabanaysa taariikhda xubnaha barlamaanka Federaalka la dhaariyo. | *Faqradda 2aad waxay tilmaameysaa in 90 maalmood gudohood lagu qabto doorasho, iyo 30 cesho doorasho madaxwayna*<br><br>*Sidoo kale waxaa la akhrisaa soojeedinta cusub ee qodobka 84aad faqradda 5aad ee awoodaha madaxweynaha.* |
| Qodobka 61aad: Xilka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka | Qodobka 65aad: Xilka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka | *Cinwaanka waxba iskama bedelin* |
| (1) Xubin kasta oo ka mid ah labada Aqal ee Baarlamanka Federaalka marka ay xilkeeda gudaneyso waa in ay ku shaqaysaa sida ay danta qaranku ku jirto. | *1.* Xubin kasta oo ka mid ah Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka marka ay gudanayso xilkeeda waa in ay ku shaqeeysaa si waafaqsan Dastuurka, Xeerarka kale ee Jumhuuriyadda Federaalka, midnimada iyo danta Qaranka. | *Faqrdadda 1aad ee asalka dasatuurka waxaa lagu sameeyey dib u eegis farsamo ayadoo lagu soo kordhiyey, si waafaqsan Dastuurka, shuruucda kale iyo midnimada".* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Iyada oo oofinaysa waajibaadka ku cad faqradda (1) ee qodobkan, xubin kasta oo ka mid ah Golaha Shacabka, xil gaar ah ayaa ka saaran matilaadda degaan-codbixiyeyaasha laga soo soo doortay, iyadoon loo eegin siyaasad iyo taageerid xisbiyo kale. | *2.* Xubin kasta oo ka mid ah Golaha shacabka wuxuu xil gaar ah ka saaran yahay matalaadda degaan-doorashada laga soo doortay. | *Faqradda 2aad waxaa laga tagey, "iyadoon loo eegin siyaasad iyo taageerid xisbiyo kale".* |
| (3) Xubin kasta oo ka mid ah Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu xil gaar ahi ka saaran yahay matalaadda danaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ee uu matalayo iyo in uu ilaaliyo nidaamka Federaalka, kuna shaqeeyo dareen iskaashi Federaalnimo. | *3.* Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu xil gaar ahi ka saaran yahay matalaadda danaha Dawlad Goboleedka uu matalayo iyo in uu ilaaliyo nidaamka Federaalka, xoojiyana iskaashiga ka dhaxeeya heerarka dawladaha kuna shaqeeyo dareen qarannimo. | *Faqradda 3aad wax weyn lagama bedelin aan ka ahayn, "dareen iskaashi Federaalnimo" oo lagu bedeley, "dareen qarannimo".* |
| Qodobka 62aad: Guddiyada Wadaagga ee Baarlamaanka Federaalka | | *Waxaa loo raray qodobka 57aad ee soo jeedinta* |
| (1) Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ahi waxa ay dhisan karaan guddiyo wadaag ah oo hawlahooda u fududeeya.<br>(2) Xeer-nidaamiye labada Gole ay wadajir u mariyaan ayaa lagu go'aanminayaa tirada guddiyada iyo habraacyada xil-fulintooda. | | *Asalkii Dastuurka waxab lagama bedelin.* |

| | | |
|---|---|---|
| | **Qodobka 66aad: Xasaanadda iyo Xuquuqda Xubnaha Baarlamaanka Federaalka** | *Waxaa laga soo raray qodobada 70aad iyo 78aad ee dastuurka si labada qodob loo mideeyo* |
| | 1. Xubin Baarlamaan cod iyo ra'yi uu dhiibtay laguma eedayn karo isagoo gudanaya waajibaadkiisa xildhibaannimo. | *Dhamaan faqradaha qodobkan wax lagama bedelin nuxur ahaan balse waxaa lagu sameeyey dib u habeyn farsamo.* |
| | 2. Xubin Baarlamaan lama xiri karo, laguma oogi karo dacwad ciqaabeed lama baari karo oogadiisa ama hoygiisa, lamana basaasi karo, iyadoo aan laga haysan oggolaansho Golaha uu ka tirsan yahay, haddii aan xubinta lagu qaban iyadoo faraha kula jirta dambi ka dhigaya xiritaankiisa khasab. | |
| | 3. Xubin Baarlamaan waxaa lagu soo oogi karaa dacwad aan ahayn mid ciqaabeed iyadoo aan oggolaansho la weydiisan Golahiisa. | |
| | 4. Gunnooyinka iyo daryeelka kale ee ay xaqa u leeyihiin Xubnaha Barlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa laga bixinaya Khasnadda Dhexe ee Xukuumadda Federaalka. | |
| | **Qodobka 67aad: Guddiga Adeegga Baarlamaanka** | *Qodobkaan waxaa laga soo raray cutubka 10aad  Qodobka 111D* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 1. Waxaa jiraya Guddiga Adeegga Baarlamaanka Federaalka, wuxuuna ka kooban yahay 9 xubnood oo ka kala imaanaya Labada Aqal iyo xubin khabiir ah oo ka imaanaysa dadweynaha. Xubnahaas waxay kala noqonayaan:<br>a. Guddoomiyaha Golaha shacabka oo ah guddoominaya Guddiga;<br>b. Guddoomiyaha Aqalka Sare oo noqonaya guddoomiye ku-xigeen;<br>c. Afar xubnood oo laga soo magacaabay Golaha shacabka kuwaasoo ay ugu yaraan ay ka mid yihiin laba haween ah;<br>d. Laba xubnood laga soo magacaabay Golaha Aqalka Sare kaa soo ay midkood tahay haweenay;<br>e. Hal xubin oo ay soo magacaabay Golaha Shacabka oo ah shakhsi khabiir ku ah arrimaha dadweynaha hase yeeshee aan ka mid ahayn xubnaha Baarlamanka Federaalka. | |
| | 2. Xubin ka mid ah Guddiga Adeegga Baarlamaanka waa inuu baneeyaa xafiiska:<br>a. Marka ay dhamaato muddada xileedka Baarlamaanka Federaalka;<br>b. Haddii ay xubin la magacaabay, magacaabistii kala noqodaan Golaha uu ka tirsanaa. | |

| | | |
|---|---|---|
| | 3. Guddiga Adeegga Baarlamanku wuxuu mas'uul ka noqonayaa:<br>a. Diyaarinta qiyaasta kharashyadda Baarlamanka ee sannadkiiba hal mar;<br>b. Diyaarinta kulamada wadajirka ah ee labada Gole;<br>c. La socodka, koontaroolka iyo maareeynta miisaaniyadda iyo kharashaadka ku baxayo adeegyada Baarlamaanka;<br>d. Dejinta siyaasad lagu hormarinayo aqoonta, xirfadda iyo garaadka xubnaha iyo shaqaalaha Baarlamaanka;<br>e. Xallinta aragti kala duwanaanshaha labada Gole haddii ay soo ifbaxaan;<br>f. Qabashada howl- kasta oo kale oo lagu daryeelayo xubnaha iyo shaqaalaha Baarlamaanka. | |
| | 4. Xubinta Guddiga Adeegga Baarlamaanka ee ka imanaya labada aqal waxaa soojeedinaya Guddoonka Aqalka waxaana ansixinaya Golaha uu ka tirsan yahay. | |
| | 5. Labada Xoghaye guud ee labada Gole iyo shaqaalaha xafiisyadooda ayaa waxay kaabayaan Guddiga Adeega Baarlamaanka Federaalka. | |
| *MADAXA LABAAD: GOLAHA SHACABKA* | | |
| Qodobka 63aad: Awoodaha Xeer-dejinta Golaha Shacabka | Qodobka 68aad: Awoodaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka | *Qodobkan 63 iyo 69 ayaa lagu mideeyey* |
| Golaha Shacabku ee Baarlamaanka | 1. Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalku | *Si loo qaabeeyo awoodaha Golaha* |

| | | |
|---|---|---|
| Federaalku wuxuu matilaa dhammaan shacabka Soomaaliya, Awoodda sharci-dejinta ee Golaha shacabku keligii leeyahay waxaa ka mid ah:<br><br>a. Ka-qaybgalka wax ka beddelidda Dastuurka, si waafaqsan Cutubka 15aad;<br><br>b. Ansixinta, wax ka beddelidda iyo diidmada sharciyada la horgeeyo, si waafaqsan Cutubkan iyo Cutubka15aad;<br><br>c. Ka-baaraandegidda sharciyada uu ansixiyo Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka;<br><br>d. U-igmashada Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka awoodaha sharci-dejinta marka laga reebo wax ka beddelidda Dastuurka. | wuxuu leeyahay awoodaha soo socda in:<br>a. Uu Curiyo Xeerar, Ansixiyo, wax-ka-beddelidda ama diidmada hindise sharciyeed la horkeenay si waafaqsan habraaca soo saarida xeer ee ku xusun Dastuurka;<br>b. Ka-qaybgalidda wax-ka-beddelka Dastuurka si waafaqsan habraaca wax-ka-beddelka Dastuurka; iyo<br>c. Ansixinta ama diidmada heshiisyada caalamiga ah, ansixinta ama diidmada heshiisyada xukuumadu gashay iyo ka bixidda heshiis hore | *Shacabka, waxaa la isku daray Qodobada 63 iyo 69 ee Dastuurka KMG ah si hal meel la iskugu keeno awoodha Xeer-dejinta iyo kuwa kale ee Golaha Shacabka.*<br><br>*Dib u habeynta farsamo ka sokow waxaa kale ee is bedely:*<br><br>▪ *Waxaa la tirtiry xarfaha c iyo d maadaama aaney nuxur aysan ku fahdin.*<br>▪ *Waxaa la soo kordhiyey xaraf cusub e, oo ka hadlaya ansixinta iyo xil ka qaadista Garsoorashaayasha*<br>▪ Waxaa lasoo kordhiyey xarafka “e” “Doorashada Guddoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen oo laga soo doorto xildhibaanada Golaha Shacabka si waafqsan Dastuurka Federaalka.”<br>▪ *Sidoo kale waxaa la soo kordhiyey xarafcusub h, oo sheegaya ansixinta heshiisyada caalaalamiga*<br>▪ *Sidoo kale xarafka I, ee ansixinta miisaaniyadda Qaranka.* |

| | | |
|---|---|---|
| | | ▪ *Iyo ansixinta xaalad dagaal iyo mid deg deg ah* |
| | 2. Awoodaha kale waxaa kamid ah:<br>a. La xisaabtanka iyo korjoogteynta hay'adaha Dawladda Federaalka, si loo xaqiijiyo dhaqangalka shuruucda dalka iyo xeerarka Dowladda Federaalka;<br>b. Ansixinta Ra'isul-wasaaraha, Golaha Wasiirada iyo barnaamijka xukuumadda ayagoo siinaya codka kalsoonida si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br>c. Kalsooni kala noqoshada Ra'iisul Wasaaraha, Golaha Wasiirada xubin kamid ah iyo saraakiisha Sare ee Dawladda marka ay gudan waayaan xilkooda;<br>d. Ka-qaybgalka doorashada iyo xil-ka-qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br>e. Doorashada Guddoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen oo laga soo doorto xildhibaanada Golaha Shacabka si waafqsan Dastuurka Federaalka.<br>f. Ka qayb qaadashada ansixinta iyo xilka qaadista Golaha Sare ee Garsoorka, Garsoorayaasha Maxkamadda sare iyo | |

| | | |
|---|---|---|
| | Maxkamadda Dastuuriga;<br>g. Ka-qaybgalka ansixinta iyo xil-ka-qaadista xubnaha Guddiyada iyo Xafiisyada Madaxbannaan si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br>h. U yeeridda iyo weydiinta su'aalo Golaha Wasiirada, xubnaha Guddiyada, Xafiisyada Madaxbanaan iyo saraakiisha Dawladda Federaalka.<br>i. ka qaybqaadashada Ansixinta Miisaaniyada qaranka;<br>j. Ansixinta ama diidmada xaalad degdeg ah si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br>k. Ansixinta ama diidmada xaalad dagaal si waafaqsan Dastuurka;<br>l. Hawl kasta ee kale oo u xilsaaro Dastuurku ama shuruucda kale ee dalka. | |
| Qodobka 64aad: Tirada xubnaha Golaha Shacabka | Qodobka 69aad: Tirada Xubnaha Golaha Shacabka | *Waxba lagama bedelin* |
| Xubnaha Golaha Shacabka waxaa si toos ah, qarsoodi ah, oo madaxbanaani ku dooranaya shacabka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.<br>(1) Tirada xil-dhibaannada caadiga ah ee Golaha Shacabka (Aqalka Hoose) ee | 1. Golaha Shacabka ee Barlamaanka Federaalka wuxuu ka kooban yahay 275 xubnood.<br>2. Tirada guud ee xubnaha Golaha shacabka waa in ay matilaad isu dheellitiran ku yeeshaan dhammaan qaybaha bulshada. | *Faqradda labaad ee doorashada waxaa loo rarey qodob cusub "60aad ee soo jeedinta" oo ka hadlaya doorashada labada gole*<br>*Waxaa lagu sameeyey dib-u-habeyn farsamo.* |

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa laba boqol iyo tobotaan iyo shan (275).<br>(2) Tirada guud ee xubnaha Golaha shacabka waa in ay matilaad isu dheellitiran ku yeeshaan dhammaan qaybaha bulshada.<br>(3) Qof kasta oo noqda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, marka uu xilka banneeyo, wuxuu noqonayaa xildhibaan Golaha Shacaba inta uu nool yahay haddii aan xil-ka-qaadis lagu samayn iyadoo aanay muddadii xil-hayntiisu dhammaan si waafaqsan qodobka 92aad ee Dastuurkan, tirada xildhibaanadana dheeraad ayuu ka yahay. | | *Faqradda 3aad waxaa loo raray Qodobka tirada Xubnha Aqalka sare iyadoo la caddeeyay in Xubinnimada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee dhammaystay xilkiisa uu yahay xubin sharafeed si uu uga duwanaado Xubnaha Caadiga ah ee Golaha Aqalka Sare.* |
| **Qodobka 65aad: Guddoomiyaha iyo Ku-xigeennada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 70aad: Gudoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Shacabka** | ***Waxba lagama bedelin*** |
| (1) Golaha Shacabka, fadhigiisa koowaad oo uu guddoominayo qofka ugu da'da weyn, waa inuu iska dhex doorto Guddoomiye iyo laba (2) Ku-Xigeen.<br>(2) Haddii ay dhacdo waqtiyada qaar in ay | 1. Golaha Shacabku, fadhiyadiisa ugu horreya oo uu guddoominayo qofka ugu da'da weyn, wuxuu iska dhex dooranayaa Guddoomiye iyo labo (2) Ku-Xigeen;<br>2. Xildhibaanada Golaha Shacabku waxay ku | *Guud ahaan waxaa lagu sameeyey dib u habeyn farsamo ayadoon wax laga bedelin nuxurka, balse:*<br>*Faqradda 1aad, "fadhigiisa koowaad" waxaa lagu bedeley,* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| maqanaadaan Guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisu, Goluhu waa in uu mid ka mid ah xubnihiisa u doortaa in uu noqdo shir-gudoomiye ku- meel-gaar ah.<br>(3) Guddoomiyuhu inta uusan qaban xilka waa in uu ka tanaasulo xil kasta oo uu ka hayo xisbi siyaasadeed, waana in uu noqdo dhexdhexaad marka uu gudanayo/gudaneyso xilalkiisa/xilalkeeda.<br>(4) Guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisa waxaa codayn qarsoodi ah ku doorta aqlabiyadda tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka ee Federaalka ah, xilkana kaga qaada codbixinta saddex dalool laba dalool xubnaha Golaha Shacabka Federaalka ah. | dooranayaan Guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisa cod qorsoodi ah habkaan:<br>a. Wareega 1aad musharixii hela 2/3 tirada guud ee xubanaha Golaha Shacabka ayaa guulaysanaya, haddii lawaayo musharax guulaysta, waxaa loo gudbayaa wareega labaad,<br>b. Wareega labaad ee doorashada waxaa usoo gudbaya afarta musharax ee ugu codka badan, murashaxii hela 2/3 ee tirada guud ee xubanaha Golaha Shacabka ayaa ku guuleysanaayo doorashada, haddi lawaayo musharax guulaysta waxaa loo gudbayaa wareeg saddexaad<br>c. Wareega seddexaad waxaa usoo gudbaya labada murashax ugu codka badan wareeggii labaad, waxayna ku kala guulaysanayaan cod hal dheeri ah oo ah 50% +1 ee tirada Guud ee Golaha Shacabka.<br>*2.* Haddii ay dhacdo waqtiyada qaar in ay maqanaadaan Guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisu waxaa shir-gudoominaya Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka ee Golaha Shacabka si ku-meel-gaar ah. | *"fadhiyadiisa ugu horeeya".*<br><br>*Faqradda 2aad waxaa lasoo jeediyey in codka doorashada iyo xil-ka qaadista laga dhigo mid isku mid ah oo ah 2/3 qarsoodina ah.*<br>*Sidoo kale, Faqradda 4aad, waa faqrad cusub oo tilmaamaysa in Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka uu shir guddominayo Golaha hadii uu guddoonku maqan yahay.* |
| | Qodobka 71aad: Shuruudaha Gudoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Shacabka | *Qodob Cusub* |

| | | |
|---|---|---|
| | 1. Waxaa loo dooran karaa Xilka Guddoomiye ama ku xigeenka muwaadin kasta oo buuxiya sharuudaha soo socdo:<br>a. Xildhibaan kamid ah Golaha Shacabka;<br>b. Da'da musharaxa Guddoonka Golaha Shacabka aanay ka yarayn soddon iyo shan sano (35)<br>c. Labadiisa waalid ay yihiin muwaadiniin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>d. Qabin xaas ajnabi ah, horayna u soo guursan.<br>e. In uusan haysan dhalasho dal kale ka hor codsiga.<br>2. Inta uusan qaban xilka, Guddoomiyuhu waa in uu ka tanaasulo xil kasta oo rasmi ah oo uu ka hayo xisbi siyaasadeed, waana in uu noqdo dhexdhexaad marka uu gudanayo xilalkiisa; | *Qodobkaan waxaa nidaaminaya shuruudaha lag arabo guddoonka Golaha shacabka si loo helo musharaxa ku habboon.* |
| | **Qodobka 72aad: Xil-waayiddda Guddoonka Golaha Shacabka** | ***Qodob Cusub*** |
| | 1. Guddoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen waxay xilka ku lumin karaan:<br>a. Geeri;<br>b. Xilgudasho la'aan joogto ah ee dhanka | *Qodobkaan cusub wuxuu qeexa sababa uu ku lumen karo guddonko xilka iyo habka xil-qaadistiisa.* |

| | | |
|---|---|---|
| | jirka ama maskaxda;<br>c. Istiqaalad qoraal ah uuna gudbiyo uuna oggolaado Golaha uu ka tirsan yahay;<br>d. Ku xad gudub Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo Xeer-hosaadka Golaha;<br>2. Guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisa waxaa xilka looga qaadi karaa codeyn qarsoodi ah oo 2/3 tirada guud ee Golaha Shacabka. | |
| Qodobka 66aad: Kal-Fadhiyada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka | | *Waxba lagama bedelin* |
| (1) Golaha Shacabka ee Federaalka ah ee cusub, fadhigiisa koowaad waa inuu ku qabsoomaa soddon (30) maalmood gudahood kaddib marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada guud. Taariikhda fadhiga la qabanayo waxaa goynaya Guddiga Qaranka ee Madax Bannaan ee Doorashooyinka.<br>(2) Golaha Shacabku ee Federaalka ihi waa inuu sannad kasta yeeshaa labo kalfadhi oo caadi ah oo ugu yaraan midkiiba socdo afar (4) bilood.<br>(3) Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka Federaalka ah ayaa lagu xaddidayaa waqtiyada iyo taariikhda kalfadhiyada | | *Qodobkaan waxaa loo raray Qodobka 62aad* |

| | | |
|---|---|---|
| caadiga ah ee Golaha Shacabka iyo xilliyada nasashada.<br><br>(4) Golaha Shacabku wuu yeelan karaa Kalfadhiyo aan Caadi ahayn haddii:<br><br>a. Madaxweynaha Federaalku isugu yeero, ka dib marka uu helo codsi ka yimaada Golaha Wasiirrada;<br><br>b. Guddoomiyaha Goluhu isugu yeero;<br><br>c. Haddii ay codsi qoraal ku weydiistaan ugu yaraan boqolkiiba labaatan (20%) xubnaha Golaha Shacabka ee Federaalku. | | |
| Qodobka 67aad: Kala-dirista Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka | | *Qodobkaan waxaa loo raray Qodobka 63aad* |
| Lama kala diri karo Golaha Shacabka ka hor dhammaadka muddadiisa afarta sano ah marka laga reebo haddii uu Goluhu awoodi waayo in uu ansixiyo golaha wasiirrada iyo barnaamijka Dawlada sida ku xusan qodobka 100aad (c) ee dastuurkan. | | |
| Qodobka 68aad: Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah | Qodobka 73aad: Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah | *Waxba lagama bedelin* |
| (1) Golaha Shacabku ee Baarlamaanka Federaalka ah waa in uu samaystaa | 1. Si waafaqsan Xeerhoosaadka wadajirka ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, Golaha | *Guud ahaan faqradaha qodobkan waxaa lagu sameeyey siiqayn* |

| | | |
|---|---|---|
| xeer-hoosaadkiisa, kaas oo siinaya ka-qaybgal buuxa xubnihiisa.<br>(2) Golaha Shacabku ee Baarlamaanka Federaalka ah wuxuu isu qaybinayaa guddiyo u kala xilsaaran hawlihiisa.<br>(3) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah marka la horkeeno sharci qabyo ah wuxuu u xil-saarayaa guddiga qaabilsan, si uu uga soo baaraandego, talana uga soo jeediyo fadhiga loo dhan yahay ee Golaha.<br>(4) Sharci qabyo ah oo Goluhu diidey dib looguma soo celin karo Golaha ilaa ay ka soo wareegato soddon (30) maalmood maalinta Goluhu diidey.<br>(5) Fadhiyada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah iyo guddiyadiisaba waa inay u furan yihiin dhegeysiga dadweynaha iyada oo maanka lagu hayo mabaadii'da guud ee daahfurnaanta Dawladda. Xeer-hoosaadka Golaha waa inuu qeexo mararka ay lagama maarmaan noqonayso in Golaha Shacabku yeesho fadhiyo ay albaabadu u xiranyihiin. | Shacabka wuxuu sameesanayaa xeer-hoosaadkiisa, kaasoo uu ku nidaaminayo habsami u socodka hawlihiisa.<br>2. Golaha Shacabka wuxuu yeelanaya guddiyo u xilsaaran hawlihiisa<br>3. Fadhiyada Golaha Shacabka iyo guddiyadiisaba waa inay u furan yihiin dhegeysiga dadweynaha ee aan ka ahayn xaaladaha ay lagama maarmaan noqonayso in Golaha Shacabku yeesho fadhiyo ay albaabadu u xiranyihiin oo loogu baahan yahay si loo ilaaliyo xaqa qofka ama danta qaranka kaas oo uu qeexayo xeer-hoosaadkiisu | *ayadoon waxba laga bedelin nuxurka guud.* |

DRAFT

| Qodobka 69aad: Awoodaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah | | *Waxaa looraray qodobka 65aa ee Soojeedinta cusub* |
|---|---|---|
| (1) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah wuxuu leeyahay awood sharci-dejin oo ah:<br>a. Inuu ansixiyo, wax ka beddelo ama diido sharciyada la horkeeno;<br>b. Inu curiyo sharci kasta oo cusub oo aan ka ahayn | | *Fiiri Soojeedinta cusub qodobka 67aad* |
| (2) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka waxaa kale oo uu leeyahay awoodahan dheeriga ah ee soo socda:<br>a. Inuu oggolaado ama diido guddiyada madaxa bannaan ee ra'iisul wasaarahahor-keeno Golaha Shacabka;<br>b. Awoodda la-xisaabtaanka iyo kor-joogtaynta hay'dahaDawladda ee Heerka Qaranka, gaar ahaan dhinaca hubinta dhaqangelinta sharciyada dalka;<br>c. U yeeridda Ra'isul Wasaaraha xubnaha golaha wasiirrada, Gudoomiyayaasha Guddiyada | | *Fiiri Soojeedinta cusub qodobka 67aad ee soojeedinta waxkabaddelka* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Qaranka iyo Xafiisyada Madaxa Bannaan, Mas'uulkastaoo uu u hoggansami waaya u-yeeridda, wuxuu Golaha Shacabku awood u leeyahay inuu dib-u-eegid ku sameeyo xilkiisa;<br>d. Inuu Ra'isul Wasaaraha xubnaha Golaha Wasiirrada iyo barnaamijika xukumadda kalsooni ku siiyo codayn gacan-taag ah ee aqlabiyadda tirada guud ee Golaha Shacabka 50% +1;<br>e. Inuu cod aqlabiyadda tirada guud ee Golaha Shacabka 50% +1 oo gacan-taag ah kalsoonida Golaha Shacabka ugala noqdo Ra'iisul Wasaaraha iyo ku- xigeenka/kuxigeennada Ra'iisul Wasaaraha;<br>f. Doorashada iyo xil-ka-qaadidda Madaxweynaha sida ku cad Dastuurka;<br>g. Hirgelinta muhiimadaha kale ee uu u oggolaadey Dastuurku, si loo hubiyo dhaqan-gelin habboon iyo dib-u-eegid Dastuurka. | | |

DRAFT

| Qodobka 70aad: Xasaanadda Xildhibaannada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka | | *Waxaa loo rarey qodobka 65aad ee soojeedinta wax ka bedelka cusub* |
|---|---|---|
| (1) Xildhibaanka Golaha Shacabka dhibaato kama soo gaari karto fikradda ama codka uu ka hor dhiibto Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah iyo guddiyadiisa.<br>(2) Haddii aan laga haysan oggolaansho Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah, Xildhibaanka laguma qaadi karo dacwad ciqaabeed; lama xiri karo lamana baari karo qof ahaan, hoygiisa ama meeshii kale ee u gaar ah, haddaan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi sharci ahaan khasab ay tahay in laga soo saaro amar qabasho ah. Sidoo kale haddii aan laga helin oggolaansho Golaha Xildhibaanka lama qaban karo, xabsina laguma hayn karo iyadoo la fulinaayo xukun maxkamadeed oo xataa kama dambays ah.<br>(3) Dacwad aan ahayn mid ciqaabeed Xildhibaanka waa lagu furi karaa, iyadoo aan oggolaansho la weydiisan Golaha Shacabka. | | *Waxaa loo rarey qodobka 65aad ee soojeedinta wax ka bedelka cusub* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (4) Sharci gaar ah ayaa qeexaya xasaanadda Xilidhibaanada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka.<br><br>(5) Gunnooyinka iyo daryeelka kale ee ay xaqa u leeyihiin Xildhibannada Golaha Shacabka waxaa laga bixinaya Khasnadda Dhexe ee Xukuumadda Federaalka. | | |
| *MADAXA 3AAD: GOLAHA AQALKA SARE* | | |
| Qodobka 71aad: Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | Qodobka 74aad: Awoodaha Aqalka Sare | *Waxba lagama Bedelin* |
| (1) Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku wuxuu matalaa Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, masuuliyadihiisa sharci-dejintaba waxaa ka mid ah:<br><br>a. Ka qayb qaadashada wax ka beddelidda Dastuurka, si waafaqsan Cutubka 15aad;<br><br>b. Ansixinta, wax ka beddelidda iyo diidmada sharciyada la horkeeno, si waafaqsan Qodobbada 82-83;<br><br>c. Eegidda sharciyada loo igmadey si waafaqsan Qodobbada 82-83; | 1. Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku wuxuu leeyahay awoodo xeerdejin, waxaana kamid ah:<br><br>a. Ansixinta ama wax-ka-beddelidda hindise-sharciyeedyada la horkeenay Golaha sida ku xusan habraaca sharcidejinta ee Dastuurka;<br><br>b. Ka-qaybgalka wax-ka-beddelka Dastuurka si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka; iyo<br><br>c. Ansixinta ama diidmada heshiisyada caalamiga ah;<br><br>2. Awoodaha kale ee Aqalka sare waxaa kamid ah:<br><br>a. Ka-qaygalka doorashada iyo eedeymaha xil-ka-qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda | *Waxaa la soojeediyay in la isku daro awoodaha Golaha Aqalka Sare iyo in la hagaajiyo taxana awoodaha sida ugu haboon. Waxaa dib u hagaajin farsamo lagu sameeyey qodobkan siduu asalka u qornaa waxaana lagu soo kordhiyey faqrado ka hadlaya:*<br><br>▪ *Korjoogteynta Aqalka ee hay'adaha heer federal iyo heer dawlad goboleed*<br>▪ *Ilaalinta midnimada iyo nidaamka federaalka*<br>▪ *Xalinta khilaafaadka heer federaal iyo heer dawlad* |

| | | |
|---|---|---|
| d. Ka qayb qaadashada doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 89aad;<br><br>e. Xil ka qaadida Madaxweynaha si waafaqsan Qodobka 92aad;<br><br>f. Ka qayb qaadashada habraaca ku-dhawaaqista xaalad dagaal si waafaqsan dastuurkan;<br><br>g. Hirgalinta muhiimadaha kale ee uu u oggolaaday Dastuurka si loo hubiyo dhaqangalin habboon iyo dib-u-eegid Dastuurka;<br><br>h. Ka qayb qaadashada habraaca ku dhawaaqa xaalad deg-deg ah si waafaqsan dastuurkan; iyo<br><br>i. Ka qayb qaadashada nidaamka lagu magacaabayo xubnaha soo socda ee ha'aydaha Dawladda ee soo socda si waafaqsan Dastuurkan:<br><br>i. Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka;<br><br>ii. Guddoomiyaha iyo Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuuriga ah; | Federaalka Soomaaliya si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka<br><br>b. Ka qayb qaadashada ansixinta iyo xilka qaadista Golaha Sare ee Garsoorka, Garsoorayaasha Maxkamadda sare iyo Maxkamadda Dastuurka;<br><br>c. Ka qayb qaadashada ansixinta xubnaha Guddiyada iyo Xafiisyada Madax-bannaan si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br><br>d. Ansxinta Taliyaasha Ciidamada iyo safiirada la soo magacaabay<br><br>e. Ansixinta Miisaaniyadda Qaranka<br><br>f. Ka-qayb qaadashada ansixinta xaalad degdeg ah iyo xaalad dagaal si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka<br><br>g. Ilaalinta nidaamka federaalka iyo midnimada qaranka;<br><br>h. Xallinta khilaafaadka soo kala dhexgala hay'adaha Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada iyo Dawlad Goboleedyada dhexdooda;<br><br>i. Hawl kasta ee kale oo u xilsaaro Dastuurku ama Xeerarka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *goboleed*<br>▪ *Ansixinta safiirada iyo taliyaasha ciidamada*<br>▪ *Ansixinta heshiisyada caalamiga ah*<br><br>▪ Ansixinta Miisaaniyadda Qaranka |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| iii. Xubnaha Guddiga Qaranka ee Madax-bannaan ee Doorashooyinka;<br><br>iv. Xubnaha Guddiga Xuduudaha iyo Federaalaynta;<br><br>v. Xubnaha Guddiga Xalinta Khilaafaadka. | | |
| Qodobka 72aad: Tirada Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | Qodobka 75aad: Tirada Xubanaha Golaha Aqalka Sare | *Waxba lagama bedelin* |
| Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxaa si toos ah, qarsoodi ah oo madaxbannaan u dooranaya shacabka Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, tiradoodana waa ugu badnaan konton iyo afar (54) Xildhibaan oo ka imaanaya toban iyo sideed (18) gobol ee Soomaaliya lahayd ka hor 1991kii, iyada oo saldhig looga dhigayo:<br><br>a. Tirada Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka;<br><br>b. Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxay Aqalka Sare ku yeelanayaan xubno tiro isle'eg ah;<br><br>c. Tirada guud ee xubnaha Golaha Aqalka Sare waa in ay matilaad isu | 1. Tirada Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka waa 54 waxayna ka imaanayaan Dawlad Goboleedyada. waxaana laga galayaa wada xaajood siyaasadeed.<br>2. Tirada guud ee xubnaha Golaha Aqalka Sare waa in ay matalaad isu dheellitiran ku yeeshaan dhammaan qaybaha bulshada.<br>3. Qof kasta oo noqda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, marka uu xilka banneeyo, wuxuu xubin sharafeed ka noqonayaa Golaha Aqalka Sare inta uu nool yahay haddii aan xil-ka-qaadis lagu samayn iyadoo aanay muddadii xil-hayntiisu dhammaan si waafaqsan Dastuurkan. | *Tirada iyo qaabka loo qaybsanayo Waxaa la soo jeediyay in wada xaajood siyaasadeed laga galo.*<br><br>*Faqradda 3aadna waa lagu daray, ayadoo laga soo raray qodobkii tirada Xubnaha Golaha Shacabka.* |

| | | |
|---|---|---|
| dheellitiran ku yeeshaan dhammaan qaybaha bulshadu. | | |
| Qodobka 73aad: Guddoomiyaha iyo ku-xigeenada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | Qodobka 76aad: Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenada Aqalka Sare | *Waxba lagama bedelin* |
| Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxaa loo doortaa xilkana looga qaadaa habraac la mid ah kan Guddoomiyaha/Ku Xigeenada Golaha Shacabka. | Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxaa lagu dooranayaa xilkana ku weynayaan shuruudaha iyo habraaca la mid ah kan Guddoomiyaha/Ku Xigeenada Golaha Shacabka. | Waxaa lagu sameeyey dib u habeyn si loo waafajiyo shuruudaha iyo habraacyada guddoonka Golaha Shacabka eek u xusan qodobada 69 ilaa 71 ee soojeedinta cusub. |
| Qodobka 74aad: Kalfadhiyada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | | *Waxaa loo rarey qodob Qodobka 62aad ee labada gole ka dhaxeeya.* |
| (1) Golaha cusub ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, fadhigiisa koowaad waa inuu ku qabsoomaa 30 maalmood gudahood, kaddib marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada guud. Taariikhda fadhiga la qabanayo waxaa goynaya Guddiga Qaranka ee Madax-bannaan ee Doorashooyinka.<br>(2) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waa inuu sannad kasta yeeshaa labo kalfadhi oo caadi ah oo ugu yaraan midkiiba socdo afar (4) bilood. | | *Waxaan ku raacney Asalka Dastuurka*<br>*Isugu yeeritaanka Golaha Aqalka Sare ee uu lahaa Ra'iisul-wasaaraha waxaa la siiyay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya maadaama uu yahay madax Dawladda.*<br>*Waxaa la soo kordhiyey in xubnaha Aqalka Sare ugu yeraan 20% ay soo jeedin karaan kulanka guud ee golaha.* |

| | | |
|---|---|---|
| (3) Xeer-hoosaadka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ayaa lagu xaddidayaa, waqtiyada iyo taariikhda kalfadhiyada caadiga ah ee Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka iyo xilliyada nasashada.<br><br>(4) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka wuu yeelan kara Kalfadhiyo aan Caadi ahayn haddii:<br><br>a. Ra'iisul wasaaraha isugu yeero;<br><br>b. Guddoomiyaha Goluhu isugu yeero;<br><br>c. Haddii ay codsi qoraal ku weydiistaan ugu yaraan laba (2) Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | | |
| **Qodobka 75aad: Xeer-hoosaadka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 77aad: Xeer-hoosaadka Golaha Aqalka Sare** | ***Waxba lagama bedelin*** |
| (1) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku waa in uu samaystaa xeer-hoosaadkiisa, kaas oo ka-qaybgal buuxa siinaya xubnihiisa.<br><br>(2) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu isu qaybinayaa guddiyo u kala xilsaaran hawlihiisa.<br><br>(3) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka | 1. Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku wuxuu yeelanayaa xeer-hoosaad u gaar ah.<br><br>2. Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku wuxuu yeelanayaa guddi hoosaadyo uu ku fuliyo waajibaadkiisa.<br><br>3. Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka | *Waxaan ku raacney Asalka Dastuurka balse faqradda 5aad ayaa waxaa lagu soo darey, " xeer-hoosaadka ayaa tilmaamiya marka ay lagama maarmaan tahay in albaabada loo xiro fadhiyada si loo ilaaliyo xuquuqda qofka ama danaha qaranka."* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Federaalka marka la horkeeno sharci qabyo ah wuxuu u xilsaarayaa guddiga qaabilsan si uu uga soo baaraandego talana uga soo jeediyo fadhiga loo dhanyahay ee Golaha.<br>(4) Sharci qabyo ah oo Goluhu diiday dib looguma soo celin karo Golaha ilaa ay ka soo wareegato soddon (30) maalmood maalinta Goluhu diiday.<br>(5) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka iyo guddiyadiisuba waa inay u furan yihiin dhegeysiga dadweynaha iyada oo maanka lagu hayo mabaadii'da guud ee daahfurnaanta Xukuumadda. | Federaalka marka la horkeeno hindise sharciyeed wuxuu u xilsaarayaa guddiga qaabilsan si uu uga soo baaraandago talana uga soo jeediyo fadhiga loo dhanyahay ee Golaha.<br>4. Sharci qabyo ah oo Goluhu diiday dib looguma soo celin karo Golaha ilaa ay ka soo wareegato soddon (30) maalmood maalinta Goluhu diiday.<br>5. Golaha Aqalka sare ee Baarlamaanka Federaalka iyo guddiyadiisuba waa inay u furan yihiin dhegeysiga dadweynaha iyada oo maanka lagu hayo mabaadii'da guud ee daahfurnaanta; xeer-hoosaadka ayaa tilmaamiya marka ay lagama maarmaan tahay in albaabada loo xiro fadhiyada si loo ilaaliyo xuquuqda qofka ama danaha qaranka. | |
| Qodobka 76aad: Go'aan- qaadashada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | | *Qodobkan waa la tirey* |
| (1) Haddii aan Dastuurku si kale u sheegin, xubin walba oo ka tirsan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ahi waxay yeelaneysaa hal cod.<br>(2) Haddii aan Dastuurku si kale u sheegin, go'aamada Aqalka Sare ee | | *Waxaa la soo jeediyey in la tirtiro faqradaha qodobkan maadaama aaney macno weyn soo kordhinayn lana fahmayo xubin Baarlamaan ay hal cod lee dahay isla markaana go'aanada ay yihiin mar walba kuwo aqlabiya ah.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka Federaalka ihi waxay ku ansaxayaan codad aqlabiyad ah marka loo eego tirada guud ee xubnaha aqalka. | | |
| Qodobka 77aad: Ka-qaybgalka Wasiirrada ee Fadhiyada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | | *Qodobkan waa la tirtirey* |
| (1) Wasiirradu waxay ka soo qayb geli karaan fadhiyada, kana hadli karaan, iyaga oo aan cod ku lahayn. Xeer-hoosaadka Aqalka Sare ee Baarlamaanku Federaalka ah wuxuu oggolaan karaa in kalfadhiyada caadiga ah ay wasiirradu, qoraal ama tiraab, kaga jawaabaan su'aalaha xubnaha.<br>(2) Golaha Aqalka Sare ama Guddiyada Golaha Baarlamaanka Aqalka Sare waa ay u yeeri karaan Ra'iisul Wasaaraha iyo xubnaha Golaha Wasiirrada si ay wax uga weydiiyaan arrimaha xilkooda la xiriira.<br>(3) Golaha Baarlamaanka Aqalka Sare ama Guddiyadiisu waa in ay si qoraal ah ugu | | *Maadaama Aqalka sare uu la xisaabtan ku lee yahay dhamaan heyadaha dawladda qasabna tahay inay yimaadaan fadhiyada Aqalka marka loo baahdo, muhiim ma ahan in lagu sheego dastuurka inay ka qaygalayaan shirarka aqalka. Sidoo kale inay u yeeri karaan golaha wasiirada waa iska cadahay haday la xisaabtamayaan.* |

| | | |
|---|---|---|
| diraan arrimaha ay ugu yeeranayaan ugu yaraan toddobaad ka hor maalinta ay u muddeeyeen. | | |
| Qodobka 78aad: Xasaanadda Xubnaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | | *Waa la rarey Qodbka 65aad ee Madaxa 1aad ee Cutubkaan.* |
| (1) Xubnaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku waxay leeyihiin xasaanad la mid ah tan xubnaha Golaha Shacabka sida ku xusan Dastuurkan.<br>(2) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka lama kala diri karo. | | *Sababaha loo tiray Qodobkaan ayaa ah in lagu mideeyay xasaanadda labada Gole qodobka 65aad ee dib u eegista cusub "Xasaanadda Xubnaha Baarlamaanka Federaalka".* |
| *MADAXA AFARAAD: HABRAACA XEER DEJINTA BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA* | | |
| Qodobka 79aad: Sharci-dejin qabyo ah | | *Waa la tirey qodobkan* |
| (1) Si waafaqsan Dastuurka, habraaca sharci-dejintu waa hindise sharciyeed qabyo ah oo ku saabsan:<br>a. Dib-u-eegidda iyo soo jeedinta wax ka beddelka Dastuurkan dib ugu noqoshada Dastuurkan;<br>b. Qoridda iyo diyaarinta sharci qabyo | | *Qodobkan waxaa loo arakay in laga maarmo sidaa darteed waxaa la soojeediyay in la tiro* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| ah oo cusub oo aan la xiriirin miisaaniyad-sanadeedda;<br>c. Soo-jeedinta sharci-qabyo ah oo cusub oo aan la xiriirin miisaaniyad-sanadeedda;<br>d. Dib-u-eegid sharci hore u jirey. | | |
| (2) Ka doodidda sharci qabyo ah oo la xariira wax ka beddelka Dastuurkan waxay ka billabanayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka.<br>(3) Ka-doodidda sharci kasta oo qabyo ah wuxuu ka bilaaban karaa mid kasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka | | |
| Qodobka 80aad: Curinta sharciyada | Qobobka 78aad: Curinta Xeerarka | *Sharciga waxaa loo baddelay "xeerarka"* |
| (1) Sharci qabyo ah oo heer qaran ah, waxaa curin kara:<br>a. Golaha Xukuumadda; ama<br>b. Ugu yaraan toban (10) xildhibaan oo ka mid ah xubnaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah, marka laga reebo sharci qabyo ah oo la xiriira arrimaha miisaaniyadda sanadlaha ah oo Golaha | 1. Hindise sharciyeed waxaa curin kara labada Gole ee Baarlamaanka.<br>2. Hindise sharciyeed ku saabsan miisaaniyad sanadeedka Xukuumadda Federaalka waxaa curin kara oo keliya Golaha Wasiiradda.<br>3. Dhammaan hindise sharciyeedyada marka laga reebo miisaaniyadda waxaa curin kara oo awood sharciyeed u leh: | *Guud ahaan dib ayaa loo siiqeeyey waxxana loo kala qaybdiyey faqrado ayadoo la soo kordhinay laba farqadood oo kale ah "4 iyo 5" oo tilmaamaya in hindise sharciyeedka ku xusan qodobka 53aad uu ka bilowdo Golaha shacabka halkii arrimaha ku xusan qodobka 54aad sharciyada ay ka bilowdaan Aqalka Sare.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Xukuumadda oo keliyihi curin karo.<br>(2) Sharciyada qabyada ah waxaa Golaha Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah u soo bandhigi kara:<br>a. Ugu yaraan hal wakiil oo ka socda Dowladaha Xubinta ka ah Federaalka; ama<br>b. Guddi kasta oo ka mid ah Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah. | a. Golaha Wasiirada;<br>b. Ugu yaraan toban (10) xubin oo ka mid ah xubnaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka.<br>c. Ugu yaraan toban (10) xubin oo ka mid ah xubnaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka.<br>d. Ugu yaraan xubanaha hal Dowlad-Goboleed; ama<br>e. Guddi kasta oo ka mid ah labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ah.<br>4. Hindise Sharci qabyo ah oo ku saabsan arrimaha lagu qeexay awoodaha xeer-dejinta ee u gaarka ah Baarlamaanka Federaalka sida ku xusan qodobka 53aad, wuxuu ka bilaabanayaa Golaha Shacabka.<br>5. Hindise Sharci oo qabyo ah oo ku saabsan arrimaha lagu qeexay qodobka 54aad, wuxuu ka bilaabanayaa Golaha Aqalka Sare. Hindise sharciyeed u curiyey mid kamid ah labada Aqal, waxaa u ka bilaaban kara isla golihii curiyey<br>6. Golaha Shacabka marka la horkeeno hindise sharciyeed ama qaraar, Guddoomiyaha wuxuu u xil saarayaa guddiga ay khusayso, si uu uga | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | soo baaraandego, talana uga soo jeedidyo fadhi loo dhanyahay ee Golaha<br>7. Xeer qabyo ah oo Goluhu diidey dib looguma soo celin karo Golaha ilaa ay ka soo wareegto sodon (30) maalmood oo ka bilaabanaysa maalinta Goluhu diiday.<br>8. Aqalka curiyey ama uu ka bilowday sharci qabyo ah ayaa u gudbinaya Madaxweynaha Jumhuuriyada Federaalka Soomaaliya si uu u saxiixo, loona faafiyo si rasmi ah | |
| Qodobka 81: Go'aamo Siyaasadeed | Qodobka 79: Xalinta khilaafaadka | *Waxaa loo badalay Xalinta khilaafadka* |
| (1) Labada Aqal ee Baarlamaankuba way curin karaan Sharci.<br>(2) Aqalka Shacabka oo keliya ayaa leh awoodda diidmada sharci qabyo ah.<br>(3) Haddii labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah uu dhex yimaado khilaaf ku saabsan sharci qabyo ah, mid kasta oo ka mid ah labada Aqal ayaa Guddi wadajir ah oo ka kooban labada Aqal | Haddii labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ah uu dhex yimaado khilaaf ku saabsan sharci qabyo ah, Guddoonka labada Gole ayaa u magacaabaya Guddi wadajir ah si uu u xalliyo khilaafaadka iyo in uu labada Gole u soo jeediyo sharci qabyo ah oo la is-waafajiyey. | *Waxaa loo raaray faqrada 1aad ee Asalka dastuurka qodobka ka horeeya qodobkaan.*<br>*Faqradda 2aad waa la tirtiray.*<br>*Nuxurka farqada 3aad waxba lagama baddelin ayaoo lagu sameeyey siiqo toosin.*<br>*Farqada 4aad ee asalka Dastuurka aya la bedeley nuxur ahaan ayadoo* |

| | | |
|---|---|---|
| ugu baaqi kara in uu isku dayo in uu xalliyo khilaafaadka iyo in uu labada Aqal u soo jeediyo sharci qabyo ah oo la is-waafajiyey iyada oo laga duulayo iskaashiga dowladaha ee ay dhigayaan Qodobbada 51aad iyo 52aad.<br>(4) Golaha Shacabka oo keliya ayaa sharci qabyo ah u diri kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, una faafiyo si rasmi ah. | | *uu Madaxweynaha u dirayao sharciga Aqalka uu ka bilowday waxaana looraray Q 77.* |
| **Qodobka 82aad: Hindise sharci qabyo ah oo ka bilawday Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 80aad: Habka Xeer-dejinta ee Golaha Shacabka** | ***Cinwaanka Qodobkan waxaa loo bedeley "Habka Xeer-dejinta ee Golaha Shacabka"*** |
| (1) Golaha Shacabka marka la horkeeno handise sharci qabyo ah waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah sida soo socota:<br>a. Inuu u ansixiyo sharcigaas sida uu yahay ama inuu ansixiyo isagoo wax ka beddelay, markaa loo diro Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka si uu u ansaxiyo;<br>b. In uu diido, kuna wargeliyo Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, isagoo raacinaya sababaha loo | 1. Golaha Shacabka marka la hor keeno hindise sharci si waafqasan faqrada koowaad ee qodobkan, waxaa u furan mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br>a. Inuu u ansixiyo Xeerkaa s sida uu yahay ama inuu ansixiyo isagoo wax ka beddelay kaddibna loo diro Golaha Aqalka Sare si uu u ansixiyo; ama<br>b. In uu diido, kuna wargeliyo cidda marka hore so curisay iyo Aqalka sare, isagoo raacinaya sababaha loo diidey. | *Qodobkaan waxaa lagu sameeyay dib u-eegis farsamo sidoo kalana Qodobkan waxaa lagu soo kordhiyey axkaam badan oo ay kamid tahay:*<br>*-in dhamaan xeerarka qodobka 53aad ku xusan ay ka bilaabmayaan Golaha Shacabka*<br>*- muddo 45 cisho (Aqalka Sare) iyo 90 cisho (Golaha Shacabka) si ay mudaddas gudohood uu go'aan uga gaaro gole walba.* |

| | | |
|---|---|---|
| diidey. | | |
| (2) Marka Aqalka Sare uu soo gaaro sharci qabyo ah oo uu soo ansixiyay Golaha Shacabka, waxaa u furan mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br>a. Inuu u ansaxiyo sida Golaha Shacabku ugu soo gudbiyay sharcigaas ka dibna dib ugu diro Golaha Shacabka;<br>b. In ay ku sameeyaan wax ka beddel iyagoo sababeynaya isbeddeladaa, dibna ugu diraan Golaha Shacabka;<br>c. In ay diidaan una gudbiyaan Golaha Shacabka iyagoo raacinaya sababaha ay u diideen. | | *Fadlan eeg faalada faqrada 1aad* |
| (3) Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise sharci qabyo ah oo u soo ansixiyay Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ihi, waxay u dirayaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, uguna soo saaro faafinta rasmiga ah. | 2. Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise sharciyeed oo uu soo ansixiyay Golaha Aqalka Sare sidii uu Goluhu shacabku ugu gudbiyey, wuxuu u dirayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, uguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah; | *Fadlan eeg faalada faqrada 1aad* |

| | | |
|---|---|---|
| (4) Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise sharci qabyo ah kaasoo uu soo beddelay Aqalka Sare waxaa u furan inuu sameeyo arrimaha soo socda middood:<br><br>a. Inuu oggolaado wax ka beddelkaa lagu sameeyay hindisaha sharciga qabyada ah, ka dibna u gudbiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu Saxiixo uguna soo saaro faafinta rasmiga ah;<br><br>b. Inuu diido isbeddelada la sameeyay uuna ku baal maro go'aanka Aqalka Sare aqlabiyad 2/3 ah marka la eego tirada guud ee xubnaha aqalka, ka dibna uu u diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo uguna soo saaro faafinta rasmiga ah. | 3. Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise sharciyeed uu Golaha Aqalka Sare soo diiday, waxaa u furan muddo 90 cisho gudohood ah inuu sameeyo arrimaha soo socda middood:<br>a. Inuu oggolaado diidmada Aqalka sare uuna wargaliyo ciddii soo curisay hindise sharciyeedka una gudbiyo sababaha diidamada;<br>b. In uu ku buriyo go'aanka Golaha Aqalka Sare aqlabiyad seddex meelood labo (2/3) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka, kaddibna uu u diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo looguna soo Saaro Faafinta rasmiga ah. | *Fadlan eeg faalada faqrada 1aad* |
| (5) Marka Golaha shacabka uu soo gaaro sharci qabyo ah oo uu soo diiday Aqalka Sare, Aqalkaasi wuxu samyn karaa arrimahan midkood:<br><br>a. Inuu uu aqbalo diidmada, sharcigaana uu faraha ka qaado;<br><br>b. In uu ku baal maro diidmaddii | 4. Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise sharciyeed uu Golaha Aqalka Sare wax kaasoo beddelay, waxaa u furan muddo 90 cisho gudohood ah inuu sameeyo arrimaha soo socda middood:<br>a. Inuu oggolaado wax-ka-beddelka lagu sameeyay hindise sharciyeedka una gudbiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah; | *Fadlan eeg faalada faqrada 1aad* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Aqalka Sare aqlabiya 2/3 ah marka la eego tirade guud ee xubnihiisa, ka dibna uu u diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, uguna soo saaro faafinta rasmiga ah. | b. Inuu diido isbeddelada la sameeyay uuna ku buriyo go'aanka Golaha Aqalka Sare aqlabiyad seddex meelood labo (2/3) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka, kaddibna uu u diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo looguna soo Saaro Faafinta rasmiga ah. | |
| **Qodobka 83aad: Hindise Sharci oo Qabyo ah oo ka bilowday Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 81aad: Habka Xeer-dejinta ee Aqalka Sare** | *Cinwaanka Qodobkan waxaa loo baddelay "Habka Xeer-dejinta ee Aqalka Sare".* |
| (1) Markuu Aqalka Sare soo gaaro hindise sharci oo qabyo ah, waxaa u furan inuu sameeyo mid kamid ah, arimaha soo socda:<br>a. Inuu ku ansixiyo sharcigaas sida uu yahay ama isagoo wax ka beddel ay kaddibna u gudbiyo Golaha Shacabka si uu u oggolaado;<br>b. Inuu diido sharcigaas kuna wargaliyo Golaha Shacabka isagoo raacinaya sababaha uu ku diiday. | 1. Markuu Aqalka Sare helo sharci qabya ah sida ku xusan farqadda (1), Aqalka Sare wuxuu qaadi kara mid ka mid ah tallaabooyinka soo socota:<br>a. Inuu aqbalo iyadoo aan wax laga beddelin, ama uu wax kabadelo iyadoo la raacayo go'aan aqlabiyad fudud oo xubnaha joogo, ka dibna loo gudbiyo Golaha Shacabka si loo ansixiyo; ama<br>b. In uu diido kuna wargeliyo curiyaha sababaha loo diiday. | *Qodobkaan waxaa lagu sameeyay dib u-eegis farsamo sidoo kalana Qodobkan waxaa lagu soo kordhiyey axkaam badan oo ay kamid tahay:*<br>*- in dhamaan xeerarka qodobka 54aad ku xusan ay ka bilaabmayaan Aqalka sare*<br>*- muddo 45 cisho (Aqalka Sare) iyo 90 cisho (Golaha Shacabka) si ay mudaddas gudohood uu go'aan uga gaaro gole walba.* |
| (2) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalku marka uu helo hindise sharci oo | 2. Haddii Golaha Shacabku go'aan aqlabiyad fudud ee xubnaha joogo ku oggolaado sharciga qabyada ah oo ay u gudbisay Aqalka | *Fadlan eeg faalada faqrada 1aad ee qodobkaan* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| qabyo ah, kaas oo Aqalka Sare oggolaadey, waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br>a. In uu u oggolaado sharcigaas sida uu ugu soo gudbiyey Aqalka Sare, ka dibna uu u gudbiyo Madaxweynaha Dawlada Federaalka si uu ugu ogolaado, u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga;<br>b. Inuu wax kabeddelo sharcigaas dibna ugu celiyo Aqalka Sare isagoo raacinaya sababaha uu wax ugu beddeley; | Sare, sharcigaas qabyada ah waxaa dib loogu celinayaa Aqalka Sare si Guddoomiyaha Aqalka Sare ugu diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si uu u saxiixo looguna faafiyo Faafinta Rasmiga ah. | |
| (3) Markuu Aqalka Sare soo gaaro hindise sharci qabyo ah, kaas oo uu wax ka beddeley Golaha Shacabku, waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br>a. Inuu aqbalo wax ka beddelidda sharciga qabyada ah, isagoon codayn una gudbiyo Madaxweynaha Dawlada Federaalka si uu u oggolaado, u saxiixo, looguna soo saaro faafinta rasmiga ah;<br>b. Inuu diido wax kabeddelka sharcigaas, | 3. Haddii Golaha Shacabku diido sharci qabyo ah oo uu u gudbiyey Aqalka Sare, Aqalka Sare waxaa muddo 45 cisho gudohood ah u furan mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:<br>a. In la aqbalo diidmada oo lagu wargaliyo curiyaha sababaha loo diiday; ama<br>b. Inuu ku meelmariyo sharciga qabyada ah go'aan 2/3 ah aqlabiyad xubnaha guud ee Golaha, ka dibna u gudbiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo laguna faafiyo Faafinta Rasmiga ah. | *Fadlan eeg faalada faqrada 1aad ee qodobkaan* |

| | | |
|---|---|---|
| kagana gudbo/ku baalmaro go'aanka Golaha Shacabka cod aqlabiyad ah oo 2/3 tirada xubnihiisa ah, dibna ugu celiyo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah. | | |
| (4) Markuu Aqalka Sare soo gaaro hindise sharci qabyo ah, kaasoo uu diiday Golaha Shacabku, waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br><br>a. Inuu aqbalo diidmada sharcigaas isagoon u codeyn, joojiyana hindaha sharciga qabyada ah;<br><br>b. Inuu kaga gudbo/ku-baalmaro diidmada Golaha Shacabka cod aqlabiyad 2/3 tirada xubnaha Aqalka ah, dibna ugu celiyo Golaha Shacabka Federaalka ah. | 4. Haddii Golaha Shacabku go'aan aqlabiyad fudud leh ee xubnuha jooga wax kaga beddelo sharci qabyo ah oo uu u gudbiyay Aqalka Sare, Aqalka Sare muddo 45 cisho gudohood ah wuxuu sameyn karaa mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:<br>a. In uu aqbalo wax ka badalida iyadoo la raacayo go'aan aqlabiyad fudud ee xubnaha jooga, ka dibna sharciga qabyada ah loo gudbiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo laguna faafiyo faafinta rasmiga ah; ama<br>b. In uu diido wax ka badalka iyadoo oo uu ku meelmarinayo 2/3 go'aan aqlabiyad ah ee xubnaha guud ee Golaha, ka dibna u gudbiyo sharciga qabyada ah Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo laguna faafiyo faafinta Rasmiga ah. | *Fadlan eeg faalada faqrada 1aad* |
| (5) Haddii uu Golaha Shacabka soo gaaro hindise sharci qabyo ah, kaasoo uu horay wax uga beddelay, isbeddeladdii | | |

| | | |
|---|---|---|
| uu hore u sameeyayna uu Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku aqbalay, waa in uu Hindisahaa Sharci Qabyada ah u diraa Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, faafinta rasmiga ahna ugu soo saaro.<br>(6) Haddii Golaha shacabka uu soo gaaro Hindise Sharci qabyo ah, kaasoo ay hore wax uga beddeleen ama ay hore u diideen, go'aankooda horena uu baal maray Aqalka Sare, Golaha Shacabku wuxuu sameyn karaa arrimahan midkood:<br>a. In ay ku baal maraan go'aanka Aqalka Sare cod aqlabiyad 2/3 tirada xubnahooda ah, halkaa ayeeyna ku joojin karaan hindisahaa sharci ee qabyada ah;<br>b. In ay aqbalaan go'aanka Aqalka Sare, ka dibna Hindisahaa Sharci ee qabyada ah u gudbiyaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, faafinta rasmiga ahna ugu soo saaro.<br>(7) Haddii ay ku kala aragti duwanaadaan Hindise Sharci qabyo ah Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah marka uu | | *Waxaa loo raray qodobka 79* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| marayo Hindisahaa Sharci heerka lagu qeexay Qaybta 4aad ama 6aad ee qodobkan, Labada Aqal midkood ayaa dalban karaa in la saaro Guddi wadajir ah oo labada aqalba ka kooban si la isugu dayo in la xalliyo khilaafkaa, loona helo Hindise Sharci qabyo ah oo labada aqalba isla waafaqsan yihiin, iyadoo laga duulayo iskaashiga Dawladaha ka dhexeeya sida ku cad Qodobbada 51aad iyo 52aad ee Dastuurkan. | | |
| Qodobka 84aad: Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada | Qodobka 82aad: Kaydinta iyo Faafinta Sharciyada | *Ereyga "Xafidaada" waxaa lagu bedely "Kaydinta"* |
| Kaydka sharciyada Dawladda waxaa mas'uul ka ah xoghayeyaasha Labada Aqal iyo Garyaqaanka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka oo faafinta rasmiga ah ku samaynaya. | 1. Garyaqaanka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka ayaa mas'uul ka ah kaydinta xeerarka Dawladda Fedeaalka ee lagu soo saarayo faafinta rasmiga ah.<br>2. Xoghayayaasha Guud ee labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ayaa masuul ka noqonaya xafidaada iyo kaydinta sharciyada labada Gole. | *Qodobkan waxaa loo qaybiyey laba faqradood oo kala tilmaamaya masuuliyaada Garyaqaanka guud iyo Labada Xoghaye ee labada Aqal.* |
| Qodobka 85aad: Dhaqangelidda Sharciyada | Qodobka 83aad: Dhaqangelidda Xeerarka | *Waxba lagama bedelin* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Hindise sharci qabyo ah wuxuu dhaqan-gelayaa kaddib marka uu maro habraaca sharci-dejinta ee ku xusan qaybtan, Madaxweynaha Jamhuuriyadduna saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga. | 1. Xeer kasta oo uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalku waa in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku saxiixaa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah.<br>2. Haddii uu ku saxiixi waayo muddada kor ku xusan, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa inuu ku soo celiyaa Golihii usoo gudbiyey sharciga ee ansixiyey, marka ay jirto sabab ka mid ah kuwa soo socda:<br>a. Xeerarka oo ka horimaanaya Dastuurka ama shurcuucda kale ee dalka;<br>b. Xeerarka oo aan soo marin habraacyadii loogu talagalay ee ku xusan Dastuurka; ama<br>c. Xeerarka oo ka soo horjeeda danaha qaranka.<br>3. Haddii uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu ku saxiixi waayo 30 maalmood gudahood ama dib ugu soo celin waayo Golihii u soo gudbiyey sabab la'aan, xeerku wuxuu noqonayaa mid dhaqangal ah laguna soo saaro faafinta rasmiga ee Dawladda.<br>4. Haddii Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu soo celiyo xeer si | *Qodobkan si fiican ayaa loo faah-faahshey ayadoo si fiican loo qorey habraaca uu sharci ku dhaqan galayo kuna saxiixayo madaxweynaha ka dib ansixinta Baarlamaanka. Qodobka wuxuu cadeeyey:*<br>▪ *Mudada uu madaxweynaha ku saxiixayo iyo hadduu saxiixi waayo waxa la sameynayo*<br>▪ *In madaxweynaha uu diidi karo iyo sababaha uu ku diidi karo.*<br>▪ *Inuu madaxweynha dib ugu celin karo golihii u soo gudbiyey iyo waxay ka yeelayaan golaha marka uu soo gaaro sharci uu madaxweynaha diidey saxiixiisa.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | waafaqsan Faqradda (2), Gole kasta ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu ku diidayaa saddex meelood labo (2/3) aqlabiyadda tirada guud ee xubnihiisa, Madaxweynaha waa inuu toban iyo shan (15) maalmood gudahood marka la ansixiyo ku saxiixaa xeerkaas, haddiise uu ku guuldaraysto inuu saxiixo xeerkaas wuxuu isla markiiba noqonayaa mid dhaqangal ah. | |
| Qodobka 86aad: Durid Sharci | Qodobka 84aad: Heshiisyada Caalamiga | *Waa Qodob cusub* |
| (1) Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada iyo dhaqangeliddaba waxaa lagu duri karaa oo keliya inuu ka soo horjeedo Dastuurka.<br>(2) Sharci maray shuruudaha ku xusan cutubkan waxaa duri kara:<br>a. Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, asagoo isu dhan ama ergo hal Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ka mid ah;<br>b. Saddax meelood meel ka mid ah xildhibaannada Golaha Shacabka Federaalka; | 1. Baralmaanka Federaalka Soomaaliya waa in u ogaalaada heeshiisyada caalamiga ah ee saameeya difaaca iyo nabadda gobannimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda; heshiisyada ku saabsan siyaassdda, dhaqaalaha, ganacsiga iyo kuwa Dawladda u keenaya mas'uuliyad lacageed.<br>2. Xukuumadu waa in ay u soo gudbisaa Baarlaamanka Federaalka heshiisyada ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkan ugu badnaan 60 maalmood oo ka bilaabaneysa maalinta la saxiixay heshiiska, ayadoo BFS ay waajib ku tahay inuu ku ansixiyo ama ku diido mudo aan ka badneyn 120 maalmood. | |

| | | |
|---|---|---|
| c. Golaha Wasiirrada Federaalka;<br>d. Ugu yaraan toban kun (10,000) oo cod bixiye oo diiwaangashan.<br>(3) Duridda sharci si waafaqsan faqradaha 1 iyo 2 ee qodobkan waxaa la horgeyn karaa go'aanka gaari karta Maxkamadda Dastuuriga ah oo keliya.<br>(4) Haddii Maxkamadda Dastuurigu ay jebiso duriddii sharciga, kharajka ku baxay waxaa bixinaaya dhinacii hindisaha duridda Maxkammadda Dastuuriga hor- keenay.<br>(5) Habraaca loo marayo duridda iyo go'aan-ka- gaarista waa in lagu qeexaa nidaamka garsoorka. | | |

DRAFT

| *CUTUBKA 7AAD*<br>*MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA* | | |
|---|---|---|
| *ASALKA DASTUURKA KMG* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: SABABAHA SOOJEEDINTA WAX-KA-BEDDELKA* |
| CUTUBKA 7AAD: MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA | CUTUBKA 7AAD: MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA | Waxba lagama bedelin |
| Qodobka 87aad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | Qodobka 85aad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | *Waxba lagama baddelin* |
| (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa: | 1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa: | *Faqradda 1aad ee asalka Dastuurka waxaa lagu sameeyay kaabid iyo qaabayn, waxaa "Madaxa JFS" lagu* |

| | | |
|---|---|---|
| a. Madaxa Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;<br>b. Astaanta midnimada qaranka;<br>c. Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka.<br>(2) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federal Soomaaliya wuxuu xilkiisa u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Jamhuuriyadda Federal Soomaaliya | a. Madaxa Dowladda;<br>b. Astaanta midnimada qaranka;<br>c. Ilaaliyaha Dastuurka.<br>2. Madaxawaynaha Jamhuuridda Federaalka Soomaaliya waa in uu u gutaa waajibaadkiisa si waafaqsan Shareecadda Islaamka, Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka. | *bedeley "madaxa Dawladda" sidoo kale "Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka"* waxaa lagu bedeley *"ilaaliyaha Dastuurka".*<br>*Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka ayaa waxaa lagu sameeyay wax ka bedel xagga siiqada ah, iyadoon nuxurkeeda waxba iska bedelin, waxaa lagu kordhiyay "shareecada Islaamka".* |
| **Qodobka 88aad: Shuruudaha u Doorashada Madaxweynennimada ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 86aad: Shuruudaha xilka madaxwaynaha** | *Cinwaanka qodobka waxaa lagu sameeyay qaabayn iyadoon waxba laga badelin nuxurka.* |
| Waxaa loo dooran karaa xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Muwaaddin kasta oo:<br>a. Muwaadin Soomaali, Muslim ah;<br>b. Da'adiisu aanay ka yarayn afartan (40) sano;<br>c. Leh aqoon ama wayo'aragnimo u qalanta xilkaas;;<br>d. Dhimirkiisu dhan yahay; | 1. Waxaa loo dooran karaa Xilka Madaxwaynaha Jamhuuriyaddda Federaalka muwaadin kasta oo buuxiya sharuudaha soo socdo:<br>a. Muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Muslim ah;<br>b. Labadiisa waalid ay yihiin muwaadiniin Jamhuuriyadda Soomaaliya;<br>c. Da'adiisu aanay ka yarayn afartan sano (40) maalinta doorashada;<br>d. Qabin xaas ajnabi ah, horayna u soo guursan. | *Asalka Dastuurka waxaa lagu kordhiyay*<br>*Xarfaha kala aha: b, d, f, g, h, i, k, iyo l,*<br>*Sidoo kale, waxaa lagu kordhiyey axkaam cusub shuruudihii hore u xusna sida: xarafka **c**, ereyga "maalinta doorashada". Xarafka (e) aqoontana waxaa lagu xiray ilaa heer jaamacadeed iyo khibrad* |

| | | |
|---|---|---|
| e. Gelin denbi culus oo ay maxkamadi xukuntay. | e. Aqoontiisa ay gaarsiisantahay heer jaamacadeed iyo waayo-aragnimo hogaamineed oo aan ka yarayn 15 sano.<br>f. Waa in aan lagu aqoon fal mujtamaca dhexdiisa ku xun.<br>g. Maamuus ka qaadis aan horey lagu samayn.<br>h. Waa in uu wadanka dagan yahay marka uu soo gudbinayo musharaxnimadiisa ugu yaraan labo sano oo xiriir ah.<br>i. Dhimirkiisu dhan yahay, horayna aan dhakhtar ugu caddayn xanuun dhimirka ah.<br>j. Gelin fal-dambiyeed culus oo ay ciqaabtiisu gaarsiisantahay 5 sano oo xabsi ah oo ay Maxkamadu ugu xukuntay si kama dambays ah;<br>k. In uusan haysan dhalasho dal kale ka hor codsiga musharaxnimadiisa.<br>l. In uu usoo bandhigaa Guddiga Madax-banaan ee Doorashoyinka Qaranka guud ahaan hantidiiisa oo ayku jirto guurto iyo maguurtaba.<br><br>2. Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka waa in uu xaqiijiyaa in musharaxu buuxiyay shuruudaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, sharciga doorashooyinka iyo shuruucda | *muddo aan ka yarayn 15 sano.*<br><br>*Xarafka "j" waxaa lagu kordhiyay dembi culus oo ay ciqaabtiisu gaarsiisan-tahay 5 sano si kama damabays ahna Maxkamadi ugu xukuntay.*<br><br>*Xarafka "l" usoo bandhiga Guddiga Madax-banaan ee Doorashoyinka Qaranka*.<br><br>*Faqradda 2aad waa mid cusub oo lagu kordhiyay asalka Dastuurka oo dhigaysaa in la xaqiijiyo in uu musharaxu uu buuxiyay shuruudaha kor ku xusan iyo* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | kale ee dalka. | *shuruucda xeerka doorashooyinka dalka.* |
| **Qodobka 89aad: Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 87aad: Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Waxba lagama bedelin** |
| (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waa in ay doortaan labada gole ee Baarlamaanka oo wada fadhiya, waxaana guddoominaya fadhigaa guddoomiyaha golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah.<br>(2) Ugu yaraan saddex meelood labo tirada guud ee gole walba ee Baarlamaanka Federaalku waa inay joogaan u codaynta doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka.<br>(3) Waa in ay murashaxnimadiisa u soo jeediyaan fadhiga labada gole ee Baarlamaanka ugu yaraan labaatan (20) xildhibaan golaha Shacabka ah ama ugu yaaraan hal (1) Dawlad goboleed.<br>(4) Xubnaha golaha Aqalka Sare markii ay u codeynayaan dorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka wuxuu qof kasta leeyahay hal cod. | 1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waxaa dooranaya labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka oo wada fadhiya uuna shir-guddoominayo Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka.<br>2. Ugu yaraan saddex meelood labo (2/3) tirada guud ee Gole kasta ee Baarlamaanka Federaalku waa inay joogaan u codaynta Madadaxeynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.<br>3. Waa in murashaxa ay murashaxnimadiisa u soo jeediyaan fadhiga wadajirka ah ee labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ugu yaraan Labaatan (20) Xildhibaan oo ka tirsan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.<br>4. Murashax kasta ee Madaxweyne waa in uu murashaxnimadiisa u soo bandhigaa Baarlamaanka Federaalka kaas oo ku dooran doona Madaxweynaha habraaca soo socda:<br>a. Codayn xor, xalaal iyo qarsoodi ah.<br>b. Murashaxa wareegga koowaad hela | *Faqradda 1aad waa asalki dastuurka waxba laguma darin.*<br>*Faqradda 2aad waa salki dastuurka waxba laguma kordhin.*<br>*Faqradda 3aad waa asalki dastuurka,hase yeeshee waxaa meesha laga saaray hal dowlad goboleed.*<br>*Faqrada 4aad ee asalka Dastuurka waa la laalay, maadaama aqalka sare uu ka mid yahay Baarlamaanka, waxa wax dooranayana ay yihiin xubnaha Baarlamaanka oo ka kooban* |

| | | |
|---|---|---|
| (5) Murashax Madaxweyne oo kasta waa in uu murashaxnimadiisa gaarsiiyaa Baarlamaanka Federaalka waana in uu barnamijkiisa doorashada u soo bandhigaa Baarlamaanka Federaalka, oo markaa ka dib dooranaya isaga oo la raacaya geeddi-socodkan:<br><br>a. Codeynta doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waa qarsoodi;<br><br>b. Labada gole ee Barlaamanka Federaalka waxay Madaxweyne u dooranayaan murashaxa ku guleeysta aqlabiyad seddax meelood laba, tirada guud ee xubnaha Labada gole ee Baarlamaanka Federaalka ah;<br><br>c. Haddii murashax ku guuleeysan waayo waxaa codayn labaad loo qaadayaa afarta murashax ee ugu cod badan waxaana ku guleeysanayaa Madaxweyninimada Jamhuuriyadda Federaalka murashaxa hela aqlabiyad ah seddax meelood laba codadka tirada guud ee xubnaha labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah; | aqlabiyadda seddax meelood laba meel (2/3) ee tirada guud ee xubnaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ah ayaa noqonaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.<br><br>c. Haddii musharaxna ku guulaysan waayo wareegga koowaad, waxaa ay afarta musharax ee ugu codadka badan u gudbayaan wareegga labaad.<br><br>d. Haddii wareegga labaad uu heli waayo musharaxna aqlabiyadda seddax meelood labo (2/3), waxaa loo gudbayaa wareegga saddexaaad oo ay iskugu soo harayaan labada mushax ee ugu codadka badan.<br><br>e. Waxaana Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya noqonaya musharaxa hela codadka aqlabiyadda (50%+1) Labada Gole ee Baarlamaanka, waxaana lagu dhaarinayaa isla goobta doorashada.<br><br>5. Madaxwaynaha la doortay wuxuu xafiiska kula wareegayaa ugu badnaan 15 cisho guddahood.<br>6. Haddii dib u dhac ku yimaado doorashada Baarlamaanka, Madaxwaynaha xilka haya wuxuu noqonayaa sii-haye, mana qaban karo howlaha soo socda:<br>a. Kuma dhawaaqi karo xaalad dagaal | *labada aqal.*<br><br>*Faqradda 4aad ee wax ka bedelku waa faqradda 5aad ee asalka Dastuurka,nuxur keedana waxba lagama bedelin.*<br><br>*Faqradda 5aad waa mid cusub, waxaana la xadiday mudada xil la wareegidda oo laga dhigay 15* |

| | | |
|---|---|---|
| d. Haddii murashaxna ku guleeysan waayo codbixinta wareegga laabad waxaa codbixin wareeg seddaxaad loo qaadayaa labada murashax ee ugu cod badan waxaana Madaxweynennimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku guuleysanaaya murashaxa hela tirada ugu badan ee codadka guud ee xubnaha labada aqal ee Baarlamaanka. | ama xaalad degdeg ah;<br>b. Kuma dhawaaqi karo Afti dadwayne;<br>c. Waxba kama bedeli karo qaab-dhismeedka hay'addaha dowladda;<br>d. Ma magacaabi karo xilal siyaasadeed iyo kuwa amni; | *maalmood gudahood.*<br><br>*Faqradda 6aad waa mid cusub, waxaana lagu caddeeyay haddii doorashada Baarlamaanku ku dhici weyso waqtigeeda in madaxweynaha talada hayo uu noqonayo sii haye xil, sidoo kale ay ka reeban-tahay in uu ku dhawaaqo xaalad dagaal, mid degdeg, afti dadweyne, wax ka bedel qaab-dhismeedka iyo haykalka dowaldda iyo magacaabista jagooyin siyaasadeed iyo kuwa amniga.* |
| | Qodobka 88aad: Dhaarta Madaxweynaha | Qodobkan waxaa laga soo rarey 96aad ee asalka Dastuurka |
| | Waxaa Madaxweynaha lagu dhaarinayaa goobta doorashada isla marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Federaalka, wuxuuna marayaa dhaartaan:<br><br>*Bismilaah "Anniga oo ah...........................waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan ilaalinayo madax banaanidda, gobonimada, midnimada iyo saraynta sharciga ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, una hoggaansamo Dastuurka iyo* | *Qodobkaan waxaa laga soo raray Qod. 96aad ee asalka Dastuurka, waxaana la gartay in uu halkaan ku haboon-yahay iyadoo lagu kordhiyay in madaxweynaha lagu dhaarinayo isla goobta doorashada kadib marka lagu dhawaaqo natiijada.*<br><br>*Waxaa sidoo kale wax ka bedel xagga siiqada ah lagu sameeyay qaabki dhaarta ee asalka Dastuurka oo kabid lagu sameeyay.* |

DRAFT

| Qodobka 90aad: Xilka iyo Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | Qodobka 89aad: Xilka Madaxweynaha | Waxaa labo qodob laga dhigay qodobka 90aad ee asalka Dastuurka |
|---|---|---|
| Awoodaha iyo xilka Madaxweynaha waxaa ka mid ah:<br>a. Wuxuu ku dhawaaqaa Xaaladda Deg degga ah iyo Xaaladda dagaal, si wafaaqsan sharciga.<br>b. Waa Taliyaha Guud ee Ciidammada Qalabka Sida.<br>c. Wuxuu magacaabaa Taliyeyaasha Ciidammada Heer Federaal iyo ka qaadista xilalkooda, markii ay soo jeediyaan Golaha Wasiirradu.<br>d. Wuxuu magacaabayaa xilka Wasiirka Koowaad wuxuuna xilka ka qaadayaa ama kala dirayaa Xukuumadda Federaalka haddii ay waydo codka kalsoonida Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka, oo ah cod hal-dheeri ah (50%+1).<br>e. Wuxuu xilka ka qaadayaa Wasiirrada, Wasiiru-dawleyaasha, iyo Wasiir-ku-xigeennada, markuu soo jeediyo Wasiirka Koowaad. | Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:<br>a. Wuxuu matalaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.<br>b. Wuxuu ilaaliyaa Dastuurka iyo shuruucda dalka.<br>c. Wuxuu dhowraa Midnimada iyo madaxbannaanida Qaranka.<br>d. Wuxuu furayaa kalfadhiyada caadiga ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, wuxuuna ka warbixiyaa xaaladda dalka iyo hiigsiga mustaqbalka.<br>e. Wuxuu aqoonsadaa, qaabilaa danjireyaasha iyo ergooyinka dublamaasiyadeed.<br>f. Wuxuu bixiyaa billadaha iyo abaalmarinnada qaranka.<br>g. Wuxuu qabtaa xil kasta oo kale ee aan ka hor imaanayn Dastuurku iyo shuruucda kale ee dalka. | *Waxaa asalka dastuurka ee Qododbka 90aad loo qeybiyay Labo Qodob oo kala ah xilka iyo awoodda, oo si gooni ah loo soocay xilalka, halka awoodda lagu sheegay qodob kale.*<br>*Faqradaha g,h, i,m,n, ee asalka Dastuurka ayaa lagu soo koobay qodobkaan ayadoo lagu sameeyay kaabid, saxid iyo siiqeyn hab sharci ah.*<br>*Waxaa kale lagu kordhiyay xilalka ah ilaalinta dastuurka, shuruurcda iyo midnimada iyo madaxbannaanida dalka.*<br>*Waxa uu sidoo kale uu qabtaa xil kasta oo kale ee uu Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalku siiyaan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| f. Wuxuu saxiixaa sharciyada uu soo ansixiyo Baarlamaanka Federaalku, si sharci looga dhigo.<br>g. Wuxuu furaa Golaha Shacabka.<br>h. Wuxuu la hadlaa fadhiga gaarka ah ee Golaha Shacabka sanadkiiba mar.<br>i. Wuxuu la hadli karaa Golaha Shacabka mar kasta oo kale.<br>j. Wuxuu magacaabaa Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga, Maxkamadda Sare iyo Garsooreyaasha kale Heer-Federaal, soo-jeedinta Guddiga Adeegga Garsoorka ka dib.<br>k. Wuxuu magacaabayaa jagooyinka sare ee Xukuumadda Federaalka iyo madaxda ha'adaha Dawladda Federaalka, marka uu soo jeediyo Golaha Wasiirradu.<br>l. Wuxuu magacaabaya jagooyinka danjireyaasha iyo qunsuliyadaha guud, markuu Golaha Wasiirradu soo jeediyo.<br>m. Wuxuu qaabbilaa diblomaasiyiinta shisheeye iyo wakiillada | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| qunsuliyadaha dalalka shisheeye.<br>n. Wuxuu guddoonsiiyaa abaalmarinta Xushmada Qaranka markuu Golaha Wasiirradu soo jeediyo.<br>o. Madaxweynuhu wuxuu kala diri karaa Golaha Shacabka marka ay muddadiisa xilku dhammaato, si doorasho ay u aadaan.<br>p. In uu cafis u fidiyo ama ciqaab ka dhimo dembiilayaal marka uu ka talo-qaato Guddiga Adeegga Garsoorka.<br>q. In uu saxiixo heshiisyada caalamiga ah kadib markii Golaha Wasiirrada soo jeediyo, Golaha Shacabkuna ansixiyo | | |
| | **Qodobka 90aad: Awoodaha Madaxweynaha** | Waxaa labo qodob laga dhigay qodobka 90aad ee asalka Dastuurka |
| | Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa ka mid ah:<br>1. Wuxuu u soo magacaaba Ra'isul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada si waafaqsan habraaca ku xusan Q.102 ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.<br>2. Wuxuu xilka ka qaada Ra'iisul Wasaaraha iyo | *Waxaa qodobkan si gaar ah loogu dhigayaa awoodda Madaxweynaha JFS*<br>*Faqradda 1aad waa mid cusub.*<br>*Faqradda 2aad waa xarafka "d" ee qod. 90aad asalka Dastuurka oo lagu sameeyay kaabid ayadoo* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | Golaha Wasiirada kadiba marka ay kalsoonida kala noqdaan Golaha Shacabka ee Baralamaanka Federaalka Soomaaliya si waafaqsan habraaca ku xusan Qodobka 103 ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.<br>3. Waa Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida.<br>4. Wuxuu ku dhawaaqaa doorasho laga soo hormariyey waqtigeeda marka uu Golaha Shacabku gudan waayo waajibaadkiisa Dastuuriga ah ayadoo la dhowrayo habraaca ku xusan qodobka 63aad ee Dastuurka.<br>5. Wuxuu magacaabaa xilkana ka qaadaa, ka dib soojeedinta Golaha Wasiirada iyo ansixinta Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya xilalka soo socda:<br>a. Danjireyaasha iyo qunsuliyadaha guud;<br>b. Taliyeyaasha Ciidammada Federaalka;<br>c. Guddiyada iyo Xafiisyada Madaxbannaan;<br>d. Xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka;<br>6. Wuxuu u magacaabaa xilkana ka qaadaa Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadda Sare ee Federaalka iyo Xeer Ilaaliyeyaasha Federaalka ka dib soojeedinta Golaha Sare ee Garsoorka iyo ansixinta Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.<br>7. Wuxuu saxiixaa hindise sharciyeedyada uu | *"haddii ay waydo codka …. hal-dheeri ah (50%+1)" lagu bedeley "kadiba marka ……habraaca ku xusan Qodobk 103 ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya".*<br><br>*Faqradda 3aad waa asalka dastuurka ee qod. 90aad (b).*<br><br>*Faqradda 4aad mid cusub oo tilmaameysa inuu madaxweynaha ku dhawaaqo doorasho waqtigeeda laga soo hormariyey.*<br><br>*Faqradda 5aad waa nuxurka faqrado ka mid ah qodobka 90aad ee asalka oo la isku ururshey ayadoo siineysa madaxweynaha awood ah inuu magacaabo xilalkan kadib markey ka soo gudbaan Goleyasha fulinta iyo xeer-jedinta.*<br><br>*Faqradda 6aad waa xarafkii (j) ee* |

| | | |
|---|---|---|
| | ansixiyo Baarlamaanka Federaalka si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka.<br>8. Wuxuu ku diidi karaa saxiixa hindise sharciyeed loo soo gudbiyay habraaca ku xusan Qodobka 82aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.<br>9. Wuxuu saxiixaa heshiisyada caalamiga ah ee uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.<br>10. Wuxuu ku dhawaaqaa xaalad dagaal iyo mid deg deg ah si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka. | *qod. 90aad asalka dastuukra.*<br>*Faqradda 7aad waa xarafkii (f) ee qod. 90aad asalka dastuukra.*<br>*Faqradda 8aad, waa mid cusub oo awood u siineysa madaxweynaha inuu diidi karo saxiixa xeerarka si waafaqsan dastuurka.*<br>*Faqradaha 9aad iyo 10aad waa xaruufta (a)iyo (q) ee qod. 90aad asalka dastuukra.* |
| Qodobka 91aad: Muddada Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | Qodobka 91aad: Muddo Xileedka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | Waxba lagam bedelin |
| Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu xilka haynayaa muddo afar (4) sano ah oo ka bilaabata maalinta xilka loo dhaariyo, sida ku xusan qodobka 96 ee dastuurka. | 1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu xilka haynayaa muddo shan (5) sano ah oo ka bilaabata maalinta xilka Madaxweynaha loo dhaariyo.<br>2. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waxaa la dooran karaa laba muddo xilliyeed oo kaliya. | *Muddada xilka Madaxweynaha waxaa laga dhigay 5 sano, halki ay marki hore ka ahayd 4 sano.*<br>*Faqradda2aad waa mid cusub, waxaana lagu xadiday laba mudo xileed oo kaliya.* |
| Qodobka 92aad: Maxkamadeynta iyo Maamus-Ka-qaadista Madaxweynaha | Qodobka 92aad: Eedaynta iyo Xil-Ka-qaadidda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka | *Dib u hagaajin ayaa lagu sameeyey cinwaanka qodobkan* |

| Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | Soomaaliya | |
| --- | --- | --- |
| (1) Xil-ka-qaadidda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa soo jeedin kara Golaha Shacabka marka lagu eedeeyo khiyaano-qaran, xadgudub culus oo Dastuuri ah ama ku-xad-gudub sharciyada kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | 1. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soo jeedin karaa hindishaha xil-ka-qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya marka lagu eedeeyo mid kamid ah arrimaha soo socda:<br>a. khiyaano-qaran.<br>b. ku xad-gudubka Dastuurka iyo shuruucda kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Faqradda 1aad waxaa la baddelay oo lagusoo kordhiyey in Barlamaanka FS usoo jeedin karo mooshinka Xil-ka-qaadista Madaxweynaha ayadoo la raaciyey sababaha lagu soo eedeyn karo..* |
| (2) Hindisaha xilka-qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waxaa golaha hor-keeni kara ugu yaraan saddex dalool hal dalool (1/3) xubnaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka, Maxkamadda Dastuuriga ayaa galaysa dhageysiga eedeyntu inay sal leedahay. | 2. Khiyaano qaran dastuurka dhexdiisa waxaa loola jeeda:<br>a. Fal kasta oo lagu hor istaagayo ama lagu Baabi'inayo ku dhaqanka iyo sarraynta Dastuurka.<br>b. Falkasta oo lid ku ah gobanimadda, madaxbanaanida iyo midnimadda Qaranka Soomaaliya.<br>c. Daacad u noqoshada, gacan siinta iyo u basaasidda quwado kale. | *Faqradda 2aad waa mid cusub waxaana lagu qeexayaa falka qiyaanada qaran oo ay soo hoosgalayaan falalka ku xusan faqradaha "a, b, c" ee isla faqradda.* |
| (3) Haddii ay go'aamiso maxkamadu inay eedayntu sal sharci leedahay, saddex dalool labo (2/3) ee labada aqal ee Baarlamaanka ayaa Madaxweynaha xilka ka qaadaya. | 3. Hindisaha Soojeedinta eedaymaha Madaxweynaha waxaa Baarlamaanka hor-keeni kara ugu yaraan saddex meelood meel (1/3) xubnaha guud ee Baarlamaanka Federaalka. | *Faqradda 3aad waa faqradda 2aad ee asalka Dastuurka oo nuxur ahaan laga dhigey in 1/3 oo labada aqal ah ay keeni karaan eedeynta Madaxweynaha.* |
| (4) Haddii Madaxweynaha xilka lagaga qaado si waafaqsan faqradaha 1 ilaa 3 ee qodobkan, waxaa xilka madaxweyninimo la wareegaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee | 4. Habraaca go'aan ka gaarista eedeymaha Madaxweynaha ee Baarlamaanka | *Faqradda 4aad waa mid cusub oo ka hadleysa in habraaca eedeynta madaxweynaha uu hogaaminayo oo keliya Guddoomiyaha Golaha* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka Federaalka. | Federaalka waxaa hogaaminaya oo keliya Guddoomiyaha Golaha Shacabka.<br>5. Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu sii gudanayaa waajibaadkiisa shaqo ilaa iyo inta go'aan laga gaarayo eedaymaha lidka ku ah oo aan saamaynayn maamuuska iyo mansabka Madaxweynimadiisa.<br>6. Madaxwaynuhu ma go'aamin karo doorasho ama afti dadweyne inta lagu guda jiro habraaca eedaymaha xil ka qaadistiisa.<br>7. Baarlamaanka Federaalka waa inuu ka doodaa soojeedinta eedeymaha Madaxweynaha muddo aan ka badnayn 30 maalmood oo ka bilaabanaysa maalinta loo gudbiyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka.<br>8. Go'aanka soojeedinta eedeymaha Madaxweynaha waxaa uu ku hirgalayaa codka 2/3 tirada guud ee Xubnaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxayna u gudbinayaan go'aankooda Maxkamadda Dastuurka.<br>9. Go'aanka eedaymaha Madaxweynaha ee Faqradda 8aad ee qodobkan waxa uu la mid-yahay xil ka qaadis, waxaana diidi kara oo keliya Maxkamadda Dastuurka oo dhagaysanaysa eedda, soona saaraysa xukunka. | *Shacabka.*<br><br>*Faqradda 5aad waa mid cusub, waxaana lagu caddaynayaa in inta u socdo habka baarista eedaymaha uu Madaxweynuhu sii gudanayo waajibaadkiisa, sidoo kale aanay taasi wax u dhibayn maamuuskiisa iyo mansabkiisa madaxweynenimo.*<br><br>*Faqradda 6aad waa mid cusub lagu nidaaminayaa waxyaabaha ka reeban madaxweynaha inta uu socdo habraaca eedaymihiisa.*<br><br>*Faqradda 7aad waa mid cusub waxaana lagu faahfaahinayaa muddada ay baaristo soconayso oo dhan 30 maalmood.*<br><br>*Faqradda 8aad waxay caddaynaysaa in marka uu Baarlamaanku ugu cadeeyo 2/3 tirada guud in baarista ay saxtahay ay u gudbinayaa go'aankooda baarista uga soo baxay oo qoraal ahaan Maxkamadda Dastuurka*<br><br>*Faqradda 9aad, wuxuu tilmaamaya dowrka makmadda Dastuurka ee ah burinta iyo dhagaysiga.*<br><br>*Faqradda 10aad waxay* |

| | | |
|---|---|---|
| | 10. Waxaa ay Madaxkamadda Dastuurku dhagaysaneynaa eedeymaha Madaxweynaha waxayna muddo aan ka badnayn 30 maalmood ka bilaabata maalinta Barlamaanka Federaalka usoo gudbiyo ku soo saareysaa xukun noqonaya kama-dambeys.<br>11. Haddii Maxkamadda Dastuurka ay ku hesho madaxweynaha eedeymaha loo soo jeediyey waxaa uu weynayaa xilkiisa. | *caddaynaysaa in haddii Baarlamaanku ku qanco una codeeyo 2/3 tiradiisa guud falka eedaymaha, caddaynta iyo in uu loo gudbiyo Maxkamadda Dastuurka ay taasi la mid xil ka qaadis, waxaana saldhigga arrintaas dhagaysanayaa go'aanna ka soo saaraya Maxkamadda Dastuurka.*<br>*Faqradda 11aad waa mid cusub waxay dhigaysaa in haddii Madaxweynaha lagu helo falka lagu soo eedeeyay in uu weynayo xilkiisa.* |
| Qodobka 93aad: Iscasilaadda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | | *Waxaa la tiray qodobkaan maadaama nuxurkiisa lagu sheegay Qod.92aad ee wax ka bedelka oo lagu uruuriyay nuxurka qodobkaan iyo qodobka 95aas ee asalka dastuurka.* |
| Madaxweynuhu wuxuu u gudbinayaa istiqaaladiisa Barlamaaanka Federaalka, isaga oo marsiinaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah. | | |
| Qodobka 94aad: Ku-simaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | Qodobka 93aad: Ku-simaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | *Waxba lagama bedelin* |

| | | |
|---|---|---|
| (1) Haddii Madaxweynuhu ka maqan yahay dalka ama caafimaad-darro ama sabab kasta oo kale darteed uusan awoodin inuu guto xilkiisa, Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah ayaa xilkiisa sii qabanaya ilaa inta uu Madaxweynuhu xilkiisa dib ugu soo noqonayo.<br>(2) Ku-xigeenka koowaad ee Guddoomiyaha Baarlamaanka ayaa si kumeel gaar ah u haynaya Xilka Guddoomiyaha Baarlamaanka inta uu Guddoomiyaha Baarlamaanku sii hayo xilka Madaxweyninimo | Haddii Madaxweynahu dalka ka maqan yahay, waxaa ku sime ah Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka, haddii uu Guddomiyaha Golaha Shacabka maqan yahayna waxaa xilka qabanaya Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare oo ahaanaya ku simaha xilka Madaxweynaha. | *Faqraddaan waxaa lagu kordhiyay oo keliya in marka uu maqan-yahay guddoomiyaha golaha shacabka oo ah markaas ku simaha madaxweynaha in uu booskiisa galayo xilkana ku-simanimo uu sii haynayo Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka.*<br>*Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waa la tirtiray, maadaama Cutubka Baarlamaanka lagu nidaamiyay cidda ku simo u noqonayso. Guddoomiyeyaasha Labada Aqalka ee Baarlamaanka marka ay maqan-yihiin, halkaana aan looga baahnayn in lagu sheego.* |
| **Qodobka 95aad: Bannaanaanta Xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 94aad: Bannaanaanta Xilka Madaxweynaha** | ***Cinwaanka Qodonkaan waxba lagama bedelin.*** |
| (1) Haddii uu bannaanaado xafiiska Madaxweyne, waxaa qabanaya xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka ilaa laga soo dooranayo Madaxweyne cusub muddo aan ka badnayn soddon (30) maalmood gudahood. | 1. Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ku bannaanaan karaa sababaha soo socda midkood:<br>a. Geeri;<br>b. Istiqaalo qoraal ah oo uu u soo gudbiyo | *Faqradda 1aad waa mid cusub waxaana si kooban loogu sheegay sababaha uu ku bannaan-karo xilka nadaxweynaha,* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Haddii Madaxweynaha uu ku dhaco xanuun aan ka-raysasho lahayn mudo ka badan sadddex bilood oo ay caddeeyeen xeeldheereyaal caafimaad waxaa sharciyan bannaanaanaya xilka xafiiska Madaxweynaha.<br><br>(3) Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka beddelaya Madaxweyne mansabkiisi bannaanaaday sida ku xusan farqadda (2) ee qodobkan waxaa loo maraya habraaca doorashada Madaxweynaha ku xusan ee Qodobk a 89aad ee Dastuurka.<br><br>(4) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka lagu doorto si waafaqsan faqradda (3) ee Qodobkan wuxuu dhamaystiraya muddada xilhaynta ee u harsanayd Madaxweynihii ka horeeyey. | Guddoomiyeyaasha labada Gole.<br><br>c. Haddii uu kala diro Baarlamaanka Federaalka si waafaqsan Q-63aad ee Dastuurka.<br><br>d. Haddii uu u codeeyo 2/3 tirada guud ee Baarlamaanka hindisaha xilka qaadista Madaxweynaha loona gudbiyo Maxkamadda Dastuurka ayna go'aamiso si waafaqsan Qodobka 91aad;<br><br>e. Xilgudasho-la'aan joogta ah ee xilka xafiiska sababo maskaxeed ama jireed awgood oo uu caddeeyay dhakhtar caafimaad;<br><br>f. Haddii Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu xaafiiska ka maqnaado muddo lixdan (60) maalmood oo xiriir ah ama sagaashan (90) maalmood oo teel-teel ah sanad gudahiis.<br><br>2. Haddii xilka Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya uu bannanaado, Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa sii qabanaya xilka illaa iyo inta Madaxweyne laga soo dooranayo, haddii uu maqanyahay Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxaa ku-sime sii-haye noqonaya Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare. | *Faqradda 2aad ee wax ka bedelku waa nuxurki faqradda 1aad ee asalka dastuurka waxaana lagu kordhiyay in guddoomiyaha golaha shacabka uu sii ahaanayo sii-haye, haddii uu maqan-yahay waxaa sii-haye oo ah guddoomiyaha golaha shacabka u sii noqonaya guddoomiyaha aqalka sare.*<br><br>*Faqradda 3aad: waa cusub tahay, waxaana lagu tilmaamay arrimaha Sii-haya Madaxweynuhu uusan qaban Karin.* |

| | | |
|---|---|---|
| | 3. Sii-hayaha Madaxwaynaha ma laha awoodaha soo socdo:<br>a. Ma magacaabi karo xilalka dowladeed ee dhaca awoodda Madaxweynaha.<br>b. Ma bixin karo dalacsiin;<br>c. Ma geli karo heshiisyo caalami ah;<br>d. Ma iclaamin karo afti dadweyne;<br>e. Kuma dhawaaqi karo xaalad dagaal ama xaalad deg-deg ah ogalaansho la'aanta Baarlamaanka.<br>*4.* Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo buuxinaaya xilka bannaanaaday si waafaqsan Faqradaha (1) iyo (2) ee Qodobkan waa in la qabtaa soddon (30) maalmood gudahood laga billaabo maalinta uu xilka baneeyey iyadoo habraaca ku xusan Qodobka 85aad ee Dastuurka.<br>*5.* Madaxweynaha cusub ee la doortay si waafaqsan Faqradda 4aad ee qodobkaan wuxuu dhammaystirayaa muddada ka harsan mudda xilliyeedka madaxweynihii ka-horeeyey. | *Faqradda 4aad waa cusub tahay, waxayna ka hadlaycaddeenaysa in Doorashada lagu qabto 30 maalmood gudahood.*<br><br>*Faqradda 4aad waxaa ay mudeynaysaa doorashada madaxweynaha cusub.*<br><br>*Faqradda 5aad waa cusub tahaywaxayna ka hadleysaa in madaxweynaha cusub uu dhameysanayo mudadii ka dhimaneyd madaxweynihii ka hooreeyey* |
| Qodobka 96aad: Dhaarinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | | *Qodobkaan waxaa loo raray Qodobka 86aad ee wax ka bedelka Dastuurka.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Inta uusan xilka bilaabin, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu Baarlamaanka Federaalka hortiisa ku marayaa dhaar, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, dhaartaas oo ah sidan:<br><br>"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u gudanaayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, dhawrana Dastuurka qaranka iyo shuruucda kale oo dalka u yaalla" | | *Qodobkan waxaa loo rarey Qodobka 86aad.* |

DRAFT

| CUTUBKA 8AAD<br>XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA | | |
|---|---|---|
| *ASALKA DASTUURKA KMG* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: SABABAHA SOOJEEDINTA WAX-KA-BEDDELKA* |
| CUTUBKA 8AAD: LAANTA FULINTA | CUTUBKA 8AAD: XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA | Cinwaanka waxaa loo baddelay "Xukuumadda Federaalka Soomaaliya" |
| Qodobka 97aad: Golaha Wasiirrada | Qodobka 95aad: Golaha Wasiirrada | Cinwaanka Asalkii ayaa loo daayey |
| (1) Awoodda fulinta ee Jamhuuriyadda Federaalka ah waxaa leh Golaha Wasiirrada, waxayna u qabanayaan sida Dastuurka ku tilmaaman.<br><br>(2) Golaha Wasiirradu waa ha'addafulinta maamulka ugu sarraya Dowladda Federaalka, wuxuuna ka kooban yahay Ra'iisul Wasaaraha Ra'iisul-Wasaare ku-xigeen/ku-xigeenno, Wasiirro, Wasiirro-Dawlayaal iyo Wasiirro-ku-Xigeenno.<br><br>(3) Ra'iisul-wasaarahu wuxuu magacaabayaa Ra'iisul Wasaare ku-xigeenno, wasiirro, wasiirro-Dawlayaal iyo wasiirro-ku-xigeeno. Golaha Wasiirrada waa ay ka iman karaan xubin ka mid ah Golaha Shacabka iyo xubin aan ka mid aheyn Golaha Shacabkaba.<br><br>(4) Xil banneeynta jagada Ra'isul Wasaaraha | 1. Awoodda fulinta ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka waxaa leh Golaha Wasiirrada, waxayna ku shaqeynayaan siyaasadda Madaxweynaha.<br><br>2. Golaha Wasiirrada waa hay'adda fulinta ugu sarraysa ee Xukuumadda Federaalka, wuxuuna ka kooban yahay Ra'iisul-wasaare, Ra'iisul-wasaare Ku-xigeen, Wasiirro, iyo Wasiirro-Ku-xigeenno.<br><br>3. Ra'iisul-wasaarahu wuxuu soojeediyaa magacaabidda iyo xil ka qaadidda Ra'iisul Wasaare ku-xigeenka, wasiirrada, iyo wasiir-ku-xigeenada. | *Faqradda 1aad ee qodobkan waxaa la bedeley, "waxayna u qabanayaan sida Dastuurka ku tilmaaman", waxaana lagu bedeley, "waxayna ku shaqeynayaan siyaasadda Madaxweynaha".*<br><br>*Faqradda 2aad waxaa ku xigeenada Ra''isul wasaaraha laga dhigay hal, waxaana laga saarey "wasiiru-dawlayaal".*<br><br>*Faqradda 3aad waxaa lagu baddelay ereyga "Magacabaaya" ereyga "soojeedinayaa" "Xilkana ka qaadayaa", sidoo kale, waxaana meesha laga saarey in xubin.*<br><br>*Faqradda 4aad waxaa lagu daray Qodobka 95aad ee cusub ee ka hadlaysa xil-waayidd xubnnaha* |

| | | |
|---|---|---|
| oo sababaysa dhicitaanka Golaha Wasiiradda, waxay ku imaan kartaa istiqaalad, xil ka qaadid, xil gudasho la'aan iyo geeri. | | *Golaha Wasiirada* |
| Qodobka 98aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Wasiirrada | Qodobka 96aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Wasiirrada | *Cinwaanka qodobkan waxba iskama bedelin* |
| (1) Qofka qabanaaya xilka Xafiiska Ra'iisul-Wasaarahaiyo Ku-xigeenkiisa:<br>a. Waa in aan da'diisaka yaraan afartan (40) sano; iyo<br>b. Waa in Aqoontiisu gaarsiisan tahay heer jaamacadeed.<br>Qofka loo magacaabayo Wasiir ama Wasiir Dawlo ama Wasiir-ku-xigeen:<br>c. Waa inaan da'diisu ka yaraan soddon (30) sano;<br>d. Waa in aqoontiisu gaarsiisan tahay heer jaamacadeed<br>(2) Xubnaha Golaha Wasiirrada muddada ay xilka hayaan, waxaa ka reebban:<br>a. In ay qabtaan xilal kale oo aan ahayn xilka xildhibaannimada Golaha Shacabka; | 1. Waxaa xilka Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka loo magacaabi karaa muwaadin kasta ee buuxiya shuruudaha soo socdo:<br>a. In uu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo muslim ah;<br>b. In Da'diisu aanay ka yarayn Afartan Sano (40).<br>c. In aqoontiisa ay gaarsiisantahay heer jaamacadeed, uuna leeyahay aqoon maamul iyo waayo-aragnimo hogaamineed oo aan ka yarayn 10 sano;<br>d. In uu ka tirsanyahay xisbi siyaasadeed oo lagu diiwaan galiyay hanaan waafaqsan sharciga xisbiyada siyaasadda ee Dalka;<br>e. In labadiisa waalid ay yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed;<br>f. In uusan qabin xaas ajnabi ah, horayna u | *Faqradda 1aad: siiqada ayaa wax laga bedeley balse macnaha isma bedelin. Balse waxaa lagu soo kordhiyey, "In uu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo muslim ah" iyo "uuna leeyahay aqoon maamul iyo waayo-aragnimo hogaamineed oo aan ka yarayn 10 sano". Sidoo kale faqraddan waxaa la soo kordhiyey (d ilaa k) oo shuruudo muhiim ah u yeelaya Ray'iisul wasaaraha sida inuu xisbi ka tirsan yahay, in waalidiintiisa ay Soomaali yihiin, qabin xaas ajnabi ah, lagu aqoon fal mujtamaca ku xun, degan yahay wadanka laba sano, dhimirkiisu dhan yahay, hantidiisa cadeeyo iyo inuusan haysan dhalasho dalka kale.* |

| | | |
|---|---|---|
| b. In ay qabtaan meherad madaxbannaan, hawl ganacsi, maaliyadeed ama warshadeed oo u gaar ah;<br><br>c. In ay iibsadaan ama ijaartaan hanti Dawladeed;<br><br>d. In ay hantidooda ka gadaan ama ka ijaaraan Dawladda. | soo guursan;<br><br>g. In aan lagu aqoon fal mujtamaca dhexdiisa ku xun;<br><br>h. In uu degan yahay wadanka ugu yaraan labo sano oo xiriir ah magacaabistiisa ka hor;<br><br>i. In dhimirkiisu dhan yahay, horayna aan dhakhtar ugu caddayn xanuun dhimirka ah;<br><br>j. In uusan haysan dhalasho dal kale ama uu ka tanasulo ka hor magacaabistiisa.<br><br>k. In uu caddeeyo guud ahaan hantidiiisa guurto iyo maguurtaba;<br><br>2. Waxaa xubin Golaha Wasiirada loo magacaabi karaa muwaadinka buuxiya shuruudo la mid ah kuwa Ra'iisul Wasaaraha marka laga reebo shardiga ku xusan xarafka "J" ee faqradda 1aad ee qodobkan.<br><br>3. Xubnaha Golaha Wasiirrada muddada ay xilka hayaan, waxaa ka reebban:<br><br>a. In ay qabtaan xilal kale ee xafiis dawladeed ama masuuliyad kale;<br><br>b. In ay ku shaqeeyaan xirfad gaar ah ama uu fuliyo hawlo ganacsi gaar ah, mid | *Faqradda 2aad ee qodobkan waxaa tilmaamaya in isla shuruudihii faqradda 1aad laga rabo shuruudaha wasiirada marka laga reebo xarafka "k".*<br><br>*Faqradda Seddexaad waxaa laga dhigay qodob cusub*<br><br>*Faqraddan 4aad (a) waxaa laga reebey in Golaha wasiiradu noqon karaan xildhibaan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | maaliyadeed ama hawlo warshadeed;<br>c. In uu iibsado ama ijaarto hanti Dawladeed; ama uu hantidiisa ka gado ama ka ijaaro Dawladda. | |
| | Qodobka 97aad: Xil-waayid Xubinnimada Golaha Wasiirrada | *Qodob Cusub* |
| | 1. Xubnaha Golaha wasiiradda waxay xilkooda ku waayi karaan:<br>a. Geeri;<br>b. Istiqaalo qoraal ah;<br>c. In qofka maxkamadi ku xukunto in uu masulifay;<br>d. Xilgudasho la'aan joogta ah oo ku yimid sababo maskaxeed ama jireed awgood oo uu caddeeyay dhakhtar caafimaad.<br>e. Haddii uu galo fal khiyaano-qaran, laaluush, ama xad-gudub culus oo Dastuuri ah ama sharuucda kale ee dalka.<br>**2.** Xil banneeynta jagada Ra'isul Wasaaraha oo sababaysa dhicitaanka Golaha Wasiiradda, waxay ku imaan kartaa istiqaalad, xil ka qaadid, xil gudasho la'aan ama geeri. | *Qodobkan wuxuu tibaaxayaa sababaha Golaha Wasiirada ay xilkooda ku weyn karaan oo ay ka mid tahay: geeri, istiqaalo qoraal ah, musalifid in lagu xukumo, xil gudasho la'aan sababo maskaxeed, eedeyn khiyaano qaran iyo ku xadgudub dastuur.* |

DRAFT

| Qodobka 99aad: Xilalka Golaha Wasiirrada | Qodobka 98aad: Waajibaadka Golaha Wasiirrada | *"Xilka" waxaa lagu bedeley "Waajibaadka"* |
|---|---|---|
| Golaha Wasiirradu waxa uu leeyahay awoodaha soo socda:<br>a. Dejinta siyaasadda guud ee Xukuumadda iyo dhaqangelinteeda;<br>b. Ogolaanshaha iyo fulinta xeerarka maamulka, si waafaqsan shuruucda;<br>c. Diyaarinta hindiso sharciyadeed iyo soo-hor-dhigiddooda Golaha Shacabka;<br>d. Diyaarinta miisaaniyad-sannadeedka iyo xisaab-xirkooda;<br>e. Dejinta qorshaha guud oo lagu hormarinaayo dalka;<br>f. Dhaqangelinta shuruucda, sugidda nabadgelyada dalka iyo ilaalinta danaha Dawladda;<br>g. Magacaabidda iyo xil-ka-qaadidda saraakiisha sare ee Dawladda;<br>h. Golaha Wasiirradda waxay soo jeedinayaan magacaabidda/ xil kaqaadidda danjirayaasha, qunsiliyadda guud iyo | Golaha Wasiirradu waxay leeyihiin awoodaha iyo waajibaadyada soo socda:<br>a. Dejinta iyo hirgalinta siyaasadda guud ee Dalka;<br>b. Ansixinta iyo hirgalinta xeerarka maamulka si waafaqsan shuruucda dalka;<br>c. Diyaarinta hindise sharciyadeedyo iyo u gudbinta Baarlamaaanka Federaalka;<br>d. Diyaarinta miisaaniyad-sannadeedka iyo xisaab-xirkeeda;<br>e. Dejinta iyo hirgelinta qorshaha lagu hormarinayo dalka;<br>f. Dejinta iyo fulinta Siyaasad lagu sugayo Amniga Dalka;<br>g. Hirgelinta Xeerarka iyo ilaalinta danaha dalka;<br>h. Soojeedinta magacaabista iyo xil-ka-qaadista Guddiyada iyo Xafiisyada Madaxabannaan si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br>i. Soojeedinta magacaabista iyo xil-ka-qaadista taliyeyaasha Ciidamada Qalabka | *(b) Siiqada ayaa wax laga bedeley.*<br>*(e) waxaa lagu kordhiyey, "hirgelinta".*<br>*(f) waxaa loo kala jabiyey laba qaybood maadaama ay xambaarsan tahay laba arrimood oo muhiim ah.*<br>*Xarfaha (g iyo h) ee asalka dastuurka waxaa la bayaaniyey saraakiisha dawlada xarfaha (h, I ,j,) ee soojeedinta waxkabaddelka Dastuurka.*<br>*Xarfaha "K, l, "waa cusubyihiin, waxayna tilmaamayaan awoodaha Golaha ee heshiisyada caalamiga ah, ku dhawaaqidda xaalada dagaal iyo mid deg deg ah.*<br>. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| diblomaasiyiinta.<br><br>i. Awoodaha kale ee Dastuurka ama shuruucda lagu siiyey. | Sida;<br><br>j. Soojeedinta magacaabista iyo xil-ka-qaadista danjirayaasha, qunsuliyadaha iyo saraakiisha sare ee Xukuumadda Federaalka;<br><br>k. Wada-xaajoodyada heshiisyada caalamiga ah iyo horgeyntooda Baarlamaanka Federaalka si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br><br>l. Soojeedinta ku dhawaaqid xaalad degdeg ah ama mid dagaal si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br><br>m. Soojeedinta ku dhawaaqid xaalad dagaal si waafaqsan Dastuurka;<br><br>n. Qabashada hawlaha kale uu u xilsaaray Dastuurku ama shuruucda dalku. | |
| **Qodobka 100aad. Xilka iyo Awoodda Ra'iisul Wasaaraha** | **Qodobka 99aad: Xilka iyo Awoodaha Ra'iisul-wasaraaha** | ***Cinwaankan waxba lagama baddalin*** |
| a. Awoodaha Ra'iisul Wasaaraha waa:<br><br>a. Madaxa Xukuumadda Federaalka ah;<br><br>b. Magacaabista iyo xil ka qaadista xubnaha Golaha Wasiirrada;<br><br>c. Horgeynta Golaha Shacabka xubnaha Golaha Wasiirrada iyo | Ra'iisul-wasaaraha wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:<br><br>a. Waa Madaxa Xukuumadda Federaalka;<br><br>b. Dejinta iyo fulinta siyaasadda xukuumadda;<br><br>c. Matalaadda Golaha Wasiirradda iyo shir-guddoominta kulamadooda; | *Xarafka a, waxbaba lagama baddelin.*<br><br>*Xarafka (b) waa cusub "Dejinta iyo fulinta siyaasadda xukuumadda,".*<br><br>*Xarafka C waa cusubtahay, waxaana ku cad shir-guddoominta iyo mataalada* |

| | | |
|---|---|---|
| Barnaamijka Xukuumadiisa si ay u siiyaan kalsooni.<br><br>d. In uu qabto hawlaha kale ee loogu loogu xilsaaray Dastuurkan ama sharci kale ee waafaqsan Dastuurkan iyo qiyamkiisa. | d. Soojeedinta Magacaabidda iyo xil-ka-qaadidda xubnaha Golaha Wasiirrada;<br><br>e. Isku xirka hawlaha wasaaradaha, hay'adaha iyo xafiisyada dawladda;<br><br>f. Saxiixidda go'aannada Golaha Wasiirada;<br><br>g. Adkaynta xiriirka iyo Iskaashiga Xukuumadda Federaalka iyo Xukuumadaha Dowlad-goboleedyada;<br><br>h. Horumarinta iyo sare u qaadidda maamul-wanaagga dhammaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br><br>i. Qabashada hawlaha kale uu u xilsaaray Dastuurku ama shuruucda dalku. | *Xarafka d waa xarafkii B ee asalka dastuurka oo siiqadii laga baddelay.*<br><br>*Xarafka C ee asalkii dastuurka waa la tirtiray, waxaana lagu daray awooda madaxweynaha JFS.*<br><br>*Xarafka E, f, g, h, waa xarfoo cusub.*<br><br>. |
| **Qodobka 101aad: Ku-Xigeenka Ra'iisul Wasaaraha** | **Qodobka 100aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Ra'iisul-wasaare Ku-xigeenka** | ***Cinwaanka waxaa lagu soo kordhiyey, "Awoodaha iyo Waajibaadka"*** |
| Ku-Xigeenka Ra'iisul Wasaaraha wuxuu qabtaa xilka Ra'iisul Wasaraha marka uu dalka ka maqan yahay, iyo Xilalka kale uu u igmado Ra'iisul Wasaaraha. | Ra'iisul-wasaare Ku-xigeenka waa sii hayaha xilka Ra'iisul-wasaraha marka uu dalka ka maqan yahay, waxa uu sidoo kale qabtaa howlaha kale uu u igmado Ra'iisul-wasaarahu. | *Qodobkaan siiqada ayaa wax laga bedeley balse nuxurka waa isku mid.* |
| **Qodobka 102aad: Xilka Wasiirka, Wasiir ku-xigeenka iyo Wasiir Dawlaha** | **Qodobka 101aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Wasiirradda iyo Wasiir Ku-xigeennada** | ***Cinwaakan waxaa la tiray "wasiiru-dawlayaal"*** |
| (1) Wasiir kasta wuxuu si shakhsi ah | 1. Wasiir kasta wuxuu si shakhsi ah Masuul uga | *Faqradda 2aad waxaa lagu soo* |

| | | |
|---|---|---|
| Mas'uul uga yahay hawlaha Wasaaraddiisa.<br>(2) Wasiir ku-xigeen kasta wuxuu qabta xilka wasiirka wasaaraddu u igmado.<br>(3) Wasiiru Dawluhu wuxuu qabtaa xil gaar ah oo uu Ra'iisul Wasaaraha. | yahay hawlaha Wasaaraddiisa;<br>2. Wasiir Ku-xigeen kasta wuxuu qabanayaa xilka Wasiirka Wasaaradda uu u igmado iyo in uu matalo wasiirka marka uu maqan yahay;<br>3. Haddii wasiir xilka laga qaado ama uu xilka baneeyo sababo kale awgeed, waxaa xilka sii haynaya wasiirka ku-xigeenka inta laga soo magacaabayo wasiir cusub. | *kordhiyey,* "in uu matalo wasiirka marka uu maqanyaay".<br>*Faqradda 3aad waa la tuurey balse waxaan soo kordhinay in wasiir ku xigeenka uu yahay sii-haye haddii wasiirka xilka baneeyo.* |
| **Qodobka 103aad: Xukuumadda Xil-Gaarsiinta** | **Qodobka 102aad: Xukuumadda Xil-Gaarsiinta** | ***Cinwaankan waa asalkii*** |
| Inta u dhexaysa taariikhda doorashada guud iyo marka Raisul-Wasaare cusub la dhaarin doono, Raisul- Wasaarihii hore ee xilka hayey iyo Golihiisa Wasiirradu waxay sii haynayaan xilka, waxayna u fulinayaan waajibaadka caadiga ah ee Dawlada si xilgaarsiin ah. | 1. Marka xukuumadda xilligeedu dhamaado ama xilka laga qaado Ra'iisul Wasaaraha, Golaha Wasiiradu waxay ahaanayaan xukuumad xil-gaarsiin, waxayna fulinayaan waajibaadkooda caadiga ah.<br>2. Waxaa ka reeban Xukuumadda xil-gaarsiinta arrimaha soo socda:<br>a. Gelida heshiisyo caalami ah ama kuwo wakhti dheer qaadatanaya oo saamaynaya siyaasadda Xukuumada cusub;<br>b. Magacaabida Xilalka sare ee Dowladda<br>c. Soojeedinta waxka bedelka Dastuurka<br>d. Curinta ama soo gudbinta hindise ama | *Faqraddan waxaa lagu sameeyey dib u habeyn yer waxaana lagu soo kordhiyey in Xukuumadda Xil gaarsiinta aaney gaari* (a) heshiisyo iyo wada-xaajood caalami ah; ama(b) soojeeinta ku-dhawaaqid xaalad-dagaal. |

| | | |
|---|---|---|
| | mashruuc sharci<br>e. Go'aano abuuraya qalalaase ama khilaaf siyaasadeed<br>f. Jaangooynta qiimaha badeecadaha, mushaaraadka iyo adeegyada saamaynaya dhaqaalaha Qaranka<br>g. Qabashada afti dadwayne<br>h. soojeeinta ku-dhawaaqid xaalad-dagaal. | |
| Qodobka 104aad: Dhaarta | Qodobka 103aad: Dhaarta Golaha Wasiirradda | *Waxaa lagu kordhiyey "Golaha Wasiirada"* |
| Raisul-Wasaaraha iyo Golihiisa Wasiirradu markay helaan codka kalsoonida inta aysan xilkooda bilaabin, waxa lagu dhaarinayaa kalfadhi gaar ah ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah, waxaana dhaarinaya Gudoomiyaha Maxkamadda sare, dhaartaasina waa sidatan:<br><br>"Waxaanku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u gudanaayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, dhawrana Dastuurka qaranka iyo shuruucda kale oo dalka yaalla" | Ra'iisul-Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada kadib marka ay helaan codka kalsoonida ee Golaha Shacabka, waxaana isla goobtaas ku dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Federaalka, waxayna marayaan dhaarta soo socota:<br><br>*Bismillaahi-Raxmaani-Raxiim*<br><br>*"Aniga oo ah........... waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan ilaalinayo madax banaanidda, gobonimada, midnimada iyo saraynta sharciga ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, una hoggaansamo Dastuurka iyo Sharciyada kale ee dalka inta ay awoodaydu tahay anniga oo markasta ku shaqaynaya danta dalka diinta iyo dadka".* | *Faqraddan dib ayaa loo siiqeeyey, dhaarta asalkana waxbaa laga bedeley.* |

| | Qodobka 104aad: Habraaca Magaccabidda Xubnaha Golaha Wasiirradda | *Waa Qodob cusub* |
|---|---|---|
| | 1. Madaxwynuhu marka uu la tashado xisbiga aqlabiyada ama isbahaysiga xisbiyada wuxuu kusoo magacaabayaa Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka muddo 30 maalmood gudohood oo ka bilaabatay maalinta Madaxweynuhu la doorto ama maalinta booska raysul wasaaruhu bannaanaday, asagoo kasoo magacaabaya:<br>a. Xisbiga aqlabiyadda Baarlamaanka ama;<br>b. Isbahaysiga Axsaabta ee haysta aqlabiyadda Barlmaaanka;<br>2. Waa in Ra'iisul-wasaaruhu soddon (30) maalmood gudahood ku soojeediyaa barnaamijka xukuumadda iyo magacaabidda xubnaha Golaha Wasiirada, kuna horgeeya Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka.<br>3. Golaha Shacabka waxaa uu kalsoonida ku siinayaa Xukuumadda iyo Barnaamijkeeda cod gacan taag aqlabiyad hal dheeri ah (50%+1) ee Xubnaha Golaha Shacabka.<br>4. Haddii Golaha Wasiirada ay heli waayaan codka kalsoonida ku xusan Faqradda (3) ee Qodobkan, waa in madaxweynuhu ku soo magacaa Raysul Wasaare Cusub muddo 15 | *Qodobkan waa cusubyahay wuxuu tilmaamayaa habraaca loo marayo magacaabidda iyo ansixinta (kalsooni siinta) Golaha Wasiirada.* |

| | | |
|---|---|---|
| | maalmood gudahood ah si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkaan;<br>5. Haddii uu mar labaad Golaha Shacabku siin waayo codka kalsoonida, Guddoomiyaha Golaha Shacabka asagoo la tashana Guddoomiyaha Aqalka Sare wuxuu ka codsanayaa Madaxweynaha Jumhuuriyada Federaalka inuu kala diro Barlamaanka uuna ku dhawaaqo doorasho laga soo hormariyey waqtigeeda laguna qabanayo muddo lix bilood gudaheed ah, ayadoo la raacayo qodobka 67aad ee Dastuurka. Madaxweynuhuna wuxuu sii magacaabayaa Raysul-wasaare ilaa iyo inta doorashada laga qabanayo, xukuumadda cusubna laga ansixinayo.<br>6. Haddii ay banaanaadaan in ka badan kala bar xilalka xubnaha Golaha Wasiirradda ee kalsoonida helay, xukuumaddu waxa ay waaysa kalsoonida Golaha Shacabka.<br>7. Haddii lagu sameeyo isku shaandheyn ama magacaabis cusub ee Golaha Wasiirrada, xubinta cusub waa ina la horgeeyaa Golaha Shacbku si ay u siiyaan cod kalsooni ah sida ku xusan farqadda (2). | |
| | **Qodobka 105aad: Codka Kalsooni kala Noqoshada** | ***Waa Qodob cusub*** |

| | Ra'iisul-wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada | |
|---|---|---|
| | 1. Hindisaha kalsooni kala noqoshada Ra'iisul-wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada waxaa soojeedin kara afar meelood meel (1/4) xubnaha Golaha Shacabka<br>2. Guddoonka Golaha Shacabku waa in ay ku horgeeyaan fadhiga guud ee Golaha Shacabka muddo 10 maalmood gudohood oo maalmo shaqo ah si ay uga doodaan Hindisaha Kalsooni kala noqoshada ee lasoo gudbiyey.<br>3. Golaha Shacabka wuxuu ka doodayaa Hindisaha Kalsooni kala noqoshada ugu badnaan muddo 15 maalmood ah ayadoo Xukuumada la siinayo fursad is- difaac.<br>4. Haddii Golaha Shacabka ay cod gacan taag aqlabiyad boqolkii konton hal dheeri (50%+1) tirada guud ee xubnahiisa kala noqdaan kalsoonida Ra'iisul-wasaaraha iyo Golaha Wasiirradda, Madaxweynaha Federaalka wuxuu soo magacaabayaa Ra'iisul-wasaare cusub si waafaqsan habraaca ku xusan faqradda 1aad ee qodobka 103aad. | *Qodobkan waa cusubyahay wuxuu tilmaamayaa habraaca loo marayo magacaabidda iyo ansixinta (kalsooni siinta) Golaha Wasiirada.* |

| CUTUBKA SAGAALAAD: GARSOORKA | | |
|---|---|---|
| *ASALKA DASTUURKA KMG* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: SABABAHA SOOJEEDINTA WAX-KA-BEDDELKA* |
| CUTUBKA SAGAALAAD:<br>AWOODDA GARSOORKA | CUTUBKA SAGAALAAD:<br>GARSOORKA | *Magaca cutubka waxaa lagu sameeyay wax ka bedel, waxaa meesha laga saaray awoodda maadaama qodob gaar ah looga hadli doono awoodda garsoorka, waxaa sidoo kale lagu soo kordhiyay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.* |
| Qodobka 105aad: Awoodda Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | Qodobka 106aad: Awoodda Garsoorka | *Cinwaanka qodobkaan waxba lagama badelin.* |
| (1) Awoodda Garsoorka waxaa u xil saaran Maxkamadaha.<br>(2) Qaab dhismeedka garsoorka waxaa xeer ah kasoo saaraya Baarlamaanka Federaalka. | 1. Dhammaan awoodda Garsoorka iyo Garsooridda waxaa u xil saaran Maxkamadaha.<br>2. Maxkamaduhu waxay fasiraan, ilaaliyaan ayna hirgeliyaan Dastuurka iyo xeerarka Dalka ilaa iyo in ku eg awoodda iyo ikhtisaaska Maxkamad kasta. | *Faqradda 1aad waxaa lagu kordhiyay erayga "Garsooridda" si awoodda garsooridda ay u yeeshaan Maxkamadaha oo keliya.*<br>*Faqradda 2aad waa mid cusub waxayna tilmaamaysaa in Maxkamad kasta ay gelayso ayna fasirayso Dastuurka iyo shuruucda Dalka in ku simad* |

| | | |
|---|---|---|
| | | *ikhtisaaskeeda.* |
| Qodobka 106aad: Madaxbannaanida Garsoorka | Qodobka 107aad: Madaxbannaanida Garsoorka Iyo Garsooreyaasha | *Waxaa lagu kordhiyay erayga "Garsooreyaasha"* |
| (1) Garsoorku wuxuu ka madax bannaan yahay laamaha Dawladda ee Sharci-dejinta iyo Fulinta marka ay gudanayaan xilkooda. Xubnaha garsoorku waxay u hoggaansamayaan oo keliya sharciga.<br>(2) Garsooraha laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa garsoorennimo.<br>(3) Garsooraha lama baari karo qofnimadiisa ama hoygiisa, haddii aan oggolaansho laga haysan Golaha Adeegga Garsoorka. | 1. Garsoorku waxa uu ka madax bannaan yahay laamaha Dawladda ee Xeer-dejinta iyo Fulinta marka ay gudanayaan xilkooda.<br>2. Garsooreyaashu waxay u hoggaansamayaan oo keliya sharciga, waxayna u fulinayaan si dhax-dhaxaad, cabsi la'aan, eex la'aan ah, cid gaar ahna aan loogu daneynayn.<br>3. Go'aamada ka soo baxo Maxkamadaha waxay ku fulayaan dhammaan Dadka iyo Hay'adaha lagu soo saaray.<br>4. Garsooraha laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa garsoorennimo.<br>5. Xubin ka tirsan garsoorka lama xiri karo, lagumana soo oogi karo dacwad ciqaabeed, lamana baari karo oogadiisa ama hoygiisa, lamana basaasi karo, iyadoo aan ogolaansho | *Faqradda 1aad waxaa loo qeybiyay Labo Faqradood, maadaama cinwaanka Qodobka lagu kordhiyay erayga "garsooreyaasha", si loo sugo Madaxbannaanida hay'adda Garsoorka iyo in ay ku ilaaliso hay'adahaha kale ee dowladda ku dhaqanka dastuurka iyo shuruurcda dalka*<br>*Faqradda 2aad waxaa ku jira qeyb ka mid ah nuxurki faqradda 1aad ee asalka Dastuurka, waxaana lagu kordhiyay, erayada "dhax-dhaxaad, cabsi la'aan, ka fog eex, cid gaar ah aan loogu danaynayn", si loo adkeeyay sinnaanta sharciga.*<br>*Faqradda 3aad waa mid cusub* |

| | | |
|---|---|---|
| | laga haysan Golaha Sare ee Garsoorka haddii aan lagu qaban xubinta garsoorka isagoo faraha kula jira dembi ka dhigeya khasab xiritaankiisa.<br><br>6. Garsooraha xilka lagama qaadi karo, lama bedeli karo, howlgabna lagama dhigi karo marka laga reebo xaaladaha Dastuurka iyo xeerka nidaamka Garsoorku tilmaameen. | *waxaana looga gol-leeyahay in loo sinnaado sharciga, loona hogaansamo fulinta go'aanada, amarrada, qaraarada iyo xukunnada ka soo baxa Maxkamadaha.*<br><br>*Faqradda 4aad waa faqradda 2aad ee asalki Dastuurka waxna laguma kordhin.*<br><br>*Farqadda 5aad waa faqradda 3aad ee asalka dastuurka oo lagu sameeyay dib u habeyn habka siiqada ah, hase yeeshee nuxurkeeda waxba lagama bedelin.*<br><br>*Faqradda 6aad waa mid cusub, Sababta loogu soo kordhiyay ayaa ah in aan si fudud ah oo aan sharci ku qotomin loo bedelo Garsoorayaasha, xilkana looga qaado.* |
| Qodobka 107aad: Habka Dacwad Qaadista | Qodobka 108aad: Habka Dacwad Qaadista Maxkamadaha | *Nuxurka cinwaanka waxba lagama bedelin, keliya waxaa lagu kordhiyay erayga "Maxkamadaha" si loo caddeeyo in Maxkamaduhu ay* |

| | | *qaadayaan dacwadaha.* |
|---|---|---|
| (1) Dacwad-qaadistu waxay u furan tahay dhegeysiga dadweynaha, hase yeeshee maxkamaduhu waxay go'aansankaraan in dacwadda lagu dhegeysto qol ka xiran dadweynaha sababo la xiriira anshaxa, nabadgelyada qaranka, badbaadinta markhaatiga, iyo haddii dacwaduhu khuseeyaan dhallaan ama kufsi.<br>(2) Go'aan maxkamadeed lama gaari karo haddii aan la siinin dhinacyada fursado isku mid ah oo ay ku soo bandhigaan doodahooda.<br>(3) Go'aan kasta oo maxkamadeed waa inuu ku qotomo sababo sharciyeed. | 1. Maxkamadaha waxaa u dacwoon kara qof kasta ayadoo aan loo eegin xaaladda dhaqaalahiisa, jirkiisa, qofnimadiisa, jinsigiisa, diintiisa, maqaamkiisa ama duruufihiisa gaarka ah ee kale.<br>2. Dacwad-qaadistu way u furan tahay dhegeysiga dadweynaha, hase yeeshee maxkamaduhu waxay go'aansan karaan in dhageysiga dacwaddu noqoto mid albaabada u xiran yahiin sababaha soo socda midkood:<br>a. Sababo la xiriira nabadgelyada qaranka ama midda guud;<br>b. Sababo la xiriira anshax-wanaagga iyo badqabka;<br>c. Badbaadinta markhaatiga;<br>d. Dacwado khuseeya dhallaan;<br>e. Dacwad la xiriirta tacadiyada haweenka;<br>f. Sabab kasta oo kale oo joojinaysa in dacwadu noqoto mid la buunbuuniyo kadib marka uu qiimeeyo garsooraha dacwadda qaadayo.<br>3. Go'aan maxkamadeed lama gaari karo haddii aan la siinin dhinacyada fursado isku mid ah oo | *Faqradda 1aad waa mid cusub oo ka hadlaysaa in qof kasta uu xaq u leeyahay in uu dacwoodo Maxkamadaha iyadoon loo eegayn duruufaheeda gaarka ah.*<br>*Faqradda 2aad waa faqradda 1aad ee asalka Dastuurka, ayadoo dib loo siiqeeyey laguna soo kordhiyey: "midda guud, anshax wanaagga iyo badqabka, tacadiyada haweenka iyo sababo kale oo uu garsooruhu go'aamin karo".*<br>*Faqradda 3aad waa asalka Dastuurka ee faqradda 2aad, waxbana lagama bedelin.*<br>*Faqradda 4aad waa cusub tahay, waxayna caddeynaysaa in go'aanka maxkamadda aan la daahin sabab la'aan.*<br>*Faqradda 5aad waa asalka* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | ay ku soo bandhigaan doodahooda.<br>4. Go'aanka maxkamadda waa in la soo saaraa oo aan la daahinin haddii aysan jirin sababo maangal ah.<br>5. Go'aan kasta oo Maxkamadeed waa in uu ku qotomo asbaab sharci oo maangal ah, laguna bixiyaa qoraal.<br>6. Go'aanka maxkamadda waa in la ogeysiiyaa dhinacyada, la shaaciyaa lana keydiyaa.<br>7. Go'aan kastoo maxkamadeed waa in uu tilmaamaa inay jirto fursad racfaan qaadasho, marka laga reebo xaaladaha uu sharcigu si kale u sheegay. | *Dastuurka ee Faqradda 3aad waxaana lagu kordhiyay eray "maangal iyo lagu bixiyo qoraal".*<br>*Farqadda 6aad waa mid cusub, waxaana loogu kordhiyay in la ogaysiiyo dhinacyada go'aanka la gaaray, sidoo kale la keydiyo.*<br>*Faqradd 7aad waa mid cusub oo lagu tilmaamayaa in xukun ama go'aan kasta yeesho racfaan si waafaqsan sharciga.* |
| **Qodobka 108aad: Qaabka Maxkamadaha Dalka** | **Qodobka 109aad: Qaab-Dhismeedka Maxkamadaha Dalka** | **Cinwaanka qodobkan waxba lagama badelin** |
| (1) Garsoorka dalku wuxuu noqonayaa sadex Heer oo kala ah:<br>a. Maxkamada Dastuurka;<br>b. Maxkamadaha Heer Dawlad Federaal;<br>c. Maxkamadaha Heerka Dawladaha xubinta ka ah Dawlada Federaalka. Maxkamada ugu saraysa dalka ee Heer Federaal waa Maxkamadda Sare ee Federaalka, iyadoo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyaguna yeelanayaan | 1. Qaab-dhismeedka Maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sida soo socota:<br>a. Maxkamadda Dastuurka oo ah maxkamadda ugu sarreysa awood ahaan iyo ikhtisaas ahaan dhammaan arrimaha dastuuriga ah;<br>b. Maxkamadda Sare ee Federaalka oo ah midda ugu sarreysa Federaalka iyo tan ugu dembeysa ee xagga racfaan qaadashada ee la xiira | *Faqradda 1aad waxa la baddelay nuxurkii Asalka dastuurka. Waxayna sifiican u kal qeexaysaa qaab-dhismeedka Maxkamada Dalka ee Nimdaanka isku dhafka ah:*<br>✓ *Maxkamadda Dastuurka*<br>✓ *Maxkamadda Sare ee Federaalka* |

| | | |
|---|---|---|
| Maxkamad Sare ee heer Dawladaha Xubinta ka ah federaalka oo iyaga u gaar ah. | Xeerarka Federaalka, marka laga reebo arrimaha Dastuuriga;<br>c. Maxkamadaha Sare ee Dawlad Goboleedka xubinta ka ah Dowladda Federaalka waa darajada ugu sarreysa Maxkamadaha Dowlad Goboleedka ee xagga racfaan qaadashada ee Xeerarka Dawlad-gobleedka;<br>d. Maxkamadaha Hoose oo leh awoodda iyo ikhtisaaska dhammaan dacwadaha hoose ee Maxkamadaha ee xeerarka federaalka iyo kuwa dowlad goboleedka;<br>2. Lama abuuri karo hay'ado Garsoor ama Maxkamado aan caadi ahayn iyo kuwa gaar ah Xeer Federaal ah la'aan. | ✓ *Maxkamadda Sare ee heer Dawlad-goboleed.*<br>✓ *Maxkamadaha Darajada 1aad iyo Darajada 2aad.*<br>*Faqradda 2aad waa mid cusub, waxaana la reebayaa in la dhiso maxkamado gaar ah sharci la'aan* |
| **Qodobka 109aad: Habka Hawlqabadka Maxkamadaha Qaranka** | | *Waa la tirtiray,* |
| (1)Maxkamad haddii la horgeeyo dacwad oo ay sharci ahaan dacwadaas quseyso Dawladda Fedraalka oo kaliya, maxkamadaasi waa inay u celisaa dacwadaas maxkamad heer Dawladda Federaal ah.<br>(2)Maxkamad haddii la horgeeyo dacwad oo ay sharci ahaan dacwadaas quseyso arin Dastuuri ah, maxkamadaasi waxay u celin kartaa dacwadaasi maxkamada Dastuuriga si ay uga | | *Qodobka 109aad ee asalka Dastuurka waa la tirey maadaama si faahfaahsan loogu nidaamiyay howl-qabadka Maxkamadaha Qodobada wax ka beddelka ee soo socda, sidoo kale la tilmaamay awoodda iyo ikhtisaaska Maxkamad kasta heer federaal iyo heer dowlad* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| gaarto go'aan:<br>(a) Maxkamad walba oo awood Garsoor lihi wey go'aankartaa in arrini la hor keenay ay tahay mid dastuuri ah iyo in kale, mar haddii aanay ka hor imanayn awoodaha gaarka aah ee Maxkamadda Dastuurka sida kuxusan Qodobka 109C ee Dastuurka;<br>a. Maxkamadda Dastuurka ayaa ah garsooraha kama danbeysta ah ee arrimaha dastuurka;<br>b. Maxkamadda Dastuurka keliya ayaa leh awoodda garsoor ee qeexidda arrimaha dastuurka ee aan ka iman kiisaska maxkamadeed;<br>c. Shakhsi ama koox ama dawladdiba si toos ah ayeey ugu gudbin karaan maxkamadd Dastuurka codsi tixraac ah oo la xiriira arrimaha khuseeya danaha dadaweynaha.<br>(3) Marka laga reebo arrinta lagu xusay faqradaha (1) iyo (2) qodobkan, Baarlamaanku Federaalka wuxuu soo saarayaa sharci faahfaahin buuxda ka bixinaya sida ay u wada falgelayaan maxkamadaha heer Federaal iyo maxkamadaha heerka dawlad goboleedyada Xubanaha ka ah Federaalka. | | *goboleedba.* |

DRAFT

| Qodobka 109A: Golaha Adeegga Garsoorka | | *Waxaa loo guuriyay qodob kale oo isla cutubkaan oo si faahfaahsan loogu sharxi doonno* |
|---|---|---|
| (1) Dastuurkani wuxuu asaasayaa Golaha Adeegga Garsoorka.<br>(2) Golaha Adeegga Garsoorku wuxuu ka koobnaanayaa sagaal (9) xubnood, oo kala ah sida soo socota:<br>a. Garsooraha Sare ee Maxkamadda Dastuurka;<br>b. Garsooraha Sare ee Maxkamadda Sare;<br>c. Garyaqaanka Guud;<br>d. Laba (2) Garyaqaan oo sare oo ka tirsan garyaqaanadda Soomaaliyeed, oo mid walba xilli afar (4) sanno ah ururka garyaqaanadda ay magacaabeen;<br>e. Qofka Guddoomiyaha ka ah Guddiga Xuquuqul Insaanka; iyo<br>f. Saddex (3) qof oo xushmad sare ku dhex leh bulshada rayidka ah oo uu soo jeediyay Golaha Wasiiradu ka dibna uu u magacaabay madaxweynuhu xilli afar (4) sannadood ah.<br>(3) Xubnaha Guddiga Adeegga Garsoorku waxay dhexdooda ka dooranayaan qof u noqda | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka.<br>(4) Xubinta Golaha Adeegga Garsoorku waxay xilka hayn kartaa hal xilli oo shan sannadood ah, oola cusbooneysiin karo mar keliya.<br>(5) Wixii Sharci ama qanuun ay sameystaan Golaha Adeegga Garsoorku), oo khuseeya anshax marinta Garsoorayaasha heer Federaal, wuxuu sharcigaasi sidoo kale qabanayaa xubinta Golaha Adeegga Garsoorka.<br>(6) Sida sharciga ama xeerkuba dhigayo, Golaha Adeegga Garsoorku waa in uu:<br>a. Magcaabaa, anshax mariyaa isla markaana beddelaa xubnaha garsoorka ee Federaalka;<br>b. Go'aamiyaa mushaharka iyo lacagta hawlgabka ee garsoorayaashaa;<br>c. Dejiyaa shuruudaha shaqo ee garsoorkaa. | | |
| Qodobka 109B: Asaaska Maxkamadda Dastuurka | Qodobka 110aad: Maxkamadda Dastuurka | *Qodobkan waxaa la isku daray Qod.109B iyo Qodob109C ee asalka Dastuurka.* |

| | | |
|---|---|---|
| (1) Dastuurkani wuxuu aasaasayaa Maxkamadda Dastuurka oo ka kooban shan (5) garsoore oo uu ku jiro Garsooraha Sare iyo ku xigeenka Garsooraha Sare.<br>(2) Golaha Adeegga Garsoorku, waa in uu u magacaabaa Garsoore Maxkamadda Dastuurka qof daacadnimo sare leh oo keliya, isla markaana si rasmi ah u bartay sharciga iyo Shareecada, khaas ahaanna ku xeel dheer sharciga dastuurka.<br>(3) Golaha Adeegga Garsoorku waa in uu u soo jeediyaa Golaha Shacabka qofka noqonaya Garsoore Maxkamadda Dastuurka.<br>(4) Haddii Golaha Shacbigu ansixiyo magacii la soo jeediyay iyadoo la raacayo faqradda (3) ee Qodobkan, Madaxweynuhu waa in uu u magacaabaa qofkaa Garsoore Maxkamadda Dastuurka.<br>(5) Dhexdooda, garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurku waxay ka dooranayaan Garsooraha Sare iyo ku xigeenka Garsooraha Sare. | 1. Maxkamadda Dastuurka waxay ikhtisaas u leedahay oo kaliya dhegeysiga iyo go'aan ka gaaridda arrimaha ku saabsan Dastuurka Federaalka iyo Dastuurada Dawlad Goboleedyada.<br>2. Xarunta Maxkamaddu waa magaalo Madaxda Dalka, waxayna awood u leedahay in ay ku qaaddo dacwadaha meel kasta oo dalka ka mid ah.<br>3. Maxkamadda Dastuurka waxay ka kooban tahay sagaal (9) garsoore oo uu ku jiro Guddomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka Maxkamadda Dastuurka.<br>4. Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka waxaa lagu soo dooranayaa habka soo socda:<br>a. Golaha Sare ee Garsoorka waxa uu soo jeedinayaa magacaabidda Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo todobo (7) garsoore ee Maxkamadda Dastuurka Federaalka;<br>b. Waxaa Garsoore Maxkamadda Dastuurka loo magacaabayaa qof hufnaan sare leh, kana haysta shahaado Sharciga Jaamacad la aqoonsan yahay oo leh khibrad Garsoorenimo, Qareennimo ama Barenimo Sharci muddo aan ka yareyn 10 sano, kadib waxa uu Golaha Sare | *Faqraddan 1aad waa mid cusub oo ka hadleysa ikhtisaasaadka Maxkamadda Dastuurka.*<br>*Faqradda 2aad waa mid cusub oo ka hadlaysa xarunta Maxkamadda Dastuurka balse siineynsa fursad ah inay meel kasta oo dalka dacwad ka geli karto.*<br>*Faqradda 3aad waa asalka Dastuurka ee faqradda 2aad balse nuxur ahaan waxaa is bedeley tirada garsoorayaasha maxkamadda Dastuurka ayadoo laga dhigey 9 garsoore.*<br>*Faqradda 4aad waxay koobeysaa nuxurka faqradaha 2aad, 3aad, 4aad iyo 5aad ee asalka dastuurka ayadoo ka hadleysa habraaca doorashada garsoorayaasha, sida ay ku imaanayaan Guddoonka, aydoo faah-faahin dheeri ka bixisey shuruudaha xubinta garsooraha loo dooranayo.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | horgeynayaa labada Gole ee Baarlamaanka si ay u ansixiyaan;<br>c. Gole kasta ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu ku ansixinayaa ama ku diidaya xubnaha la soo magacaabay cod hal dheeri ah ee Golaha;<br>d. Markuu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka xubnaha la soo magacaabay, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaaalka Soomaaliya ayaa digreeto ku meel marinaya Garsooreyaasha la soo ansixiyey ee Maxkamadda Dastuurka Federaalka; waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ee Dawladda;<br>5. Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka waxay xilkooda ku waayi karaan:<br>a. Geeri;<br>b. Da'diisa oo gaarta 70 sano;<br>c. Awood darri jireed ama mid maskaxeed oo joogta ah oo lagu caddeeyay baaritaan caafimaad uuna soo xaqiijiyo Golaha Sare ee Garsoorka;<br>d. Istiqaalo Qoraal ah uu ugudbiyo Golaha Saree ee Garsoorka;<br>e. Fal-anshax marin uu go'aamiyo Golaha Sare ee Garsoorka si waafaqsan Dastuurka iyo Xeererka | *Faqradda 5aad waa mid cusub oo ka hadlaysa sababaha ay garsooreyaasha ku waayi karaan xilkooda.*<br><br>*Faqradda 6aad waxaa ay ka hadleysaa awoodaha iyo* |

| | | |
|---|---|---|
| | Dalka;<br>6. Maxkamada Dastuurka waxay leedahaay awoodda iyo ikhtisaaska asalka ah ee soo socda:<br>a. Hubinta iyo xaqiijinta in dhammaan xeerarka, go'aamada maamulka iyo go'aamada Maxkmadaha ay waafaqsanyihiin Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Federaalka;<br>b. Fasiraadda Qodobada Dastuurka Federaalka iyo Dastuurrada Dowlad Goboleedyada;<br>c. Dhagaysiga iyo go'aan ka gaaridda khilaafaadka ka dhaxeeya Laamaha iyo Xubnaha Dawladda Federaalka ah ee la xiriira awoodaha iyo waajibaadka dastuuriga ay kala leeyihiin;<br>d. Dhageysiga iyo go'aan ka gaaridda saldhigga sharci ee eedaymaha Madaxweynaha ee la xiriira fal-dambiyeedyada khiyaamo qaran, ku xad-gudubka Dastuurka iyo Shuruucda Dalka ee uu u soo gudbiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;<br>e. go'aan ka gaaridda dacwadaha la xiriiro dastuurka ee looga soo gudbiyay maxkamadaha caadiga ah;<br>f. Dhageysiga iyo go'aan ka gaaridda khilaafaadka Dastuuriga ee u dhaxeeya Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada ama Dowlad Goboleedyada | *akhtisaasaadka Madxkamadda Dastuurka ayadoo laga soo guuriyey Qod. 109C ee asalka Dastuurka Balse nuxur ahaan wax lagu kobciyey.* |

| | | |
|---|---|---|
| | dhexdooda;<br>g. Go'aan ka gaaridda heshiis kasta ee caalami ah ee ka hor imaanaya Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Qaranimada Soomaaliya;<br>h. Go'aan ka gaaridda dacwadaha la xiriira ku xadgudubka xuquuqaadka Dastuuriga ah;<br>i. Burinta xeeerarka, go'aannada maamul iyo go'aannada maxkamadeed ee aan waafaqsanayn shareecada Islamka iyo Dastuurka;<br>j. Hubinta ansaxnimada hannaanka wax ka bedelka Dastuurka iyo aftida Dadweynaha iyo ku dhawaaqidda natiijada aftida.<br>7. Waxay awood u leedahay in ay ku amarto dhamman hay'adaha dowladda heer federal iyo heer dowlad goboleed fulinta xeerarka, axkaamta iyo go'aanada ee xiriirka la leh xuquuqda aasaasiga ee muwaadinka. | *Faqradda 7aad waa mid cusub oo siiseyna Maxkamadda Dastuurka awoodda amar siinta hay'adaha Dawladda inay fuliyaan go'aanada iyo axkaamta la xiriira xuquuqda aas-aasiga ah ee muwaadinka.* |
| **Qodobka 109C: Awoodaha Maxkamadda Dastuurka** | | *Qodobkan nuxurkiisa waxaa lagu darey Qodobka kore ee dib uu eegista* |
| (1) Maxkamadda Dastuurku waay yeelaneysaa awoodahan u garrka ah:<br>a. Marka uu codsi ka yimaaddo Xubin ka Mid ah Golaha Wasiirada, Guddi ka tirsan aqalada Baarlamaanka midkood, ama toban | | |

| | | |
|---|---|---|
| Xubnood oo ka mid ah Aqalada midkood, in ay Maxkamaddu dib u eegto hindisa sharci, ayna go'aansato in sharcigaasi waafaqsan yahay Dastuurka;<br>b. In Maxkamaddu dhegeysato go'aanna ka gaadho kiis ka soo unkamay sida ku cad Qodobka 86aad, oo la xidhiidha muran ka dhashay sida xeer uu u waafaqsan yahay dastuurka;<br>c. In maxkamaddu dhegeysato, go'aanaka gaadho kiis ka soo unkamay sida ku cad faqradda Qodobeedka 109(2)(c) kaasoo khuseeya in dhinac uu hor keenay maxkamad dood kiis macquul ah, kiiskaana loo gudbiyay Maxkamadda Dastuurka si ay go'aan uga gaadho;<br>d. Inay go'amiso khilaafyada u dhexeeya dawladda federaalka ah iyo dawlad goboleedyada xubinta ka ah dawladda federaalka ah iyo Dawlad goboleedyada federaalka dhexdooda;<br>e. In ay dhegeysato, go'aana ka gaadho Khilaafyada ka dhexeeya waaxaha Dawladda federaalka ah ee la xidhiidhaawoodaha dastuuriga ah iyo waajibaadka ay kala leeyihiin; iyo;<br>f. In ay dhegesato, go'aana ka gaadho Marka la eego Qodobka 92aad oo la xidhiidha kiisaska denbiyada dastuur ee Madaxweynaha lagu soo oogo ee xil ka | | |

| | | |
|---|---|---|
| qaadista keeni kara.<br>(2) Maxkamadda Dastuuriga ah ayaa go'aansan doonta taariikhda ay ka bilaabmi karto hirgelinta marka la gaadho laguna dhawaaqayo in uu sharci yahay wax kama jiraan.<br>a. Haddii sharci loo arko mid aan dastuuri ahayn, marka laga reebo sida ku cad a faqradda (b) ee qaybtan, iyadoo xisaabtana lagu darsanayo saameynta ay ku leedahay taariikhda uu sharcigaasu noqonayo wax kama jiraan, dadka daneynaya arrinta iyo guud ahaan danaha bulshoba, waxay maxkamaddu go'aansan kartaa in sharcigaasi uu yahay waxba kama jiraan ilaa markii la sameeyay,ama taariikhda ka bilaabanta markii xukunku dhacay ama, si ay haboon tahay marka wax kama jiraanimada sharcigu bilaabmayo, taariikh mustaqbalka ah loo qabto.<br>b. Haddii arrintu ku lug leedahay sharci dembiyeed, haddii in sharcigaa wax kama jiraankiis laga bilaabo markii la sameeyay, haddii arrintaasi u faa'iideyneyso qof lagu xukumay sharcigaa aan dastuuriga ahayni, waa in ay Maxkamadda Dastuurka waqtigaa isaga ah ka soo bilowdaa wax kama jiraanimadiisa. | | |

DRAFT

| | Qodobka 111aad: Maxkamadda Sare ee Federaalka | *Waa qodob cusub* |
|---|---|---|
| | 1. Maxkamadda Sare ee Federaalka ayaa ugu sarreysa Garsoorka JFS, uguna dembaysa xagga racfaan-qaadashada marka laga reebo arrimaha dastuuriga ah.<br>2. Maxkamadda Sare ee Federaalka waxay ka koobantahay, Guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeen iyo sagaal (9) Garsoore.<br>3. Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Federaalka waxaa lagu soo xulayaa habka soo socda:<br>a. Golaha Sare ee Garsoorka waxa uu soo jeedinayaa magacaabista Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo sagaal (9) garsoore ee Maxkamadda Sare Federaalka;<br>b. Waxaa Garsoore Maxkamadda Sare loo magacaabayaa qof hufnaan sare leh, kana haysta shahaado Sharciga Jaamacad la aqoonsan yahay oo leh khibrad Garsoorenimo, Qareennimo ama Barenimo Sharci muddo aan ka yareyn 10 sano;<br>c. Marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaaalka Soomaaliya ayaa si rasmi ah u ugu soo saaraya xeer Madaxweyne, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ee Dawladda; | *Faqradaha Qodobkaan dhammaantood waa kuwa cusub, waxaana si dhammaystiran loogu faahfaahiyay awoodda iyo ikhtisaaska Maxkamadda Sare ee Federaalka, waxaa sidoo kale caddeeyay tirade garsooreyaashada iyo habka lagu magacaabayo iyo shruudaha looga baahan-yahay.* |

| | | |
|---|---|---|
| | 4. Garsooraha Maxkamadda Sare ee Federaalka waxa uu xilkiisa ku weyn karaa siyaabaha soo socda:<br>a. Geeri;<br>b. Da'diisa oo gaarta 70 sano;<br>c. Awood darri jireed ama mid maskaxeed oo joogta ah oo lagu caddeeyay baaritaan caafimaad uuna soo xaqiijiyo Golaha Sare ee Garsoorka;<br>d. Istiqaalo Qoraal ah uu ugudbiyo Golaha Saree ee Garsoorka;<br>e. Fal anshax-marin uu go'aamiyo Golaha Sare ee Garsoorka si waafaqsan Dastuurka iyo Xeererka Dalka;<br>5. Maxkamadda Sare ee Federaalka waxay awood iyo ikhtisaas asal ah u leedahay:<br>b. waxay fasiirtaa qodobada xeerarka iyo dhawridda hirgalintiisa gaar ahaan qodobada ay ka taagan tahay kala duwanaansho fasiraad xeer oo asaasi ah;<br>c. waxay dhagaysataa, go'aanna ka gaarta dhammaan Racfaanada laga soo qaato xukunnada, go'aamada iyo qaraarada ka soo baxa Maxkamadaha Hoose ee la xiriira xeerarka federaalka;<br>d. waxay go'aan ka gaartaa khilaafka dhinaca xuduudaha iyo awoodaha ee ka dhexdhaca Maxkamadaha Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka; | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | e. Waxay dhagaysataa go'aanna ka gaarta dacwadaha la xiriira magacaabidda jagooyinka Dawladda ee heer Federaal;<br>f. Waxay go'aan ka gaartaa go'aamada dhammaadka ah ee hay'adaha dowladda ee heer federal.<br>g. Waxay dhagaysataa, go'aanna ka gaartaa doodaha u baahan ku noqoshada ama ka noqoshada go'aaneed ee laga keeno go'aan iyada ka soo baxay;<br>h. Waxay amartaa dib u furidda dacwadaha loo xiray caddeyn la'aan dartood marka la helo caddeymo iyo marag-muujino cusub.<br>6. Maxkamada sare ee Federaalka waxay kale oo ay leedahay awoodaha kale ee soo socda;<br>a. waxay soo saartaa amarada ku socda Hay'daha maamulka guud ee Dowladda ee ku saabsan gudashada howl Qaran oo uu sharcigu ku waajibiyay ama ka joogsashada fulinta arin aan sharcigu awood u siin;<br>b. Go'aan ka gaarida cabashooyinka la xariira xuriyad ka qaadidda sharci darada ah ee loo soo gudbiyo ayna ikhtisaaska u leedahay<br>c. Go'aan ka gaaridda muranada la xariira xilalka iyo magacaabida ee Xafiisyada Dowladda ee heer Federaal ee aan ka ahayn kuwa Dastuuriga ah.<br>7. Dhammaan arrimaha kale ee Dastuurka iyo | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | Xeerku awood u siiyo. | |
| | Qodobka 112: Maxkamadda Sare Ee Dowlad Goboleedka | *Waa qodob cusub* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 1. Maxkamadda Sare ee Dowlad-goboleedka ayaa ah tan ugu sarreysa dacwadaha Dowlad Goboleedka marka laga reebo dacwadaha dastuuriga, waxayna awoodeedu ku baahsantahay xuduudka Dowlad Goboleedka oo dhan.<br>2. Dowlad-goboleedyadu waxay yeelanayaan Maxkamado Sare.<br>3. Maxkamadaha Sare ee Dowlad-goboleedku waxay awood iyo ikhtisaas u leedahay:<br>a. Dhagaysiga iyo go'aan ka gaaridda racfaannada laga soo qaato Maxkamadaha Hoose ee la xiriira xeerarka dawlad-goboleedka;<br>b. Fasiraadda Qodobada xeerarka Dowlad Goboleedka;<br>c. Go'aan ka gaaridda khilaafaadka dhinaca awoodaha iyo xuduudaha ee ka dhex dhaca Maxkamadaha Hoose ee Dowlad Goboleedka;<br>d. Go'aan ka gaaridda go'aamada dhammaadka ee hay'adaha dowlad goboleedka;<br>e. Go'aan ka gaaridda cabashooyinka laga keeno doorashooyinka Dowlad Goboleedka;<br>f. Soo saaridda amarrada ku socdo hay'adaha maamulka guud, wakaaladaha ee dhaca xuduuddaDowlad Goobleedka ee ku saabsan fulinta arrimo la xiriiro gudashada howl dan-guud ee sharcigu ku waajibiyay hay'adaas ama ka joog-sasho fulina arrin aanu sharcigu awood u siin; | *Dhammaan Faqradaha Qodobkaan waa kuwa oo lagu soo kordhiyay, laguna faahfaahinayo awoodda Maxkamadaha Sare ee dawlad goboleedyada dalka, si loo yareeyo wixii khilaaf ah ee imaan kara, sidoo kale aan loo siinin awoodo ka hor imaanaya kuwa Dastuuriga ah.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | g. Go'aan ka gaaridda murannada xilalka iyo magacaabista ee xafiisyada Dowladda ee heer-dowlad goboleed ee ku siman xuduudda Dowlad Goboleed kasta;<br>h. Dib u furidda dacwadaha loo xiray caddeyn la'aan haddii la helo caddeymo iyo marag-muujino dheeri ah.<br>4. Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Dowlad-goboleedyada waxaa soo jeedinaya Golaha Sare ee Garsoorka, waxaana ansixinaya golaha wakiilada Dowlad Goboleedka, kadibna waxaa si rasmi ah u magacaabayo Madaxweynaha Dowlad Goboleedka. | |
| | **Qodobka 113: Maxkamadaha Hoose** | *Waa qodob cusub, waxaana la soo jeedinayaa in la isticmaalo eray bixinta Maxkamadaha Hoose halki la dhihi lahaa Maxkamadda Darajada 1aad iyo 2aad.* |
| | 1. Maxkamadaha Hoose oo ikhtisaas iyo awood u leh dhagaysiga dhammaan dacwadaha Madaniga, Ciqaabta, Shaqaalaha iyo Arrimaha Qoyska ee dhammaan deegaannada Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka iyo magaala madaxda Dalka.<br>2. Garsooreyaasha Maxakamadaha Hoose ee | *Sababta loo doortay Maxkmadaha Hoose ee Darajada kowaad iyo Darajada labaad ayaa ah in la helo fursado lagu dhisi karo darajooyin maxkamadood oo kala duwan iyadoo markasta la fiirnayo baahida bulshada;* |

| | | |
|---|---|---|
| | Darajada kowaad iyo Darajada labaad waxaa soo jeedinaya Golaha Sare ee Garsoorka, waxaana si rasmi u magacaabaya, dikreetana ugu soo saarayo Madaxweynaha Dowlad Goboleedka kadib ansixinta golaha wakiilada. | *waxaana si faah-faahsan loogu nidaaminayaa Xeerka Nidaamka Garsoorka, taasina waxay sahleysa in si fudud loo bedeli karo haddii loo baahdo.* |
| | **Qodobka 114aad: Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka** | ***Waa Qodob Cusub*** |
| | 1. Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud oo ka mid ah Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.<br>2. Xeer Ilaaliyaha Guud ee ku xigeennadiisa waxaa lagu magacaabayaa xilkana looga qaadayaa ama ay ku weynayaan habraac la mid kan garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka iyo Maxkamadda Sare ee Federaalka.<br>3. Xeer Ilaaliyeyaasha Guud iyo ku xigeenadooda ee dowlad goboleedyada waxaa lagu dooranayaa, xilkana looga qaadayaa habraac la mid kan garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Dowlad Goboleedka.<br>4. Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud waxa uu waajib ka saran yahay ilaalinta sharciga iyo difaacidda shacabka.<br>5. Awoodda iyo xilka Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud waxaa ka mid ah:<br>a. Waxa uu ilaaliyaa cadaaladda iyo ku dhaqanka sharciga; | *Dhammaan faqradaha qodobkaan waa kuwa cusub oo lagu soo kordhiyay Dastuurka, waxaana lagu faahfaahinayaa awoodda Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | b. Waxa uu dhaqaajiyaa isla markaana ogaa dacwadaha ciqaabta ah;<br>c. Waxa uu difaacaa danaha qaranka iyo kuwa dadweynaha;<br>d. Waxa uu qaadaa racfaannada dacwadaha laga xukumar markay ay ku jirto danta cadaaladdu;<br>e. Waxa uu Maxkamadaha ku matalaa dadka taagta daran iyo caruurta agoonta ah;<br>f. Waxa uu ku kormeeraa hay'adaha baarista iyo saraakiisha Booliska shaqadooda;<br>6. Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxay mas'uuliyad gaar ahi ka saarantahay:<br>a. daryeelka maxaabiiska, agoonta iyo dadka aan isdifaaci Karin sharciga hortiisa;<br>b. Hubinta in eedda lagu gudbiyo muddada sharcigu tilmaamay;<br>c. Booqashada xabsiyada iyo goobaha kale ee lagu xiro eedeysaneyaasha. | |

DRAFT

| | Qodobka 115aad: Golaha Sare Ee Garsoorka | *Waxaa la bedelay ciwaanka asalka Dastuurka waxaana lagu bedela "Golaha Sare ee Garsoorka"* |
|---|---|---|
| | 1. Waxaa jiraya Golaha Sare ee Garsoorka kaasoo xaqiijinaya madaxbannanida garsoorka iyo Garsooreyaasha.<br>2. Golaha Sare ee Garsoorka waa in uu ahaadaa mid maamul iyo maaliyad ahaan madaxbannaan.<br>3. Golaha Sare ee Garsoorka wuxuu ka koobnaanayaa xubnaha soo socda:<br>a. Guddomiyaha Maxkamadda Dastuurka;<br>b. Guddomiyaha Maxkamadda Sare;<br>c. Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;<br>d. Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare ee Dowlad Goboleedyadaa;<br>e. Guddomiyaha Guddiga Xuquuqul Insaanka;<br>f. Saddex (3) Qareen Sare oo xubin ka ah Ururka Qareennada Soomaaliyeed, ayna soo magacaabaan Guddiga Fulinta Ururka Qareennada Soomaaliyeed, xilkana haynaya muddo 5 sano;<br>g. Labo (2) Xubnood oo bulshada sumcad ku leh, kuna xeel-dheer Shareecada iyo Qaanuunka oo haysta Shahaado Jaamacadeed, leh khibrad muddo aan ka yarayn 10 sano, ayna soo jeediyaan Golaha Wasiirada, xilkana haynaya muddo 5 sano ah. | *Faqradda 1aad waxaa wax ka bedel xagga siiqada ee lagu sameeyay faqradda 1aad ee asalka dastuurka.*<br>*Faqradda 2aad waa mid cusub sababta loogu kordhiyay ayaa ah in Goluhu maamul ahaan iyo maaliyad ahaanba u madaxbannaanaado.*<br>*Faqradda 3aad oo ah faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waxaa lagu kordhiyay Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare ee Dowladaha xubinta ka ah Federaalku in ay kamid noqdaan Golaha Sare ee Garsoorka;*<br>*Sidoo kale waxaa wax ka bedel lagu sameeyay tirada qareennada iyadoo laga dhigay seddex, halki ay marki hore ka ahaayeen hal, waxaa sidoo kale soo magacaabista loo daayay guddiga fulinta ururka qareennada soomaaliyeed, waxaana ansixinaya BFS*<br>*Waxaa sidoo kale laga dhigay tirada labada qofood ee* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 4. Si waafaqsan Dastuurka Federaalka iyo Xeerarka, Golaha Sare Garsoorka wuxuu samaysanayaa xeer-hoosaadkiisa.<br><br>5. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee federaalka ayaa ah Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka, Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka ayaa ah ku-xigeenka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka;<br><br>6. Si waafaqsan Dastuurka Federaalka Soomaaliya, Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo xeer-hoosaadka Golaha Sare Garsoorka wuxuu fulinayaa hawalaha soo socda:<br>(a) Horumarinta iyo ilaalinta madax bannaanida iyo hufnaanta garsoorka;<br>(b) nidaaminta qaab-dhismeeddka gudaha ee maxkamadaha iyo hay'adaha kale ee garsoorka iyo xafiisyada.<br>(c) Soo-jeedinta magacaabista iyo xil ka qaadista garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyeyaasha iyada oo la raacayo habraacyada ku xusan Dastuurka Federaalka;<br>(d) Magacaabista, xil ka qaadista, edbinta, wareejinta, dalacsiinta iyo go'aan ka gaarista mushaharka iyo howlgabnimada xubnaha garsoorka;<br>(e) Hagaajinta xaaladaha shaqada iyo heerarka xubnaha garsoorka;<br>(f) Maareynta maaliyadda iyo miisaaniyadda garsoorka.<br>(g) Kala-talinta Dowladda Federaalka arrimaha | *bulshada sumcadda ku leh, qof aqoon iyo aqoon iyo takhasus u leh sharciga ama shareecada Islaamka oo ay tahay in uu ansixiyo BFS*<br><br>*Faqradda 5aad wax ka bedel yar ayaa lagu sameeyay ayadoon nxurkeeda waxba laga bedelin.*<br><br>*Faqradda 6aad waxaa lagu sameeyay wax ka badel, waxaana guddoomiyaha golaha laga dhigay guddoomiyaha Maxkamadda Sare, maadaama maxkamadda dastuurku ay tahay Maxkamad gaar ah, guddoomiyeheeduna aanu kor joogtayn ku lahayn Maxkamadaha Hoose, ayaa waxaa la doortay in Guddoomiyaha Maxkamadda Sare uu noqdo Guddoomiyaha Guddiga, Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurkuna uu noqdo Guddoomiye ku xigeenka guddiga.* |



DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | maamulka ee ku saabsan garsoorka.<br>(h) La xisaabtanka, qiimeynta iyo korjoogteynta howlqabadka hay'adaha garsoorka ee heerarka dowladda oo dhan ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>(i) In ay fuliyaan wixii kale ee waajibaadka ah ee ku xusan Dastuurka Federaalka ama shuruucda dalka. | |
| | **Qodobka 116aad: Xafiiska Garyaqaanka Guud** | *Waa qodob cusub oo lagu dhisayo xafiiska garyaqaanka guud ee Federaalka* |
| | 1. Xafiiska Garyaqaanka Guud waa Qareenka iyo La taliyaha Sharci ee Dowladda Federaalka.<br>2. Garyaqaanka Guud waxa uu leeyahay awoodda iyo xilalka soo socdo:<br>a. Waxa uu ka qeybgalaa dhammaan dacwadaha Madaniga, Maamulka, Shaqaalaha iyo Xisaabaadka ee ay Dowladda Federaalka dhinaca ka tahay;<br>b. Wuxuudiiwaan-geliyaa, u doodaa isla markaana uu difaacaa dhammaan hantida dowladda ee guurtada iyo maguurtada ah;<br>c. Wuxuu keydiyaa dhammaan shuruucda Dalka, Heshiisyada iyo qoraallada rasmiga ah ee Dowladda kuna soo saaraa faafinta rasmiga ah;<br>d. Waxa uu kala taliyaa dowladda federaalka dhammaan heshiisyada iyo qandaraasyada | *Dhammaan Faqradaha Qodobkani waa kuwa cusub, waxaana lagu nidaaminayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, kaasoo ah Qareen iyo La taliyaha Sharciga ee Dowladda.* |

| | | |
|---|---|---|
| | ay dowladdu dhinaca ka tahay ee lala galayo shirkadaha ama dadka kale ee maxalliga ah;<br>e. Wuxuu qabtaa howl kasta oo kale ee uu sharcigu awood u siiyay ama ay Dowladda Federaalka u xilsaarto. | |

DRAFT

## CUTUBKA 10AAD
## DAWLAD GOBOLEEDYADA

| ASALKA DASTUURKA | Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
|---|---|---|
| | *CUTUBKA 10AAD:*<br><br>*DAWLAD GOBOLEEDYADA* | *Waa cutub cusub oo faah-faahin dheer ka bixinaya qaab-dhismeedka dawlado-goboleedyada.* |
| | Qodobka 117aad: Mabaadii' Guud ee Dhisamaha Dawlad-goboleedyada | Qodob Cusub |
| | 1. Si waafqasan Dastuurkan, waxaa jiraya Dowlad-goboleedyo ka kooban gobollo ku midoobaya hal Magac, leh calan iyo Astaan u gaar ah, kana mid ah Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Waa Qodob cusub oo qeexaysa Dawlad-goboleed yada.* |
| | 2. Dawlad Goboleed kasta waa in ay ku shaqeysaa si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Qaranka iyo Dastuurkooda ayadoo ilaalinaysa mabaadii'ada aas-aasiga u ah dimuqraadiyadda, xuquuqul-insaanka iyo midnimada Qaranka. | *Waa faqrad cusub oo ka hadlaysa u hogaansanaata DG ee Dastuurka JFS.* |
| | Qodobka 118aad: Dastuurka Dowlad Goboleedka | |
| | 1. Dowlad Goboleed kasta waxay yeelanaysaa Dastuur u gaar ah oo aan ka hor imaanayn | *waa asalka dastuurka balse siiweyn ayaa lagu sameeyey.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | Dastuurka Dawladda Federaalka. | |
| | 2. Qodob kasta oo ku jira Dastuurada dawlad gobleedyada ee aan waafaqsanayn Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa waxba kama jiraan, waxaana awoodda burinta iska leh Maxkamadda Dastuurka Federaalka. | |
| | **Qodobka 119aad: Golaha Wakiilada Dawlad Goboleedka** | *Qodob cusub* |
| | 1. Dowlad Goboleed kasta waxay yeelanaysaa Gole Wakiilo oo ku dhisan matalaada dadweynaha Dawlad- Goboleedka, laguna dooranayo cod toos ah oo qorsoodi ah, muddo xileed dhan 5 sano. | *Faqradahan waa kuwo cusub oo ka hadlaya Goleyaasha wakiilada ee Dawlad Goboleedyada* |
| | 2. Tirada xubnaha Golaha Wakiilada waxaa lagu xaddidayaa Dastuurka Dowlad Goboleedka taas oo lagu xaqiijinayo in dhammaan dadka ku nool dowlad-goboleedkaas ay helaan matalaad buuxda. | |
| | 3. Golaha Wakiilada waxay soo saarayaan Xeerar aan ka hor imaanayn Dastuurka Federaalka iyo Xeerarka Dawladda Federaaka. | |
| | **Qodobka 120aad: Golaha Fulinta Dawlad Goboleedka** | *Qodob cusub* |

| | | |
|---|---|---|
| | 1. Dowlad Goboleed kasta waxay yeelanaysaa Madaxa Xukuumadda oo ah xubinta ugu sareeysa hay'adda fulinta oo leh ku-Xigeen/ku xigeeno Iyo xoghayeyaal. | *Faqrad cusub* |
| | 2. Madaxa Xukuumadda iyo ku-Xigeenkiisa/ku-xigeenadiisa waxaa dooranaya Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka Muddo xileed Shan (5) Sano ah. Waxaana dib loo dooran karaa hal muddo xileed kale oo isku xiga. | *Faqrad cusub* |
| | **Qodobka 121aad: Golaha Deegaanka ee Dawlad Goboleedyada** | *Qodob cusub oo ka hadlaya Goleyaasha deegaanka ee DG* |
| | 1. Dowlad Goboleed kasta waa inuu yeeshaa Gole Deegaan oo ku dhisan matalaada dadka degmada, laguna dooranayo cod toos ah oo qorsoodi ah, muddo xileed dhan 5 sano. | |
| | 2. Golaha Deegaanka wuxuu awood u leeyahay dajinta xeerar u gaar ah oo aan ka hor imaanayn Dastuurada iyo Xeerarka Dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada.<br>3. Awoodaha iyo tirada Golaha Deegaanka waxaa lagu xadidayaa Dastuurka Dawlad Goboleedka.<br>4. Golaha Deegaanku wuxuu dooranayaa Duqa degmada, ku xigeenaddiisa iyo xubnaha Golaha si ay u gutaan howlaha degmada muddo xileed shan (5) sano ah. | |

| CUTUBKA 11AAD:<br>GUDDIYADA MADAXBANNAAN | | |
|---|---|---|
| *Asalka Dastuurka KMG* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
| *CUTUBKA 10 AAD: GUDDIYADA MADAXA BANNAAN* | *CUTUBKA 11AAD: GUDDIYADA MADAXBANNAAN* | *Waxba lagama baddelin* |
| Qodobka 110aad: Mabaadi'da Guud | *Qodobka 122aad: Mabaadii'da Guud* | *Cinwaanka qodobka waxba lagama bedelin* |
| | 1. Waxaa jiraya Guddiyo Madaxbannaan ee heer federaal iyo heer dawlad-goboleed oo u igman xoojinta sarreynta sharciga, kaabidda howlaha hay'adaha Dowladda iyo awood kasta oo kale oo ay ku fuliyaan howlaha dadwaynaha oo ku shaqeynaya si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | ***Faqrad cusub:***<br>*Sababta Farqaddan loogu soo daray ayaa ah in marka hore la dejiyo mabaadii' guud oo tilmaamaysa in ay jirayaan guddiyo madaxbannaan oo ku xiran hadba baahida iyo danta dalka, laguna nidaaminayo xeer uu soo saarayo BFS.* |
| | 2. Guddi Madaxabannaan ee heer federaal waxaa dhisi kara Baarlamaanka Federaalka, midka heer Dowlad-goboleedna waxaa dhisi kara Golaha Wakiillada si waafqsan dastuuradooda. | |
| (1) Guddi madax banaan waa hay'ad ka madax | 3. Guddiyada madaxabanaan waxa ay leeyihiin | *Faqradaan waxaa lagu sameeyay* |

| | | |
|---|---|---|
| bannaan xukuumadda ama xakamayn siyaasaded, awoodna u leh adeegsiga aqoontooda xirfadeed ee la xiriira hawlahooda u gaarka ah. | shakhsiyad qaanuuneed iyo madaxbannaani farsamo, maamul iyo maaliyadeed, waxayna ku shaqeeyaan ayagoo ka madax bannaan xukuumadda ama xakamayn siyaasaded. | *dib-u-habayn isugu jirta qaabayn, siiqayn iyo kaabid, waxaana lagu kordhiyay in guddiyada madaxabannaan ay leeyihiin shakhsiyad qaanuuneeed si ay u sahlanaato in go'aannadooda cabasho loogu qaato Maxkamadda awoodda u leh.* |
| | 4. Guddiyada madaxa-banaan waxay awood u leeyihiin dajinta xeer-nidaamyo iyo hab-raacyo u gaar ah hawlahooda si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Waa faqrad cusub, waxaana loogu soo daray si loo tilmaamo in Guddi kastaahi uu yeelan karo xeerhoosaad iyo habraacyo shaqo oo u gaar ah.* |
| | 5. Guddiyada madaxabannaani waxay u hogaansamayaan oo keliya Dastuurka iyo Sharciga, waana in ay u gutaan shaqadooda si daah-furan, dhaxdhaxaad ah oo aan cid gaar ah loogu danaynayn. | *Faqraddaan waa mid cusub waxaana lagu adkeynayaa madaxbannaanida Guddiyada sidoo kale in ay shaqadooda u gutaan si daacadnimo ku dheehantahay.* |
| | 6. Cidna ma fara-gelin karto shaqada guddiyada madaxabannaan, waana in dhammaan hay'adaha dowladdu ku gacan-siiyaan shaqadooda. | *Waa faqrad cusub waxaana loogu soo kordhiyay si loo adkeeyo madaxbannaanida guddiyada, loogana fogaado faragelin kasta oo carqaladayn karta shaqadooda.* |

| | | |
|---|---|---|
| | 7. Baarlamaanka Federaalka ayaa leh awoodda la-xisaabtanka iyo kor-joogtaynta Guddiyada Madaxabannaan si loo hubiyo fulinta shaqada loo idmaday. Waxayna warbixin lix biloodle ah u gudbinayaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | *Waa faqrad cusub waxaa loogu soo kordhiyay si loo caddeeyo in la xisaabtanka guddiyada uu leeyahay BFS, sidoo kale ay khasab-tahay in guddi kastaahi uu warbixin lix biloodle ah u gudbiyo BFS.* |
| (2) Guddi madax banaan marka uu ku jiro gudashada waajibaadkiisa iyo hawlgalkiisa waa in ay ka muuqataa in uu ku shaqaynayo dareenka dhawrista xuquuqda Aadanaha, dimuqoraaddiyad iyo daahfurnaan. | 8. Guddi madaxabannaan marka uu gudanayo waajibaadkiisa iyo hawlgalkiisa waa in uu dhowraa xuquuqda Aadanaha, dimuqoraaddiyadda iyo daah-furnaanta. | *Faqraddan waxaa lagu sameyey siiqeyn balse waxba lagama bedelin nuxurka* |
| (3) Guddi madaxbannan marna ma hoos imanayo, kamana amar-qaadanyo qof ama hay'ad awood xukun leh midna. | | *Waxaan soo jeedinaynaa in la tiro faqraddaan maadaama nuxurkeeda lagu sheegay faqradaha 2aad iyo 4aad ee sare ku xusan.* |
| (4) Maaliyadda Guddi kasta oo madax banaan la siinayaa waxay ahaanaysaa madax gaar ah oo ka tirsan miisaaniyadda qaranka. | 9. Maaliyadda Guddi kasta oo madaxbannaan waxay ahaanaysaa madax gaar ah oo ka tirsan miisaaniyadda qaranka. | *Faqraddan sideeda ayaa loo qaatey* |
| | 10. Muddada xil haynta xubnaha guddiyada madaxabannaan waa Shan (5) sano oo hal muddo xileed ah. | *Waa faqrad cusub oo lagu caddaynayo waqtiga xil haynta guddiga madaxabannaan oo laga dhigay 5 sano ooh al muddo xileed ah.* |
| | 11. Haddii Dastuurka si kale u sheegin, tirada Guddi Madaxabannaan wuxuu noqon karaa 5 ilaa | *Faqradaan waxaa laga soo raray Qod. 135(1), ee Dastuurka, hase yeeshee waxaa lagu daray in ugu* |

| | | |
|---|---|---|
| | 9. | *yaraan ay noqdaan 5 ugu badnaana 9.* |
| Qodobka 111aad: Samaynta Guddiyada Madaxa Bannaan | *Qodobka 123aad: MAGACAABIDDA GUDDIYADA MADAXABANNAAN* | *Ereyga "Sameynta" waxaa loo baddelay "Magacaabidda"* |
| (1) Dalku wuxuu yeelan doonaa Guddiyo Madaxbanaan oo Heer Federaal iyo Heer Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya, waajibaadkooda, xilkooda, iyo tiradooda waxaa lagu qeexayaa Xeer ah oo laga ansixiyo labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | | *Waxaan soo jeediyey in la tiro faqradda 1aad ee asalka Dastuurka maadaama nuxurkiisa lagu sheegay faqradda 1aad ee qodobka kore.* |
| (2) Iyadoo la tixgalinayo duruufaha gaarka ah oo Guddiyadaas loo xilsaaray, xubnaha ka qaybgalayaa waa in lagala tashadaa inay ka qaybqaataan Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya. | 1. Xubnaha Guddiyada Madaxa Bannaan ee heer federaal waxaa loo magacaabayaa sida soo socota:<br>a. Golaha Wasiirada ayaa soo jeedinaya Xubnaha Guddiyada madaxabannaan;<br>b. Baarlamaanka Federaalka ayaa ansixinaya ama diidaya xubin/xubno ka mid ah kuwa la soo jeediyay;<br>c. Marka uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo dhammaan xubnaha Guddiga Madaxabannaan, Madaxweynaha ayaa soddon (30) maalmood gudahood ah si rasmi ah xeer Madaxweyne ugu meelmarinaya guddiyada la magacaabay.<br><br>2. Xubnaha Guddiyada Madaxa-bannaan waxay xilkooda ku waayi karaan oo keliya arrimaha soo socda midkood:<br>a. Geeri;<br>b. da'da hawlgabka;<br>c. Xil gudasho la'aan joogta ah sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu | *Faqradan waa mid cusub oo ka hadleysa habraaca magacaabidda xubnaha guddiyada madaxbannaan* |

| | | |
|---|---|---|
| | caddeeyey dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay;<br>d. Is-casilaad qoraal ah oo uu u gudbiyey Guddoomiyaha Guddigiisa lagana aqbalo;<br>e. Xukun maxkamadeed oo kama danbays ah oo aan ka yarayn hal sano xabsi ah;<br>f. aqbalaada xil kale oo dowladeed. | *Faqraddan 2aad waa mid cusub oo ka hadleysa habraaca xil waayidda xubnaha guddiyada Madaxbannaan.* |
| | 3. Waa in xukuumadda ama hay'adda ay khusayso ay ku soo dhamaystirtaa guddiyada madaxabannaan muddo 60 maalmood oo ka bilaabanaysa maalinta uu Baarlamaanku ansixiyo xeerka lagu dhisay guddi kasta. | *Waa faqrad cusub waxaana loogu soo kordhiyay si loo dedejiyo magacaabista guddiyada madaxabannaan, ayna ku soo dhamaystirto hay'adda ay khuseyso muddo 60 maalmood ah oo ka bilaabanaysa marka uu ansixiyo BFS.* |
| Qodobka 111A: Golaha Adeegga Garsoorka | | *Qodobkaan waxaa loo raray Cutubka 9aad* |
| (1) Waa inuu jiraa Golaha Adeegga Garsoorka, Golahaasoo kala talinaya Caddaaladda iyo Federaal Dawladda arrimaha ku sabaasan maamulka caddaaladda oo ay ka mid tahay qoritaanka, shaqo kasaaridda and talaabo ka qaadista Garsoorayaasha. | | Sababaha loo raray Qodobkaan ayaa ah in Cutubka 9aad uu nidaaminayo arrimaha Garsoorka, sidaa awgeedna uu qodobkaan ku habboonyahay in loo raro Cutubka 9aad ee Dastuurka oo ka hadlaya Garsoorka JFS. |
| (2) Golaha Adeegga Garsoorka waa in uu madax banaanaadaa, dhexdhexaad noqdaa uu hal dhinac u xaglin uu xaqiijiyaa madax banaanidda cadaladda. | | |
| (3) Golaha Adeegga Garsoorka waxa uu lahaanayaa awood, iyo hawlo loo xilsaaray oo ku sheegan Dastuurka iyo Sharciyadda Qaranka. | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Qodobka 111B: Guddiga Xuquuqda Aadamiga | *Qodobka 124: Guddiga Xuquuqda Aadanaha* | *Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka* |
| (1) Waa inuu jiraa Guddiga Xuquuqda Aadamiga oo loo xilsaaro:<br>a. Horumarinta xushmeynta xuquuqdda aadmigga iyo dhaqanka xuquuqda aadamigga;<br>b. Horumarinta ilaalinta, xoojinta iyo adkeynta xuquuqda aadmiga; iyo<br>c. Baaritaanka iyo qiimeynta hab dhaqanka xuquuqda aadamiga ee Jamhuuriyadda Federaalka eeSoomaaliya. | Waxaa jiraya Guddiga Xuquuqda Aadanaha oo uu waajibkiisu yahay:<br>a. Adkaynta, sare-u-qaadidda, difaacidda, xushmeynta iyo xaqiijinta qiyamka xuquuqda aadanaha iyo xoriyadaha guud si waafaqsan Dastuurka, Shareecada Islaamka iyo Shuruucda Dalka;<br>b. U kuur-gelidda, baarista iyo diyaarinta warbixnno la xiriiro xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Dalka;<br>c. Ka hortagga tacadiyada iyo ku xad-gudubyada xuquuqda aadanaha iyo ku wargelintooda hay'adaha qaranka ee ay khusayso;<br>d. Hubinta damaanad-qaadka xuquuqda aasaasiga iyo dhowrista hab-dhaqanka xuquuqda aadanaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>e. Ka talo-bixinta habka ugu haboon ee lagu dhowri karo xuquuq aadanaha iyo xaqsoorka gabood-fallada, iyo kala talinta Dowladda ee ka mid noqoshiyada iyo gelidda heshiisyada caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee aan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Dalka; | *Faqradaan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah iyadoon nuxurka waxba laga bedelin, waxaa kaloo lagu sameeyay kordhin la xiriirta nuxurka qodobka, waxaa sidoo kale la mideeyay nuxurka faqradaha 1aad iyo 2aad oo laga dhigay hal faqrad.* |

| | | |
|---|---|---|
| | f. Baarista iyo diiwaan-gelinta xad-gudubyada xuquuqda aadanaha, kormeeridda xabsiyada iyo goobaha kale ee dadka lagu xiro iyo wacyi-gelinta bulshada ee xuquuqda aadanaha;<br>g. Qabashada howl-kasta oo kale ee uu sharcigu u xilsaaro. | |
| (2) Guddiga Xuquuqdda Aadmiga Iyadoo la tixraacayo Dastuurka, Guddiga Xuquuqda Aadmiga, wuxuu yeelahanayaa awood uu ku fuliyo hawlahan:<br>a. Inay baaritaan ku sameeyaan, warbixina ka soo saaraan sida loogu dhaqmayo xuquuqddaaadmiga;<br>b. Inay si ku habboon xal ugu raadiyaan meelaha lagu xad gudbay xuquuqda aadmiga<br>c. Inay cilmi baaris ku sameeyaan; iyo<br>d. Inay cilmi wacyi gelin u sameeyaan dadweynaha iyo saraakiisha xukuumadda heerarkacaalamiga ah 195oh a saabsan xuquuqdda aadmiga. | | *Fiiri faqradda hore ee wax ka bedelka Dastuurka, waxaa nuxurkeeda loo raray faqradda 1aad sidaasna waxaa lagu kulmiyay faqradaha 1aad iyo 2aad ee dastuurka.* |
| (3) Awoodaha iyo hawlaha ah ee Guddiga waa inuu ku dhignaadaa Sharciyadda Xuquuqda Aadmiga. | | *Nuxurka Faqraddan waxaa loo raray Qodobka 121aad ee Soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka* |
| (4) Golaha Xuquuqda Aadmiga waa inuu madax banaanaadaa, waa inayna hal dhinac u xaglin, waa in loo dhamaadaa waana inaanu ka badnaan sagaal (9) xubnood. | | *Nuxurka Faqraddan waxaa loo raray Qodobka 121aad ee Soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka* |
| **Qodobka 111C: Guddiga La dagaalanka Musuqmaasuqa** | **Qodobka 125aad: Guddiga La-dagaalanka** | ***Soojeedinta Wax-ka-baddelka Dastuurka*** |

| | Musuqmaasuqa | |
|---|---|---|
| (1) Waa inuu jiraa Guddi la Dagaalanta Musuqmaasuqaq waana in awoodoodu noqotaa inay baaraan eedaha ku saabsan musuqmaasuqa lagu soo oogo qaybaha Dawladda. | 1. Waxaa jiraya Guddiga La-dagaalanka Musuqmaasuqa oo u xilsaaran:<br>a. In uu dejiyo siyaasado iyo hal-beegyo looga hortagayo musuqmaasuq kasta.<br>b. In uu dejiyo istiraatiijiyado lagula dagaalamo khatarta musuqa iyo in uu soo bandhigo sababaha keeno musuqa iyo sida lagu ciribtiri karo;<br>c. In uu diyaariyo cilmi-baaris qoto-dheer iyo warbixinno tifaftiran oo la xiriira dhacdooyinka musuqmaasuqa iyo laaluushka ka dibna uu u gudbiyo Xukuumadda iyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;<br>d. In uu daba-galo, baaro, raadiyo, diiwaan-geliyo kiisaska musuqmaasuqa kadibna uu u gudbiyo hay'adaha awooda u leh dhaqaajinta iyo talaabo ka qaadista fal-dembiyeedka musuqmaasuqa;<br>e. In uu u baaro fal kasta oo musuqmaasuq ah, si madaxbannaan, ama cabasho uga timid dhibane ama uu qof kale u soo gudbiyo;<br>f. In uu ka qaado tallaabo sharciyeed uu ku wergelinayo hay'adaha garsoorka si loo xayiro, loo qabto, ama loola wareego hanti | *Faqraddan 1aad ee soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka waxay ka kooban tahay Faqaradda 1, 2, 3 iyo 4 ee asalka Dastuurka KMG waxaana lagu uruuriyay faqraddaan, iyadoo sidoo kale loo qoray hab qaanuuni ah nuxurkeena aan waxba laga bedelin, keliya lagu sameeyay ku daris iyo kaabid.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | kasta ee sharci darro looga dhaco qaranka;<br>g. In uu wacyi-geliyo, sarana- u- qaado garaadka bulshada qeybaheeda kala duwan, kuna baraarujiyo khatarta musuqmaasuqa iyo saamaynta uu ku leeyahay horumarka dhaqaalaha, bulshada, xasiloonida iyo siyaasadda dalka.<br>h. In uu qabto hawl kasta ee kale uu tilmaamay Dastuurka ama shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | |
| (2) Guddiga La-dagaallanka Musuqmaasuqa waxay sameyn karaan baaris marka ay rabaan, kuma eka keli ah hawshoodu marka cabasho loo soo gudbiyo. | | *Nuxurka Faqraddaan waxaa lagu sheegay Faqradda 1aad ee Soojedinta Waxkabaddelka Dastuurka* |
| (3) Mas'uuliyadaha Guddiga La Dagaalanka Musuqmaasuqa waxa ka mid ah:<br>a. Horumarinta iyo adkeynta tallaabooyinka lagu joojinayo lagulana dagaalamayo musuqmaasuqaee ugu fiican uguna habboon;<br>b. Horumarinta, fududeynta iyo taageeradda Iskaashiga Caalamiga iyo taageeradda farsamadda<br>c. Horumarinta daacadnimadda, xisaabtanak, iyo habsami u maamulka arrimaha dadweynaha iyo hantida dadweynaha. | | *Faqradaan waxaa lagu mideeyay Faqradda 1aad ee isla Qodobkaan ee soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (4) Awoodaha Guddiga La Dagaalanka Musqmaasuqa waxa ka mid ah:<br>a. Ka hortaga, baarista, faafinta dacwooyinka musuqmaasuqa;<br>b. Xayiraadda, qabashada, la wareegga/qaadashada iyo celinta faa'iidada fal danbiyeedka;<br>c. Taageerista dejinta sharciyadda iyo tallaabooyinka ku habboon ee lagu joojinayo, xakameynayo laguna qaadayo falal dembiyeedka la xiriira musuqmaasuqa. | | *Faqraddaan waxaa loo raray faqradda 1aad ee isla qodobkaan ee wax ka bedelka Dastuurka.* |
| (5) Halka ay gaarsiisan tahay awoodda Guddiga La-dagaallanka Musuqmaasuqa waxa ka mid aharrimaha la xiriira:<br>a. Musuqmaasuqa qaranka ama dibeddea ee saraakiisha Dawladda;<br>b. Boobka, isdhicitaanka iyo leexsashada saraakiisha Dawladda ee hantida Dawladda iyo hantidagaarka ah;<br>c. Ku-shaqaysashada nufuudda ama xiriirada gaarka ah;<br>d. Si xun ugu dhaqanka hawlaha shaqada iyo taajiridda aan sharciga ku dhisnayn | 2. Waxaa Dastuurkaan dhexdiisa Musuqmaasuq loola jeedaa:<br>a. Fal kasta ee la xiriiro qaadasho ama bixin lacag, faa'iido, abaal-marin xaq-darro ah, eex, laaluush, ogolaasho ballan-qaad lacageed ama faa'iido ee uu ku kaco qof, hay'ad ama sarkaal loo xilsaaray howl dan-guud, ama fal khilaafsan xilka Xafiiska uu u qaata naftiisa ama ugu daneeyo dhinaca kale.<br>b. Ku tagri-falka iyo si-xun u isticmaalka awoodeed ee xafiisyada qaranka, ku xad-gudubka iyo lunsashada hantidada danta guud, tan-dadweynaha iyo falkasta oo kale ee qalin-shubatanimo. | *Farqaddaan waxaa lagu sameeyey kaabid iyo erey bixin.* |
| (6) Guddiga La Dagaalanka Musuqmaasuqa waa inuu madax banaanaadaa, dhedhexaad ahaadaa, eexla'aanahadaa, waa in lagu wada jiraa, loona dhan yahay, waana in aanu ka badan sagaal (9) xubnood. | | *Fqaraddan waxaa loo raray Qodobka 121 ee soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka,* |

DRAFT

| Qodobka 111D: Guddiga Adeegga Baarlamaanka | | *F.G: Qodobkan Waxaa loo raray Cutubka 6aad ee Barlamaanka.* |
|---|---|---|
| (1) Mudadda bilowga ah ee Golaha shacabka, waa in labada aqal ee Federaalku sameeyaan Guddiga Adeega Baarlamaanka taasoo shaqeyneysa mudadda Aqalka Shacbka jiro. | | *Waxaa loo raray cutubka 6aad* |
| (2) Guddiga Adeega Baarlamaanku waa inuu ka koobnaadaa:<br>a. Guddoomiyaha Golaha shacabka oo ah guddoominaya fadhiyada<br>b. Guddoomiyaha Aqalka Sare oo noqonaya guddoomiye ku-xigeen;<br>c. Afar xubnood oo lagu soo magacaabay Golaha shacabka kuwaasoo ay ugu yaraan ka midyihiin laba haween ah;<br>d. Laba xubinood laga soo magacaabay Golaha shacabka kaasoo ay midkood tahay haweenay;<br>e. Hal xubin oo ay soo magacaabay Golaha Shacabka oo ah shakhsi khabiir ku ah arrimahadadweynaha hase yeeshee aan ka mid ahayn xubnaha Baarlamanka Federaalka. | | *Waxaa loo raray cutubka 6aad* |
| (3) Xubin ka mid ah Guddiga Hawlaha Baarlamaanka waa inuu baneeyaa xafiiska:<br>a. Marka ay dhamaato muddada Golaha Shacabka;<br>b. Haddii xubintaasi ay ka mid ahayd Baarlamanka Federaalka ayna dhamaato xubinnimadiisii<br>c. Baarlamaanku Federaalka; ama<br>d. Haddii ay xubin la magacaabay; | | *Waxaa loo raray cutubka 6aad* |

| | | |
|---|---|---|
| magacaabistii kala noqodaan Golaha Shacabka | | |
| (4) Guddiga Hawlaha Baarlamanku waa inuu mas'uul ka noqdaa:<br>a. Adeegyada iyo fududeynta si loo hubiyo wanaaga iyo hawgalka fiican ee BaarlamaankaFederaalka;<br>b. Abuuris xafiisyadda taageeraya adeegga Baarlamaanka iyo magacaabidda iyo kor ka maamulkamasuuliyiinta xafiisyada;<br>c. Diyaarinta qiyaasta kharashyadda Baarlamanka ee sannadkiiba hal mar iyo u gudbintoodaGolaha Shacabka si ay u ansixiyaan iyo inay xakameynta miisaaniyadda hawlaha maaliyadda;<br>d. Inay sameeyaan hawlaha kale ee loo baahdo, kuwaasoo lagu daryeelayo xubinaha shaqaalahaee Baarlamaanka Federaalaka kuna cad sharciga Federaalka ah. | | *Waxaa loo raray cutubka 6aad* |
| (5) Marka laga helo ansixin Aqalka ay khuseyso, Golaha Adeegga Baarlamaanku waa inay umagacaabaan xoghayn aqalka kasta oo Aqaladda baarlamanka Federaalka. Xafiisyaddaxoghayayasha iyo xafiisyadda xubinaha shaqaalaha ee xoghayayasha waa inuu noqdaa xafiisyoadeegga baarlamaanka. | | *Waxaa loo raray cutubka 6aad* |
| **Qodobka 111E: Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka** | **Qodobka 126aad: Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka** | ***Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka*** |
| (1) Waa inay jiraan Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka si ay u taageeraan isbeddeladda | 1. Waa inuu jiraa Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka si uu u taageero isbeddeladda | *Waxaan ku raacney Asalka Dastuurka balse siiqada ayaan* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Degaanadda ee Soomaaliya una noqdaan xukuumaddo federaal ah oo xoogan. | Degaanadda ee Soomaaliya una noqdaan xukuumaddo federaal ah oo xoogan. | *wax ka beddelney.* |
| (2) Guddiyada Xuduudaha iyo Federaalka waxa kaashan karaan khubaro ka mid ah qaranka ama ka yimid, iyagoo sameynaya daraasad, iyo khariidado isla markaana ku dhaqaaqaya daraasado taageerayo abuurista xukuumado wax-ku-ool ah | 2. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu kaashan karaan khubaro iyagoo sameynaya daraasad iyo khariidado taageeraya abuurista xukuumado wax-ku-ool ah. | *Waxaan ku raacney Asalka Dastuurka balse siiqada ayaan wax ka beddelney.* |
| (3) Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waa inay tixgeliyaan xogta dadka iyo dhulka, eegayana wadci siyaasadeed iyo kan dhaqan duruuftiisa iyo qaabka bulshada kuwaasoo ay taallooyin ahaan ugu soo jeediyaan baarlamanka fedeeraalka sidii loo jeexi lahhaa xuduudaha xukuumaddaha Federaalka; | *3.* Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waa inay tixgeliyaan xogta dadka iyo dhulka, ayagoo eegaya xaalad-siyaasadeedka, kan dhaqan iyo qaabka bulshadeedka jira kuwaasoo ay talooyin ahaan ugu soo jeediyaan Baarlamanka Fedeeraalka. | *Waxaan ku raacney Asalka Dastuurka balse siiqada ayaan wax ka beddelney.* |
| (4) Guddigu waa inay madax banana tahay, dhexdhexaad tahahy, meteshaa qaybaha deeggaandda Soomaaliya oo dhan, loona dhan yahay | | *Waxaan ku soo sheegney mabaadi'ida Guddiyada Madaxabaannaan ee kor ku xusan* |
| (5) Go'aan kama dambeynta ah ee xuduudaha, xuduudaha Xukuumaddaha Federaalka waa inay sameyaa baarlamanka Federaalka, waana inuu ku saleyaa tallooyinka Guddiga Xuduuddaha Federaalka. | 4. Go'aan kama-dambeynta ah ee xuduudaha waxaa leh baarlamanka Federaalka, ayadoo la tixgelinayo talooyinka Guddiga Xuduuddaha iyo Federaalka. | *Waxaan ku raacney Asalka Dastuurka balse siiqada ayaan wax ka beddelney.* |
| **Qodobka 111F: Guddiga isku xirka Xukuumadaha** | | *Qodobkan Nuxurkiisa waxaan u rarney Cutubka 5aad* |
| (1) Waa in sharci Federaal ah lagu sameeyaa Guddi isku xirta xukuumaddaha. | | *Waxaa loo rarey cutubka 5aad* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Guddiga isku xirka xukuumaddaha "waa inay lahaadaan awoodaha Federaalka Baarlamaanka uu uarko daruuri sida:<br>a. Fududeynta is-kaashi iyo isla-xiriirka Dawladda Federaalka iyo xubinaha xukuummadaha Federaalka dhexdooda; iyo<br>b. Xalilinta wixii khilaafaad ku saabsan maamul ama siyaasadda ee awoodooda hoos yimaadda kuwaasoo soo kala dhexgeli kara Dawladda Federaalka iyo hal dawlad oo xubin ka ah Federaalka ama in ka badan Dawladdaha xubinta ka ah xukuummadaha Federaalka ama. | | *Waxaa loo rarey cutubka 5aad* |
| (3) Guddiga Isku Xirka Xukuumaddaha waa inay ka koobnaataa xubnno uu soo magacaabay Ra'iisul<br>Wasaaruhu iyo marka ugu yaraato tiro la mid ah oo ay soo magcaabenn mid walba oo ka mid ahdawladaha xubnaha ka ah Federaalka. | | *Waxaa loo rarey cutubka 5aad* |
| **Qodobka 111G: Guddiga Qaranka ee Madax Bannaan ee Doorashooyinka** | **Qodobka 127aad: Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka** | ***Cinwaanka qodobkan waxaa lagu sameeyay qaabayn yar iyadoon waxba laga bedelin nuxurkiisa.*** |
| (1) Waa in la dhisaa Guddiga Qaranka ee Madaxbanaan ee Doorashooyinka; taasoo loo tixraacayo Dastuurka. Guddiga waa inay guddigu ka madax banaanaadaan waaxda fulinta waana inay maamushaan maaliyadooda u gaarka ah. Guddiga waa in ahaataa mid loo dhan yahay, waana inaynoqotaa dhexdhexaad waana inayna ka badnaan tiro sagaal xubnood ah. | 1. Waxaa jiraya Guddiga Madaxabannaan ee doorashooyinka Qaranka oo u gudanaya waajibaadkiisa si waafaqsan Dastuurka, si loo helo doorasho xor iyo xalaal ah oo Qaran. | *Faqraddan dib ayaa loo siiqeeyey waxaana nuxurka qayb ahaan horey loogu soo sheegey qodobka mabaadii'da guud ee Guddiyada Madaxbannaan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (2) Masuuliyadaha Guddiga Qaranka ee Madax-bannaan ee Doorashooyinka waxa ka mid ah:<br>a. Inay maamulaan doorashooyinka Madaxweynaha<br>b. Inay maamulaan dooorashooyinka Federaalka<br>c. Inay si joogta ah u diiwaan geliyaan cod-bixiyayaasha dib-u-eegisna ku sameeyaan xaashiyahacod-bixiyayaasha<br>d. Inay diiwaan geliyaan murashaxiinta doorashooyinka<br>e. in ay xadidaan degaanada cod-bixineed<br>f. Sharciyeynta habka xisbiyadda siyaasadda<br>g. Xalinta khilaafyadda doorashooyinka<br>h. Fududeynta kor-joogista, ilaalinta iyo qiimeynta doorashooyinka<br>i. Sharciyeynta lacagaha ay isticmaalaan murashaxiinta ama xisbi marka ay doorasho jirto<br>j. Sameynta hab dhaqanka murashaxiinta iyo xisbiyadda doorashooyinka<br>k. Ilaalinta in lagu dhaqmo sharciyadda magacaabista murashaxiinta ee xisbiyadda siyaasadeed<br>l. Waci gelinta cod-bixiyayaasha | 2. Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaaranka waxaa xilkiisa iyo waajibaadkiisa ka mid ah:<br>a. In uu maamulo, la socdo, xaqiijiyo habsami u socodka, xalaalnimada iyo hufnaanta Doorashooyinka Qaranka iyo in uu ku dhawaaqo natiijada Doorashooyinka Qaranka.<br>b. In uu diyaariyo, abaabulo, fududeeyo, qabto doorashooyinka Guud ee Madaxweynaha iyo Baarlamaanka Federaalka.<br>c. In uu si joogta ah u diiwaangeliyo codbixiyeyaasha doorashooyinka Baarlamaanka ee heer qaran.<br>d. In uu si joogta ah u diiwaangeliyo axsaabta siyaasadeed iyo musharxiinta doorashooyinka Guud ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.<br>e. In uu sooh-dimeeyo, asteeyo deegaan-doorashooyinka iyo goobaha codbixinta;<br>f. In uu dejiyo hab dhaqanka doorashooyinka ee musharixiinta iyo axsaabta siyaasadda ee doorashooyinka Guud ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;<br>g. In uu diyaariyo, maamulana warqadaha codeynta, sanaadiiqda iyo xarumaha codaynta;<br>h. In uu qabto hawl kasta ee kale uu tilmaamay Dastuurka ama shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | *Faqradaan waxaa loo qoray hab qanuuni ah, waxaa kale oo lagu sameeyay kaabid, kordhin iyo siiqeyn hase keliya waxaa laga tiray Xarafka (a) maadaama Madaxweyanaha ay si toos u dooranayaan Baarlamaanku.* |
| (3) Baarlamaanka Federaaalka waa inuu sameeyaa Guddiga Qaranka ee Madaxbanaan ee Doorashooyinka iyo sharciyadda loo baahan | | *Qodobka 121 ee wax ka bedelka Dastuurka ee ka hadlaya mabaadi'da guud ayaa lagu* |

| | | |
|---|---|---|
| yahay inay taageeraan iyagoo siinaya ahmiyadda koowaad. | | *caddeeyay in keliya guddi madaxbannaan lagu dhisi karo xeer uu ansixiyo BFS.* |
| Qodobka 111H: Guddiga Ammaanka Qaranka | | |
| (1) Guddi Amaanka ee Qaranka waa in lagu sameeyaa sharci Federaal ah. Guddiga Amaanku ee Qarabja waa inay ka koobnaataa khubarro ka tirsan amaanka ee qaybaha oo dhan. | | *Waxaa soo jeedinayaa in guddigaan iyo guddiyo kale oo muhiim ah- haddii la arko lagama maarmaan in la soo saaro- hase yeeshee aan laga dhigin guddi madaxbannaan, waayoo amniga qaranka waxaa u xilsaaran hay'ado dowladeed, wayna adagtahay in arrimaha amniga guddiga ka madaxbannaan hay'adahaas loo sameeyo.* |
| (2) Mas'uuliyadaha Guddiga Amaanka ee Qaranku waa inuu noqdaa:<br>a. Inay darsaan oo ay sameeyaan hab isku xiran oo ah hawlwadeen shaqo kaasoo aabaaraya baahidda waqtiga la joogo iyo mustaqbalkaba ay Soomaaliya u qabto dib-u-eegista iyo kudhaqanka baarlamanka Federaalka;<br>b. Inay so bandhigaan tallooyin lagu hubsanayo in nabad geliyadda dadka la siiyo ahmiyadda koowaad iyo in la isku daro habaka shaqo ee Amaanka Qaranka;<br>c. In la sameeyo hab-shaqo oo dadweynaha amaanka ku ilaaliyaan iyo ilaalinta amaanka ee la xiriira kharajka; | | *Fiiri faalada kore.* |

| | | |
|---|---|---|
| d. In la raadiyo bogsiintga gaboodfalka ay geystaan shaqaalaha amaanku. | | |
| (3) Ahmiyadda ugu horeysa waa inay ka koobnaataa:<br>a. Burcad Badeedda;<br>b. Ka saaridda ciidan ee kooxaha hubeysan iyo bulsho ku- darkooda taasoo ay ka mid tahay in la siiyo tababaro xirfadeed iyo diyaarin waxyaalaha lagu taageerayo iyo la-tallinta dhinaca cilmiga maanka/nafisiga;<br>c. Hawlaha Boliiska<br>d. In la hubsado in maamul shacbiya lagu xakameeyo ciidammadda hubaysan. | | *Fiiri faalada kore* |
| (4) Guddiga waa inuu sameeyaa Guddi-hoosaad Ilaalinta ee Bulshada. Guddi hoosaadku waa in uu kakoobnaadaa khubarrada ammaanka, xubnaha Baarlamaanka Federaalka, aqoonyahanno iyo wakiilloka socda ururrada bulshada kuwaasoo qayb kasta Bulshada Soomaaliyeed. Mas'uuliyadda Guddi hoosaadka waa:<br>a. Inay soo bandhigaan tallooyin lagu hubsanayo in ahmiyadda koowaad la siiyo amaanka dadka iyo in lagu daro nidaamka shaqada ee ammaanka qaranka;<br>b. Sameyn hab-shaqo kaasoo ay dadweynaha siiyo ilaalin guud; | | |

| | | |
|---|---|---|
| c. Ilaalinta amaanka la xiriira kharajka;<br>d. In la helo daaweynta gaboodfalka ay sameeyaa shaqaalaha amaanku. | | |
| **Qodobka 111I: Guddiga Runta iyo dib-u-heshiisiinta** | | ***Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka*** |
| (1) Waa in la sameeyaa Guddiga Runta iyo dib-u-heshiisiinta si loo helo qaran bogsoon, heshiisya oo mideysan si loo sugo in arrimaha la xiiriira in aan denbi laysu qabsan, aargoosiga iyo kuwa kale ee colaaddaabuura in xal loo helo iyadoo la raacayo hab Dawladeed oo sharciyeysan. | | *Waxaan soo jeedinaynaa in la laalo qodobkaan, Sababta loo tiray waxay tahay iyadoo dib-u-heshiisiinta loo arkay mudnaanta koowaad ee Qaranka ee xukuumad kasta iyo guud ahaan dadweynaha Soomaaliyeed, sidaas darteed ma haboona in arrintaan muhiim ka ah la hoosgeeyo guddi gaar ah oo ay awooddiisu xadidantahay.* |
| (2) Guddigu waa inuu madax banaaanaadaa, dhexdhexaad noqdaa waa inay ku jiraan wakiiladda ay ka mid yihiin odayo dhaqameedku, iyo hogaamiyayaasha, xubnaha Baarlamaanka, xubnaha ururaddabulshada ee la ixtiraamo, garsoorayaasha iyo shaqaalaha amaanka. | | *Fiiri faalada kore* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (3) Mas'uuliyadaha Guddiga waxa ka mid ah:<br>a. Inay ka markhaati kacaan, qoraal iyo in dacwooyinka qaarkood ay cafis u fidiyaandembiilayaashas, kuwaasoo la xiriira meel ka dhaca xuquuqda aadmiga iyo toosin iyohagaajinta dembigalayaasha<br>b. Hirgelinta is-cafiska, dib-u-heshiisiinta iyo mideynta qaranka. | | *Fiiri faalada kore* |
| **Qodobka 111J: Gardoonka/Ilaaliyaha Dadweynaha** | | ***Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka*** |
| (1) Waxaa la dhisayaa xafiiska Gardoonka Dadweynaha. | | *Waxaa soo jeedinaynaa in la tiro qodobkaan maadaama fikirkaani uu yahay mid dadka Soomaaliyeed ku cusub, ilaalinta dadweynuhuna ay tahay mas'uuliyad wadareed oo laga rabo dadka iyo dowladdaba.* |
| (2) Gardoonka Dadweynuhu wuxuu u dhaqmaa sida uu qabo Dastuurkan iyo sharciga oo keliya.<br>a. Waa in xubin ka tirsan Golaha Wasiirrada, Sharci-dejinta ama qof kale aanu AdeegahaGardoonka Dadweynaha ku faragelin hawsha xafiiskaa;<br>b. Waax kasta oo ka tirsan Dawladdu waa in ay Gardoonka Dadweynaha ku siisaa gacanqabashadauu ugu baahan yahay ilaalinta madax-bannaanida, sharafta iyo wax-ku-oolnimadaGardoonka Dadweynaha. | | *Fiiri faalada kore* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (3) Isaga oo ku dhaqmaya talada Golaha Adeegga Garsoorka, Madaxweynuhu JamhuuriyaddaFederaalka Soomaaliya waa in uu magacaabaa Adeegaha Gardoonka Dadweynaha.<br>a. Guddiga Adeegga Dadweynaha waxaa uu ku talo-bixin karaa in Adeegaha GardoonkaDadweynaha loo magacaabo oo keliya qof u qalma in loo magacaabo garsoore Maxkamadda Dastuur.<br>b. Adeegaha Gardoonka Dadweynaha waxaa uu shaqeynayaa muddo xilli toddoba (7) sano ah. | | *Fiiri faalada kore* |
| (4) Faqradda (5) dhexdeeda, erayga "Sarkaal" waxaa macnihiisu u dhacayaan sarkaal la soo doortey ama la magacaabey ama qof u shaqeeya hay'ad Federaal, Dawlad-goboleed iyo Dawlad Hoose, sarkaal ka tirsan ganacsi ay leedahay ama maamusho ama gacanta ugu jira Dawladda, oo ay Dawladdu wax weyn ku leedahay, ama sarkaal ka tirsan ciidamada difaaca ama booliska, laakiin sooma hoos gelayoGarsoore Maxkamadda Dastuuriga ah, Maxkamadda Sare ama Maxkamad Sare, ama sarkiilkii kaleba intiiba ay cabashadu la xiriirto hawl garsoor. | | *Fiiri faalada kore* |
| (5) Adeegaha Gardoorka Dadweynaha waa in uu:<br>a. Baaraa cabashooyinka ku saabsan eedeyn ama xadgudub muuqda oo loo geysto xuquuqdaiyo xorriyaadka aasaasiga ah, ku-xadgudub awoodeed, hab-dhaqan caddaalad-darro, naxariisdarro, u-turid la'aan ama edeb-darro/ixtiraam la'aan ah | | *Fiiri faalada kore* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| oo qof deggan Soomaaliya uu kulakaco sarkaal Dawladda uga shaqeeya heerarkeeda kala duwan, hab-dhaqan uu ka muuqdo caddaalad darro, ama musuq-maasuq ama hab-dhaqanka sarkaalkaasi sameeyo oo bulsho dimuqraaddi ah ay si habboon ugu aragto in uu yahay mid sharci-darro, dulmi ama xaq-darroah;<br>b. Baaro cabashooyinka la xiriira hawlaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda, hay'adaha maamulka ee Dawladda, iyo ciidamada difaaca iyo booliska intiiba ay cabashadaasi la xiriirto in lagu guuldarreystey in si miisaaman loo qaabeeyo adeegyadaas ama in dhammaan dadku ay si simman shaqaale loogu qoro adeegyadaas ama si xaq ah loo maamulo adeegyadaas;<br>c. Uu qaado tallaabo habboon oo uu ku baaqo daaweynta, sixidda ama beddelidda arrimahalagu sheegey Faqradihii soo hormarey iyada oo loo marayo habab caddaalad ah sax oo kuhabboon, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobneyn:<br>i. La tashiga iyo wax isu-oggolaasho dhex mara dhinacyada ay khuseyso;<br>ii. Ka warbixinta cabashada iyo waxyaabaha uu adeegaha gardoonka dadweynaha kaogaadey arrinta, una gudbiyo madaxda qofka dembiga geystey;<br>iii. In uu arrinta u gudbiyo dacwad-oogaha guud; | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| iv. In uu arrinta hor-keeno maxkamad xarraantinimeysa hab-dhaqan aanhabbooneyn ee sarkaal;<br>v. Ama in arrin looga shakisan yahay musuqmaasuq uu u soo gudbiyo dacwad- oogaha guud. | | |
| (6) Xeer Ilaahiya Guud waa in uu sanad kasta warbixin u soo gudbiyaa Golaha Shacabka, Aqalka Sareee Baarlamaanka Federaalka ah, iyo guud ahaan dadweynaha. | | *Eeg Faallada Faqradda 1aad ee Qodobkan.* |
| **Qodobka 112aad: Magacaabidda Guddiyada Madaxbannan Heer Federaal** | | ***Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka*** |
| Haddii uusan Dastuurku si kale u dhigin, Wasiirka ay khuseyso ayaa u soo jeedinaya Golaha Wasiirrada magacyada Guddiga. Haddii Golaha Wasiiradu ay ansixiyaan, magacyada waxaa loo gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka (labada aqal) Haddii Baarlamaanka Federaalka uu ansixiyo magacyadaas, waxaa<br>loo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka, si uu magacaabistooda xeer uga soo saaro. | | *Nuxurka iyo dulucda qodobkaan waxaa loo raray Qodobka 121 ee ka hadlaya mabaadi'da Guddiyada Madaxabannaan, sidaasi darteed waxaan soo jeedinaynaa in la laalo gebi ahaantiisba.* |
| **Qodobka 113aad: Shuruucda Guddiyada Madaxa Bannaan** | | ***Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka*** |
| Shuruucda la xiriirta Guddiyada Madaxbanaan waxaa lagu soo saari doonaa Xeer gaar ah oo ay soo saaraan Golaha Shacabka ee Dawladda Federaalka Soomaaliya. | | *Waxa soo jeedinaynaa in la tirtiro qodobkaan, maadaama nuxurkiisa loo raray Qodobka 121aad ee ka hadlaya mabaadi'da guddiyada madaxabannaan iyo sida lagu dooranayo.* |
| **Qodobka 114aad: Xafiisyadda Madaxa Bannaan** | | ***Soojeedinta Wax-ka-beddelka*** |

DRAFT

| | | *Dastuurka* |
|---|---|---|
| Waxaa jiri doona Hey'ado madaxbanaan oo ay yeelanayaan Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, sida Garyaqaanka Guud, Hanti-dhowrka Guud, iyo Bangiga Dhexe oonoqonaya Heer Federaal ah. | | *Waxaan aragnaa in qodobkaan aanu ku haboonayn halkaan, waxaan so jeedinaynaa in loo raro Xafiis kasta meesha uu ku haboon, laguna faah-faahiyo cutubka loo raray.* |

## CUTUBKA 12
## SHAQAALAHA RAYIDKA EE DAWLADDA

| *ASALKA DASTUURKA* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
|---|---|---|

| CUTUBKA 11AAD: *SHAQAALAHA RAYIDKA EE DAWLADDA* | *CUTUBKA 12AAD: SHAQAALAHA RAYIDKA* | Cutubkaan waa cutubka 12aad, maadaama cutubyadu ay isbedeleen. |
|---|---|---|
| Qodobka 115aad: Qiyamka Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah | Qodobka 128aad: Hal-beegga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda | Cinwaanka qodobkaan waxaa lagu sameeyay wax ka bedel, waxaana laga dhigay "hal-beegga" halka ay marki hore ka ahaa "qiyamka", waxaa kale oo lagu kordhiyay erayga "dowladda" |
| | 1. Waa in dowladdu ilaalisaa xuquuqda shaqaalaha dowladda ee rayidka ah. | *Waafaqrad cusub oo lagu soo kordhiyay asalka Dastuurka, sababta loogu soo darayna waxay tahay in lagu adkeeyo dowladda in ay ilaaliso xuquuqda shaqaalaha u shaqeeyo.* |
| | *2.* Waa in shaqaalaha rayidka Dowladda ee u hogaansamaan, una gutaan shaqadooda si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda iyo hal-beegga anshaxa iyo akhlaaqda shaqaalaha. | *Waa faqrad cusub, waxaa si gaar ah loogu caddeynayaa in shaqaalaha in ay u gutaan waajibaada shaqo si waafaqsan xeerka shaqaalaha rayid iyo mabaadi'da iyo anshaxa shaqada,* |
| Shaqada rayidka ee heerarka kala duwan ee xukuumadda waa amaano ummadda loogu adeego waana in ay ku saleeysnaataa qiyamka Dastuurka, naxariis, daahfurnaan, u-adeegga bulshada iyo dhawrista ku kala dambeynta darajooyinka maamul, dhegonugayl, sirxajin, asluub-wanaag shaqo, howlkarnimo, waxa-ku-ool ah, mihnadyahannimo, dhawrista Mabaadi'da caadaaladda, sinnaan iyo habka xilgudashada ugu habboon. | 3. Hal-beegga iyo qiyamka shaqaalaha iyo howl-wadeennada dowladda ee rayidka ah waa in uu ku qotomaa ammaano, hufnaan, daacadnimo, isla-xisaabtan, is-qadarin, dhex-dhaxaadnimo, xifdinta sirta shaqada iyo ilaalinta xuquuqda dadka kale. | *Faqradan waxaa loo qoray hab sharci iyadoon nuxurkeeda waxba lagama bedelin, waxaana la qaabeeyay siiqadeedi.* |

| | | |
|---|---|---|
| | 4. Shaqaalaha rayidka laguma sameyn karo arimaha soo socda:<br>a. Ku xadgudub sharci darro ah asagoo gudanayo waajibaadkiisa shaqo;<br>b. Xil-ka-qaadid, ka-bedelid xafiis, darajo-dhimis haddii aysan jirin sabab maangal ah oo sharci ku dhisan;<br>c. Waa in loo maraa habraaca anshaxmarinta shaqaalaha rayidka ah hab waafaqsan xeera shaqaalaha. | *Faqraddaan waa laga soo raray qodobka 116aad ee asalka dastuurka, waxaana loo arkay in ay halkaan ku haboontahay.* |
| | 5. Shaqaalaha iyo hawlwadeennada Dawladda Federaalka iyo kuwa Dawlad Goboleedyada kama mid noqon karaan madaxda xisbiyada siyaasadda, Guddiyada doorashooyinka, waxaa kale oo ka reeban in ay u ololeeyaan murashax gaar ah waqtiyada doorashada . | *Faqradda 5aad waa nuxurka faqradaha 2, 3aad ee 118 ee salka dastuurka, waxaana loo arkay in ay halkaan ku haboontahay.* |
| | 6. Waxaa jiraya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda oo lagu asaasayo xeer u ansixyo Barlamaanka Federaalka Soomaaliya. | *Waa faqrad cusub oo lagu caddeynayo in uu jirayo guddiga shaqaalaha rayidka ah oo haddaba shaqeeyo, laguna aasaasayo xeer uu ansixiyo Baarlamaanka FS.* |
| **Qodobka 116aad: Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah** | | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| Shaqaalaha rayidka ah lagulama kici karo:<br>(1) Bahdilid waajibaadkooda shaqo ay gudanayaan awgood. | | *Waxaa la soojeediyaa in la tiro Qodobkan maadama nuxurkiisa lagu faahfaahiyay qodobka hore ee ka* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Laguma sameyn karo xilkaqaadid, lagama wareejin karo xafiiska, darajadooda hoos loomadhihi karo, inay jirto sabab maangal ah oo sharci ku dhisan. | | *hadlaya hal-beegga shaqaalaha dowladda ee rayidka ah.* |
| **Qodobka 117aad: Magacaabista Saraakiisha Darajooyinka Sare** | | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| Hawlwadeennada iyo Saraakiisaha darajooyinka sare ee Dawladda uu sharcigu tilmaamo waxaa magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, ka dib markuu arko soo jeedinta Golaha Wasiirrada. | | *Waxaa la soojeedinaynaa in la tiro Qodobkan, madaama nuxurkiisa lagu xusan Qodobka "Awoodaha Madaxweynaha" waxaana loona arkay inuu ku celcelis yahay,* |
| **Qodobka 118aad: Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha Dawladda** | | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| (1) Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha Dawladdu waxay xilkooda u gudanayaan si waafaqsan sharciga iyo danta guud oo keliya. | | *Qodobkan nuxurkiisa waxaa lagu daray qodobada hore ee wax ka bedelka dastuurka ee isla cutubkaan.* |
| (2) Hawlwadeennada iyo shaqaalaha Dawladdu kama mid noqon karaan hoggaamiyayaalka xisbiyada siyaasadda. | | |
| (3) Waa in Sharci lagu xaddidaa qaybaha shaqaalaha Dawladda ee ka reebban in ay xubno ka noqdaan axsaab siyaasadeed iyo hawlaha aan la socon karin xilalka ay hayaan. | | |
| (4) Xaaladda qaanuun ee shaqaalaha Dawladda waxaa nidaaminaya sharciga. | | |
| (5) Shaqada joogtada ah ee Dawladda, waxaa looga mid noqon karaa tartan furan oo keliya, marka laga reebo xaaladaha sharcigu tilmaamay. | | |
| **Qodobka 119aad: Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah** | **Qodobka 129aad: Shaqo Qoridda iyo Magacaabidda Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda** | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| (1) Xukuumadda Federaalka iyo Dawladaha xubinta | 1. Waxaa jiraya shaqaale rayid ah oo u | *Faqraddan waxaa lagu sameeyay* |

| | | |
|---|---|---|
| ka ah Dawladda Federaalka waxay shaqaalasanayaan hawl-wadeennadooda. | shaqeeyo dowladda federaalka iyo dowlad-goboleeyada. | *qaabayn, nuxurkeeda waxba lagama bedelin marka laga reebo erayga howl-wadeennada oo la tiray.* |
| | 2. Dowladda Federaalka waxay soo saaraysaa siyaasadda iyo hal-beegyada shaqaalaha rayidka ee dowladda ee heer federal iyo heer dowlad goboleed, kaasoo lagu salaynayo mabaadi'da iyo hal-beegyada caalamiga ah ee shaqaalaha. | *Faqraddaan waa faqradda 2aad ee Qod.119aad ee asalka dastuurka, waxaana la toosiyay siiqadeedi, iyadoo lagu kordhiyay in dowladda federaalka ay dejinayso siyaasadda iyo mabaadi'da guud ee shaqaalaha heer federal iyo heer dowlad goboleedba.* |
| (2) Waxaa jiraya Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka ah ee Heer Federaal iyo Heer Dawladaha Xubinta ka ah DawladdaFederaalka, waxaana lasoo saarayaa xeer nidaaminaya oo waafaqsan shuruucda caalamiga ah ee shaqaalaha oo ay soo saarayaan Golaha Shacabka ee Federaalka iyo golaha sharci dejinta ee Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka. | 3. Dowlad-goboleedyadu waxay dejisanayaan xeerka shaqaalaha rayidka ee dowladooda si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Federaalka Soomaaliya. | *Faqraddan waa faqradda 2aad ee Qod.119aad ee asalka dastuurka, waxaana loo qoray hab qaanuuni ah iyadoon nuxurka aan waxba laga bedelin, keliya waxaa lagu xoojiyay in sharciyadaasu waafaq-sanaadaan dastuurka iyo shuruucda federaalka.* |
| (3) Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah waxay iska kaashanayaan ka wada faa'ideysiga hawl-wadeennada heerarka kala duwan, si loo xaqiijiyo khibradda iyo waayo-aragnimadu in ay noqdaan mid laga heli karo heer kasta oo looga baahan yahay, iyada oo taasna lagu horumarinaayo midnimada qaranka. | | |
| (3) Shaqaalaha rayidka ee Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka waa inay ka muuqataa dheelitirnaan dadka wada deggan. | | *Waxaan la soo jeedinayaa in la tirtiro faqraddaan maadaama nxurkeeda lagu sheegay faqradaha hore ee isla qodobkaan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| CUTUBKA 12AAD:<br>*DAWLADAHA XUBINTA KA AH DAWLADDA FEDERAALKA* | | |
| *ASALKA DASTUURKA* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
| **Qodobka 120aad: Hay'adaha Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka** | | *Qodobada cutubakan waxaa loo rarey cutubka 5aad iyo 10aad ee qabyo qoraalka 3aad* |
| Dhismaha laamaha sharcidejinta iyo fulinta ee maamulada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waa arrimo lagu nidaaminayo Dastuurada maamul-goboleedyada. | | *Eeg faalada kore* |
| **Qodobka 121aad: Mabaadi'ida Dastuurada** | | *Eeg faalada kore* |
| Mabda'iyan waa in la iswaafajiyaa Dastuurka Dawladda Federaalka iyo Dastuurada Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | | *Eeg faalada kore* |

| | | |
|---|---|---|
| CUTUBKA 13<br>NIDAAMKA MAALIYADDA GUUD | | |
| *ASALKA DASTUURKA* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |

| CUTUBKA 13AAD: *MAALIYADDA GUUD* | CUTUBKA 13AAD: ***Nidaamka MAALIYADDA GUUD*** | Cinwaanka cutubkaan waxaa lagu kordhiyay erayga "Nidaamka" iyadoon nuxurkiisa kale aan waxba laga badelin. |
|---|---|---|
| Qodobka 122aad:<br>Mabaadii'da Maaliyadda Guud | Qodobka 130aad:<br>Mabaadii'da Maaliyadda Guud | Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka |
| Mabaadiida Guud ee Maaliyadda waxaa ka wada xaajoon doona Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ah Dawladda Federaalka si waafaqsan qaab Dastuuri ah.ax | | *QODOBADA 129 ILAA 139 WAXAA LOO BAAHANYAHAY IN AY HESHIIS KA GAARAAN DAWLADDA FS IYO DAWLAD GOBOLEEDYADA.*<br><br>*Labada Guddi qabyo-qoraalkii 1aad, kamaysa diyaarin aragti iyo soojeedin ku aadan arrimaha maamulka maaliyadda.*<br><br>***F.G:*** *SI LO SAHLO WADA-XAAJOODKA MAAMULKA IYO MAALIYADDA, GUDDIGA LA SOCODKA WUXUU U DIRAY GUDDIGA MADAXA-BANNAAN INUU KASOO DIYAARSHO ARAGTI SAHLAYSA OO LAGU DUL SHAQAYN KARO. GUDDDIGA MADAXABANNAAN MARKA UU DIYAARINAYEY QABYO QORAALKA LABAAD AYUU SOOJEEDIYAY ASAGOO LA KAASHANAYA KHUBURO IYO LA TALIYAAL CAALAMI AH SI MADAXDA FEDERAALKA IYO MADAXDA-DAWLAD GOBOLEEDYADU UGA SAMEEYAAN WADAXAAJOOD SIYAASADEED.* |
| | Qodobka 131aad: Hannaanka Qoondeynta Khayeraadka Qaranka (Criteria for determining equitable allocation of national resources) | |
| | Qodobka 132aad: Guddiga Madax-bannaan ee Wadaagga Kheyraadka (Independent Commission on Resource Sharing | |
| | Qodobka 133aad: Awoodda canshuur Soo-rogiddda (Revenue Raising powers) | |
| | Qodobka 134aad: Sanduuq Maaliyad ee Midaysan (Consolidated Revenue Fund) | |
| | Qodobka 135aad: Amaahda Dawladda (Public borrowing) | |

| | | |
|---|---|---|
| | Qodobka 136aad: Qodobka Daynta Dawladda (Public debt) | *Waxaa sidoo kale labada guddi isla garteen in lifaaq ahaan loogu daro dastuurka, maadaama uu yahay arrimaha u baahan wada xaajoodka si ay ugu sahlanaato dhinacyada gelaya wadaxaajoodka in ay wixii ka anfaca ay ka qaataan kadibna Dastuurka uu kamid noqdo.*<br><br>*Fadlan eeg lifaaqa 3aad.* |
| | Qodobka 137aad: Odorooska Miisaaniyadda Sanadle (Annual budget estimates) | |
| | Qodobka 138aad: Xeerka Qoondeeynta (Appropriation bill) | |
| | Qodobka 139aad: Xakameeyn Maaliyadeed iyo La Xisaabtanka (Financial control and accountability) | |
| | Qodobka 140aad: Iibsiga Dadweynaha iyo Ka-dhimista (Public procurement and concessions) | |
| **Qodobka 123aad:<br>Bangiga dhexe ee Federaalka** | **Qodobka 141aad: Bankiga Dhexe ee Federaalka** | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| (1) Sharci baarlammaanka Federaalku ansixiyay ayaa lagu dhisiyaa Bangiga dhexe ee Federaalka eeJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | | *Waxaa la soo jeedinayaa in la tiro faqraddaan, maadaama lagu daray qodobada ka hadlaya awoodda Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.* |
| | 1. Bankiga Dhexe ee Federaalka waa hay'ad dowladeed oo madaxbannaan lehna shakhsiyad qaanuuneed, una hogaansamaysa kaliya Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyaddda Federaalka Soomaaliya. | *Faqraddan waxaa laga soo raray faqradda 5aad ee Qod.123aad ee asalka Dastuurka waxaana loo siiqeeyey hab sharci.* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Bangiga dhexe ee Federaalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa masuul ka ah dejinta iyohirgelinta siyaasadda maaliyadda iyo lacagta, bangiyada oo dhammina waxay u hoggaansamaaan xernidaamiyayaashauu dhejiyo Bangiga Dhexe ee Federaalka. | 2. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya waxa uu leeyahay xilalka soo socda:<br>a. La talinta dowladda dhaqaalaha dalka;<br>b. Dejinta siyaasadda lacagta iyo ilaalinta keydka dahabka iyo kan lacagta adag;<br>c. Daabacaadda, soosaaridda iyo qeybinta lacagta;<br>d. Hubinta negaashaha sicirka iyo sarifka lacagaha;<br>e. Dhisidda nidaam banki oo hagaagsan;<br>f. Dejinta xeerarka lagu dhaqayo dhamaan bankiyada, xawaaladaha iyo hay'adaha maaliyadeed;<br>g. Bixinta shatiyada Bangiyada iyo xawaaladaha gaarka ah;<br>h. Bixinta ammaahda;<br>i. Horumarinta lacagta dalka ee xagga ammaahda iyo sarifki hadba ka socdo suuqyada adduunka si loo helo dhaqaalo dheelitiran;<br>j. Waa kaydka qaranka;<br>k. Qabashada howl kasta oo kale ee sharcigu u ogolaado; | Faqradda 2aad waxay ka kooban tahay faqradda (2), (3) iyo (5) ee Qod.123 ee asalka Dastuurka, waxaana loo qoray hab qaanuuni ah. |
| (3) Xilaalka ugu mudan hawlaha Bangiga Dhexe ee Federaalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyawaxa weeye:<br>a. Soo saaridda lacagta<br>b. Hubinta negaanshaha ascaarta<br>c. Negaanshaha heerka sarrifka; iyo<br>d. Nidaam bangi oo maangal ah. | | *Faqraddan waxaa loo raray Faqradda 2aad ee soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka. Eeg Faqradda 2aad ee isla Qodobkan soojeedinta dib-u-eegis iyo wax-ka-beddelka Dastuurka*. |
| (4) Siyaasadda maaliyaddu waa inay ku tiirsanaato dhaq-dhaqaaqa suuqa ee aan go'aanno maamulsaldhig looga | 3. Siyaasadda lacagta ee Bankiga Dhexe ee Federaalka waa in ay ku salaysantahay danta dhaqaalaha iyo mabaadi'da iyo hal-beegga | *Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuneed iyadoo nuxurka dib-u-habayn lagu sameeyay.* |

| | | |
|---|---|---|
| dhigin amah-bixinta. | maaliyadda qaranka. | |
| | | *Faqraddan waxaa laga soo raray Faqradda 1aad ee qodobka 140aad ee wax ka bedelka Dastuurka, iyadoo loo arkay inay tirsi ahaan halkan ku haboon tahay.* |
| (5) Bangiga Dhexe ee Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu leeyahay awood madaxbannaan oo dhammaystiran oo uu ku guto siyaasadda lacagta. | | *Faqraddan waxaa loo raray faqradaha hore ee isla qodobka 140aad ee wax ka bedelka dastuurka, s kuwaasoo si fiican loogu faahfaahiyay, lagu dhigay dhammaan xilalka muhiimka ah ee bankiga dhexe ee federaalka.* |
| (6) Bangiga Dhexe ee Federaalka waa Bangiga Keydka Qaranka. | | *Faqraddan waa la tiray, maadama nuxurka faqraddaan lagu faahfaahiyay faqradaha sare ku xusan ee isla qodobkan.* |
| **Qodobka 124aad: Sharci-dejinta Federaalka ee Arrimaha Maaliyadda** | | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka**<br>*Waxaa la soo jeediyay in qodobkan loo raro awoodaha Baarlamaanka* |
| Sharci Baarlammaanka Federaalku ansixiyo ayaa qeexaya heykal maamul-maaliyadeed oo astaamihiisu ay ka mid yihiin:<br>a. Habka loo soo bandhigo miisaaniyadda Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkada iyo Jadwalka habraaca miisaaniyad-samaynta Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayada iyo degmooyinka kaasoo ay tahay inuu ahaado mid daahfuran, la xissabtan leh, wax-ku-oolna ah. | | Waxaa la soo jeedinayaa in qodobkaan loo raro qodobada ka hadlayo awoodda baarlamaanka federaalka ee soo saarista xeerarka uu ka midka yahay kan maareynta maaliyadda iwm.<br><br>*Waxaan soo jeedinaynaa in laga tiritiro faqraddaan halkaan, maadaama khubarada iyo labada guddi isla arkeen in laga saaro* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| b. In Dawladda Federaalku uu damaanad-qaad siiso deymaha ay weydiistaan Dawlada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayada;<br>c. Habraaca Dawladdu u marayso Qandaraasyada Guud;<br>d. Baarista xisaabaadka hay'adaha aan xukuumiga ahayn ee Dawladda dhaqaale ka hela;<br>e. Tallabooyinka guud ee lagama maarmaanka u ah dhaqangelinta cutubkan | | *meeshaan laguna daro qeybta kore ee ka hadlaysaa maaliyadda guud ee ay soo diyaariyeen ICRIC iyo khubarada, labada guddina ay u arkeen sidaas.* |
| Qodobka 125aad: Kaydka Qaranka | | *Waxaa la soo jeediyay in loo raro qeybta hore ee ka hadlaysaa xisaabaadka iyo keysdka qaranka. Sidoo kale asalka dastuurka iyo waxka bedelka 1aad ee Dastuurka ee labada guddi.* |
| (1) Sharci uu ansixyo Baarlamaanka Federaalku waa in lagu dhiso hay'ad Qaran oo u adeegta kayd Qaran ahaan. Isla sharcigaasuna dejiyo hannaan sugan oo lagu hubin karo xalaalnimada dakhli xeraynta iyo kharash bixinta heer kasta ee hay'adaha Jamhuuriyadda Federaalka. Isla sharcigaasuwaa inuu ku salaysnaado nidaam xisaabtan adduun ahaan la tijaabiyay lana aqoonsanyahay oo leh halbeegyo la xariira kaydinta iyo khrajbixinta maaliyadda oo si iskumid uga dhaqangala meel walbaoo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka mid ah. | | *Waxaa la soo jeediyay in loo raro awoodda baarlamaanka, maadaama awoodda soo saarista xeerarka uu leeyahay baarlamaanku, laguna daro awoodahaas.* |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Hay'adda Kaydka Qaranku waa inuu hubiso uhoggaansanaanta mabda'a ku xusan Farqadda (1), waa inay ka joojiso xawilladaha lacageed qayb kasta oo Dawladda ka mid ah oo xadgubyo culus geysataama si isdabajoog ah u garab marta sharciga Kaydka Qaranka. | | *Waxaa soo jeedinaynaa in la tiro sabab lamid ah kuwa kor lagu sheegay.* |
| | **Qodob 142aad: Hanti-dhowrka Guud ee Federaalka** | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka, waxaa cinwaanka qodobka lagu daray erayka federaalka** |
| | 1. Hanti-dhowrka Guud waa hay'ad madaxbannaan oo leh shakhsiyad qaanuuneed, una hogaansameysa keliya Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Xafiiska Hanti-dhowrka guud waxa uu ka mid yahay xafiisyada madaxabannaan ee loogu sheegay Qod.114aad ee asalka Dastuurka, waxaana loo arkay in laga dhigo qodob gaar ah, si qumanna loogu faahfaahiyo looguna nidaamiyo Dastuurka, maadaama uu ahmiyad gaar ah u leeyahay qaranka isla markaana uu yahay mid aad muhiim u ah.* |
| | 2. Xafiiska Hantidhawrka Guud waa hay'adda ugu sarreysa hanti-dhawrka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Fiiri faqradda 1aad ee wax ka bedelka dastuurka.* |
| | 3. Hanti-dhowrka Guud wuxuu baaraa, kana warbixiyaa hantida qaranka, xisaabaadka, qoraalada iyo maareeynta maaliyadda ee la xiriira:<br>a. Hay'adaha Dawladda Federaalka;<br>b. Hay'adaha Dowladaha Xubinta ka ah | *Fiiri faqradda 1aad ee wax ka bedelka dastuurka.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | Federaalka;<br>c. Hay'adaha Dawladaha Hoose;<br>d. Hay'ad kasta oo kale ee hesha maaliyad guud; | |
| | 4. Warbixinadda Hanti-dhowrka ee ku xusan Faqrada (2) ee Qodobkan waxaa loo gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka ama Golaha xeer Dejinta ee Dawlad-goboleedka ay khuseyso; | *Fiiri faqradda 1aad ee wax ka bedelka dastuurka.* |
| | 5. Hanti-dhowrka guud waxaa lagu magacaabayaa habraaca soo socda:<br>a. Golaha Wasiirada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa soojeedinaya musharaxa jagada Hanti-dhowraha guud; waxayna u gudbinayaan Baarlamaanka Federaalka;<br>b. Gole kaste ee Baarlamaanka Federaalka ayaa codka aqlabiyadda hal-dheeri (50+1) ku ansixinaya ama ku diidaya musharraxa la soo jeediyay. | *Fiiri faqradda 1aad ee wax ka bedelka dastuurka.* |
| | 6. Marka Labada Gole ee Baarlamaanku ansixiyaan musharraxa, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ayaa si rasmi ah xeer Madaxweyne ugu meelmarinaya magacaabista ugu badnaan soddon (30) maalmood gudahood. | *Fiiri faqradda 1aad ee wax ka bedelka dastuurka* |
| | 7. Hanti-dhowrka guud ayaa xilka haynaya hal xilli oo shan (5) sano ah oo hal mar la cusbooneysiin karo. | *Fiiri faqradda 1aad ee wax ka bedelka dastuurka.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 8. Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka waxaa xilka looga qaadi karaa oo keliya habraac la mid ah kan lagu soo magacaabay. | *Fiiri faqradda 1aad ee wax ka bedelka dastuurka.* |
| | 9. Hanti-dhowraha Guud ee Qaranku waa in uu noqdaa qof leh sumcad wanaagsan, haysta shahaado Jaamaceed oo la xiriirta maaliyadda ama xisaabaadka, u lehna khibrad ugu yaraan 10 sano howlaha hanti-dhowrka, buuxiyana shuruudaha kale ee ku xusan xeerarka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Fiiri faqradda 1aad ee wax ka bedelka dastuurka.* |

DRAFT

## CUTUBKA 14AAD
## DIFAACA IYO AMNIGA

| *ASALKA DASTUURKA* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
|---|---|---|

| CUTUBKA 14AAD: NABADDA IYO AMNIGA | CUTUBKA 14AAD: DIFAACA IYO AMNIGA QARANKA | *F.G: Cinwaanka "Nabadda Iyo Amniga" waxaa lagu bedelay "Amniga iyo Difaaca Qaranka"* |
|---|---|---|
| **Qodobka 126aad: Suggidda Amniga Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 143aad: Ciidamadda Amniga iyo Difaaca** | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| (1) Xukuumadda Federaalku waxay damaanad-qaadaysaa nabadda, gobannimada iyo ammaanka qarankaee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo bedbaadinta shacbigeeda, iyadoo la adeegsanaayo adeegyada ciidammada amniga oo ay ku jiraan:<br>a. Ciidanka xoogga dalka;<br>b. Nabadsugidda;<br>c. Ciidanka booliska;<br>d. Ciidamada Asluubta | 1. Ciidamada qalabka sida ee Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo kala ah:<br>a. Ciidanka Xoogga Dalka;<br>b. Ciidanka Booliska;<br>c. Ciidanka Asluubta; iyo<br>d. Hay'adda Nabadsugidda Qaranka; | Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah, waxaana lagu sameeyay kala hor marin iyo qaabayn iyadoon nuxurka waxba laga bedelin. |
| (2) Adeegsiga ciidamada amniga waxaa lagu suggaya sharciga loo dejiyey. | | |

| | | |
|---|---|---|
| (3) Ciidammada qalabka sida ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa xil ka saaran yahay ilaalinta gobannimada iyo madaxbannaanida Dalka iyo difaaca midnimada dhuleed. | 2. Ciidamada qalabka sida waxay u xilsaaran yihiin damaanad-qaadidda nabadda, ammaanka, gobannimada, midnimada qaranka, badbaadinta shacabka, ilaalinta sirta Qaranka iyo difaacidda Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 1aad iyo 2aad ee Qodobka 126aad ee asalka Dastuurka ayaa la mideeyay kadibna loo qeybiyay laba faqradood, iyadoo siiqadooda wax laga bedelay. |
| (4) Booliska Federaalka xilkiisu waa ilaalinta nolosha iyo hantida, ammaanka iyo nabadgelyadaMuwaaddiniinta iyo dadka kale ee deggan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | 3. Taliska ciidamada qalabka sida wuxuu hoos tagayaa dowladda rayidka ah ee shacabku soo doortay. | Waxaa laga soo raray faqradda 6aad ee Qod.126aad ee asalka Dastuurka, waxaana loo arkay in ay halkaan ku haboontahay. |
| (5) Ciidanka booliska ee lagu abuuray sharciyada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayadaxilkiisu waa ilaalinta nolosha iyo hantida muwaaddiniinta iyo dhawrista xasilloonida iyo ammaanka degaannadooda iyagoo kaligood ah ama kaashanaya ciidammada booliska federaalka. | 4. Waxaa ka reeban cid kasta, koox, hay'ad ama xisbi in uu abuuro koox hubaysan, ama aan hubaysnayn ee leh astaan ciidan. | Faqraddaan waa mid cusub waxaana lagu caddeynayaa in ay reeban tahay in aan la ogolayn ciidan aan ka ahayn kan lagu sheegay Dastuurka iyo xeerarka Dalka. |
| (6) Hay'adaha amniga qaranka oo ah kuwa hubka sita waxaa kormeeraya oo koontaroolaya hay'adaha rayid ah. | 5. | |

DRAFT

| | Qodob 144aad: Ciidamada Xoogga Dalka | Waxaa la soo jeediyay in qodob gaar ah laga dhigo ciidamada xoogga dalka, waxaana lagu sheegayaa halkaan awoodda ciidama xoogga dalka iyo qeybaha ay kala yihiin. |
|---|---|---|
| | 1. Ciidanka Xooga Dalka waa mid wuxuu ka kooban yahay ciidanka dhulka, badda iyo cirka. | Waxaa laga soo raray faqradda 1aad ee qodobka 126aad, waxaana lagu daray nuucyada ciidamada qalabka sida ee dalka. |
| | 2. Ciidanka Xoogga dalku waxa uu u xilsaaran-yihiin:<br>a. Difaacidda dalka;<br>b. Ilaalinta madaxbannaanida iyo midnimada qaranka;<br>c. Badbaadinta iyo gurmadka dadka ee xaaladaha masiibooyinka dabiiciga;<br>d. Gacan siinta ciidanka Booliska marka ay jiraan xaalado deg-deg ah ama xaalad dagaal si loo ilaaliyo amniga dadka iyo hantida dalka si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Waa faqradda 3aad ee Qod.126aad ee asalka Dastuurka oo lagu sameeyay faah faahin dheeri ah iyadoo si gaar ah qodob cusub loogu nidaamiyay ciidanka xoogga Dalka. |
| | 3. Dowladda Federaalka oo keliya ayaa leh ciidanka xoogga Dalka, hogaaminta, tababarka iyo maamulkiisa ayadey u gaar tahay. | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 4. Waxaa jiraya Golaha Difaaca Qaranka oo kala taliya dowladda federaalka:<br>a. Waxay falanqeyaan xaaladaha amniga gudaha iyo dibadda Dalka, kadibna waxay talooyinka hortabinta leh u gudbiyaan xukuumadda;<br>b. Waxay aragti ka siiyaan dowladda hannaanka isku xirka iyo wada shaqeynta hay'adaha amniga iyo ciidamada difaaca;<br>c. Waxay diyaariyaan istaraatiijiyadda dhisidda, qalabaynta, tababaridda iyo horumarina ciidamada qalabka sida ee Dalka;<br>d. Waxay ka talo bixiyaan fulinta istaatiijiyadaha iyo qorshooyinka diffaaca iyo amniga qaranka ee u degsan dowladda. | *Waa faqrad cusub oo lagu soo kordhiyay wax ka bedelka, waxaana lagu nidamainaya golaha difaaca qaranka.* |
| | 5. Golaha Difaaca Qaranka wuxuu ka kooban yahay:<br>a. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo ah Guddoomiye, waxaana guddoomiye ku xigeen ah Wasiirka gaashaandhigga;<br>b. Wasiirada gaashaandhigga, Amniga, Arrimaha Dibadda iyo Maaliyadda;<br>c. Taliyeyaasha Ciidamada Xoogga Dalka iyo Booliiska Federaalka;<br>d. Agaasimaha hay'adda nabadsugidda qaranka;<br>e. Labo xubnood oo khubaro ah oo uu soo magacaabo Madaxweynaha JFS lehna aqoon iyo waayo aragnimo dheereed ah oo la xiriirta arrimaha aminiga iyo | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | difaaca. | |
| | **Qodob 145aad: Ciidamada Booliiska** | Waxaa la soo jeediyay in qodobka gaar ah lagu nidaamiyo awoodda ciidamada Booliska ee lagu tilaamay Qodobka 126aad ee asalka Dastuurka. |
| | 1. Ciidanka Booliska Federaalka oo hoos-imaanaya Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, xilkiisuna yahay:<br>a) Dabagalka, baarista iyo ka- hortagga dambiyada;<br>b) ilaalinta nolosha muwaadiniinta iyo dadka kale ee deggan Jamhuuriyadda;<br>c) ilaalinta ammaanka iyo nabadgelinta hantida muwaadiniinta iyo dadka deggan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>d) ka-hortagga falalka argaggaxisannimada, burcadbadeedda iyo tahriibinta sharcidarrada ah iyo dembiyada abaabulan;<br>e) ka hortagga iyo ciribtirka dhammaan dembiyada abaabulan, daraagoda iyo mukhaadaraadka kale ee dhibaatada ku ah nolosha iyo badqabka dadka;<br>f) ka hortagga dembiyada ka dhaca xeebaha, garoomada, dekadaha iyo xuduudaha;<br>g) fulinta go'aannada iyo amarrada hay'adaha garsoorka. | Waxaa halkaan lagu nidaamiyay faqradda 4aad ee qodobka 126aad ee asalka Dastuurka, maadaama la qaatay in qodobka gaar ah lagu faahfaahiyo awoodda Booliiska, laguna sameeyay kaabid iyo toosin. |



DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 2. Waxaa jira Ciidanka Booliiska Dowlad goboleedka oo lagu abuurayo sharciga dowlad goboleedka, xilkiisuna yahay:<br>a. Dabagalka, baarista iyo ka- hortagga dambiyada ka dhaca xuduudda dowlad goboleedka;<br>b. Ilaalinta nolosha iyo hantida muwaaddiniinta iyo dhawridda xasilloonida iyo ammaanka degaannadooda iyagoo kaligood ah ama kaashanaya ciidammada booliska ee federaalka; | Waxaa lami deeyay nuxurka faqradaha 1, 5aad ee Qod.126aad ee asalka Dastuurka, waxaana lagu sameeyay kaabis iyo ku daris waafaqsan nuxurka asalka. |
| | 3. Booliska federaalku waxay ka hawl-gelayaan dalka oo dhan; ayagoo iskaashi dhow la samaynaya Booliska dawlad-goboleedyada. | Waa faqrad cusub oo lagu caddeynayo in booliiska federaalku in uu ka howl-geli karo isagii iskaashi dhowr la yeelanayo booliiska dowlad goboleedka. |
| | 4. Xukuumadda Federaalka ayaa dejinaysa, siyaasadda guud, halbeegyada, qaabdhismeedka, qorista, xilalka, dallacsiinta, dhimista garaaddada, howl-gabnimada iyo habraacyada kale ee dhammaan ciidanka Booliiska ee heer federaal, waxaana lagu soo saarayaa xeer uu ansixiyo Baarlamanka Federaalka Soomaaliya; | Waa faqrad cusub oo lagu nidamainayo in dowladda federaalku ay yeelanayso siyaasadda iyo halbeegyada nidaaminaya qaabdhismeedka booliiska dalka oo dhan. |
| | 5. Xeerka Dowlad Goboleedka waa in uu xaqiijiyaa nidaaminta booliska dawlad-goboleedyada heer u dhigma midka loo isticmaalay nidaaminta booliska federaalka, iyo in ay xaqiijiyaan inay nidaamintaasu waafaqasan tahay mabaadi'da ku xusan faqradda hore ee isla qodobkaan iyo si | Waa faqrad cusub waxaa lagu nidaamiyay in xeerarka dowlad goboleedku aanay khilaafin siyaasadda, halbeegga iyo dastuurka iyo xeerka federaalka. |

| | | |
|---|---|---|
| | waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Federaalka. | |
| | **Qodobka 146aad: Ciidanka Asluubta** | Waxaa la soo jeediyay in qodobka gaar ah lagu nidaamiyo awoodda ciidamada Asluubta ee lagu tilaamay Qodobka 126aad ee asalka Dastuurka. |
| | 1. Ciidanka Asluubta Federaalka oo u xilsaaran ilaalinta, maamulidda, sugidda amniga Xabsiyada, fulinta adeegyada dhaqan-celinta iyo daryeelka maxaabiista. | Waa faqrad cusub oo lagu nidaaminayo awoodda iyo shaqada ciidaanka Asluubta Federaalka. |
| | a. Ciidanka Asluubta Dawlad-goboleedka oo u xilsaaran ilaalinta, maamulidda, sugidda amniga, fulinta adeegyada dhaqan-celinta iyo daryeelka maxaabiista maxaabiista ku jirta xabsiyada Dowlad-Goboleedka iyo xarumaha asluubta. | |
| | b. Xabsiyada Dawladda Federaalka waxay lagu xirayaa, laguna haynayaan maxaabiista ku xukuman dambiyada federaal si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee federaalka. | Waa faqrad cusub oo lagu soo kordhiyay asalka, waxaana lagu tilmaamayaa in xabsiga federaalka lagu haynayo maxaabiista gelay dembiyada federaalka. |
| | c. Xabsiyada Dowlad-Goboleedka waxaa lagu xirayaa, laguna haynayaa maxaabiista ku xukuman dembiyada dhaca awoodda xeerka dowlad goboleedka si waafaqsan Dastuurka, xeerka federaalka iyo xeerka dowlad goboleedka. | Waa faqrad cusub oo lagu nidaaminayo xabsiyada dowlad goboleedka iyo dadka lagu xirayo oo ah maxaabiista u xiran dembiyada ku cad xeerar dowlad goboleedka. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | 2. Xukuumadda Federaalka ayaa dejinaysaa xeerka, siyaasadda guud, halbeegyada, qaabdhismeedka, qorista, xilalka, dalacsiinta, dhimista garaaddada, howl-gabnimada iyo habraacyada kale ee dhammaan ciidanka asluubta ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed; | Waa faqrad cusub oo dhigaysa dejinta mabaad'ida iyo xeerar la xiriira. |
| | 3. Xeerka Dowlad Goboleedka waa in uu xaqiijiyaa nidaaminta Asluubta dawlad-goboleedyada heer u dhigma midka loo isticmaalay nidaaminta Asluubta federaalka, iyo in ay xaqiijiyaan inay nidaamintaasu waafaqasan tahay mabaadi'da ku xusan faqradda hore ee isla qodobkaan iyo si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Federaalka. | |
| | **Qodobka 147aad: Hay'adda Nabad-sugidda Qaranka** | Waxaa la soo jeediyay in qodobka gaar ah lagu nidaamiyo shaqada hay'adda nabad-sugidda ee lagu tilaamay Qodobka 126aad ee asalka Dastuurka. |
| | 1. Hay'adda Nabad-sugidda Qaranka oo u xil-saaran:<br>a. uruurinta iyo falan-qaynta xogaha sirta ah ee wax-tarka u leh amniga qaranka, ciidamada iyo ujeedooyinka siyaasadda dibadda dalka;<br>b. samaynta cilmibarisyo la xiriiro amniga iyo nabadgalyada qaranka;<br>c. kala talinta Dowladda Federaalka Soomaaliya arrimaha la xiriira amniga iyo nabadgalyada guud ee qaranka; | Hay'adda Nabad-sugidda Qaranku waxay u xil-saaran-tahay uruurinta iyo falan-qaynta, xogaha sirta ah ee wax-tarka u leh amniga qaranka, ciidamada iyo ujeedooyinka siyaasadda dibadda dalka. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | d. ka hortagidda cid kasta ama koox kasta oo isku daydo faldambiyeed lid ku amniga qaranka ama afgembi ama ku xadgudub sharci darro oo lid ku ah Dastuurka iyo hay'adaha dastuuriga ee dalka. | |
| | 2. Agaasimaha hay'adda nabad-sugidda waxaa soo jeedinaya Golaha Wasiirrada, waxaana ansixiya ama diidaya xubinta la soo jeedshay Baarlamaanka Federaalka soomaaliya, waxaa xubinta degreeto ku meel-marinayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya. | Waa faqrad cusub oo lagu nidaaminaya habraaca magacaabista agaasimaha hay'adda nabadsugidda qaranka. |
| | | Waxaa loo raray Farqadda 3aad ee Qod.143 ee wax ka bedelka Dastuurka. |
| **Qodobka 127aad: Mabaadii'da Ciidamada Amniga** | **Qodobka 148aad: Mabaadii'da Ciidamada Difaaca iyo Amniga** | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| (1) Waa in ay Ciidammada Amniga dhawraan mabaadii'da soo socota:<br>a. Mihnadda ciidannimo, anshax-wanaag iyo waddaniyad;<br>b. Dhawrista Talinta Sharciga, hay'adaha dimoqoraaddiga ah iyo xuquuqda asaasiga;<br>c. U-heellanaanta ilaalinta Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>d. Furfurnaan iyo oggolaansho laxisaabtan;<br>e. Dhexdhexaadnimo xag siyaasadeed; iyo | 1. Waa in Ciidamada Difaaca iyo Amniga ay dhowraan markey gudanayaan waajibaadkooda mabaadii'da soo socota:<br>a. Ilaalinta iyo ku dhaqanka Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>b. Dhowridda sarraynta sharciga iyo ilaalinta xuquuqda aasaasiga ee muwaadinka iyo hannaanka dowladnimo ee Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>c. Mihnadda ciidannimo, anshax-wanaag iyo waddaniyad;<br>d. Dhawridda Talinta Sharciga iyo | Faqradaan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah, waxaa sidoo kale lagu sameeyay toosin iyo kaabid. |

| | | |
|---|---|---|
| f. Xubnaha ciidanka waa in lagu tababara dhaqan gelinta Dasturkan, sharciyada dalka iyo heshiisyada caalamiga ee Jamhuriyadda Federaalka Soomaaliya ay qayb ka tahay. | hay'adaha dimoqoraaddiga ah;<br>e. Dhexdhexaadnimo xag siyaasadeed;<br>f. U-heellanaanta ilaalinta Dastuurka;<br>g. Adkaynta wadaniyadda, Isku-tiirsanaanta, istaakulaynta iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed. | |
| | 2. Xubnaha ciidanka waa in lagu tababaraa wadaniyad, asluub wanaag, tixgelinta iyo u hogaansamidda Dastuurka iyo shuruucda dalka. | Faqradaan waxaa laga soo rayay faqradda 1(f) ee Dastuurka ee isla Qodobkan. Iyadoo lagu kordhiyay ereyada "wadaniyad, tixgelinta iyo u hogaansamidda nidaamka Dastuuriga". |
| (2) Muwaadin kasta oo Soomaali waxa uu xaq u leeyahay in uu ka qayb qaato jagooyinka iyo jaranjarooyinka darajo ee Ciidammada iyada oo aan la takooreyn, iyadoo la ilaalinaaya xuquuqda haweenka ee arrintan la xiriirta. | 3. Muwaadin kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka ah wuxuu xaq u leeyahay in uu qabto jago kasta ee ciidamada amniga iyo difaaca dalka, marka uu buuxiyo shuruudaha qorista ciidamada, iyadoo ka mid noqoshadooda loo siman yahay. | Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuni ah iyadoo laga saaray erayga "takoorid" laguna bedelay "loo siman yahay". Hase ahaatee nuxurka waxba lagama bedelin. |
| | 4. Xubnaha ciidamada nabadgelyada iyo kuwa difaaca waa in lagu magacaabaa laguna dalacsiiyaa qaab ku saleysan aqoon, mudnaan iyo tartan furan. | Sababaha loogu soo kordhiyay ayaa ah dejinta mabaadi'da guud oo lagu magacaabayo laguna dalacsiinayo Ciidamadda Amniga iyo Difaaca Dalka qaybahooda kala duwan. |
| **Qodobka 128aad: Ku-tagrifalidda Awoodeed** | **Qodobka 149aad: Ku-xadgudub Awoodeed** | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| Gaboodfallada xuquuqda Aadanaha ee la tuhunsan yahay in ay xubno ka tirsan Ciidammada Amniga inay dad rayid ah ka | Gabood-fallada xuquuqda aadanaha ee la tuhunsan yahay xubno ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida inay dad rayid ah ka galeen waa in | Waxaa la qaatay asalka Dastuurka. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| galeen waa in dacwadooda lagu qaadaa Maxkamadaha rayidka ah. | dacwadooda lagu qaadaa Maxkamadaha rayidka ah. | |
| **Qodobka 129aad: Xafiiska Gardoonka** | | |
| (1) Dastuurkan wuxuu dhisayaa xafiiska Gardoonka (Ombudsman) waa hay'adaay dadweynuhu u geysan karaan cabashooyinkooda ku saabsan xadgudubyada xubno ka tirsan ciidamada and maamulka Dawladda. | | Waxaa lsoojeedinaynaa in la tiro Qodobkaan gebi ahaantiisa. |
| (2) Hay'adda Gardoonku waxay baaritaan iskeed u bilaabi kartaa haddii ay jiraan tuhummo la xariira xadgudubyo ay ciidammadu u geysteen qof and koox ka mid ah bulshada, haddii ay qanacdo inu jiro faldembiyeedna waxa ka oogi karta dacwad maxkamadda ku habboon. | | |
| (3) Sharci gaar ah ayaa xaddidi doona awoodaha iyo waajibaadka Hey'adda Gardoonka | | |
| **Qodobka 130aad: Sharciga Hay'adha Amaanka** | | |
| Labada aqal ee Baarlamaanka ayaa soo saaraya xeer maamulaya qaab dhismeedka, shaqada iyo heerarkooda (Stands) hay'daha amaanka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | | Waxaa la soo jeedinayaa in loo raro cutubka Baarlamaanka iyo Qodobada ama qodobada 53, 54 ee ka hadlaya awoodda xukuumadda federaalka. |
| **Qodobka 131aad: Xaalad Deg degga ah** | **Qodobka 150aad: Xaalad Deg-deg ah** | **Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka** |
| (1) Xaalad deg deg ah waxaa la soo rogi | 1. Xaalad degdeg ah waxaa lagu dhawaaqi karaa | Faqraddaan waxaa lagu sameeyay |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| karaa keliya haddii ay lagama-maarmaan u tahay wax ka qabashada xaalad ba'an oo ka dhalatey dagaal, weerar, fallaaganimo, kala-dambeyn la'aan, masiibo dabiici ah ama arrin kale oo deg deg ah oo ba'an. | oo keliya marka ay jirto:<br>a. Dagaal ama weerar lagu soo qaaday Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>b. Gadood, fallaaganimo, kala-dambeyn la'aan iyo rabshado;<br>c. masiibo dabiici ah;<br>d. Ama arrin kale oo deg-deg ah oo ba'an oo khatar gelinaysa ammaanka iyo jiritaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; ama xaalad guud oo culus. | qaabayn, hase yeeshee waxba lagama bedelin nuxurkeedi. |
| (2) Xaalad deg deg ah waxaa looga dhawaaqi karaa guud ahaan ama qayb ahaan dalka, laakiin waa in aanu ka badnaan inta loogu baahan yahay in wax looga qabto xaaladda. | 2. Xaalad deg-deg ah waxaa looga dhawaaqi karaa guud ahaan ama qayb kamid ah dalka, ayadoo la raacayo tallaabooyinka soo socda:<br>a. In lagu soo rogo xayiraad qaar ka mid ah xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadiniinta;<br>b. In la baabi'iyo ama la laalo awoodaha laamaha ama hay'adaha dowladda;<br>c. In la siiyo hay'adda fulinta ee Dowladda Federaalka awoodo gaar ah oo lagama maarmaan u ah xakamaynta xaaladdaas.<br>d. In loo ogolaado Ciidanka Difaaca Qaranka taageeridda tallaabooyinka booliiska ee lagu difaacayo nolosho dadka rayidka ah ama hantida guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>e. Tallaabo kasta oo kale oo loo arko inay lagama maarmaan u tahay wax ka qabashada xaaladdaas waa in ay waafaqsanaa ujeedooyinka xaalada deg | Fahamka iyo murtida faqraddaan waxba lagama bedelin, keliya siiqadeeda ayaa la toosiyay, waxaa sidoo kale lagu kordhiyay dhowr arrimood oo muhiim ah. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | dega ah. | |
| | 3. Inta lagu guda jiro xaaladda degdegga ah waxaa reeban:<br>a. Ku xadgudubka xuquuqda Dastuuriga ee lagu sheegay Dastuurka haddii xadgudubkaasi uuna u ahayn lagama-maarmaan ujeeddooyinka xakamaynta iyo xal-u-helidda xaaladda degdegga ah;<br>b. Wax ka bedelidda Dastuurka;<br>c. Laalidda ama xadidda awoodda Madaxweynaha JFS, Golaha Wasiirrada, Baarlamaanka iyo Garsoorka;<br>d. Kala dirista hay'adaha la doortay ee Dowladda;<br>e. Qabashada doorashooyin ama wax ka bedelka sharciga doorashooyinka. | Faqrad cusub |
| | 4. Madaxweynuhu waxaa uu ku dhawaaqi karaa xaalad degdeg ah marka ay u soo jeediyaan Golaha Wasiiradda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ama uu codsi uga yimaad dowlad Goboleedka | Faqrad cusub |
| (3) Madaxweynaha isaga oo tallaabadiisa ku saleynaya codsi uu u soo jeediyey Golaha Wasiirrada waxaa uu ku dhawaaqi kara xaalad deg deg ah oo lagamamaarmaan ah, taas oo markaa ka dib ay kaga doodi karaan, oo ayna ku ansaxin karaan, labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka muddo 21 maalmoodgudahood ah ka dib marka lagu dhawaaqo xaaladda. Doodaha | 5. Madaxweynaha markuu ku dhawaaqo xaalad degdeg ah, waa inuu todobo (7) maalmood gudohood u gudbiyaa Baarlamaanka Federaalka Soomaalia si looga doodaa, go'aanna looga gaaro cod aqlabiyad ee ku salaysan tirada guud ee Baarlamaanka Federaalka muddo aan ka badneyn 21 maalmood. | Faqradda 3aad ee Dastuurka waxaa loo qeybiyay labo faqradood oo kala ah Faqradda (3) iyo (4), waxaana loo qoray hab qaanuuni ah, iyadoo muddada 21ka maalmood lagu bedelay 7 maalmood, waxaana loo qeybiyay dhowr faqradood. |

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka Federaalka waxaa ay ahaanayaan kuwo aan qarsoodi ku dhicin oo dadweynaha u furan haddii aaney taasi diideynin xaaladda jirta. | | |
| (4) Baarlamaanka waa uu oggolaan karaa ama waxaa uu u kordhin karaa waqtiga isaga oo gaarsiinaya muddo aan ka badneyn saddex bilood. Haddii Baarlamaanka Federaalka uusan oggolaan ama uusan waqti ku darin xaalad deg deg ah, markaa xaaladda deg degga ah ma jireyso. | 6. Baarlamaanka Federaalka wuxuu ogolaan karaa xaladda deg-degga ah oo aan ka badnayn muddo saddex bilood. | Fiiri faallada faqradda 6aad. |
| (5) Ku-dhawaaqista xaaladda deg degga ah waxaa ay laanta fulinta siin kartaa awoodo gaar ah oo loogu baahan yahay wax ka qabashada xaaladda oo keliya. | 7. Hadiise ay baahi timaado, xukuumadda waxay Baarlamaanka ka codsan kartaa muddo kordhin aan ka badanayn seddex bilood, waana inay ogoladaan 2/3 tirada guud ee xildhibaanada Barlamaanka Federaalka Soomaaliya. | Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuneed iyadoo nuxurka waxba laga bedelin. |
| (6) Awoodaha lagu bixiyo xaaladda deg degga ah gudaheeda kuma jirayaan awoodo loogu xadgudbayo xuquuqaha ku jira dastuurkan, haddii xadgudubkaasi aanu gebi ahaanba lagamamaarmaan u ahayn ujeeddooyinka wax ka qabashada xaaladda deg degga ah. | 8. Haddii Baarlamaanku uu diido muddo kordhinta xaaladda deg-degga ah, waxaa istaageysa sii-socoshada xaaladda degdegga, mana yeelaneyso raad sharci ah. | Fiiri faallada faqradda 6aad |
| (7) Saxnaanta ku-dhawaaqista xaaladda deg degga ah, iyo habraacyada loo maro ku dhawaaqista, waxaa lala tiigsan karaa maxkamad. | 9. Duridda sharciyadda ku-dhawaaqidda xaaladda degdegga ah iyo habraacyada loo maray ama ku sargo'naashaha ama u dhigmidda inta loo baahan yahay in lagu xalliyo xaaladdaas, waxaa la horgeyn karaa | Faqraddan waxaa loo qoray hab qaanuuneed waxaana lagu kordhiyay in sharciyadda ama u dhigmidda xaaladda lala aadayo maxkamadda dastuurka. |

| | | |
|---|---|---|
| | oo kaliya Maxkamadda Dastuurka. | |

CUTUBKA 15AAD
XEER-DHAQAMEEDKA

| | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
|---|---|---|
| | *Cutubka 15aad: Xeer-dhaqameedka* | *Cutub cusub: nidaaminaya xeer-dhaqameedka.* |
| | Qodobka 151aad: Aqoonsiga Xeer- dhaqameedka | |
| | Xeer-dhaqameedka aan ka hor imaanayn shareecada islaamka, Dastuurka iyo xeerarka Federaalka waa inay aqoonsadaan dhammaan hay'adaha dowladda ee heer Federaal iyo heer dowlad-goboleed. | |
| | Qodobka 152aad: Go'aanada Hogaanka Dhaqanka | |
| | 1. Go'aanada iyo heshiisyada ay gaaraan dhaqanka la aqoonsanyahay waa in hay'adaha awood u leh ay dhaqn-galiyaan haddii uusan ka hor imaanayn shareecada islaamka, Dastuurka iyo xeerarka Dalka. | |

| | | |
|---|---|---|
| | 2. Go'aan kasta iyo heshiis kasta waa in laga diiwaan galiyaa Maxkamadda awoodda u leh. | |
| | **Qodobka 153aad: Hogaanka Dhaqanka** | |
| | 1. Hogaanka dhaqanka ee ka diiwaangashan hay'adda ay khuseeyso waxay ka qayb-qaadan karaan dib-u-heshiisiin iyo nabadeynta ee aan ka hor imaanayn Xeerarka dalka. | |
| | 2. Hoganka dhaqanka kama qayb-qaadan karaan arrimaha wax u dhimaya dhex-dhexaadnimadiisa. | |
| CUTUBKA 16AAD<br>QODOBO GUUD | | |

DRAFT

| *ASALKA DASTUURKA* | *Soojeedinta Qabyo-qoraalka 3aad ee Wax-ka beddelka Dastuurka uu soo gudbiyey GMDHD uuna ansixiyey Guddiga La-socodka ee BFS* | *FAALO: Sababaha soojeedinta Wax-ka-beddelka* |
|---|---|---|
| *CUTUBKA 15AAD:*<br><br>*QODOBBADA KAMA DAMBYSTA AH IYO KUWA-KU-MEEL-GAARKA AH* | *CUTUBKA 16AAD: QODOBO GUUD* | *waanka cutubkaan waxaa lagu eyay wax ka bedel, waxaana laga ay Qodobo guud halki uu ka ahaa dobada kama dambaysta ah iyo kuwa ku meel gaarka ah.* |
| | Madaxa koowaad: Wax-ka beddelka Dastuurka | *Waa asalkii Dastuurka* |
| Qodobka 132aad : Qodobada ku dabaqma wax-ka-beddelka Dastuurka ee lasoo jeediyay dhammaadka xilliga koowaad ee Baarlamanka Federaalka | Qodobka 154aad: Wax-ka-bedelka<br><br>Ama Kabidda Dastuurka | Waxaa qodobkaan si faahfaahsan loogu dhigay habraaca wax ka bedelka Dastuurka, cidda soo jedinaysaa, habraaca looga doodayo iyo sida loo ansixinayo iyo cidda leh ansixinta wax ka belidda iyo kaabidda qodob ama qodobada Dastuurka. |
| (1) Marka laga soo tago faqradda (2), ka hor ama ka damba inta aanu dhammaan muddo xileedka koowaad ee Baarlamanka Federaalka, Midkoodna Labada aqal ee Baarlamaanka ma soo jeedin karo wax-ka-beddelka Mabaadi'da aasaasiga ah ee ku xusan cutubka 1aad ee dastuurkan, | 1. Wax-ka-bedelka ama kaabidda Dastuurka waxaa soo jeedin kara:<br>a. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>b. Saddex Meelood meel (1/3) tirada Guud ee xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka;<br>c. Saddex Meelood Meel (1/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka;<br>d. Ugu yaraan mid ka mid ah Dowlad- | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |

| | | |
| --- | --- | --- |
| | gobleedka;<br>e. Codsi ay saxiixeen ugu yaraan 50,000 codbixiyaal diiwaangashan ee Jamhuuriyadda Federal Soomaaliya. | |
| | 2. Waxaa waajib ah in soo jeedinta wax ka bedelka ama kaabidda Dastuurku ay sababaysan tahay isla-markaana ay saxiixaan dhinacyada soo gudbiyay. | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| | 3. Wax-ka-beddelka ama kaabidda qodob ama qodobada Dastuurka ee ay soo jeediyeen dowlad-goboleedyada inta aan la horgayn Baarlamaanka Federaalka waa in marka hore la soo marsiiyaa Goleyaasha Wakiilada Dawlad Goboleedyada soo jeediyay ayna ku ogolaadaan soo jeedintaas boqolkiiba konton hal dheeri (50%+1). | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| | 4. Lama oggola wax-ka-beddelid kasta oo la soo jeediya ee la xiriira mabaadi'da asaasiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sida ku cad Qodobbada (1), (2), (3) iyo (4) ee Dastuurka Federaalka. | |
| | 5. Waa in Gole kasta oo ka tirsan labada Gole ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya uu ku ansixiyaa soojeedinta wax ka beddelka Dastuurka boqolkiiba konton hal dheeri (50%+1) ee Aqal kasta inta aan la bilaabin | *Waa faqrad cusub oo lagu kordhiyay.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | doodda wax-ka-beddelka Dastuurka. | |
| | 6. Wax ka beddelka qodob ama qodobada Dastuurka waxay ku meel-maraysaa, marka uu gole kasta ku ansaxiyo seddex meelood labo meel (2/3) codka xubnihiisa. | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| | 7. Haddii Baarlamaanka Federaalka uu laalo soo jeedinta wax ka beddelka ama kaabidda Dastuurka, waxaa reeban in soo jeedintaas dib loogu soo celiyo ilaa ay ka soo wareegto muddo hal sano iyo bar ah. | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| | 8. Marka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalku uu ansixiyo soojeedinta wax ka beddelka ama kaabidda Dastuurka ayna Maxkamadda Dastuurka xaqiijiso ansaxnimada wax ka beddelka Dastuurka, waxaa xeer Madaxweyne ku soo saaraya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (2) Iyadoo shardi ahaan la eegayo Qodobka 1aad, isla markaana laga reebayo wixii isbeddel ah ee lagu sameynayo xuduudaha maamul goboleedyada marka la eego qodobka 49aad, Aqal ka mid ah Baarlamaanka Federaalku waxaa uu soo jeedin karaa wax-ka-beddelka Dastuurka habka ee ku sugan qodob hoosaadyada iyadoo la | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| raacayo nidaamka ay dhigayaan faracyada Qodobbada (3) ilaa (9). | | |
| (3) Dawladda Federaalka ama tan gobolada, xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka ama codsi ay saxiixeen ugu yaraan 40,000 oo muwaadiniin ah ayaa lagu bilaabi karaa habraaca wax-ka-beddelka . | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (4) Cidda u doodeysa wax-ka-beddelka Dastuurka hab waafaqsan faqradka (2) waxay soo jeedin karaan nooca wax-ka-beddelka ay rabaan iyaga oo hor keenaya mid ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan iyo faqradaha hore.* |
| (5) Haddii badiba xubnaha aqalka wax-ka-beddelka la soo jeediyay ee Dastuurka la horkeenaya ay aqbalaan wax-ka-beddelkaas marka koowaad ama marka xigta ee ay akhriyaan, guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamanka Federaalka ee Soomaaliya waxa uu mid kasta magacaabayaa 10 xubnood oo aqalkiisa ka tirsan oo ka mid noqdaguddi wadajir ah oo ka kooban labada aqal. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan iyo faqradaha kale.* |
| (6) Guddiga wadajirka ah ee lagu magacaabay hab waafaqsan faqradda 5 | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| waxay:<br><br>a. Dib-u-eegis ku samayn doonaan soo jeedinta ku saabsan wax-ka-beddelka;<br><br>b. Dadka ku wargalin doonaan soo jeedinta;<br><br>c. Hubin doonaan in ay jirto fursad dad weyne oo ku filan in lagaga doodo;<br><br>d. La tashan doonaan xubnaha dadwaynaha;<br><br>e. Hubin doonaan in xubnaha dadwaynuhu helaan fursad ku filan oo ay ugu soo bandhigi karaan faalooyinkooda iyo soo jeedinahooda guddiga wadajirka ah; iyo<br><br>f. Kala shaqeyn doonaan sharci-dejinta maamul goboleedyada xubnaha ka ah federaalka iyo in lagu daro wixii maamul goboleedyadu soo gudbiyeen oo la is-waafajiyay soo jeedinta wax-ka-beddelka, goorta arrini taabanayso danaha gobolka. | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (7) Laba bilood gudahood markii la magacaabay, guddiga wadajirka ahi waxay warbixin u gudbin doonaan midkasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (8) Baarlamaanka Federaalku waxaa uu aqbalayaa wax-ka-beddelka la soo jeediyay kaliya intii lagu ansixiyay cod kama danbaysa ka dib codkaasoo ay u qaadeen ugu yaraan sadex meelood laba meelood xubnaha jira aqalka shacabka, iyo cod kama dambays ah oo ay u qaadeen ugu yaraan sadex meelood laba meelood xubnaha jira ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (9) (Aqalka Baarlamaanka, waxa uu cod kama dambays ah u qaadi karaa sadex bilood iyo kabadan marka ay ka soo wareegto warbixinta Guddiga wadajirka ah sida uu dhigayo faqradda (7). | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda hore ee Qodobkan.* |
| (10) Haddii baarlamaanku ansixiyo hal iyo ka badan oo waxka beddelada la soo jeediyay ah hab waafaqsan qodobkan iyo qodobka 136 ee khuseeya dibu eegista Dastuurka kama dambaynta ah, waxa loo qaadi doonaa afti dastuurka wax-ka-beddelka lagu | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda hore ee Qodobkan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| sameeyey. | | |
| **Qodobka 133aad: Qodobada ku dabaqma wax ka badelka Dastuurka ku meel gaarka ah Jadwalka koowaad (C), ama sharci lagu xusay jadwalka koowaad (D) ee Dastuurkan ka hor inta aanay dhammaan xilliga koowaad ee Baarlamaanka Federaalka: Guddida la socodka/ kormeerka** | | **Waa la laalay qodobkaan maadaama muddadi dib u eegisti dastuurka ay dhammaatay** |
| (1) Qodobkan iyo Qodobka 134:<br>a. 'Guddiga la Socotka' waxaa loola jeedaa Guddiga ku meel gaarka ah ee dib-u-eegista iyo lasocodka hirgalinta Dastuurka;<br>b. 'Guddiga Dib-u-eegis iyo Hirgelinta' waxaa loola jeedaa Guddiga Madaxa Bannaan ee dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka ku meel gaarka ah | | Sababaha Soojeedinta ayaa ku salaysan in uu dhammaaday xilliga kowaad ee Baarlamaanka lagu doortay Dastuurka sida ku meelgaarka ah una igmanaa dib u-eegista Dastuurka ku meelgaarka ah sida awgeedna aan loo baahnayn maadaama Baarlamaankaas xilligiisa uu dhammaaday. |
| (2) Dastuurkani waxaa uu abuurayaa Guddi Lasocod kaasi oo ah Guddi ka tirsan Baarlamaanka Federaalka.<br>a. Aqal kasta oo Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ka tirsan waxaa uu u dooranayaa shan ka mid ah xubnihiisu in ay ka qayb noqdaan xubnaha Guddiga La-socodka. Intaa waxaa dheer, | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| maamul kasta oo jira qaybna ka ah Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya kaasoo u qalma in uu noqdo maamuul ka mid ah Federaal marka la fiiriyo Dastuurka Soomaaliya waxa uu soo magacaabi doonaa hal ergay oo ka socda maamulka kaasoo xubin ka noqonaya Gudida la-socodka.<br>b. Guddiga L-socodku waxay la socon doonaan, tilmaami doonnaan ansixinna doonaan hawlaha Guddiga dib-u-eegista iyo Hirgalinta, iyo, guud ahaan hirgalinta Dastuurka. | | |
| (3) Xubnaha Guddiga la-socodku waxay dooran doonaan guddoomiyahooda iyaga oo ka dooranaya xubnaha Guddiga la-socodka. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (4) Muddo aan ka badnayn bil markii Guddiga la-socodku ay doorteen Guddoomiyahooda, GuddigaLa-socodku waxay ku samaysan doonaan cod aqlabiyad ah xeerarka ay ku shaqaynayaan | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (5) Guddiga La-socodka/Kormeerka waxaa uu muddo ka dibba, uu Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta u xilsaarayaa qoris shuruuc qabyo ah oo ku saleysan baahiyaha Jadwallada Koowaad (A) iyo Koowaad (B) iyo wixii kale ee baahiyo ah ee loo arko lagama maarmaan iyada oo la raacayo natiijada ka soo baxda ansaxinta ku-meelgaarka ah e Golaha Ansixinta Dastuurka ah ee Qaran sida uu dhigayo Borotokoolka Dhisaya Golaha Ansixinta Dastuurka Qaran. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (6) Marka uu u xilsaarayo qoris hindise sharci qabyo ah ee lagu xusey faqradda (5), Guddiga Sixidda/ Kormeerka waxaa uu mashruuca mudnaan u kala siinayaa sida soo socota: Waxaa uu:<br>a. Lafagurayaa mashruuca isaga oo ka eegaya dhibaatada bulsho ee wax-ka-beddelka Dastuurka ee la soo jeediyey ama Mashruuca-sharci uu wax ka qabanayo;<br>b. Siinayaa mudnaan sare hindise sharci qabyo ah oo higsanaya in uu beddelo hab-dhaqan/ dabeecad.<br>i. Ammaanka qaranka, bedqabka dadweynaha, ilaalinta xuquuqaha Aadanaha ee aasaasiga ah, ama Deegaanka | | |

| | | |
|---|---|---|
| ii. Sinnaan la'aan dhinaca tayada nolosha ah ee qaybaha kala duwan ee dadka Soomaalida ah haysata, oo ay ka mid tahay sinnaan la'aanta dakhli, u sinnaan la'aanta daryeelka caafimaadka, iyo u sinnaan la'aanta waxbarashada;<br>iii. Horumarka dhaqaale, oo ay ka mid tahay helidda shaqooyin, hubinta in qayb caddaalad ku dhisan oo ka mid ah faa'iidada ay helaan maalgeliyeyaasha ajnebiga ah dib loogu maalgeliyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo hubinta in Muwaadiniinta Soomaaliyeed ay helaan aqoonta ku saabsan, ayna helaan shaqooyin la xiriira adeegsiga tiknolojiyada cusub, iyo<br>iv. In maaliyadda ummadda laga ilaaliyo musuq-maasuq iyo si xun u adeegsi.<br>c. Siinayaa mudnaan tan ka yar mashaariicda ku saabsan dhibaato bulsho oo la xiriirta mas'uuliyad Wasaarad jirta marka laga reebo kuwa la xiriira dhibaatooyinka bulsho ee mudnaanta sare leh; | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| d. Ilaa intii suuragal ah iyada oo sal looga dhigayo xisaabinta sax ah iyada oo la isu eegayo kharashka ku baxaya iyo faa'iidada bulshada ay ka heleyso, u qoondeeynaya mudnaan isu dhiganta mashaariicda sharci-qorista u eg in mudnaantoodu ay isku mid tahay<br>e. Ku martiqaadaya Xubnaha labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuuriyadda Soomaaliya in ay ka munaaqashoodaan kala mudnaan-siinta wax-ka-beddelka Dastuurka iyo mashaariic-shuruuc la soo jeediyey;<br>f. Sanad kasta ay Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya u gudbinayaan si uu u ansaxiyo, wax uga beddelo ama u diido, Barnaamij Qorista Shuruuc markaa jira ee mudnaanta leh ee ku saabsan wax-ka-beddel Dastuuri oo la soo jeediyey iyo mashaariic-sharci la soo jeediyey, si waafaqsan sida Guddiga Kormeerka/Sixidda uu mashaariicda u qoondeeyo in uu qoro Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta, iyo in muddo ka dib uu wax ku daro ama wax ka dhimo barnaamijkaa hadba sida xaaladda | | |

| | | |
|---|---|---|
| markaa jirta ay keeneyso. | | |
| (7) Inta Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgelinta, si waafaqsan faqradda (6), uu dhammeystirayo sharci qabyo ah la weydiistey in uu qoro, sida ku xusan Qodobka 134, waxaa uu Guddiga Kormeerka/ Sixidda u soo gudbinayaa si uu dib ugu eego wax-ka-beddelka qabyada ah ee Dastuurka ah ama mashruuca-sharci, oo ay la socoto Warbixinta lagu xusey Qodobka 134(7)(b). | | |
| (8) Gudida lasocodku waxa ay:<br>a. Dib-u-eegis gudaha ah ku sameynayaan Sharci qabyo ah oo la xiriira wax ka bedalka Dastuurka iyo warbixinta la socota hab waafaqsan faqradda 7;<br>b. In dadweynaha ku wargaliso soo jeedinta iyo warbixinta;<br>c. In ay hubiso in fursad ku filan oo dadweynuhu kaga doodi karaan jirto;<br>d. In ay la tashato xubnaha dadwaynaha iyo xubnaha kale ee Baarlamaanka Federaalka ee | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;<br>e. Hawl gali golayaasha sharci dejinta ee Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka kuna daraan waxyaalaha ay soo gudbiyeen oo lays waafajiyey wax ka badelka la soo jeediyey, haddiii arrintu taabanayso danaha gobolka. | | |
| (9) (Haddii wada tashi ka dib sida ku xusan faqradda (8) guddiga lasocodku go'aamiso in ay ku darto soo jeedinno kala duwan wax-ka-beddelka Dastuurka ama sharci qabyo ah ee la soo jeeiyay, ay ku celiyaan wax-ka-beddelka dastuurka la soo jeediyey ama sharci qabyo ah oo gudida dibu eegista iyo hirgalinta for redrafting, with instructions. | | |
| (10) Haddii markaa ka dib marka la sameeyo latashiga ku xusan faqradda (8) guddida la socodku go'aamiso wax-ka-beddelka Dastuurka ee la soo jeediyay ama sharci qabyo ah si loo ansixiyo, waxa ay u gudbin doontaa wax-ka-beddelka Dastuurka ee la soo jeediyay guddoomiyaha aqalka shacabka, iyada oo warbixintuna la socota, si hore loogu sii socdo hab wafaqsan Dastuurkan. | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (11) Guddida la -socodku wax ay ku wargalin doontaa saddexdii biloodba mar labada aqal horumarka laga sameeyey dhamaystirka mashruuca lagu xusay jadwalka kow (C) iyo kow (D) iyo sida uu dhigayo marka la fiiriyo wixii ka soo baxay golaha Dastuurka ee qaranka sida ku dhigan xeerka lagu abuurayo golaha Dastuurka ee qaranka | | |
| (12) Guddiga la socodka/kormeerka waxaa muddadiisu dhammaaneysaa marka lagu ansixiyo kala dirkiisa aqlabiyad fudud (50% lagu daray 1) tirada mid kasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, | | |
| **Qodobka 134aad: Qaybaha ku dabaqma wax-ka-beddelka Dastuurka ee lasoo jeediyay ka hor inta aanay dhammaan muddada koowaad ee wakhtiga Baarlamaanka Federaalka: Guddiga dib-u-eegista iyo Hirgalinta** | | **Qodobkan waa la tiray** |
| (1) Dastuurkani waxaa uu abuurayaa Guddiga ee dib-u-eegista iyo Hirgalinta iyaga oo ah guddi hoos tagaya guddida la socodka hab waafaqsan qodobka 133. | | Mar haddii la dhameeyo dib u eegidda dastuurka looma baahno in uu qodobkaani sii ahaado mid shaqeeyo, waayoo looma baahno gebi ahaantiisba. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (2) Bilawga muddada xileed ee koowaad ee Aqalka Baarlamaanka Federaalka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, Wasiirka u xilsaaran ayaa u soo magacaabi doonaRa'iisul Wasaaraha shan xubnood oo ka mid noqon doona Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka kuwaasoo wasiirka u xilsaaran uu kasoo xulayo liis ay soo diyaariyeen Golaha Wasiirrada. Waxaa intaa dheer, Dawlad goboleedyada jira ee Xubnaha ka ah Federaalku waa in ay u soo magacaabaan mid waliba hal ergay oo kale oo dheeraad ah guddida dibu eegista iyo hirgalinta, taasoo ku salaysan isla shuruudda doorashada. | | |
| (3) Wasiirka u xilsaaran waxaa uu dooran doonaa magacaabista qof aan xubin baarlamaan ahayn, kaasoo buuxiya shuruudaha soo socda oo lagu magacaabayo Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalinta:<br>a. Leh anshax iyo sumcad wanaagsan;<br>b. Shahaado ka sita jaamacad la aqoonsan yahay;<br>c. Ku muujiyey karti heerar sare dhinaca maamulka dadweynaha ama xagga sharciga ee Soomaliya | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| dhexdeeda, ama<br>d. In uu u leeyahay aqoon iyo khibrad ugu yaraan toban sanno arrimo la xiriira mid ka mid ah kuwa soo socda:<br>i. Sharciga,<br>ii. Maamulka dadweynaha,<br>iii. Dhaqaalaha,<br>iv. Jinsiga<br>v. Xuquuqda Aadanaha.<br>e. In uu shaqo wanaagsan ka soo qabtay shaqadiisa ama majaalka uu ku takhasusay qofka la magacaabay. iyo<br>f. In uu leeyahay waaya-aragnimo badan oo la xiiriita sharci qorista. | | |
| (4) Ra'iisul Wasaaruhu waxaa uu soo hordhigi doonaa magacyada dadkii la soo magacaabay mid kasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya 15 maalmood gudahood marka Golaha Wasiirrada la abuuro, iyaga oo afar iyo toban cisho gudahood ku ansixin doona ama ku diidi doona mid ama ka badan oo ka mid ah dadka la soo magacaabay. | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| (5) Haddii mid ka mid ah labada aqal diido qof la soo magacaabay, Wasiirka u xilsaaran waxaa uu si waafaqsan faqradda (3) u soo magacaabi doonaa beddelkii qofkaas, intaa ka dibna waxaa uu raaci doonaa habraaca ku dhigan faqradaha 4 ilaa 6. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (6) Ka dib marka Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya uu doorto shan qof oo lasoo magacaabay hab waafaqsan qodob-hoosaadyadaa (4) iyo (5) , Ra'isul wasaaruhu waxaa uu u astayn doonaa mid ka mid ah dadkaas la soo magacaabay Guddoomiye, waxaanu u diri doonaa magacyadooda madaxwaynaha isagoo isna u magacaabi doona Guddoomiye qofka Ra'isul wasaaruhu uu u asteeyey, labada kalena, Xubno ka tirsan Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalinta. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (7) Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalintu waa in ay:<br><br>a. Sida laga yaabo in uu Guddiga La-Socodku amro, waxaa loo baahan karaa in wax laga beddelo Dastuurka sida ku qoran Jadwlka Koowaad (C), ama la soo jeediyo sharci qabyo ah sida lagu magcaabay Jadwalka (D), ama sidii | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |

| | | |
|---|---|---|
| kale ee hadba loo baahdo iyada oo daba socota waxa ka soo baxa Golaha Ta'siisiga ah ee Qaranka<br>b. diyaariyaan warbixin daraasadeed oo lagu lifaaqo wax-ka-beddelka lasoo jeediyey ama sharci qabyo ah. Warbixintaasoo, hab waafaqsan cadaymaha, sababaynaysa waxka bedelka lasoo jeediyey ama mashruuca sharci kana saadaalinaysa ixtimaalka in wax-ka-beddelka lasoo jeediyay ama mashruuca ay ka dhalan karto hab dhaqankii la rabay, iyo in hab dhaqankaasi uu dib u qaabayn ku sameeyo dhibaatada bulsho ee wax-ka-beddelka la soo jeediyey ama mashruuca sharci uu higsanayo;<br>c. sameeyaan daraasadda sharci iyo ta xaqiiqo ee lama huraanka ah si ay u gudato xilalka ku xusan baragaraafyada (a) iyo (b);<br>d. sameeyaan hab waafaqsan Qodobka 133 (7), u gudbi guddiga la socodka wax-ka-beddelka lasoo jeediyay oo dhamaystiran ama mashruuca sharci la-socda warbixininta lagu xusuy baragaraafka (b) u gudbiyaan Guddiga La-socodka; | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| e. warbixin ka siiso sadexdii biloodba mar ama marka ay ka codsato Guddiga la socodka horumarka laga gaarey dib-u-eegista iyo hirgalinta lagu Dastuurkan iyo caqabad kasta oo ka hor imanaysa geeddi-socdka dib-u-eegista iyo hirgalinta.<br>f. in ay Guddoomiyaha Garsoorka ee Maxkamadda Dastuurka kala shaqeeyaan dastuurinimada soo-jeedinta, ; iyo<br>g. iyada oo loo fiirinayo hadba inta miisaaniyaddu le'eg tahay, in la qoro shaqaale ku filan in ay u guttaan xilkooda hab waafaqsan Dastuurkan. | | |
| Qodobka 135aad: Xilalka iyo Muddeynta Hay'adaha mudnaanta sare leh iyo Guddiyada Madaxa Bannaan ee uu Baarlamaanka Federaalku ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya Aasaasayo | | Waxaa la soo jeedinayaa in la laalo qodobkaan maadaama muddadii loo qabtay guddiyada iyo xafiisyada la dhaafay, sidoo kale la dhisay guddiyada iyo xafiisyada qaar |
| (1) Haddii aan si kale loogu sheegin Dastuurkan, Baarlamaanka Federaalku ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya wuxuu magacaabayaa xubnno aan tiradoodu ka badnayn sagaal oo ay yeelan doonaan guddi walba oo Madax Bannaani. | | Sababaha Soojeedinta ayaa ku salaysan in uu dhammaaday xilliga kowaad ee Baarlamaanka lagu doortay Dastuurka sida ku meelgaarka ah una igmanaa dib u-eegista Dastuurka ku meelgaarka ah sida awgeedna aan loo baahnayn maadaama Baarlamaankaas xilligiisa |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | | uu dhammaaday. |
| (2) Baarlamaanka Federaalku wuxuu asaasayaa hay'adahan iyo Guddiyadan Madaxa Bannaan ee soo socda iyadoo muddeeynta halkan ku cadna la raacayo, kuwaasoo hirgelaya marka la aasaaso Golaha Wasiirrada:<br>a. Golaha Adeegga Garsoorka - 30 maalmood<br>b. Maxkamadda Dastuurka - 60 maalmood<br>c. Guddiga Xuquuqul Insaanka, Ilaaliyaha/kormeeraha (Ombudsman), Guddiga Amaanka Qaranka, Guddiga Ilaalinta/dabagalka nabadgelyada ee rayidka ah – 45 maalmood<br>d. Guddiga Adeegga Baarlamaanka - 15 maalmood<br>e. Guddiga Qaranka ee Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka iyo Guddiga Xuduudaha iyo Federaaleynta - 60 Maalmood.<br>f. Guddiga ka Dhexeeya Dawlad Goboleedyada - 1 Sanno<br>g. Guddiga Runta iyo Dib-u-heshiisiinta - 30 Maalmood | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |

| | | |
|---|---|---|
| (3) Si hadaba loogu sahlo Baarlamaanka Federaalka ah in uu hawlihiisaa guto, Guddiga dib-u-eegista ee Farsamo ayaa soo diyaarinaya qoraalka sharciga loogu baahan yahay in lagu abuuro guddiyadaa iyadoo la raacayo Dastuurkan, si Guddiga Kormeerka iyo Guddiga dib-u-eegista iyo Hirgelintu ay u soo gabagabeeyaan uguna gudbiyaan Baarlamaanka Federaalka si uu uga sii baaran dego , si aan looga dib dhicin waqtiyada kama danbeysta ah ee ku cad faqradda (2) kore. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| **Qodobka 136aad: Qaadashada wax-ka-beddelka Dastuurka inta lagu guda jiro muddo xileedka koowaad ee Aqalka Shacab; ansixinta Dastuur kama dambays ah** | | |
| (1) Inta lagu guda jiro muddo xileedka koowaad ee Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya, baarlamaanka Federaalku waxaa uu qaadan doonaa waxkabeddelka la soo jeediyay ee Dastuurka ku meel gaarka ah kaliya intii lagaga ansixiyay kadib cod kama dambays ah aqalka shacabka codkaasoo u dhigma sadex meeloodow | | Sababaha Soojeedinta ayaa ku salaysan in uu dhammaaday xilliga kowaad ee Baarlamaanka lagu doortay Dastuurka sida ku meelgaarka ah una igmanaa dib u-eegista Dastuurka ku meelgaarka ah sida awgeedna aan loo baahnayn maadaama Baarlamaankaas xilligiisa uu dhammaaday. |

| | | |
|---|---|---|
| laba meelood, iyo cod kama dambaysa ah oo ay u qaadaan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah, codkaasoo ugu yaraan ah sadex meeloodow laba meelood xubnaha jira. | | |
| (2) Afti la qabtay taasoo khusaysa Dastuurka ku meel gaarka ah wax laga bedelay, oo la qabto dhammaadka mudada xilka ee koowaad ee Golaha Shacabka, codbixiyayaasha jamhuuriyadda Soomaaliya waxa ay ku qaadan karaan Dastuurka cusub cod aqlabiyad ah oo ay ku taageeraan wejiga kama dambaysta ah ee Dastuurkan. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.*<br><br>*Aftida waxaa looga hadli doonaa qodob gooni ah* |
| **Qodobka 137aad: Dhaqangelinta Dastuurka** | | **Qodobkan nuxurkiisa waxaa lagu sheegey qodobka hoose** |
| (1) Ka dib dhammaadka muddada koowaad ee Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalku waxaa uu dhisayaa Guddi dib- u-eegis ku sameeya hirgelinta iyo shagaynta Dasturka jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya, marka lagu ansixiyo hab waafaqsan qodobka 136 ee ku saabsan qaadashada Dastuurka kama dambaysta ah, iyo in lala tashado dawladaha xubnaha ka ah Federaalku ka koobanyahay iyo dadweynaha wax- | | Sababaha Soojeedinta ayaa ku salaysan in uu dhammaaday xilliga kowaad ee Baarlamaanka lagu doortay Dastuurka sida ku meelgaarka ah una igmanaa dib u-eegista Dastuurka ku meelgaarka ah sida awgeedna aan loo baahnayn maadaama xilligiisa uu dhammaaday. |

| | | |
|---|---|---|
| ka-beddelidda in lagu sameeyaa ay suurtogalka tahay. | | |
| (2) Lix bilood gudahood intii la magacaabay ka dib, guddigu waxaa uu u soo gudbin doonaa warbixintiisa golaha Baarlamaanka Federaalka iyo , dowldaha Federaalka ka midka ah iyo dadwaynaha. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (3) Kaddib markuu uruuriyo kana, baaraan-dego aragtiyada maamulada Federaalka ka tirsan, dadwaynaha, iyo marka la qiimeeyo lalana socdo hirgalinta iyo dabaqaadda Dastuurka kama dambaysta ah iyo muddo aan ka yarayn lix bilood ka hor inta aanay dhammaan mudada xilaka ee marka labaad ee Baarlamaanka Federaalka soomaliyeed, guddigu, iyaga oo la tashanaaya guddoomiyaha maxkamadda Dastuuriga ah waxa ay hubin doonaan in eray iyo ujeedaba laixtiraamo Dastuurka, wuxuuna Baarlamaanka Federaalka u soo gudbinayaa talooyinkiisa haddiiba ay jiraan, si uu wax uga beddelo Dastuurka iyadoo loo hab-raacayo qodobka 132aad ee dastuurkan | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |

| | | |
|---|---|---|
| (4) Haddii Baarlamaanku Federaalka ihi ansixiyo mid ama ka badan oo wax-ka-beddelka la soo jeediyay ah hab waafaqsan Qodobka 132aad, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee wax laga bedely; | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| (5) Haddii aqlabiyadda kuwa u codaynaya aftida lagu xusay faqradda (4) ay u codeeyaan Dastuurka wax-ka-beddelka lagu sameeyey, Dastuurkaasi waxa uu noqonayaa Dastuurka jamhuuriyadda faderaalka ah ee Soomaaliya. | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| Madaxa Labaad: Qodobbo Qubane Ah | | |
| Qodobka 138aad: Ka hirgelyaaa dastuurkan | | Soo-jeedinta wax ka bedelka Dastuurka Hirgelidda waxaa lagu bedelay dhaqangalka |
| (1) Dastuurkan waxa uu dhaqan galayaa maalinta ugu horeysa maalinta koowaad marka ay ansixiinayaan golaha qaran ansixinta Dastuurka ah oo isugu yimid hab waafaqsan khariidada nabada, heshiisyadii garowe 1 iyo Graowe II, Gaalkacyo, Addis Ababa, wareegtadii madaxweynaha iyo kuwa kale ee khuseyso. | | Waxaa soo jeedinaynaa in lagu sameeyay dib u-eegis farsamo isagoo tirtiray faahfaahinadda dheeraadka ah ee ku xusan Qodobkaan. Waxaa sidoo kale la soojeedinayaa in Dastuurka uu sii ahaado ku-meel-gaar illaa looga ansixiyo Afti Dadweyne taasoo la abuubulayo lana qabanayo marka la helo midnimo buuxda. Waxaa loo qaatay in la helo dabacsanaan lagu abaabulayo afti dadwayne oo lagu |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| | | ansixinayo Dastuurka marka uu yimaado waqtiga ku haboon si looga hortago baahi joogta ah oo dib loogu dhigo afti dadwayne. |
| (2) Dhaqangalka qodobada la xiriira Aqalka Sare ee Baarlmaanka Federaalka meelaha lagu xusay Dastuurkan dib ayaa loo dhigay inta laga gaarayo sameynta dhamaan dawladaha xubnaha ka ah dawladda Federaalka iyo inta kuwa matalaya loo dhaarinayo xilka ayagoo ah xubnaha ka tirsan xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka. Inta uu laalan yahay sameynta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, Golaha Shacabka ayaa qabanaya dhamaan waajibaadka iyo hawlaha Dastuurka siiyay Aqalka Sare wuxuuna u shaqeynayaa sida Baarlamaanka ka kooban Hal Aqal, si daacadnimo ku jirtana maanka ugu hayaan Mabaadii'da Asaasiga ah ee awood qeybsiga ee nidaamka Federaalka lagu qeexay Qodobka 3(3) ee Dastuurkan iyo danaha gobollada Soomaaliyeed marka la gaarayo go'aanada. | | *Faqraddan waa la dhaqan-geliyay aqalki sarena waa la dhisay.* |
| **Qodobka 139aad: Sharciyadda oo Weli Socda** | **Qodobka 155aad: Xeerarka Weli Socda** | **Wax ka bedelka Dastuurka e la soo jeediyay** |
| Dhammaan xeerarka dhaqan galka ah ka hor inta aanu hirgalin waxa ay ahaanayaan qaar sii shaqeeya waxaana laga | Dhamaan shuruucdii horay loogu dhaqmi jiray ansixinta Dastuurkan ka hor waxay ahaanayaan kuwo sii shaqeeya haddii aysan ka horimaanayn | Waxaa lagu sameeyay qodobkaan dib u qaabayn, waxaa sidoo kale qodobka lagu kordhiyay faqrad 2aad, taasoo |

| | | |
|---|---|---|
| dhadhansan doonaa laguna dabaqi doonaa waxka beddeladaas, qaadashadaas, in la cayimo iyo in wax laga soo reebo hadba sida looga maarmi waayo si loo waafajiyo Dastuurkan ilaa goorta xeerarkaas wax-ka-beddel lagu samaynayo ama meesha laga saarayo. | Dastuurka. | tilmaamaysaa guddiga cusub ee lagu sheegay Qod.107 oo ay shaqadiisu noqonayso dib u habaynta shuruucdi dalka. |
| **Qodobka 140aad: Waajibaadka Caalamiga Ah** | **Qodobka 156aad: Waajibaadka Caalamiga Ah** | **Waxaa la soojeediyay in dhamaan heshiisyada caalamiga ah lagu samayn karo dib-u-eegis si loo waafajiyo Dastuurka iyo danaha qaranka** |
| Inta heshiiska wax waajibinaya ee jirey taariikhda uu Dastuurkan dhaqan gelayo uu waqtigiisu dhacayo ama wax laga beddelayo, waajibka heshiiskaa ka dhashey sidiisa ayuu u jirayaa | Heshiisyada la galay taariikhda Dastuurka la ansixiyay ka hor waxay ahanayaan kuwo lagu samayn karo dib-u-eegid si loo waafajiyo Dastuurka iyo danaha qaranka. | |
| **Qodobka 141aad: Aftiyaha** | **Qodobka 157aad: Dhaqangalka dastuurka iyo Aftida** | **Waxaa lagu mideeyay qodobkaan qodo.137, 141 ee asalka Dastuurka ee ka kala hadlayay dhaqan-galka Dastuurka iyo Aftida** |
| (1) Haddii ay noqoto in la qaado afti uu amray Dastuurkan ama sharci kale ama sababo kaleba loo qaadayo, cidda hirgalinaysa aftidu waa in ay hubisaa in aftida lagu hubiyo in dhammaan dadka codbixin karaya ay fursad u helaan ay ku muujiyaan aragtidooda si xor ah, toos ah, qarsoodina ah si waafaqsan sharci Baarlamaanku ansixin doono | 1. Wax-ka-beddelka lagu sameeyay Dastuurka KMG ah waxa uu dhaqan-galayaa marka uu ansaxiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Lana marsiiyo Maxkamadda Dastuurka. | Waxay ku jirtay Qodobka 137aad ee asalka Dastuurka hase yeeshee waxaa loo qoray hannaan sharci, waxayna xambaarsan tahay nuxur ka duwan kan qodobka aan tilmaanay. |

| | | |
|---|---|---|
| kaasoo sugaya hab raaca aftida. | | |
| (2) Cidda hirgalinaysa aftidu waxay hubin doontaa in –<br>a. Aftidu waa in ay u waydiisaa su'aasha i cad, hab loogu talagalay in lagu helo aragtida dhabta ah ee codbixiyaha iyada oo aanay daah saarayn arimaha ay tahay in cod bixiyuhu kala doorto; iyo<br>b. Waa in aysan su'aalaha qaabka loogu dhigay warqadaha codeynta iyo habraaca aftiduba aysan ku hogaamineyn cod-bixiyaha. | 2. Dastuurka wuxuu si ku-meel-gaar ah u ahaanayaa dhaqangal ilaa inta Muwaadiniinta Soomaaliyeed ay ku ansixinayaan afti dadweyne. | *Waa faqrad cusub.* |
| | 3. Waxaa reeban in afti dadweyne loo qaado wax ka beddelka Dastuurka ama Kaabidda inta laga sugayo midnimada dhuleed iyo midda dadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Waa faqrad cusub* |
| **Qodobka 142aad: Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka ee Ka jira Soomaaliya** | | **Waa la tirey qodobkan** |
| (1) Ilaa inta laga gaarayo goorta dhammaan o Dastuurada dawladaha xubnaha ka ah federaalka la waafajinyo Dastuurka Dawladda federaalk | | Waxaan soojeedinaynaa in la tiro Qodobkan, nuxurkiisana lagu mideeyay Cutubka 5aa |

| | | |
|---|---|---|
| maamulada jira ka hor inta aan la qaadan Dastuurkan ku meel gaarka ahi waxa ay sii haysanayaan awoodaha Dastuurkoodu siinayo. | | |
| (2) Dawladaha xubinta ka ah dawladda Federaalku waa in lala tashadaa marka la qaadanayo go aanno la xiriira nidaamka fedeaalka, iyo qaabka nabadgalyada | | *Eeg Faallada kor ku xusan ee Faqradda (1) ee Qodobkan.* |
| **Qodobka 143aad: Ka Noqoshada Axdiga Federaalka.** | | **Waa la tirey qodobkan** |
| Axdiga Federaalka ee ku meel gaarka ahi waxa ay mudadiisu dhammaanaysaa marka lakala diro Golaha Ansixinta Dastuurka ee Qaranka | | Waxaa la soojeedinaynaa in la tiro faqradda madaama aan loo baahnayn. |
| JADWALKA | | |
| JADWALKA KOOWAAD (A) - CALANKA SOOMAALIYA | JADWALKA KOOWAAD (A) - CALANKA SOOMAALIYA | Halkaan waxaa la galinaya Calanka Soomaaliya |
| JADWALKA KOOWAAD (B) - ASTAANTA JAMHUURIYADDA | JADWALKA KOOWAAD (B) - ASTAANTA JAMHUURIYADDA | Halkaan waxaa la galinaya Astaanta Jumhuuriyada a |
| JADWALKA KOOWAAD (C) - KALA GUURKA: WAX-KA-BEDDELKA DASTUURKA EE SOOJEEDIYAY EE XILLIGA KOWAAD EE BAARLAMAAMKA FEDERAALKA | | Waxaa soojeedinaynaa in la tirtiro |

| | | |
|---|---|---|
| Sida waafaqsan qodobbada 133 iyo 134aad, Baarlamaanka fedaraalka Soomaaliya waxa uu soo jeedinayaa dhaqan-gelinayaana wax-ka-beddel ku aaddan Dastuurka ku meel-gaarka, hab waafaqsan heshiiskii ay ka wada-xaajoodeen Dowlladda Fedderaalka ah iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka ee jira iyo kuwa cusub, oo, balse aanan ku koobnayn, qodobbadan soo socda:-<br>(1) Ku aaddan qodobka 22aad, oo qeexaya qaababka ka wada qayb-galka siyaasadda. (2) Xeer waafaqsan qodobka 9aad, oo dejinaya maqaamka magaala-madaxda.<br>(2) Ku aaddan qodobka 39aad, oo dejinaya hanaanka xal-u-helidda xad-gudubyada xuquuqda Aadanaha.<br>(3) Ku aaddan qodobka 41aad, asaasidda Guddiga Xuquuqda Aadanaha.<br>(4) Ku aaddan qodobka 43aad, oo khuseeya waxa uu noqonayo dhulka Federaalka.<br>(5) Ku aaddan qodobka 47aad oo ku saabsan xisbiyada siyaasadda iyo qaababka doorashooyinka.<br>(6) Ku aaddan qodobbada 110aad iyo 113aad, oo dejinaya waajibaadka, xilalka, tirada iyo hanaanka Guddiyada | | Waxaa soojeedinaynaa in latiro Jadwalka maadama aan loo baahnayn, uuna tilmaamayo xiliga kowaad ee baarlamaanka Federaalka uu dhammaaday. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| Madaxa-bannaan.<br>(7) Ku aaddan qodobka 111 J) oo ku saabsan xafiiska adeegaha gardoonka dadwaynaha (ombudsman)<br>(8) Ku aaddan qodobka 130, xaaraantimeyntamaleeshiyaadka khaaska ah.<br>(9) Ku aaddan qodobka 130, sharciyeynta shirkadaha ilaaladda khaaska ah.<br>(10) Xeer waafaqsan qodobka 131, oo ku saabsan Xaaladda Deg degga ah. | | |
| JADWALKA 1(D): SHURUUCDA MUDNAANTA KOOWAAD LEH IN LA SAMEEYO XILLIGA KOOWAAD EE BAARLAMAANKA FEDDERAALKA AH | | Waxaa soojeedinaynaa in la tirtiro |
| Guddiga qoraya waxa uu tixgelin gaar ah siinayaa qoritaanka mashaariic khuseeya shuruuc cusub, hab waafaqsanna heshiiskii ay ka wada xaajoodeen Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka ah iyo maamuladda horay u jiray iyo kuwa cusub, oo ay ku jiraan, balse aanan ku koobnayn kuwan soo socda:<br>(1) Xeer waafaqsan qodobka 8aad, oo dejinaya sida qofku uu u heli karo una | | Waxaan soojeedinaynaa in latiro Jadwalka maadama aan loo baahnayn, uuna tilmaamayo xiliga kowaad ee baarlamaanka Federaalka kaasoo xilligiisa dhamaaday. |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| waayi karo dhalashada Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.<br>(2) Xeer waafaqsan qodobka 9aad, oo dejinaya maqaamka magaala-madaxda.<br>(3) Xeer waafaqsan qodobka 30aad, oo ku saabsan samaynta dugsiyada khaaska ah, mac-hadyada iyo jaamacadaha.<br>(4) Xeer waafaqsan qodobka 34aad, oo khuseeya xaqa ay eedeysanayaasha u leeyihiin in ay helaan caawinaad sharci oo lacag la'aan ah marka lagu soo oogo fal-dembiyeed.<br>(5) Xeer waafaqsan qodobka 36aad, oo khuseeya dib u celinta eedeysanayaasha iyo dembiileyaasha.<br>(6) Xeer waafaqsan qodobka 37, oo ku saabsan qaxootiga iyo magangelyo-doonka.<br>(7) Xeer waafaqsan qodobka 39aad, oo dejinaya qaab-dhaqanka xal u helidda ku xad-gudubka xuquuqda Aadanaha.<br>(8) Xeer waafaqsan qodobka 45, oo khuseeya qubitaanka qashinka.<br>(9) Xeer waafaqsan qodobbada 49 oo khuseeyo tirada iyo xudduudaha Dawlad goboleedyada iyo xallinta khilaafaadka xudduudaha.<br>(10) Xeer waafaqsan qodobka 51 aad, | | |

| | | |
|---|---|---|
| oo dejinaya shuruucda khuseeya xiriirka wada-shaqaynta heerarka kala duwan ee Dawladda.<br>(11) Xeer waafaqsan qodobka 68aad, oo dejinaya shuruucda hab-dhaqanka Golaha Shacabka.<br>(12) Xeer waafaqsan qodobka 70aad, oo qeexaya xasaannadda Xubnaha Baarlamaanka Soomaaliyeed ee<br>(13) Federaalka ah.<br>(14) Xeer waafaqsan qodobka 75, dejinaya shuruuc qaab-dhaqan oo ku aaddan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Dawladda goboleedyada.<br>(15) Xeer waafaqsan qodobka123, asaasidda Banki Dhexe ee Jamhuuriyadda Fedderaalka ah.<br>(16) Xeer waafaqsan qodobka 130, oo khuseeya ciidamada amniga.<br>(17) Xeer waafaqsan qodobka 130 asaasidda laamaha khaaska ku ah la dagaallanka argagixisada, bucad-badeedda, tahriibinta dadka iyo dembiyada kale ee abaabulan.<br>(18) Xeer waafaqsan qodobka 130 nidaaminta dhismaha iyo shaqooyinka booliska Federaaliga ah.<br>(19) Xeer waafaqsan qodobka 130 | | |

DRAFT

| | | |
|---|---|---|
| nidaaminta xiriirrada ka dhexxeeya adeegyada booliska Federaalka iyo kuwa Dawlad goboleedyada.<br>(20) Xeer waafaqsan qodobka 130 oo qeexaya arrinta u hogaansamidda amarrada sharci-darrada ah.<br>(21) Xeer waafaqsan qodobka 130 oo khuseeya asaasidda iyo shaqaynta guddiga Baarlamaanka ee khaaska ku ah arrimaha ciidamada qalabka sida.<br>(22) Xeer waafaqsan qodobka 130 oo khuseeya doorka dadweynaha ee dabagal ku samaynta adeegyada booliska Federaalka.<br>(23) Xeer waafaqsan qodobka 141, oo khuseeya u codeynta arrin khaas ah ee dadweynaha. | | |

Lifaaqyada La socda Warbixintaan:

1. **Jadwalka 2AA (A):** Awoodaha Gaarka u ah Dawladda Federaalka Soomaaaliya
2. **Jadwalka 2AA (B):** Awoodaha Gaarka u ah Dawladda Dawlad Goboleedyada
3. **Jadwalka 2AAD (C):** Awoodaha Wadaagga ah
4. **Lifaaqa 3aad:** Maaliyadda Qodobka 129 ilaa Qodobka 139.
5. **Warbixinta 4ta sano ee qeexaysa hannaanka wax-**ka-baddelka qabyo-qoraalka.

DRAFT

| Jadwalka 2aad: Awoodaha |
| --- |
| Jadwalka 2aad (A) Qodobka 53aad: Awoodaha U Gaarka ah Dawladda Federaalka |

1. Baarlamaanka Federaalku wuxuu lahaanayaa awood xeer-dejin u gaar ah oo uu ku meel mariyo xeer kasta oo ku saabsan arrimaha soo socda:
    a. Arrimaha dibadda iyo xiriirka diblomaasiyadeed ee waddamada shisheeye;
    b. Difaaca Qaranka iyo Ciidanka Difaaca Qaranka;
    c. Jinsiyadda, xorriyadda isku-socodka, baasaboorada, diiwaangelinta deganaanshaha iyo kaararka aqoonsiga;
    d. Socdaalka, hijrada iyo masaafurinta, oo ay ku jiraan qaxootiga iyo magangalyo-doonka;
    e. Midnimada furdooyinka iyo aagagga ganacsiga, heshiisyada ku saabsan ganacsiga iyo bad-mareenka, dhaqdhaqaaqa xorta ah ee badeecada, iyo is-dhaafsiga badeecadaha iyo lacag-bixinta lala yeesho wadamada shisheeye, oo ay ku jiraan kastamyada iyo ilaalinta xuduudaha;
    f. Lacagta, lacagaha iyo qadaadiicda, sarifka lacagaha qalaad, amaahda iyo Bangiga Dhexe;
    g. Xisaabaadka guud ee Qaranka iyo keydka, oo ay ku jiraan aruurinta canshuuraha iyo dakhliyada Qaranka iyo Hanti-dhowrka Guud;
    h. Go'aaminta  halbeegyada iyo cabbiraadaha, heerarka waqtiga iyo taariikhda;
    i. Duulista rayidka, gaadiidka hawada iyo garoomada diyaaradaha caalamiga;
    j. Xuquuqda hanti-warshadeed, xuquuqda halabuurka iyo daabacaadda;
    k. Hubka iyo waxyaalaha qarxa;
    l. Xeerarka madaniga, sharciga dambiyada, abaabulka maxkamada iyo nidaamka, oo ay ku jiraan maxkamadaha ciidanka, xirfad sharciyeed, nootaayo, iyo bixinta talo sharci;
    m. Adeegyada Boostada iyo Isgaarsiinta oo ay ku jiraan adeegyada taleefanka, internetka, warbaahinta iyo aaladda kale ee isgaarsiinta;
    n. Ka-qaybgalka siyaasadeed ee muwaadiniinta, nidaamka axsaabta badan iyo diiwaangelinta xisbiyada siyaasadeed.

DRAFT

| |
|---|
| o. Qaab-dhismeedka dowladda hoose iyo doorashooyinka degmooyinka ee caasimada federaalka (KALIYA XULASHADA 1 ee QODOBKA 9aad!)<br>p. Oggolaansho macluumeed ee la siinaaya muwaadiniinta iyo daah-furnaanta dawladda;<br>q. Xallinta xadgudubyada xuquuqda aadanaha;<br>r. Bixinta aqoonsiga Dowlad-goboleed cusub iyo go'aaminta arrimaha xuduudaha Dowlad-goboleedyada;<br>s. Tilmaamaha, mabaadi'da iyo habab raaca loogu talagalay isuduwidda iyo iskaashiga dowladeed iyo iskaashi u dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>t. Qaab-dhismeedka iyo habraacyada Golaha Iskaashiga U Dhaxeeysa Dawladaha;<br>u. Qaab-dhismeedka iyo habraacyada guddiyada madaxa bannaan ee heer qaran;<br>v. Afti Dadweyne ee Dastuurka Federaalka laga dhiibto;<br>w. Xasaanadaha baarlamaaneed iyo gunnoyinka xubnaha baarlamaanka Federaalka;<br>2. Dowladda Federaalka waa inay maamusho oo fuliso dhammaan shuruucda ku xusan Farqadda (1) isla markaana ay aasaasto oo ay sii waddo hay'adaha iyo xafiisyada dawliga ah ee lagama maarmaanka u ah. |
| **Jadwalka 2aad (B) Qodobka 54aad: Awoodaha Wadaagga (ka dhaxeeya DF iyo DG)** |
| 1. Iyadoo ujeedadu ay tahay in la qeexo heerar iyo qaab-dhismeed qaran, Baarlamaanka Federaalku wuxuu adeegsan karaa awoodaha sharci dejinta arrimaha soo socda:<br>a. Waxbarashada;<br>b. Caafimaadka;<br>c. Adeegyada bulshada iyo gargaarka;<br>d. Arrimaha qoyska;<br>e. Beeraha iyo xoolaha;<br>f. Kalluumeysiga;<br>g. Ilaalinta Macaamiisha;<br>h. Dekadaha, jidadka iyo kaabayaasha dadweynaha, oo ay ku jiraan garoomada diyaaradaha aan caalamiga ahayn;<br>i. Arimaha dhaqanka;<br>j. Maamulka, adeegsiga iyo dhowrista deegaanka, dhulka iyo Kheyraadka kale ee dabiiciga ah, goobaha taariikhiga ah iyo wax lamid ah<br>k. Qorshaynta iyo horumarinta gobolka |

DRAFT

| |
|---|
| l. Dalxiis;<br>m. Ruqsadda Gawaarida;<br>n. Maareynta musiibada;<br>o. Doorashooyinka iyo la xisaabtanka dowladda;<br>p. Shaqaalaha rayidka iyo maamulka dadweynaha;<br>q. Maamulka iyo maaraynta maaliyadda dadweynaha;<br>r. Qaab-dhismeedka iyo habraacyada Guddiga Wadajirka ah ee is waafajinta dastuurada dowlad-gobolleedyada iyo Dastuurka Federaalka;<br><br>2. Golaha Wakiilada ee Dawlad-goboleed kastaa waxay ku adeegsanaysaa awood sharci-dejin arrimaha ku xusan Farqadda (1) ee kor ku xusan, keliya illaa iyo inta sharciyada dowlad-goboleedyada ee noocaas ahi aysan ka hor imaanaynin sharciyada federaalka ee isla mowduuca la xiriira.<br><br>3. Xukuumadda Federaalku waa inay maamushaa oo fulisaa dhammaan shuruucda ku xusan Farqadda (1) illaa xadka lagama maarmaanka u ah joogtaynta heerarka iyo qaab-dhismeedka guud iyo asaasidda iyo joogtaynta hay'adaha iyo xafiisyada dawladda ee lagama maarmaanka ah.<br><br>4. Dawladaha Dawlad-goboleedyadu waxay maamuli doonaan oo fulin doonaan dhammaan shuruucda lagu dabaqay Farqadda (1) illaa iyo inta Dowladda Federaalka aysan si toos ah maareynayn una fulinayn sida ku xusan Farqadda (3). |
| **Jadwalka 2aad (C) Qodobka 55aad: Awoodaha U Gaarka ah ee Dawlad Goboleedka**<br>1. Dhammaan awoodaha sharci-dejineed ee aan si cad loogu siinin Baarlamaanka Federaalka kaligiis, ama aysan ahayn awwodaha baarlamaanka federaalka iyo golaha wakkilada ee Dowlad-goboleedyadu ay wadaagayaan - waxay u harsan yihiin Golaha Wakiilada Dowlad-goboleedyada.<br><br>2. Xukuumadda Dawlad-goboleed kastaa waxay maamuli doontaa oo fulinaysa dhammaan shuruucda ku xusan Farqadda (1) isla markaana ay aasaasto oo ay sii waddo hay'adaha iyo xafiisyada dawladda ee lagama maarmaanka u ah. |

DRAFT

Lifaaq: 3aad

Maaliyadda Guud

| Qodobka 129aad:<br>Mabaadii'da Maaliyadda Guud | Soojeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka |
|---|---|
| Mabaadi'da maaliyadda guud ee JFS ee xukuumadda federaalka iyo xukuumadaha dowlad goboleedyada waxaa saldhig u ah mabaadi'da soo socota:<br>a. U isticmaalka ilaha dhaqaalaha dalka si daah-furan oo isla-xisaabtan ku jiro;<br>b. In ilaha dhaqaalaha loo qeybiyo loona qoondeeyo si sax ah, eex la'aan ah oo ay ku jirto danta muwaadiniinta;<br>c. In ilaha dhaqaalaha loo isticmaalo loona kharash-gareeyo si ay masu'uuliyadi ku jirto oo ilaalinaysa danaha jiilal dambe waqtiga dhow iyo msutaqbalkaba;<br>d. In kharashka dowladda loo isticmaalo si ay ku jirto hufnaan, wax-ku-oolnimo iyo baykhaamin; iyo<br>e. In ilaha dhaqaalaha loo wadaago si caddaalad ah looguna qaybiyo dhammaan heerarka kala duwan ee dowladaha. | *QODOBADA 129 ILAA 139 WAXAA LOO BAAHANYAHAY IN HESHIIS KA GAARAAN DAWLADDA FS IYO DAWLAD GOBOLEEDYADA.*<br><br>*Labada Guddi qabyo-qoraalkii 1aad, kamaysa diyaarin aragti iyo soojeedin ku aadan arrimaha maamulka maaliyadda.*<br><br>***F.G:*** *SI LO SAHLO WADA-XAAJOODKA MAAMULKA IYO MAALIYADDA, GUDDIGA LA SOCODKA WUXUU U DIRAY GUDDIGA MADAXA-BANNAAN INUU KASOO DIYAARSHO ARAGTI SAHLO LAGA DUL SHAQAYN KARO. GUDDDIGA MADAXABANNAAN WUXUU SOO DIYAARIYEY SOOJEEDIIN(Proposal) ASAGOO LA KAASHANAYA KHUBURO IYO LA TALIYAAL CAALAMI AH SI MADAXDA FEDERAALKA IYO MADAXDA-DAWLAD GOBOLEEDYADU UGA SAMEEYAAN WADAXAAJOOD SIYAASADEED.* |

| | |
|---|---|
| | *Waxaa sidoo kale labada guddi isla garteen in lifaaq ahaan loogu daro dastuurka, maadaama uu yahay arrimaha u baahan wada xaajoodka si ay ugu sahlanaato dhinacyada gelaya wadaxaajoodka in ay wixii ka anfaca ay ka qaataan kadibna Dastuurka uu kamid noqdo.* |
| **Qodobka 130: Hannaanka Qoondeynta Khayeraadka Qaranka** | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 1. Si loo xaqiijiyo in si xaqsoor ah loo qoondeeyay loona qeybiyay kheyraad qaranka waa in la tixgeliyo hannaanka soo socdo:<br>a. In la hubiyo in heer kasta ee dowladeed ay awooddo fulinta howlaha loo igmaday;<br>b. In la xaqiijiyo in dhammaan muwaadiniintu ay helaan adeegyo isu dheelitiran oo isku mid ah;<br>c. In la dhiirigelio horumar loo wada siman yahay guud ahaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>d. in la xaqiijiyo in khayraadka loo qoondeeyo hannaan la saadaalin karo iyo in habka kharash garayntuna uu ku sargo'an yahay xasilloonida dhaqaalaha guud; iyo<br>e. In la fuliyo waajibaadyada qaran ee dhaqaale sida bixinta deynta dawladda. | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Hannaanka lagu xusay faqraddaa 1aad ee qodonkaan waa in lagu dabakahaa dhammaan qooneynta kheyraadka dalka, canshuur qaranka, kheyraadka dabiiciga ilaha kale ee dakhli qaran. | |
| **Qodobka 131: Guddiga Madax-bannaan ee Wadaagga Kheyraadka** | *Fadlan  eeg faalada qodobka 29aad* |

DRAFT

| | |
|---|---|
| 1. Waxaa jiraya guddiga madaxabannaan ee wadaaga Kheyraadka oo ka kooban:<br>a. Shan xubnood oo ay soo jeediyaan golaha wasiirada xukuumadda federaalka soomaaliya uuna ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;<br>b. Min hal xubin oo ay soo jeediyaan dowladyad-goboleedyada iyo xubin ka imaanaysa Caasimada Jumhuuriyada oo uu soo magacaabo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya isla maraakana uu dhammaantood ansixiyo Baarlamaanka Federaalka; | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Xubnaha Guddiga ayaaa iska dhex-dooranaya Guddoonka Guddiga. | |
| 3. Xubinta loo magacaabay guddiga ee ku xusan Farqadda (1) waa in uu leeyahay tacliin jaamacadeed oo sare ee dhaqaalaha iyo maaliyadda oo ay dheertahay khibrad shaqo muddo aan ka yarayn 20 sano oo aan hayn xafiis ama shaqo kale oo dowladeed. | |
| 4. Xilka guddigu waxa uu noqonayaa talo-siin/talo soo-jeedin ku aadan in la helo hannaan kheyraad qeybsi ku qotoma xaqsoor oo u dhaxeeya:<br>a. Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada;<br>b. Dowlad Goboleedyada dhexdooda. | |
| 5. Talo-siinta/talo soo-jeedinta guddigu waxay ku jaan go'antahay mabaadi'da kheyraad qeybsiga ee lagu sheegay Dasruurka JFS. | |
| 6. Guddiga waa in uu warbixin sanadle ah u gudbiyo xukuumadda JFS, Parlamaanka FS iyo goleyaasha wakiillada dowlad goboleedyada ka hor 5 bilood xisaab xir sanadeedka, warbixintaas oo ka kooban: | |

DRAFT

| | |
|---|---|
| a. Dejinta qorshe muujinaya saamiga kheyraad qeybsiga dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada ee (5) sano ee soo socota iyadoo la raacaya mabaadi'da maaliyadda iyo hannaan qoodeynta kheyraadka dalka ee lagu xusay dastuurka federaalka;<br>b. Isbar-bardhigidda misaaniyadda sanadlaha ah ee lagu saleeyay qeybinta dakhliga oo ay la socoto talo soo jeedin; iyo<br>c. Soo jeedinta misaaniyadda loo qoondeeyay Dowladda Federaalka iyo midda loo qoondeeyay dowlad goboleedyada ee sanad xisaabeedka soo socoda. | |
| 7. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in uu qiimeeyaa warbixinta guddiga uuna soo saaro qaraar uu ku ansixinayo ama uu wax uga bedelayo. | |
| 8. Haddii uu Baarlamaanka Federaalka:<br><br>a. uu meel-mariyo qaraarka ogolaashiyaha warbixin waa in muddo 60 maalmood gudahood ah ay xukuumadda aqbashaa qeybinta miisaaniyadda la qadaray ee uu soo jeediyay guddiga ee ku jirta sanad-maaliyadeedka soo socda;<br>b. uu ansixiyo qaraarka wax ka bedelka warbixinta guddiga muddo 60 maalmood gudahood ah waa in xukuumadda federaalka ay qoondaysaa miisaaniyadda waxka bedelka lagu sameeyay ee uu soo jeediyay guddiga eek u jirta miisaaniyadda odoroska ee sanadka xiga;<br>c. uu diido ansixinta warbixinta guddiga muddada kor lagu sheegay, waxaa loo qaadanayaa in uu ogolaaday wax ka bedel la'aan xukuumadda federaalkana waxay qoondaynaysaa miisaaniyadda uu soo jeediyay guddiga ee ku jirta miisaaniyadda odoroska ee sanadka xiga. | |

DRAFT

| Qodobka 132: Awoodda canshuur Soo-rogiddda | |
|---|---|
| 1. Canshuur waxaa lagu jidayn karaa, lagu beddeli karaa, lagu cafin karaa, lagu baabi'in karaa ama lagu laali karaa xeer oo keliya ah. | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Canshuuraha la qaado iyo dakhliyada kale Dawladda waa in lagu shubaa khasnada Maaliyadda, ayna ka mid noqdan miisaaniyadda Dawladda, haddii sharci uusan si ka duwan u tilmaamin. | |
| 3. Mashruuca sharci ee Dawladda u keenay oo kharaj cusub ama ka badan ku-tolo-galki hore waa in uu tilmaamaa meelaha laga bixinayo kharajka cusub. | |
| **Qodobka 133: Sanduuq Maaliyad ee Midaysan** | |
| 1. Waxaa jiraya Sanduuq Maaliyadeed oo wadaag ah oo lagu shubayo dhammaan canshuuraha ama dakhliga kale kale ee ka soo xaroodo lacagaha adeegyada ay dowladdu soo rogto ama magaceeda lagu qaado waxaa bixin doono dowladda Federaalka Soomaaliya. | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Dakhliga ama lacagaha kale ee ku xusan Farqadda (1) kuma jiraan canshuuraha ama lacagta kale ee:<br>a. Ay dowladda federaalka ka bixiso ee lagu shubayo qasnadda guud ee qaranka ee loo asaasay ujeedo gaar ah;<br>b. Iyadoo la raacaya xeerka federaalka waxay hayn kartaa ama keydin kartaa ha'adaha dowladeed ee helaya | |

| | |
|---|---|
| dakhliga ama lacagaha ee loo fasaxay inuu kharashaadkiisa iska bixiyo. | |
| 3. Lacagta waxaa keliya oo laga saari karaa Sanduuqa Dakhliga mideysan ah ee maalgelinta:<br>a. In lagu daboolo kharashaadka lagu soo rogay maalgelinta lagu sheegay dastuurka ama xeerka federaalka;<br>b. Sida uu u fasaxaya sharciga ku-haboonaanta ama sharciga ku-haboonaanta dheeriga ah; ama<br>c. Sida loo meelmariyo xisaabaadka haddii ay dhacdo in sharciga ku-habboonaanta ee la xiriira Sanad Maaliyadeed uusan dhaqan galeyn bilowga Sannad Maaliyadeedkaas. | |
| 4. Wax lacag ah lagama saari karo sanduuqa Lacag lagama soo saari karo sanduuqa wadaagga qaranka ee maalgelinta haddii aan laga diiwaan-gelin lacag la bixiddaas Xafiiska Hanti-dhowrka guud ee Federaalka. | |
| **Qodobka 134: Amaahda Dawladda** | |
| 1. Sida ku xusan qodobbada Dastuurka Federaalka, Dowladda Federaalku waxay ammaah ka qaadan kartaa meel kasta. | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Dowladda Federaalku ma amaahan karto, mana dammaanad qaado, ama kor u ma qaadi karto amaahda iyada oo ka wakiil ah lafteeda, Dowlad-Goboleed ama hay'ad kale oo dawli ah, ama qof marka laga reebo sida uu farayo sharciga federaalka. | |
| 3. Xeer uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka ayaa lagu nidaaminayaa si waafaqsan farqadda (2) hannaanka ay | |

DRAFT

| | |
|---|---|
| xukuumadda FS:<br>a. In ay soo gudbiso shuruudaha iyo xalaadaha guud ee soojeedin amaah ama dammaanad uu ansixiyo Baarlamanka Federaalku;<br>b. In ay uu dajiyo saqafk-sanadlah ee amaahda cusub iyo helitaanka dammaanadaha Dowladda Federaalka; | |
| 4. Dawlad-goboleedyadu waxay amaahan karaan lacag marka ay ballanqaad ka haystaan Xukuumada Federaalka. | |
| **Qodobka 135: Qodobka Daynta Dawladda** | |
| 1. Waxyaabaha soo socda ayaa lagu diiwaangelin doonaa deynta dadweynaha:<br>a. Dhammaan deymintа ay fuliso Dowladda Federaalka sida ku xusan qodobka 122E (2) ee Dastuurka Federaalka, ha ahaato qaadashada amaahda ama soo saaridda damaanadda;<br>b. Damaanadda ay Dowladda Federaalka qaaddo sida ku xusan qodobka 122E (2) ee Dastuurka Federaalka;<br>c. Dhammaan amaahda ay Dowladda Federaalku ku siisay dowlad-goboleed, hay'ad kale oo dawli ah, ama qof sida ku xusan qodobka 122E (2) ee Dastuurka Federaalka. | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Nidaam kasta oo ay hesho Dowladda Federaalka marka loo eego amaahda ama dib-u-bixinta amaahda waxaa lagu bixin doonaa Santuuqa Dakhliga Isku-darka, ama maalgelin kale oo dowladeed oo loo sameeyay ujeedka amaahda sida uu farayo sharciga federaalka. | |
| 3. Deynta dadweynaha waxaa laga bixinaya Sanduuqa Isku-Darka Dakhliga, ilaa sharci federaal ah uu oggolaado in dhammaan ama | |

| | |
|---|---|
| qayb ka mid ah deynta dadweynaha lagu bixiyo lacagaha kale ee dawladda. | |
| 4. Xukuumadda Federaalku waa in ay sanad kasta diyaarisaa Baarlamaanka warbixin ku saabsan deynta dadwaynaha. | |
| Qodobka 136: Odorooska Miisaaniyadda Sanadle | |
| 1. Qiyaasaha miisaaniyadda sanadlaha ah ee Xukuumadda Federaalka waa in la horgeeyaa Baarlamaanka Federaalka ugu yaraan laba bilood ka hor dhammaadka sannad-maaliyadeedka ee xiga; | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Qiyaasaha miisaaniyadda sanadlaha ah ee Xukuumadda Federaalka ah waxaa ka mid ah:<br>a. Qiyaasta dakhliga oo dhan, oo ay ku jiraan dakhliyada qaran ama lacagaha kale ee ay soo aruurisay ama heshay Dowladda Federaalka ee lala wadaagi doono Dowlad goboleedyada;<br>b. Qiyaasta kharashaadka oo dhan, oo ay ku jiraan miisaaniyadda loogu gudbinaya Dowlad-Goboleedyada;<br>c. Soo-jeedin hoo-u-dhac maalgelineed oo la-filayo inta lagu guda jiro miisaaniyad-sannadeedka;<br>d. Soo-jeedimaha ku saabsan amaahda ama arima kale kordhin kara deynta dadweynaha inta lagu jiro sannad miisaaniyadeedka. | |
| 3. Miisaaniyadda waxaa looga doodayaa looguna codaynayaa madax madax. | |

| | |
|---|---|
| | |
| 4. Haddii miisaaniyadda la guddoonsan waayo bilowga sannadka cusub ka hor, waxaa muddo aan ka badnayn saddex bilood lagu sii dhaqmayaa miisaaniyaddii sanadkii hore. | |
| 5. Sharci guud oo uu soo saaray Baarlamaanka Federaalku waa in uu qeexaa:<br>a. Dhismaha, baaxadda iyo nuxurka miisaaniyadda Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada;<br>b. Habka iyo jadwalka looga tashanayo diyaarinta miisaaniyadda ee u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo Dowlad goboleedyada | |
| **Qodobka 137: Xeerka Qoondeeynta** | |
| 1. Qiyaasaha miisaaniyad sanadeedda ee ay ansixiyaan Baarlamaanku Federaalku waa inay kujiraan sharciga qoondeeyanta. | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Sharciga Qoondeeynta waxa la horkeenaa Baarlamaanka Faderaalka si uu u fasaxo ka bixitaanka Kaydka Dakhliga Iskujirka ah, lacagaha lagu bixiyo kharashaadka miisaaniyada si loo gaaro ujeedooyinka ku xusan Sharciga. | |
| 3. Haddii Sharciga Qoondeeynta ee sanad maaliyadeedka aan la oggolaan ka hor bilowga sanadkaas, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka wuxuu awood u yeelanaya inuu fasaxokabixinta lacagaha ku jira Sanduuqa Iskujirka ah si loo daboolo kharashyada lagama maarmaanka u ah fulinta howlaha dowladda. | |
| 4. Qiyaasta Miisaaniyada ee Kaabida ah waxaa la horgeynayaa Baarlamaanka Federaalka, sanad maaliyadeed kasta iyadoo la eegayo: | |

DRAFT

| | |
|---|---|
| a. Qaddarka qoondaynta sida ku xusan Sharciga Qoondeeynta ee sanadkaa maaliyadeed oo aan ku filnayn fulinta ujeedo kasta; ama<br>b. Baahi soo korodhay oo aan kharash loo cayimin. | |
| 5. Qiyaasta miisaaniyad-kabid ah ee uu ansixiyay Baarlamaank Federaalku waa in lagu soo daraa sharciga qoondaynta oo loogu talagalay in lagu oggolaado ka soo saarid lacag Sanduuqa Dakhliga Iskujira si loo kabo kharashaadka miisaaniyada dheeri ah. | |
| 6. Faahfaahinta miisaaniyadaha iyo Sharciga Qoondeeynta ee heer dowlad gobolleed waxaa lagu qeexaya dastuurka iyo shuruucda dowlad-gobolleedyada. | |
| **Qodobka 138: Xakameeyn Maaliyadeed iyo La Xisaabtanka** | |
| 1. Baarlamaanka Federaalku waa in uu dejiyaa sharci lagu hubinayo xakameynta kharashaadka, diyaarinta xisaabaha iyo daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka isticmaalka dhammaan lacagaha guud ee heerarka dowladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Wasaaradda Maaliyadda ee Federaalku waxay, iyada oo u mareyso Xafiiska XisaabiyahaGuud, ay mas'uul ka tahay dejinta heerarka xisaabaadka ee dhammaan hay'adaha dowladda, oggolaanshaha dhammaan lacagaha ay bixiso Dowladda Federaalka, taasoo keenta diiwaannada maaliyadeed in la ilaaliyo iyo diyaarinta warbixinnada maaliyadeed ee sannadlaha ee Dowladda Federaalka. | |
| 3. Mas'uul kasta oo dowladeed oo loo xilsaaray maaraynta lacagta dowladda, hantida iyo waajibaadka hay'ad dowladeed wuxuu qaadaa mas'uuliyadda wax kasta ee lacag bixin sharci darrada ah | |

| | |
|---|---|
| intuu hayay xilka, masuuliyaddaas oo soconaysa xitaa haddii uu ka tago xilkaas. | |
| **Qodobka 139: Iibsiga Dadweynaha iyo Ka-dhimista** | |
| 1. Soo iibsiga, tanaasulid iyo bixin hantiyeed waa in lagu qabtaa si loo xoojiyo karti, caddaalad, hufnaan, daah-furnaan, tartan iyo hufnaan kharash ee heerarka dowladda oo dhan. | *Fadlan eeg faalada qodobka 29aad* |
| 2. Baarlamaanka Federaalku wuxuu dejinayaa sharci lagu maamulayo soo iibsiga dowladeed, tanaasulid iyo bixin hantiyeedee heerarka dowladda iyada oo la waafajinayo mabaadi'da ku xusan Farqadda (1). | |
| 3. Dowlad-goboleedyadu waxay sameeyn karaan oo keliya tanaasulid iyo bixin hanti-dowladeed eek u yaala dowlad-goboleedka oo ka haysato oggolaansho hore ay u siiso Dowladda Federaalka, iyadoo loo maraayo ansixinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kadib marka uu soo jeediyo Golaha Wasiirrada. | |

DRAFT

